# HAL - KARAAN

Maxamed Ibraahim Warsama

(Hadraawi)



# *HAL - KARAAN*

## *Maansadii*

MAXAMED IBRAAHIM WARSAMA

(HADRAAWI)

1970 - 1990

*This edition has been possible owing to donations from Norwegian Church Aid, the Congregation in Klepp and Den Norske Somaliakomiteen.*

*Illustration by Arnfinn Nygaard*

*Copyright: Den Norske Somaliakomiteen, 1993.*

*All rights reserved. No part of this publication may be reproduced or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying or otherwise. without the prior permission of Den Norske Somaliakomiteen.*

*Publisher:*
*Den Norske Somaliakomiteen*
*Mr. Kjell Tjosevik, secretary*
*Postboks 13*
*N-4060 KLEPPE*
*NORWAY*

*Telefax: +47.4.42.52.86*
*after the 15the September 1993:*
*+47.51.42.52.86*

*Printed in Norway by GCS AS, Oslo*

*ISBN 82-992677-1-4*



*"I think that Hadraawi is widely regarded by Somalis as one of, if not* **the** *greatest living Somali poet. His work is famous throughout Somalia and amongst all Somalis I have ever met."*
*(Professor I.M. Lewis. London)*

*"Mr. Hadraawi is indeed an artist of awesome force whose Lyrics have helped to inspire a generation of Somalis, including myself. In the past ten years, a period during which the Somalis have been through severe national crises, owing to their state's steady slide towards anarcy together with relentless outbreaks of civil wars, Mr. Hadraawi's voice has been a source of solace and comfort to many Somalis in the great demoralization of the land."*
*(Professor Said S. Samatar, Newark)*

*"He is also esteemed by Somalis because of his uncormpromising moral principles. He refused to praise and to collaborate with the dictatorial military regime, though lured by great rewards. Instead he fiercely criticised them, risked his life and had to flee into exile in order to evade arrest.*

*I know him personally and have found him to be a man of peace, wisdom and discernment."*
*(Professor B.W. Andrzejewski, London)*

# HIBEYN

*Waxaan Diiwaankan Hal-karaan u hibeynaya gaar ahaan shacbiga Soomaaliyeed ee dagaalka negaadi la'aaneed kula jira taliska diktaatooriga ah ee dalka ka dhisan, ee ku foogan dib u soo noolaynta, midnimmadooda, xorriyaddooda iyo maamuskooda dadnimo.*

*Waxaan weliba si gaar ah ugu hibeynayaa daabacaadda diiwaankan halgamaaga u ban-baxay xoraynta ummadeed, shahiid iyo nooleba ee nafahooda u huray dhiiggoodiina u hibeeyey qaddiyadda sees u dhigidda nolol aayatiin leh oo u qalanta aadamiga.*

*Aniga oo ku hadlayaa magaca jabhadihii hoggaaminayey halganka Soomaaliyeed gaar ahaan, iyo ummadda Soomaaliyeed quud ahaan, ayaan Diiwaankan u hibaynayaa dadka sokeeyaha ah ee ku dhaqan Dalkaas Ethiopia iyo dawladihii u kala danbeyyey, tii hore iyo ta maanta jirta labadaba. Waxaan dalkaas iyo dadkaas uga mehadnagayaa sidii ay ugu hagar-baxeen halganka Soomaaliyeed, isula barbar taageen hiil iyo hoo iyo sida ay ula naf qaybsadeen Welina ula naf qaybsanayaan scacbiga Soomaaliyeed iyo sida au weli ugu hagar la' yihiin danaha iyo wanaagga ummadda Soomaaliyeed. Waxan iyana Diiwaankan u hibaynayaa shacabka dalkaas aanu walaalaha nahay ee Eriteria oo dhowaan ku guulaystey gobanimadoodii ka dib markay 30sannadood oo dhow dhow naf iyo maalba u hureen.*

*Waxaan diiwaankan guud ahaan u hibeynayaa shucuubta aduunka ee xaqooda u dagaallamaysa ama dadnimada, dimuqraaddiyadda, xasilooni nabadeed iyo xuquuqal insaanka hiilka u ah.*

***Curiyaha***

# TUSMO


*Waa kuma Hadraawi ?* 11
*Mahadnaq* 13
*Gogoldhig* 18
*Ereyga curiyaha* 36
*Tilmaan* 38

*QAYBTA KOWAAD*

*Suleekha* 45
*Amal* 47
*God Madow* 49
*Tog-Dheer* 51
*Gudban* 53
*Axadii* 56
*Baaq* 58
*Ergadii Furqaan* 61
*Wacdaraha aduunka* 67
*Ina Suldaan* 69
*Saxarla* 72
*Daryeel* 74
*Hudhud* 77
*Haatuf* 79
*Siddi Qabax* 81
*Jeeganta Dhalataay* 84
*Araq Maqal* 86
*Beled-Weyn* 88
*Mulliya* 92
*Hooyo* 95
*Toddobaatan Midabley* 98
*Hoobal* 101
*Ka rogoo haddana saar* 104
*Cajeb* 109
*Beeraad* 111
*Hal la Qalay* 114
*Wadnahaan Far ku hayaa* 116

*QAYBTA LABAAD*
*Daalo* 121
*Shan Ubaxley* 124
*Xamareey ma nabadbaa* 127
*Hablaha Geeska Afrika* 131

*Tuke Baal Cad* — *136*
*Hal-Abuur* — *138*
*Arraweelo* — *143*
*Deyn Maayo Heesaha* — *148*
*Jacayl Dhiig Malagu Qoray* — *152*
*Heego Muuq Dheer* — *157*
*Indha Badan* — *160*
*Durdur* — *167*

*QAYBTA SADDEXAAD*
*Taawilo* — *187*
*Kalamaan* — *193*
*Bara Baraale* — *203*
*Daalacan* — *212*
*Dhahar* — *217*
*Bulsho* — *222*
*Quduro* — *227*
*Galaal* — *232*
*Fido* — *241*
*Dhalaalimo* — *249*
*Waxyi* — *260*
*Galan-gal* — *268*
*Daahyaley* — *276*
*Gabadh Madow* — *288*
*Heeliyo* — *296*
*Jiitama* — *304*

*QAYBTA AFRAAD*
*Isa Sudhan* — *317*
*Hambaber* — *346*
*Dibadyaal* — *357*
*Gol Janno* — *374*
*Sirta Nolosha* — *392*
*Daalalley* — *407*
*Gudgude* — *425*
*Xusuus* — *441*

# WAA KUMA HADRAAWI ?

M*axamed Ibraahim (Hadraawi), waa hal-abuur maanseed; mudh-baxay, oo dabuubta maansadiisa kala soo dhex baxay dhudhubo shareeran iyo dhadhaabo shuban dhexdood. Maansadiisu waa dawan, baaq iyo qaylo-dhaan badheedhay xilli argagixiso tii ugu darayd taagantahay. oo aqoontii cilmiyeed, iyo kartidii hal-abuurnimo galoofowdey, afkuna yeedha gabay.*

*Waa iftiin xilliga mugdigu sina u damin kari waayey iyo astaan, runtii, lagu tilmaansan karo yoolka hirashada ummadnimada iyo aayaha dadnimada ee ku jira duunka hoose ee dadka Soomaaliyeed, oon marna dhimanaynin, si kasta oo uu u weyn yahay nabarka ku dhacay iyo dhaawaca gaadhay.*

*Wuxuu ku dhashay miyiga Degmada Burco, Gobolka Togdheer, Woqooyiga Soomaaliya hilaadii 1943; halkaas oo uu ku ababay sanadihii hore ee caruurnimadiisa, isla sanadahaas oo ay xijaabatey hooyaddiis Kaaka Jaamac Buux, ka dibna adeerkii Axmed Warsawa Siciid (Niibsan) ayaa loogu geeyay magaaladas Cadan (Yemen) aayooyinkii Caasha Maxamed Xasan iyo Shamis Xasan Nuur Qaaje aya halkii hooyadii u galay. Wax barashadiisii asaasiga ahayd ilaa dugsiga sare wuxuu ku qaatay Dugsigii Baadariga Cadmeed ee wakhtigaa la odhan jirey (St. Anthony's High School.1956 - 1964)*

*Isla Cadan ayuu kaga shaqeeyey macallinimo muddo laba sanadood ah. 1967 ayuu Cadan ka guurey una kicitimay Soomaaliya. Waxa uu degey Muqdisho. Halkaas ayuu ka bilaabay shaqadii ugu horeysey Wasaarada Warfaafinta 1969kii, kumase raagin. 1971kii ayuu shaqadii ugu horeysey ee rasmiga ahayd ka qabtay Wasaarada waxbarashada, isagoo macallin ka noqday Dugsi Hoose, Dhexe, Sare oo ku Dhexyaalley Dugsiga Hoyga Nolosha ee Lafoole (Afgooye), isla wakhtigaas oo uu ku qaadanayey daraasada tababarka macallinimada machadkii Macallinimada ee Lafoole (N.T.E.C).*

*Kartidiisa hal-abuurnimo markii ugu horeysey waxay soo shaac baxday intii aanu Cadan ka tegin. 1966kii ayuu curiyey soona ban-dhigay Riwaayadii la magac baxday "HADIMO". Ha yeeshe wuxuu si fiican u doob dillaacsaday maansadiisuna caan baxday intuu u soo wareegey Soomaaliya, gaar ahaana, intii ku sinayd 1970 nadii oo ay soo shaac baxeen heesaha tirada badan ee aadna u soo jiitey dareenka dadka, Wuxu noqday nin suugaantiisu si gaar ah u taallo, si goonni ahna cid waliba u dhadhansato, had iyo jeerna dadka ka dhex dhalisa olole dood iyo muran ah. Waxa la soo qaadan karaa Riwaayaddii "Aqoon iyo Afgarad" oo ay ku la jireen Saaxiibadiis Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) Siciid Saalax Axmed, Muuse Cabdi Cilmi iyo silsiladii maansadii "Siinley" iyo*

*Riwaayaddii "Tawaawac" ee ay ku jireen heesaha ay ka mid ahaayeen "Hal la Qalay iyo Ceel Walwaaleed".*

*Suugaantiisu waxay noqotay tu si gaar ahaaneed uga nixisa oo uga cabsiisa xukunka keli talinta ah, sidaas darteed, ayaa hay'adaha cadaadiska iyo cabbudhintu u daba taagnaayeen. Ka dib silsilad-maanseeddii "Siinley" iyo Riwaayadii "Tawaawac" iyo sababo kale oo maansooyinkiisa laxidhiidha ayaa 11kii Noofambar ee 1973kii loo taxaabay xabsiga, waxaa la geeyey Qansax-dheere (Gobolka Bay) o uu ku xidhnaa ilaa 9kii Abril ee 1978.*

*Wakhtigaas ka dib, ilaa bilowgii 1982kii, wuxuu Akadamiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta ka ahaa Agaasimaha Waaxda Fanka; isla markaana wuxuu madaxa hore kaga jirey raggii mayalka u qabtay ee hoggaaminayey Silsilad-maanseeddii caanbaxday ee "Deelley", kana qaraxday dalka horraantii sannadkii 1980kii.*

*1dii May 1982kii ayuu tegey goobaha uu ka socdey halganka Mucaaradka hubaysani, wuxuuna ku biiray Uruka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM). Wuxuu halkaas ka galay halgan siyaasadeed, suugaaneed oo weji waddaniya leh.*

***Ibraahim Sheek Muuse Wacays.***

# MAHADNAQ

*Inkasta oo ay wax caadi ah tahay, in had iyo jeerba, qoraalka suugaaneed, lagu magac siiyo oo loo nisbeeyo ciddii curisay ee halabuurkiisa lahayd, haddana arrimuhu sida la moodayo ma aha.*

*Waayo, hawl kastaaba waxay bisayl noqotaa ama lamahadiyaa marka natiijadeeda u danbaysaa soo gaadho ciddii loogu talagalay inay ku intifaacdo. Taas darteed, bilowgeeda ilaa midhkeeda u danbeeya, ma jirto hawl qofnaba keli u qabtaa ama hadduu qabtana qabyo beeshaa. Isaga oo aan innaba qof labaad gacanta u taagin. Iyada oo guud ahaanba sidaas ah, ayey ta diiwaan-maanseedkan ku saabsani ka xag jirtaa.*

*Haddii uu magacaygu, hadda, diiwaankan dusha sare, kaga yaallo ama aan ahay ninkii curiyey maansooyinka ku daabacan, waxa aad ugu hawshooday oo wax badan oo tacab ah ku bixiyey, siyaalo kala duwanna gacan uga geystey dad badan oo aan midkoodna magaciisu dusha sare kaga daabacnayn, hase yeeshee, haddana aan hubo, in aan la'aantood, hawsha maansooyinkani sidan u bislaateen, kuna jirteen maanta, gacanta dadweynaha akhrisanaaya iyo cid kasta oo sideeda uga faa'iidaysanaysa.*

*Sidaas darteed, waxa ugu yar ee ay mudan yihiin waa xusidda magacyadooda iyo kaalinta ruux waliba hawshan ka qaatay wadar iyo waaxid. Mahadaydu ha gaadho qofkii mudan.*

*Ibraahim Xaaji Muuse (Wacays), run ahaan, gacanta uu ku leeyahay hawsha aad u culus ee gashay diiwaankan wax lagu qiimayn karo oo u dhigma lama heli karo. Runtii haddii aanu Wacays u guntan dhammanba hawsha daabacaadda, oo intaas oo jeer ku noqosho iyo dibu sixidba lahayd, haddii aanu isagu nafta dul dhigin, qormaynta, hormaynta iyo gebi ahaanba hoggaaminta hawshaas oo aanu hadh iyo habeenba u soo jeedin,isaga oo isla markaas, xagga caafimaadka ka dhibban oo xanuusanaya. Diiwaankan daabacani maanta gacanta kuma jireen, haddii aan Wacays oo kale u hagar bixin. Inkasta oo aanay ku filayn, waxaan kolleyba u celinayaa mahad aad iyo aad u ballaadhan.*

*Waxaan si gaar ah isagana u xusayaa saaxiibkayga qaaliga ah ee Rashiid Sh. Cabdillaahi. Laga bilaabo maansada Daalacan, waa dhif tix aan tiriyo oo marka ugu horraysa ee aan soo ban-dhigo, aanu Rashiid ka mid ahayn dadka goob jooga ka ah. Mar kasta waa qofka ugu horreeya ee gol-daloolada maansdayda farta iigu fiiqa. Dhinaca kale, wuxuu Rashiid ka mid yahay infa aysi gaar ah u xiiso geliso, taas oo keenta in ay anigana igu dhiirri geliso curinta maansada. Rashiid waxa uu ka mid yahay raggii lahaa abaabulka, isku dubba ridka, iyo soo if bixinta diiwaankan. Rashiid si joogto ah ayuu u lafa-gura hal-abuurkayga, fidintiisana si weyn ayuu uga qayb qaata.*

*Gogol-dhigga diiwaankan oo la odhan karo waa qoraal suugaaneed oo sidiisa u madax bannaan, waxa ku hawshooday Rashiid. Mahad ballaadhan baan u celinaya.*
*Waxaa isna mahad aan la koobi karin mudan Cali Jaamac Basaale (Guush) oo hawsha daabacaaddan Wacays ku weheliyey bilow ilaa dhammaad.*
*Runtii, haddii aanay hawsha soo ururinta, kaydinta, qoraalka teebka iyo sii dhilidda diiwaankani helin gacanta uu muddo dheer ku hayey Cali Jaamac Basaale (Guush), maantana kama dambaysteedii aanu u maleegan. marnaba xaaladda adag ee uu hadda ku soo baxay diiwaankani, kuma soo bixi kareen. Wuxuu Cali Jaamac Basaale (Guush) isaguna iga mudan-yahay mahadnaq aad iyo aad u ballaadhan.*

*Iminka ma xasuusni, ereyo iyo wedho aan kaga abaal gudo xanuunka iyo hawlaha dad fara-badan ka qabsaday suura gelinta iyo soo saarista diiwaankan suugaaneed, waxase hubaal ah in Jaamac Cali Maxamed (Jaamac Weyne) oo sidiisaba ku caan baxay is-dirid iyo inuu daacad ka noqdo hawl kasta oo ummadeed oo uu qabanayo, ayaa diwaankan u shiilay maanka iyo maskaxda, una amaahday wakhti iyo awood ka baxsan intii uu markaas karayey, ma jirto karti iyo dadaal uu Jaamac Cali Maxamed kala hadhay daabacaada diiwaankan mana suura gasheen indiiwaankani meel maro, haddii aanu Jaamac ku nuux nuuxsan oo aanu duldhigin aqoon, sabir iyo farsamo sida ragga kor ku xusan, Ibraahim Sheekh Muse Wacays, Rashiid Sheekh Cabdillaahi iyo Cali Jaamac Basaale (Guush).*

*Ma illaawin mana illaawi karo Xaliimo Cali Maxamed oo Hawsha aan ka sheekeeyey, Jaamac ku lammaanayd ama laba ku ahayd.*

*Waxaan si gaar ah u xusayaa Cabdi Jaamac Cawad (Faysal), oo dedaal xad- dhaaf ah, iyo xusul-duub hagar-la'aan ah ka geystey qabanqaabaddii iyo daabacaaddii diiwaankan. Waxaan hubaa haddii aanu Faysal sidaas ugu hawl gelin, danihiisana ku daayicin inaanu diiwaankani soo baxeen, Sidaa awgeed, mahadnaq gaar ah oo ma guuraan ah ayaan u hibeynayaa Cabdi Jaamac Cawad iyo marwadiisa Fadumo Maxamed Xasan Xuseen.*

*Waxaa kale oo aanan kaalintii uu lahaa illaawi karin, Ibraahim Axmed Warsame (Toyota). Ibraahim waa ninkii maansooyikan markii ugu horreysey ku bilaabay diwaan gelin uu gacantiisa ku qoray kuna dhammeeyey, taasoo saldhig u ah duug hadhka maansadan. Mahad ayaan uga celinayaa xilkaas uu isa saaray.*

*Raaqiya Cabdillaahi Oomaar oo ku xeel dheer, ku fadallo cad u doodidda xuquuqda aadmiga ayaa dadaalkeeda guud ahaaneed ku dartey inay diwaankan dhaqaale lagu daabaco u yaboohiso. Qoraallo iyo xidhiidho farabadan, hawl aan la koobi karin oo hagar la'aneed ayay ku talax tagtay sida ay arrintaas u suura gelin lahayd. Taas oo ay Raaqiyi si raganimo leh*

*ugu guuleysatey. Raaqiya Cabdillaahi Oomaar iyo dhiggeedaba si weyn baan ugu mahad celinayaa.*

*Waxaa iyana mahad iyo sharaf iga mudan Professor I. M. Lewis, The London School of Economics and Political Science. Professor B. W Andrzejewski, Institue of Cushitic Languages and Literature University of London iyo Professor Said S. Samatar, Rutgers University Newark, oo diiwaankan sidii loo daabici lahaa ku taageerey qoraallo xeel dheer oo dhiirri geliyey ciddii Diiwaankan daabacaaddiisa ka qayb qaadatay. Sidan horeba u sheegey cidda suura gelintadaabacaadda diiwaankan ka qaybqaadatay aad bay u fara badan yihiin. Waxa aan shaki lahayn haddii cid kasta oo gacan ka geysatey ama ku hawshootay la xuso in la yaabi lahaa. Iyada oo aan sidaa la yeeli karayn, bal aan soo hadal qaado dhowr goobood iyo dhowr guuto.*
*Waxa aan kasha iyo laabta uga mahad celinayaa dadka ku kala dhaqan dalalka:-*

*1.Norway*
*2.Jamhuuriyadda Jabuuti*
*3.Sweden*
*4.Denmark*
*5.Ingiriiska(U.K)*
*6.Ivory Coast*
*7.Tunis*

*Waxa mudnaan gaar ah leh Ururka Saaxibtinnimada Soomaalida iyo Noorwijiga (Den Norske Somaliakomiteen) oo uu hormood u yahay Baaderiga caanka ah Bishop Bjørn Bue.*

*Hay'adda diwaanka isku dubbaridkiisa iyo soo saariddiisa leh, waxay si xishmad leh ugu mahad naqaysaa Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo aan waxba kala hadhin suura gelinta iyo soo bixidda diiwaankan.. Hay'addani waxay mar kale ku hambalyeynaysaa Mudane Ismaaciil sida uu had iyo jeer ugu hagar baxo faafinta iyo xoojinta fanka iyo suugaanta iyo sida uu gacan buuxda u siiyo adkaynta iyo taabagalka dhaqanka iyo hidaha guud ahaan. Ismaaciil iyo hay'adaha hoos yimaadaa waxay marar badan gacan buuxda ka geysteen diwaanno kan ka horeeyey.*

*Waxa aanu jecelnahay iyana in aanu u mahad naqno hay'adaha hoos yimaadda Ismaciil*
*qaar ka mid ah sida:-*
*Wasaaradda Warfaafinta iyo Guriga Ummadda ee Jabuuti guud ahaan iyo Maamulayaashooda, Ismaaciil Xuseen Taani, Cabdi Miiggane iyo dhammaan madaxda iyo hawlwadeennada hay'adahaas.*

*Waxa aanu iyana aad ugu mahad naqaynaa hal-abuurada, hooballada iyo dhammaan shacabiga Jamhuuriyadda Jabuuti.*

*Iyada oo aanan waraaq ku soo koobi karin dadkii gacanta ka geystey hawsha maansooyinkan bilowgoodii ilaa maanta oo ay buug ahaan udaabacantay, waxa qudha ee aan dadkaa u hidin karnaa ay tahay oo keliya magacyada in yar oo ka mid ah oo aan halkan ku xuso.*

*Waxaan halkan ugu mahadnaqayaa saxiibbada magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo gacan weyn ka geystey ilaalinta, ururinta, fidinta iyo daryeelida maansooyinkan, naftayada-iyo noloshayada.*

1. *Maxamed Maxmuud Warsame* — *"Dhabaney"*
2. *Axmed Maxamed Warsame* — *"Jiinis"*
3. *Maxamed Xaashi Dhamac* — *"Gaariye"*
4. *Maxamed Cabdillaahi Riiraash*
5. *Antuwaan Faransuwaar*
6. *Maxamed Xuseen Xasan*
7. *Faarax Axmed Cali* — *"Gamuute"*
8. *Yaasiin Axmed X. Nuur* — *"Yaasiin Dheere"*
9. *Jaamac Cali Geelle*
10. *Cali Aw Cusmaan Maxamed* — *"Cali-Biid"*
11. *Jaamac Maxamuud Xayd*
12. *Cabdi Xuseen Gurraase*
13. *Cabdulraxmaan Maxamed Maax*
14. *Yaasiin Ducaale Cali*
15. *Idris Xaaji Cismaan*
16. *Maxamed Jaamac Noor* — *"Blacke"*
17. *Qaalib Cismaan Fadan*
18. *Yoonis Cali Nuur*
19. *Maxamed Ibraahim Bookh*
20. *Maxamuud Cabdi Cali-Ducaale*
21. *Maxamuud Cabdi Cali-Bayr*
22. *Saleebaan Cali Bulaale*
23. *Siciid Ismaciil Daahir*
24. *Muuse Axmed Saxar*
25. *Dr Cali Cabdiraxmaan*
26. *Maxamuud Aadan Jaamac-Galaal*
27. *Cabdikariin Faarax Qaarey*
28. *Xasan Sabriye*
29. *Maxamed Xasan* — *"Great"*
30. *Xasan Siciid Saalax iyo Marwadiisa Caasha Xasan Cali*
31. *Cumar Siciid*
32. *Muraad Xasan Boqore*
33. *Siciid Faarax Maxamuud*

*34. Saynab Maxamed Jaamac*
*35. Yuusuf Cabdillaahi iyo Marwadiisa SaamiyaYuusuf Cali Sh. Madar*
*36. Cumar Xasan Sheekeeye iyo Marwadiisa Faa'isa Axmed Maxamed Halac*
*37. Deeqa Jaamac Jibriil*
*38. Dr. Faadumo Sheekh Cali Jimcaale*
*39. Rooda Maxamuud Ibraahim*
*40. Fu'aad Binu Cabdulcasiis*
*41. Axmed Cabaas Axmed*
*42. Maxamed Daahir Afrax*
*43. Xaaji Xasan Maygaag Samatar*
*44. Faadumo X. Cumar Buraale*
*45. Ubax X. Cumar Buraale*
*46. Jaamac Cismaan Ismaaciil iyo Marwadiisa Aamina Jaamac.*
*47. Xasan Guure Jaamac*
*48. Samsam Cabdi*
*49. Al Mujaahid Al Akbar Cabdul Raxmaan Aw Cali Faarax*
*50. Cabdillahi Baaruud Cige*
*51. Maxamed Jaamac Xujaale (Aabi)*
*52. Xuseen Gaabane*
*53. Cabdul Raxmaan Salaax Axmed ( Lisaaye)*
*54. Axmed Ismaaciil Aadan (Dhakaar)*
*55. Mustafa Cabdillaahi Aadan*

*Waxan si gaar ah ugu mahad naqaya saaxaiibkayga qaaliga ah Cali Cabdi Faarax iyo marwadiisa, Sahra Ibrahim Xirsi, Degmo, Nuur, Ibrahim iyo Ilwaad.*

*Waxan iyana u mahad naqayaa ;Shacbiga, hal-abuurrada iyo Hooballada labada dal ; Soomaaliya iyo Jamhuuriydda Jabuuti.*

# GOGOLDHIG

*Muddo dheer oo ilaa tobaneeyo sano ah ayaan madaxa ku hayey oo aan runtii si kulul ugu taamayey inaan erey qoran ka idhaahdo maansada Hadraawi (Maxamed Ibrahim Warsame), kuna gudbiyo dareen iyo fikrad wixii ay maansadaasi igu dhalisay. Haddana, iyada oo sidaas ah marna ma qabyo-tirin qoraal tafa tiran mana tahlin wax dhaafsiisan qodobbo geli kara qormaynta guud (general outline), iyo fikrado koobkooban oo noqon kara keliya bar tilmaamo iyo tusmooyin xusuusta loo dhigo.*

*Inkasta oo ay jireen sababo kale oo kolal iga dhex-gelayey igana shuqliyey, ha yeeshee waxaa ka badan taas, inta aan si uga gabargaaley ee aan hore ugu dhiirran waayey; waxaana dhacday mar kasta oo aan ku talo goosto ku dhaqaaqeeda in aan haddana dib uga soo waabto.*

*Waxaa walaaca iigu wacnaa dhowr rrimood oo ku lug leh xidhiidhka gaar ahaaned ee aan anigu qof ahaan muddo dheer la galay suugaantaas Maxamed Ibrahim Warsame (Hadraawi), iyo wax yaalo kale oo labadaas weheliya.*

*Tan hore waxaa weeye, baaxadda aad u ballaadhan ee suugaanta Hadraawi ay leedahay ee ma aha tirada maansooyinka ama dhererkooda iyo qoraallada kale ee weheliya. Meesha aan ka hadlyaa waa baaxadda murtida ku jirta iyo dulucda farriinteeda ama dhambaalka ay siddo iyo bilicda fannimo iyo sida loo qiimo siin karo dhismaheeda farshaxannimo iyo qiyaasta meeshay ka fadhiisan karto socodka suugaanta Soomaaliyeed; waxay ku soo kordhisey iyo kaalintay gudatay iwm.*

*Runtii suugaanta Hadraawi waa bad weyn oo kale, mana le'eka tiradeeda kow iyo laba iyo wax dusha sare laga taataabtay. Bad weyntaas obocdeeda iyo caalamka jiifa nin sahamiyaa kuma talo-gelaayo ereyo kooban iyo weedho degdeg loo yidhi. Bad weynta Hadraawi iyo adduunka ballaadhan ee uurkeeda yaalla, waxaa qaadi kara oo lagu deyi karaa abwaag; iyana waxa ay u baahan yihiin wakhti dheer iyo u gacanbixid. Wakhti kooban iyo ereyo dhawr xaashiyood qaata markii ay noqotay, ayaan bad weynta ka soo maagey.*

*Ta xigta ee ku saabsan aniga iyo maansada Hadraawi, waxaa weeye sida goonida ah, ee aan xidhiidhka ula lahaa, aniga iyo tiro yar oo aannu isku meel ka wada joogney maansadan. Waxa sifo gaar ah u yeelaya xidhiidhkaasi waa isaga oo ku dhisnaa, mar walba, iyo ilaa haddan aynu joognaba, isla joog iyo wada kulan toos ah. Si kale haddii loo yidhaahdana, waxa weeye, ma ahayn meesha aannu ku kulanno anigiyo tixda Hadraawi, "cajalada iyo rikoodhka" la gesho, iyo dhawaaqa laga maqlo oo qudha, wax qoraal ku yaal haba dambeeyee. Waxaan ka mid ahaa, muddo ka badan tobaneeyo sano, dhawr qof oo tix walba dhalashadeedii, sida*

*ummulisada cid kasta oo kaleba uga gacan horraysa oo dibad bixinteeda gardaadisa.*

*Maxay taasi leedahay ee noqon kara wax gaar ah oo dadka kale lagaga duwanaado ? Maxaase u dhexeeya labada qof ee ku kala horreeyey maqalka ama akhriska tix-maanseed, oo labaduba si isku mid ah, uga bogteen, una dhuuxeen? Waa su'aal meesha ku jirta; jawaabteeduna waa tay u duurxulayso, oo runtii, marka ay intaas oo qudha tahay, labadaasi wax ay ku kala duwanaan karaan, dhexdooda kama muuqato. Sidaas darteed waa in aynu hoos ugu daadegno xidhiidhkaas gaar ahaaneed iyo saamayntiisa.*

*Ta meesha ku jirtaa waa xaaladda xanuunka badan ee ku timid dhaqankii Soomaaliyeed guud ahaan, kana soo jeedda nidaamka keli taliska qofeed ee wax ku xukuma hab maamul argagixin ah, musuq iyo bah-gooyada reereed iyo qalalaasaha dumiyey dhismihii bulshada, ummadnimadeedii iyo gobanimadeedii dhinac kasta oo ay ahaydba.*

*Ta xannuunka leh, ee halkan lagu soo qaadi karaa, waa himilooyinkii wacnaa ee ummadnimo loogu hiranayey, caqligii wax-garadka ahaa, aqoontii cilmiyeed iyo farsamo, hal-abuurnimadii fanka iyo midha-dhalkeediiba oo giddiba dabkoodii la bakhtiiyey. Dhinac kalena waa qiyamtii dadnimo ee wacnayd iyo anshaxii bulsheed oo ba'ay. Waxaana ka dhashay inay qofka, siiba wax garadkii dadka iyo aqoontiisii, garashadiisii iyo hal abuurnimadiisi is-waayaan, isaga iyo wax qabadkiisiina kala baadiyoobaan.*

*Muddo dheer bay maansadani aniga iyo rag kale dhaymo ay nooga ahayd waayaha cidhiidhyoon ee ku astaysan ceejinta caqliga iyo dareenka dadnimo. Waxay tix waliba noo ahayd sidii dabar adag oo na laga furay, mugdi aannu uga baxnay iftiinka cadceedda iyo adduunkeeda ballaadhan. Runtii, tix waliba maalinteeda waxay noo ahayd tu naga goysa waran nagu taagan.*

*Sidaa darteed, ma laga yaabaa, waxa aan ka sheegaaba inu noqdo wax kasoo go'ay dareen xiise is-ahaaneed (subjective) oo qudha? Ma suurowdaa inay i jiidato xaqiiqdaasi, iyadoo layga sugayo abbaar ku fadhida caqli iyo ra'yi miisaaman oo cuskanaya majare hagaagsan, lafa-gur mawduuci ah iyo qiimayn isu-dheelli tiran?*

*Ta u dambaysa ee aan kaga hadhaayo qodobkan afeefta ahi waa anigoo aan sheegan karin kartidii nin gaar ugu go'ay barashada iyo daraasadda aqoonta fanka iyo suugaanta; iskeedabana taydu tahay wax ka soo jeeda korodhsi hiwaayaddeed. Taas awgeed, waxaa madaxayga ku legdamaya ta lay tirinaayey ee aan u badnaa ku hawshoodkeeda, taas oo ah wixii ku lug leh aqoonta bulshada iyo suugaanta. Shaki malaha oo way jirtaa meelo badan oo labadu ku kulmaan; aqoonyahan cilmi bulsheedna wuu heli karaa wax badan oo uu ka yidhaahdo suugaanta Hadraawi, sidaas oo ay*

*tahay haddana waxa ay taasi ka mid ahayd sababaha aan dib ugaga soo maagey.*

*Waxay waddaba maanta iyo madbacadda ay maansadaasi gashay ee ay noqotay in ay ku gudubto qaab lagu reer gesho laguna faafiyo kii ugu habboonaa, waxay ila tahay geed aan ku xoqdo oo dambe iima hadhin, ee waa inaan wejiga ku diiraa. Sidaas darteed waxa keliya oo aynu is-weydiin karnaa hadda, waa abbaarta iyo mawduuca qodbbada, ka hadalka maansadan, dhinaca aynu kaga iman karno iyo wajahadda aynu ula kacayno iyo meesha gunaanadkeedu ku biya shubanayo.*

# *I*

*Waa caado dunida ka dhaxaysa in buugga loo yeelo hordhac loogu tala galo furaha irridaha laga gelayo buuggaas iyo murtida jiifta. Waxaa laga yaabaa inaan badiba qofku akhrisan, hor-dhaca buugga, haddii aan wax ku qasbaa jirin, sida raad-raac: sahamin cilmiyeed iyo wax la mid ah. Waxa dhici Karta in qofku toos u guda galo mawduuca, isagoo leh, "waxa hordhacu iiga sheegayo buugga, sow aniguba kala ma soo bixi karo"! Waa run, oo badanaa hawraarta hordhaca buugga laga fishaa waa war ku saabsan mawduuca buuggaasi ka hadlayo iyo majaraha dersiddiisu raacayso iyo ujeeddada ay ku biyo-shubayso; haddii ay tahay diiwaan maanseedna abbaarta hordhaciisa laga filaa waa-(inkasta oo aanu jirin mawduuc qudha iyo ujeeddo keliya oo diiwaanku leeyahay) lafa-gur iyo falanqayn ku saabsan heerka hal-abuuridda maansooyinka, dhinac kastoo ay tahayba iyo qiimayntooda iwm. Dhab ahaanna il-dheerida iyo qotada aqoonta akhristuhu way u suura gelin kartaa inuu la soo baxo dulucda buugga, wax kasta oo hordhaca lagu soo urursheyba. Ha ahaate, kol uu mar danbe isha mariyana dedaalka hor-dhacu waa inuu akhristaha wax ku kordhiyo.*

*Haddaba sidee ugu waxtar roon ee aynu u guda gallaa hor-dhaca diiwaanka maansada Hadraawi ee ina hor yaalla?*

*Sida aynu horeba u nidhi suugaanta Hadraawi waa badweyn, aan dunida uurkeeda jiifta si fudud loogu babac dhigi karin lagagana warrami karin ereyo kooban. Waxaa raaca badweyntaas suugaaneed oo aan hore cidina obocdeeda ugu sahan tegin kuna deyin daraaso dhinac kastaba buuxda oo qabyo-tiran isuna dheelli tiran. Waxaa kale oo weheliya, iyada oo ay maqantahay daraasooyin, kuwaas oo kale ah, oo ku saabsan suugaanta Soomaaliyeed iyo heerarka taariikheed ee ay soo martay iyo guud ahaanba taqaafadda, dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyedd iyo waayaha bulsho taariikheed ee giddigoodba ku leh saamayntooda suugaanta Hadraawi ee ay maansadeedii hadda ina hor taalo.*

*Sidaa awgeed, waxay dani khasbaysaa, in aynu daraasadda maansada*

*Hadraawi ee isu dhan u dayno haddeeda iyo haddii Alle yidhaahdo, hor-dhacanse aynu ku soo ururinno inta maanta aan is-leeyahay waa lagama maarmaan.*

*Sida aynu, hadda ka hor, u sheegnay kolleyba waa in ereyga hordhacu waxtar uga noqdo akhristaha dhinacyo ku lug leh garashada iyo fahamkamaansadan. Waxay ila tahay, mar haddii uu qodobku yahay Hadraawi iyo maansadiisa buuggan ku daabacan, in masaladaasi noqon karto tu laga wada hadli karo oo loogu tegi karo murti la xiisayn karo.*

*Marka aynu haddaba, sahankeena, sidaa ugu yool-samaynno, isla mar ahaanna waxa ila qumman in aynu ku hor marno dhawr hal oo jid-bannayn u noqon kara yoolkaas.*

*Waxay tahay, haddii la soo qaado Hadraawi iyo maansadiisa, waxay u badantahay in waxa maanka ku soo dhacaa noqdaan maansooyinkiisa oo qudha, oo aanay jirin wax ka baxsan maansooyinkaas, oo malaha la gelin karo.*

*Runtiise sida ay ila tahay waxa kale oo jira arrimo aan ahayn maansada lafteeda lase leh xidhiidh adag, arrimahaasoo aan looga maarmi karayn falanqaynta iyo lafa- gurka tooska ah ee maansadani.*

*Ma aha Hadraawi iyo maansadiisan oo qudha ee waxaa la odhan karaa taasi waa wax la wadaago; Waayo, dhinacyada ku saabsan shuruudaha wacaalaha taariikheed, dhaqan iyo faneed ee ku raad leh soo-if-baxa maansoyahan kasta iyo maansadiisa, ma aha wax ninnaba ku gooni ah. Iyada oo sidaas ah, haddana, dadku raadka waayaha noloshu ku yeeshaan guud ahaanba, waa laga helaa waxay ku kala duwan yihiin iyo waxa ay iskaga mid yihiinba.*

*Si kasta oo ay tahayba sababaha kala goonni yeeshay Hadraawi iyo*

*badiba suugaan-yahanka Soomaaliyeed ee sebenku kulmiyey, marka hore waa nin iyo isha uu ku eegay adduunka xilligaasi iyo awaalaha nolosha ka jira, sida uu wax u arkay, inta uga muuqatay iyo dhinaca uu ka maray; meesha uu iska taagay hirdanka dunida ka socdey sida uu wax u qiimeeyey, waxa uu xeeriyey iyo mawqifka uu doortay; marka xigana waa ninba sida ay noqotay fal-celintiisa dareenkiisa iyo sida suugaantiisu uga tarjumayso ama uga tibaax-keenayso ee ay warkeeda inoo siinayso. Murtida aynu duuduub ugala soo bixi karnaa waxaa weeye; raadka qof waliba uu ku cumri-dhammaysto ee uu nolosha kaga tago, wuxuu tilmaamo, ee sumad u noqdasidii uu ula fal-galay ee uu uga fal-celiyey waayihii xilligii uu nolaa iyo wixii kala soo dersey.*

*Sidaas darteed, ma ka dhigan karnaa gooninnimadaas, su'aal aynu jawaabteeda u baadi-doon tagno ? Waxay iigu muuqataa, in akhristaha maansadan siiba qofkii il-dheer ku dersaya ay u tahay waxtar, haddii aynu wax uga iftiiminno aragti dareen-qaad iyo qaabka cabbiriddeeda,*

*farriinteeda iyo mawqifka, waxa ay kaga duwan tahay iyo waxa ay la wadaagto suugaanta Soomaaliyeed ee ay xilliga kula fac tirsanayso;in aynu dibadda soo dhigno xaqiiqada waayaha dunida ay ka muuqaal-celinayso suugaantaasi iyo sida loogu kala tegey habka iyo majiiraha garasho, ka dibna adduun-aragga, qiyamta iyo mawqifka iyo qaabka hal abuuridda iyo farshaxannimada.*

*Inta aynaan hoos u gelin dhumucda ujeeddada aynu u soconno, waxaa ila habboon innaga oo ka il-boganna waxa dusha sare yaalla ee inoo noqonaaya bar-kulan aynu ka wada bilaabi karno dooddeenna. Waxa ugu dhow ee daymada horeba u muuqanaya, ama uu maanku haleelayaa waa su'aalo dhowra oo lug ku leh Hadraawi iyo suugaantiisa; su'aalahaas oo muujinaya kana marag kacaya in suugaantaas wax ku goonni ahi jiraan. Waxay su'aashu inoo jid bixinaysaa:- Maxaa keenay gooninnimada iyo warkeedaba ? Maxaynu dareennay ee ay maankaba ugu soo dhacday gooninnimadu ?*

*Jawaabtu waxay ag-taallaa dadka Soomaaliyeed iyo muranka is mari waaga ah ee dhexdiisa ka jira , kuna saabsan Hadraawi iyo suugaantiisa. Marka aynu si guud isha u marino bulshada Soomaaliyeed waxaynu ugu tegeynaa aragtiyo iyo mawaaqif kala wada jeedda oo is burinaya oo laga kala qabo suugaanta Hadraawi. Haddii aynu dusha sare ka taataabanno waxa ka mid ah, kuwa soo socda:-*

*1. Hadraawi iyo maansadiisaba aad baa loola col-yahay; mana jiro maanso yahan Soomaaliyeed oo loo dhigi karo nacaybka iyo colaada loo hayo isaga iyo maansadiisaba.*

*2. Hadraawi iyo maansadiisa aad iyo aad baa loo jecel yahay; maba jiro, magac iyo maanso toona, cid la ag keeni karayaa.*

*3. Ma aha suugaanta Hadraawi wax la garan karo, macnaha iyo ujeeddada ku jirta ee uu ku talo-galay curiyaheedu waana wax ku adag maanka dadka;Sidaas darteed waxa dhacda in cid waliba goonideed madaxa ku daaliso, kaddibna u fasirato si gaarkeed ah iyo wejiga qofku ka dhigto.*

*4. Hadraawi waa maansayahan Soomaaliyeed oo maanta jira ka ugu magac dheer; ka loogu hadal-haynta badanyahay ee maansadiisu ugu tis-qaadka ballaadhantahay, uguna hal qabsiga badan tahay; ka tixdiisuna dareenka ugu weyn kiciso, sida ugu kulul loo xiiseeyo ee maansadiisa goob kasta oo dad Soomaaliyeed joogo siraad lagu doonayo.*

*Waxaan is-leeyahay waa suura-gal in suugaanta Hadraawi lagu tilmaami karo ifafaale yaab ku leh bulshada Soomaaliyeed ee maanta jirta. Ifafaalenimadu waa meesheedee, la yaabka ay leedahay ayaa wax inooga daalacayaan. Maxay ku noqotay in maanso-yahanka Hadraawi kulmiyo intaaasoo ah si-u-arag, si-u-qiimayn iyo mawqifyo, kala jeedooyin iyo is-burisyo ah ? Sidee buu hal mar ku helay colaadda u kulul iyo jacaylka*

*u ballaadhan una qotada dheer ? Maxaase maansadiisa ka yeelay tu si fog loogu kala tago, ilaa xad ay noqotay tu aan la garanoo ujeeddadeeda mugdi saaran yahay; tu laga naxo oo la colaadiyo; iyo, isla markaas, haddana, tu aad loo xiiseeyo oo loo riyaaqo, oo ugu badan soo jiidsashada iyo dhaqaajinta maanka dadka ?*

*La-yaabku haddii uu laba yahay, midkooda ah dhabanka iyo gacanta oo laysa saaro isaga gees inaga dhig. Kiisa kalee wax-ku-oolka ugu dhowi waa ka lagu salayn karo hawraarta laga soo weriyey Giriigii, waayo-taariikheedkii beri hore ahaa, taasoo odhanaysa "la yaabku waa hooyada falsafadda". Sidaa darteed, murtidu waxay ku jirtaa wixi la yaableh daba gal kooda iyo soo dibad saarka xidhiidhka caqli galka ah ee isku xidhaya dhinacyada ifafaaleyaasha is burinaya ama u muuqda wax is diiddan. Waxaan uga socdaa mid keliya oo ah; caqliga u jeellan murtida maansadan iyo kasha u xiisa qabta bilicdeedaba, wax baa kaga xidhan jawaabaha su'aalaha la yaabka leh ee aynu kor ku soo taabannay.*

*Marka ay tahay jihadee loo kacaa oo runta badibalaga raadiyaa, waxa hubaal ah, sida dadka qaarkii moodi karo ama is moodsiin karo, ma aha, kumana koobna sababta loogu heshiin la'yahay maansadani isla suugaantaa iyo curiyaheeda, waxaa inagu filan oo aynu kaga gudbaynaa mawaaqiifta kala jeeddaa waa wax dhex yaalla dadka kale ee ay maansadu halkooda ugu tagto ama la kulanto, isaga oo aanu hal-abuuraheedii kaba war hayn inta badan. Sidaas darteed, Hadraawi kamaba qayb galo fikradaha is-asaraaraya ee ku saabsan maansadiisa; waayo isagu wixii uu odhan lahaaba wuxuu hore ugu dhiibtay tixdiisa. Sidaan qabo haddiiba wax laga weydiiyo ulajeeddada*

*"Tixdaa", "Tuducaas", ama "Beydkaas" jawaabta uu ka bixiyaa marna ma noqonayso, tu lagu muran baxayo. Mar haddii ay sidaas tahay, waa inaynu xaqiiqada ka doonnaa bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda.*

## *II*

*Hadal iyo dhammaantii, jawaabaha laga bixin karo su'aalaha ku jeeda maansadan waxa lagala soo bixi karaa bulshada Soomaaliyeed oo hoos loogu fiirsado lana lafa guro waayaheeda nololeed iyo siday u saameeyaan wacyigeeda.*

*Bulshadaas waxa ku dhex jira cudur ku xididdaystay oo kala wada googooyey halbowleyaashii dhaqaaleed, bulsheed, siyaasadeed, dhaqameed iyo wacyigii ummadnimo ee dadka Soomaaliyeed isku xidhayey ee sugayey midnimada jiritaankooda bulshanimo.*

*Qaska iyo qalalaasaha dalka Soomaaliyeed muddo dheer ka soo jirey iyo heerka uu gaadhey burburka bulsho ee ka dhashay ayaa u sabab ah caqligii dadku inuu kala go'doomo, in dareenkoodii is-waayo oo ay duunka iska*

*nacaan. Sidaasi ayay ku noqotay in lagu kala fogaado aragtida laga qabo dunida lagu nool yahay iyo waxa ka socda ama ka dhacaya, in laysku diido awaalaha xilligan iyo dhibaatooyinka burburka bulshada Soomaaliyeed ay ku jirto iyo maxaa wacay iyo maxaa daawo u ahaba; in aragga, garashada iyo qiimayntu is-buriso oo hiyigu kala jeeddo noqdo; ilaa xad ay gaadhey in la waayo himilo iyo yool lagu wada hirto iyo ula jeeddo lagu kulmo iyo qiyam anshax dadnimo oo la wada xeeriyo, isku sina loodhawro.*

*Sidaas awgeed la-yaab malaha haddii lagu kala tago dareenka xiisaha iyo dhadhanka wacan iyo wixii soo jiitaba, oo aan laysku fan iyo suugaanba ahaanin.*

*Waaqica nolol bulsheed ee sidaas ahi wuxuu ku yimi, oo geedkiisu ka beermay awooddii caqliga, carrabka iyo ficilka wax qabashada dadka oo xadhig adag lagu jebiyey; god dheerna lagu ridey oo gaggaab culus lagu daboolay, waxa keenay aaya-xumada bulsheed waa xorriyad la'aan iyo dimuqraaddiyad la'aan, waana taladii dalka oo dadkii lahaa laga xarrimay, waa iyada oo la damiyey tamartii midho dhalka ahayd ee wadarta bulsheed, loogana dhaartay dhaqdhaqaaq xor ah oo maskaxeed, mid siyaasadeed, bulsheed, dhaqaaleed dhaqaneed iyo mid fan iyo suugaaneedba; dhaqdhaqaaqaas oo looga saldhigo baaxadda weyn ee ummadda iyo dhismaheeda guud, ayaa si nabada u maarayn lahaa dhibaato kasta oo la soo derista ummadda, midnimada garaadkeedana ilaalin lahayd. Markiise ay weydey taa, ayey kala baadiyowdey. Taa awgeed wacyi dadnimo iyo mid ummadnimaba waxa saaray oo buuxiyey meeshoodii wacyigii ficiltanka qabiilo iyo intii uu lahaa ee ahayd hiilada xigtanimada abtirsiinta dhiigga ah ee aan kala sooci jirin xaqa iyo xaq-darrada. Taasaa ula soo baxday wixii dhalankeedu ahaa, kuna aroorisey dhabbaheedii lagu yiqiin, kalana daadegtey qabiil, laf, reer iyo qoys intaba oo ula gashay wacyi salkiisu yahay hunguri iyo iska danaysi keli qofeed.*

*Haddii maansadan laysku maan dhaafay sida mararka qaarkood la maqmaqlo waxa isku maan dhaafay waa dadka caqligoodii wadareed, sida loo gebagebeeyey ee maankoodii garasho uu u kala lumay. Ma aha inay maansadani mugdi huwatey, ee sababtu waxa weeye, sida dadkaasi*

*ugu kala tageen aragga iyo aqoonsiga adduunka iyo waayaha noloshooda, waa sida ay dooc iyo dareen, danqasho iyo damacba ugu kala fogaadeen isla sidaa; ayaa xiisahooda iyo kal jeclaysigooduna u noqdeen waxaan isu iman karin; oo hiyiga rabitaankooda, qiyamtooda iyo dhadhankooduna ku noqdeen wax kala fog. Intaa ka dib waxa lamaseegaanku noqday in fal celintoodu noqoto wax iska soo horjeeda.*

*Arrimahaas dartood ayay maansadanna si kala tagsan ula fal galeen ugalana soo baxeen duluc murtiyeed is-burinaysa, mawaaqif iska soo hor jeedda uga kala qaateen. Kaddib intaas, haddii aynu ka raad raacno*

*taariikhdaas iyo dhacdooyinkeeda, aynuna kala soo baxno wixii maansadani xilligeeda kala kulantay, si aynu u hello dillo runta u marag kacda, waxaynu xusuus ugu noqon karnaa arrimo dhawr ah oo ay u mudan yihiin:-*

*Ta koowaad:- keli-taliyaha Siyaad Bare wuxu xoog hubaysan ku qabsaday awooddii talada iyo xukunka dalka 1969kii, isla markaas suugaanta Hadraawina; gaar ahaan, maansadiisu waxay hana-qaadday oo ay noqotay taabba-gud iyo tis-qaad, ayna gashay wacyiga dadka Soomaaliyeed; oo uu magaca Hadraawi caan baxay, sannadihii hore ee toddobaatanaadkii qarnigan. Wakhtigaas iyo muddo dheer ka horeba, way jireen rag badan oo kaalintooda muuqata ku lahaa suugaanta Soomaaliyedd; hase yeeshe, ma jiro, haddana, nin ay suugaantiisu*

*degdegaas oo kale, ku soo jiidatay cabsida iyo coolaadda nidaamka taliska cusub iyo gaar ahaan, ninka madaxda ka ah ee la yidhaahdo Maxamed Siyad Barre.*

*Intaan taliskaasi laba jirsanba waxa ku noqday laf dhuunta taagan oo uu liqi kari waayo, heesihii iyo riwaayado labiyo saddex ah oo ahaa kuwii u horreeyey ee Hadraawi ku caan baxay. Waxa Siyaad Barre iyo Hay'adaha amniga ee taliska welwel iyo walba-haar weyn ku ridey, baaxadda xiisaha dadweyne ee ay suugaantaasi soo jiidatey, sida ay carrabka dadka ugu dhegtey ee ay hadal-haynteedu goor iyo goob walba u noqotay tu socota; waxaa si laxaad leh u cabsi-geliyey fasirka wejiyada badan, iyo siyaalaha kala duwan ee marba cidi uga soo murti miirato, sarbeebteeda iyo sansaanka dhismaheeda farshaxannimo.*

*Marka loo sii dhabba galo fal-celinta Siyaad Barre iyo taliskiisaba waxay talo kaga ururtay daba-gal, juuq-dhegeysi iyo in dadka lagaga dhigo denbiculus; Siday tahay xashiish iyo wax maanka dooriya. Waxay gaadhey in curiyaheedu ku galo xabsi.*

*Ta kalee ee ah dabool saaran maansadan, waxay fikraddaasi bilawgeedii horeba ka soo fushey oo faafiyey Siyaad Barre iyo kuwo uu adeegseday; waxa ilaa maantana ku wehesha badiba kuwo kala mid ah aragtida, mawqifka iyo hab-dhaqanka.*

*In maansadani tahay tu shaqlan oo ay maro ku dedantahay, ma aha wax lagu xiiqo murankeeda. Su'aasha qudha ee meesha ku jirtaa waxa weeye, maxaa Siyaad Barre iyo nin la mid ahi arrintaas uga dhigayaan gol-daloolo ? Innaga oo aan meel dheer ka doonin, sabatu waxay tahay, maansadani waxa ay iyaga ku soo jeedinaysaa indhaha dadka; waxay soo dibad-bixinaysaa oo ay ilayska cadceedda oo kale ku daaraysaa fal-xumo badan oo ay mugdiga kula dhuumanayaan; waxay qaawinaysaa cawradooda iyo iimahooda; waxayna ku noqotay jeedal lala dhacayo. Sidaas ayay kula colloobeen.*

*Siyaad Barre, oo laga dhigan karo tusaasha (typical) looga tilmaan qaadan karo nin kasta oo ay isku asluub iyo fal dhaqan yihiin, mar walba lama huraan bay ahayd inay maansadan oo kale isa seegaan. Waayo, isagu sida uu xukunka ugu qabsaday muruq iyo xoog mutuxan, ayuu isla markiina ku meel dhigtay in talo adduunba tiisa noqoto. Wuxuu ku talo goostay in aan isaga cidi ku laba ahaan; in dareenka, garashada iyo aqoontuba ku gudhaan hawadiisa iyo damaciisa qof ahaaneed, ereyguna noqdo mid keliya oo isaga laga sugo. Ka dibna wuxuu bir afaysan ku doonay in layska wada dhigo oo laga wada maarmo hal-abuur caqliyeed, cilmiyeed iyo fan iyo suugaaneedba, laguna doorsado muhmal iyo mala-awaal, khudbado gola-ka-fuul ah iyo hadllo aan sal iyo sabab midna lahayn. Ma jirtooyin sidaas ah ayuu khasab ka dhigay in lagaga kaaftoomo hodannimada runta iyo xaqaa'iqa adduunka, nolosha bulsheed iyo fikirka aadamiga.*

*Sidaas darteed, suugaantiisu (Siyaad Barre) waxa ay noqotay tu halkaas ku sal leh oo ka jeesata isla markaana dayrisa runta kuna wacad furta xurriyadda, sharafka dadnimada iyo qiyamta fanka dhabta ah. Waxaa ka dhashay suugaanta hunguri raaca ah ee la yaqaanno.*

*Marka Siyaad Barre kaas yahay maansadanina waa tusaasha dhinaceeda kale ee looga tilmaan qaadan karo, fikir iyo ficilba, mawqifka jara-diidka ah, caqaliga iyo carrabka xakamaha qaadan waayey, ee ka xidhiidh goosan waayey runta, waaqica nolosha iyo qiimaynata dadnimada ku wacan.*

*Sidaas ayay maansadani bulshadeedii kaga meel weydey kuna noqotay kootarabaan iyo wax lala dhuunto oo meel madow lagula kulmo. Wuxuu talisko caleema saaray oo uu makarafoon cod-dheer siiyey ku-sheega heesaha afka Siyaad Barre ka waraaba ee ammaantiisa ku tasbiixsada, ereyada mugga yar ee damaca keli taliyaha lagu dhudhumiyey, dhinac kastana kaga saameelan; dhawaaqa qaawan oo aan wax u qarsoon lahayn, murti hoos u qodan, nuxurna ka arradan oo ka caydha ah hoga-tusaale meel la dhigan karo. Waxa sidaasi ah ayuu u masayray markuu colaadinayo maansadan oo kale.*

*Haddii uu maansadan dhaleeco uga dhigay inay wax dedayso daboolka saarani waa huga qurxoon ee ay huwantahay;waana shaqalka iyo hagoogta farta gaashaysan ee qaabka fannimadeeda/ taas oo ah shardi aan ka maqnaan karayn fanba dhammaantii. Waxa didinayaa taliska waa habka af-gobaadsiga ah iyo dhismaha dabuubta dadban ee u dhigan hannaanka sarbeebta iyo maahmaahda ah ee ay ku salaysan tahay mug weynideeda iyo qaadkeeda murtida aad u ballaadhan ee ku dherersanaysa jiritaanka nolosha aadamiga xilli kasta iyo meel kastaba.*

*Sidaas awgeed, haddii ay dhacday, in siyaalo kala duwan loo fasirtay ama loo arkay murti kala jaad ah oo xilliyo iyo meelo kala duwan, marba cidi*

*goonni ugala soo baxayso oo ay ugu dabbaqayso waayaha hadba nolosha ka jira, taasi waa marag u dhacaya maansadan oo furaya inay kaalinteedii gudatey.*

*Ta labaad:-Waxay marar badan maansada Hadraawi iyo raga kale oo jidkiisa raacay, la kulmeen canaan iyo guhaad kaga yimaadda laba geesood, wada jir iyo kala jirba. Waxa dhacda,tusaale ahaan, qolooyin u tirsan suugaanta, weliba maansada soomaaliyeed, oo isku daya inay ka hadlaan waayaha colaadeed ee maanta dalka Soomaaliya sida baas uga oogan, ha-yeeshee gabayadoodu aanay, weelba u noqon karin nolosha dunida maanta jirta iyo waayaheeda.*

*Nimankaas tixdoodu duluc iyo qaab midnaba wax kama duwana gabayadii ay laba nin oo gabyaa, taariikh beri fog ahayd, isu celin jireen, marka labadooda qabiil colaadtamaan. Kii ay wax u raacaan waa dummaddiisee badiba isha ay adduunka ku eegaan xilligan iyo habka ay uga maansoon karaan ayaa kaas ah.*

*Qolada kale, oo iyaga toodu la yaab noqon kartaa waa kooxda aqoonta tacliimeed leh ee loogu erey bixiyey in-dheer aragto. Waxa ku jira oo ba-danka tilmaanta hadalku u dhacayaa kuwooda Jaamacadaha adduunka hore u maray ka soo baxay ee haddana caqligoodu dib ugu guurey heer nololeed oo taariikhda bulshadu ka soo hayaantay oo ay ka kortay. La yaabku waa sida maankoodu isaga hor imanayo ee koodii weliba laba iyo ka badan u kala yaallo. Waxaa taasi inoo muujinaysaa labada carrab ee midkoodna ka hadlo Yurub iyo Ameerika oo kale, ka kalena ka hadlo Soomaaliya iyo sida labadaa carrab iyaga oo qof qudha ku wada yaalla ay haddana u kala fog yihiin. Sababtu waxay tahay, waxa dhexdiisa ku hirdamaya laba wacyi oo is-burinaya; ka hore oo la xidhiidha tacliinta iyo aqoonta casriga ee xadaaradda adduunka maanta laga kasbaday, taasoo tiyoori ahaanna ay ku dabbaqaan afkaartooda guud ahaan;iyo ka labaad oo la xidhiidha caqliga dib-u-guurka ah ee ay dabbaqaan afkaarta xintanka qabyaaladeed, iyo hab-dhaqankeeda shirqoolka ahba, marka ay ka hadlayaan waayaha soomaaliya iyo loollankeeda siyaasadeed.*

*Kuwaas, sida garaadkoodu uga lumay oo uu uga hallaabay abbaartii toosnayd ee u geyn lahayd garashada heerka nolosha bulshada iyo socotadeeda taariikheed, ayay maansadanna marinkeeda ku seegeen oo uu maankoodu ku gefey una garan la'yahay dulucda iyo farshaxannimada quruxdeeda.*

*Ta saddexaad:-Dadweynaha ballaadhan eesoomaaliyeed, iyadoo aanay ka wada madhnayn kooxaha indheer-aragtada iyo dabaqadaha dhexe ee reer magaalka ah, si'aad u weyn ayuu u xiiseeyaa oo ay u soo jiidataa maansadani. Ha yeeshee marka dadweynaha ballaadhan iyo mawqifkiisa loo fiiro yeesho waxa inna hor imanaya laba ammuurood oo kala kaan u*

*yaalla, sidaas darteedna lays weydiin karo sida ay isu raaci karaan. Midi waxa weeye, dadweynaha ballaadhan, wacyigiisa garasho ama sida uu u eego waaqica noloshiisa iyo waayahiisu waa majare ku salaysan abbaartii bulshadii qabiilka iyo reer reerka ahayd ee waayadii tegey jirtey. Sidaas darteed, wuxuu dad-weynahaasi ku suurayn karaa oo ay xaaladda nolosha maanta jirtaa ugu muuqan kartaa sidii waayadaasi tegey wax ahaan jireen;kadibna wixii laga odhan karo iyo sidii wax looga odhan karo, gaar ahaanna markay maanso tahay, iyadana wuxuu u arki karaa dad-weynahaasi, inay noqon karto qudha sidii waayadaas wax loo odhan jirey, ee hawraarta maansadii sooyaalku ay ahaan jirtey. Taasi waa taas.*

*Ta kalee barbarkeeda taallaa waxa weeye, sida xoogga leh ee haddana ay maansadani u soo jiidato una xiisa geliso, dadweynahaas, ilaa xad uu ka door- biday oo uu ka jecel yahay maansada u taalla qaabkii sooyaalkii dhismaha maanseed ahaa ee dadweynahaasi u soo bartay, sida aynu halkan ku soo sheegnay waxaa lays weydiin karaa sababta ay maansooyinkii qabyaaladeed ee dalka ka socdey laga soo bilaabo 1979 iyo ilaa siddeetanaadkiiba, ee weliba sida xoogga leh looga maalgelinayey dhinaca taliska Siyaad Barre iyo dhinacyo kale oo maal-qabeen ahba, ay haddana, sinaba ugu tis qaadi waayeen;nin tiriyeyna uu uga aayi waayey magac iyo xusuus toonna;halka ay maansadan oo talisku dalkeeda ka dayriyey, dadkeedana ka xarrimay, ay haddana ka noqotay tan maalin iyo habeenba carrabka lagu hayo.*

*Labadaas arrimood ee u muuqda waxaan is-raaci karin, waxay ina tusayaan, ka sokow xaaladda caqliga kala dhanbalan, ee ay xilligan bulshada soomaaliyeed ku jirto guud ahaanba, dabeecadda kala guurka ah ee marxaladdan taarikheed. Waa marxalad ay bulshada soomaaliyeed kala jiidanayaan dhaqankeedii hore ee ka soo jeedeydhisma bulsheedkii ku salaysnaa xayn daabka abtirsiinta dhiigga iyo wacyigeeda bulsheed oo dhinac ah;iyo dhinaca kalena, lama huraanka ummadnimada soomaa-liyeed iyo gobannimadeeda, qarannimadeeda iyo dhismaha xi-dhiidha-deeda siyaasadeed, dhaqaaleed iyo dhaqameed ee sugaya midnimadeeda.*

*Hase yeeshee, haddii uu dadweynahaas ka suuliyey waaqica nolosha bulshada marxaladdan, dhaxal adoo, iyo aqoon iyo waaya-aragnimo laga hayo heer nololeed seben hore oo tegey ahaa, hawraarta maanseedna ay weli(badideedu)la tahay, tu qaab iyo dulucba, loo sargooyo oo looga sees iyo saabba dhigo habkii raggii hore u dhigeen, haddana maansadan oo kale ma weydo jid ay u marto dareenkooda iyo maankoodaba.*

*Way jirtaa oo dhab ahaan, lama beenin karo in maansadani leedahay qoto dheeri ka durugsan inta araggoodu gaadho, hase yeeshee, isla markaas, waxa aan marna is-waayin xiskooda dhalanka ah ee caa-fimaadka qaba iyo qiyamta dadnimada guud ahaaneed ee ay maansadani daafacayso.*

# III

*Waxa inoogu dambeeya erey ku saabsan maansadan lafteeda. Hase ahaatee mar haddii aanu suura gal ahayn faahfaahin iyo ballaadh loo guda geli karaa aan isku koobno inta u yar ee ah lagama maarmaanka.*

*Inkasta oo aynu suugaanta Hadraawi is-weydiin ku nidhi, ma noqon kartaa ifafaale goonnidiisa ah, ugama jeedo taas in suugaantaasi tahay cir-ka-soo dhac. Sida aan qabo suugaantaasi gaar ahaanna, maansadan inna hor taallaa tu kasta oo kale, way kaga xidid iyo qoto dheer tahay bulshada soomaaliyeed iyo heerarka taariikheed, shalay iyo maantaba; waxayna ka waraabtaa hiddaha iyo dhaqanka bulshadaasi iyo dhaxalkeedii suugaaneedba. Ha yeeshee goonninimadeedu wuxu ku jiraa habkay ula xidhiidh leedahay inta aynu soo sheegnay.*

*Dhinacyada laga sahamin karo xidhiidhkaas iyo nuxurkiisa, waxa ka mid ah suugaantiisoomaaliyeed ee sooyaalka ahayd iyo maansadan, waxa ka dhexeeya; dulucda murtiyeed ee maansada Hadraawi, sida ay uga tibaax celinayso ama ay u cabbirto waaqica nolosha maanta iyo mustaqbalka labadaba, qaab dhismeedkeeda maanseed ee goonnida ah; iyo waxa ay la wadaagto ama kaga duwan tahayba maansadii sooyaalka ahayd ee Soomaaliyeed.*

*Maansadii sooyaalka[1] ahayd haddii aynu iyada ku hor marno iyo maansadan waxaa isku xidha oo ka dhexeeya isirnimo ay wadaagaan;waxaa la odhan karaa maansadan Hadraawi waxay horseed u tahay ambaqaadka koritaanka taxanaha suugaanta soomaaliyeed oo ka xuub siibanaya, korna uga gudbaya heerarkii hore, una tallaabaya heerar iyo hirar, ka xeeldheer kana ballaadhan, kuwiihore.*

*Sidaas darteed maansadani waa xalaqo iyo meeris cusub oo ku soo biiray meerisyada is-daba yaalla ee taariikhda suugaanta Soomaaliyeed.*

*Tusaalayaasha u mudan ee inna tusaya waxay maansadani tii hore la wadaagto waxa ka mida, luqaddii suugaaneed ee hiddaha soomaaliyeed lahaan jirey iyo sida ay maansadani, teeda ugu astayso ee ay ugu yagleel dhigto. Run ahaanna, astaanta u horraysa ee farta Hadraawi lagu soo sooci karayaa waa habkii luqada ee ay lahayd suugaantii sooyaalka ahayd;ereyadeedii cuslaa iyo suuradaheedii gaarka ahaa. Waxa kale oo ka mid ah tusaalayaasha, fan hiddoodkii (Folklore) soomaaliyeed, haddii uu yahay suugaantii raggii hore ula baxay Haloosiga(heesaha ciyaaraha hiddaha iyo dhaqan, heeso hawleedyada iwm)ama yahay hawraaro maahmaaheed iyo dabuub hadal murtiyo lagula baxo iwm. Halahaas oo dhanna, maansadani aad bay hodan ugu tahay, waxa raaca oo iyana*

*1 Sooyaal waxa halkan looga jeedaa tarjumadda ereyga laatiinka ah ee "Classical", xilli ahaanna maansada soomaaliyeed ee sooyaalka ah halkan waxaannu uga jeednaa tii ka horreysey maansadii ka soo bilaabmay xarakadii gobannimo doonka ee afartaneeyadii qarnigan cusub.*

*tusaalayaashaasi ka mid ah habkii dhaqanka bulsheed ee hore sida. Caadaadkii iyo curfigii iyo qiyamtii aasaaska u ahaa nolosha bulsheed iyo xadhkaha isku xidha, xuduuddana u dhigayey fal- dhaqanka asluubta iyo anshaxa dadku ku wada socdo, guud ahaanba.*

*Waxaa la mid ah oo tusaalayaashaas raacaya degaanka dabeecadeed ee ay bulshadaasi ku noolayd, xidhiidhka ay la lahayd degaankaas, marka la eego heerka ay waagaas ku sugnayd;taasoo saamayn jirtey shucuurta, garaadka iyo dhadhanka dadka, sidaas awgeedna ka muuqaal celin jirtey oo raadkeedu ku yaallo sooyaalkii suugaaneed ee taariikhda bulshada Soomaaliyeed isa soo dhaxalsiisay. Isla dhinacanina waa mid suugaanta Hadraawi ka waraabto oo ay tixdeedu ka midha goosato xadhigeedana uga maydhax diirato.*

*Arrimahaas xaqiiqadoodu waxay inoo soo baxayaan marka aynu hoos ugu fiiro yeelano maansada halkan ku daabacan luqadeeda, eray-tusmeedya-deeda iyo dareenka ladhka wata iyo habkay u cabbirayso, qiyamta ay daafacayso iyo guud ahaanba sawirrada ay ka bixinayso. Haddaynu tusaalayaal kooban ka soo qaadano waxa ka mid ah beydadkan, sida googo'a ah u yaal ee aanu maansada Gabadh Madow ka soo dhex siibney iyagoon tuduc u qabyo tirnayn:-*

*Garayskaygu waa xeel*
*guntigaygu waa ciil.*

*Labadaa beyd marka la akhriyo erayadooda waxa lagala soo baxayaa bulshada ay ku abtirsanayaan, hiddaheedii iyo suugaanteedii. Waxaa la mid ah iyana kuwan soo socda:-*

*Maxaa gegi dabayliyo*
*gocondhaley cagaagliyo*
*galoof iyo candhooliyo*
*geyi lama deeganiyo*
*Guban lagu asqoobiyo*
*gabno iigu yeedheen.*

*Ereyadaasina waxa ay tilmaamayaan ka sokow luqada iyo ereyadeeda, xidhiidhkuu dadku la lahaa degaanka dabeecadda iyo noloshii dhaqaale iyo dhaqan ee uu lahaa iyo raadka ay ku lahayd shucuurtooda iyo sida ay wax u dhadhamiyaan; qadhaadh iyo macaanba; Waxa ay jecelyihiin ee ay ku farxaan iyo waxay necebyihiin ama ay dhibsadaan intaba.*

*Gebi ahaanba, maansadan, tix kasta oo aad soo qaadato sidaas ayaad ugu soo sooci kartaa dhaxalka hiddaha bulsheed iyo suugaantiisa ay ku abtirsanayso, xidhiidhka adagna la leedahay, ha yeeshee ta ay maansadani soo kordhisey ee ka goonni yeeshay suugaantii sooyaalka ahayd, waa arrin laba dhinac leh oo isku xidhan. Ka hore waa ujeeddada iyo adduun araga maanseed iyo mawqifka tixda; Ka kalena waa qaabka dhismaha maanseed*

*ee gaarka ah ee ay maansadaasi uga weel dhigayso dulucdeeda iyo habkeeda farshaxanimo.*

*Maansada Hadraawi waxa damqa oo ladhka ku kiciyaa waa nolosha dadnimada guud;yoolka hirashadeeda guud;waana samaha nolosha aadamiga guud ahaanba, gaar ahaana, waxay toos uga dab qaadataa waa nolosha bulshada Soomaaliyeed ee xilliga maanta ah jirta, waayaha ay ku sugantahay iyo dhibaatooyinkeeda wejiyada badan leh.*

*Waxay cabbiraysaa nolosha dadka Soomaaliyeed maanta ku nool yahay iyo haaraha ku yaal, waxay tilmaamaysaa hamigooda iyo riyadooda, himiladooda iyo hirashadooda, hibashadooda iyo yididiiladooda;waxay waddada u jexaysaa guusha halgankooda; waxay ka digeysaa murkucashadiisa iyo wixii keeni kara.*

*Taas macneheedu waxa weeye, oo ay ina tusaysaa, in maansadani dhinac iska dhigtay, ka tagtay oo ay u deysey marxaladeedii taariikheed, dhawr waxyaalood oo ay u mudanyihiin ujeeddadii maansayahankii waayadii hore u maanso dhigan jiray;taaso mawduuceedu badiba ahaa faan, amaan, canaan iyo dhalliil, aflagaado, calaacal, cabasho iwm.*

*Waxa raaca, aragtidii iyo ficil qaadashadii, ku dhisnayd bulshada abtirsiinta iyo xidhiidhka xigtonimada; taas oo saamayn weyn ku lahayd maansadii sooyaalka ahayd. Tusaale ahaan maansayahankii waagaas, adduunkiisa iyo sida uu u arkayo, u qiimaynayo, ulana fal galayo, ee maansadiisuna u cabbirayso, waxa xukumi jirey oo aasaas u ahaa, xidhiidh bulsheedkaas ku dhisan abtirsiinta dhiigga. Dadnimada iyo qiimaheeda wuxuu siin jirey tolkiisa sidaas awgeednahammiga iyo hirashada maansadiisu marka ay qadiyadda dadnimada tahay waxay ku soo go'ayeen reerkiisa ama sokeeyihiisa. Dadku wuxuu ugu qaybsanaa sokeeye iyo shisheeye; wax kasta oo wanaag ah waxaa lahaa sokeeyaha, xumaan oo dhanna shisheeyaha.*

*Sidaas awgeed, habka qiyamta bulsheed (System of social values) ee maansadii sooyaalka ahayd cabbireysey wuxuu ku dhisnaa wacyi aanu adduunku, gaar ahaan, jiritaanka aadamigu, u lahayn nuxur mideeya oo sugaya dadnimada ka dhaxaysa; sidaasna aanu qiime isku mid ah ku siin karin. Halkaas ayay ka timi, in laba weji oo iska soo hor jeeda, loogu dhaqmo, oo maansadii sooyaalka ahaydna raacdo qiyamta dadnimo; taasoo noqotay wax la rogrogan karo, oo hadba sidii danta dhow lagu gaadhi karo, laga yeelo. Waxaa ka dhashay in fidnada, dilka, iyo dhaca iyo ficil kasta oo loo yaqaan gardarro (Tolka dhexdiisa)marka nin wax is moodey kula kaco qolo shisheeye loo arkayo, ee uu ku helo ammaan iyo magaca geesi oo loogu yeedho.*

*Iyada oo halkaas ka soo jeeda, maansadii sooyaalka ahayd waxay lahayd laba kayl ama cabbir oo iska soo horjeeda, oo ay laba nin, laba reer,ama sokeeye iyo shisheeye, midba si goonni ah, miisaanka qiyamta dadnimada*

*u saarto. Waxay ku dhisnayd mabda'a cidhiidhiga ah; "Tolkaa gar iyo gardarraba u hiili" iyo "Ninna intuu kuu jiro kuuma soo dhaafo".*

*Odhaahdaas ayay maansadii sooyaalka ahayd farriinteeda siddey. Taasoo ahayd: "Nabadda, xorriyada, xaq-soorka barwaaqada nolosha, xurmaynta tolka iyo xididka, xaq-dhawrka waalidka iyo waayeelka, dusha, deeqda iyo doodda; magaca hal-abuurka, geesiga iyo wax kasta oo wanaag ah oo sharaf lagu helo giddigoodba, tolkaa la jeclow oo la doon oo nin kasta oo kale uga buri." Farriintaas ayay maansadii sooyaalka ahayd dusha ku qaaday; maansada Hadraawise, taas way ka diiddey oo waxay u deysey halkeedii iyo xilligeedii sabaan tegey ahaa.*

*Maansada Hadraawi waxay gees iska dhigtay, kadabar goosatay oo ay hayaan dheer, hore uga guurtey, wacyigaa bulsheed iyo habkii dhismaha qiyamtiisa ee soo gunta dhowaa, wejiyada is burinayana lahaa.*

*Waxa inoogu danbaysa oo iyana ka mid ah, waxyaallaha goonni yeelay maansadan, qaab dhismeedka iyo habka farshaxanimadeeda faneed. Isaga oo aan maansayahankani inaba ka tegin, oo uu aad u xurmeeyo, shuruudaha guud ee maanso oo dhan lagu yaqaan, gaar ahaana, si goonni ah u dhawra kuwa summada iyo baadi-soocda u ah maansada Soomaaliyeed, ayuu haddana maansadiisa ka xorreeyey koobnidii saabkii cidhiidhiga ahaa ee maansadii sooyaalka ahayd, una geliyey qaab mug weyn leh, oo koobi kara adduunka maanta iyo qaddiyadda dadnimada guud, iyo gaar ahaan mushkilada Soomaalinimada ummadnimada iyo gobannimada; isla markaana uu u dhigay qaabkaas, farshaxanimada maanseed ee sida ugu haboon u cabbiri kara, nuxurka midka ah ee nolosha aadamiga, taariikhda bulshada aadamiga iyo gedgedoonkeeda.*

*Maansadii sooyaalka ahayd waxay dulucdeedu ahayd duni kala googo'an;wax kastaba waxay uga hadli jirtey si toos ah. Ficilka dhacay; qofka ama cidda fashay; wakhtiga iyo meesha intaba, si toos ah, ayay u magac dhebi jirtey;guud-mar iyo duuduub midnaba may aqoon. Sidaas darteed, tixda maanso ee waagaa ahayd, warkeeda, micnaheeda iyo murtideedu muran ma geli jirin; wixii curiyaheedu uga jeedey ee uu ku talo galay in laga fahmo, wax dheer, cidina kalama soo dhex bixi karayn, umana ay baahnayn madaxoo lagu daaliyo.*

*Maansada Hadraawi sidaasi way ka duwan tahay, mana aha tix munaasabad iyo dhacdo, maalin iyo meel sugan leh. Maansadani ugu horraynba, waxay jebisey qoqobihii cidhiidhyoonaa ee ku koobnaa, goob, wax ka dhacay oo la taaban karo; waxayna qoqobahaas uga baxday adduunka ballaadhan iyo baaxadda nolosha aadamiga. Waxay isku kala bixisay adduunkaas, afartiisa geesood iyo dhumucda sebenka iyo taariikhda aadamaha, tagtadeedii, joogaheedii maanta iyo timaaddadeeda. Waxa u suurageliyey inay cabbirto intaaso dhanba waxay*

*qaadatay, oo ay ka dhigatay agabta ay ka weel tolato qiyamka dadnimada guud, fikradda, mabda'a iyo hal-tusmeedka guud marka ah.*

*Sidaas darteed, waxa taabashada gala (concrete) ee la xidhiidha falka iyo dhacdada wakhti sugan iyo maalin go'an leh, maansadani kuma ekaato, kumana hakato, inay ka shidaal qaadato mooyee, Markiiba nuxurka oo qudha iyo murtida guud ee duuduubka ah (abstract), ayay u dhigtaa hab hawraareed ma-guuraan ah (Universal).*

*Waxa masaladaasi inna xusuusinaysaa, sida maansadii ay dhashay xarakaddii gobannimo doonka Soomaaliyeed, gaar ahaan, intii ka dambaysey 1969kii iyo madax bannaanidii qarannimo, ay dhakhsaba uga taabgaabatay, ilaa ay ku guul-darraysatay in ay ka buuxsato, kana yool gaadho ka-tiraab-celinta maanseed (Poetic expression) ee dulucda gobannimada bulshada Soomaaliyeed ee dhalatay iyo aayaheeda. Sababteedu waxa weeye, wacyiga bulsheed, aqoontii iyo khibraddii maansooyinka xilligaas ayaa suuragelin kari waayey in maansadu jebiso oo ay ka gudubto duluc murtiyeedkii iyo qaab-maanseedkii sooyaalka ahaa.*

*Tusaale ahaan, markii maansa-yahankii si kale oo dhan uu ku garan waayey ayuu dooney in uu ku suureeyo wax uu garan karo oo uu meel sugan ugu hagaagi karo, soona taaban karo xaqiiqadiisa. Sidaas ayay ku timid hasha magaceedu ku caan baxay "Maandeeq", taasoo laga dhigtay calaamad lagu astaysto loogana tilmaan dhigto gobannimadaas. Mar kase hoos loogu sii fiiro yeesho tilmaamashada hashaasi, waa suurayn iyo sarbeeb aad ugu yar oo aan sina u qaadi karin qaddiyadda ay u taagan tahay, ama looga tusaala-qaatay iyo nuxurkeeda ku saabsan qaranimo ummadeed iyo nolol bulsheed ku dhisan ilbaxnimo xadaaradeed iyo horuu markeeda maaddiga iyo ruuxiba ah.*

*Maansada Hadraawi waxay martay waddo taa ka duwan, taasoo u suura-gelisey inay sahankeeda ku guulaysato, jid cusubna u jeexdo maansada Soomaaliyeed. Jidkaasi waa ka aynu soo taabanayoo waxaa weeye wacyiga abwaanka sida ugu ballaadhan uga buuxsadey garashada caqliyeed ee adduunkiisa iyo bulshadiisa iyo mawqifkiisa dad-nimada u hiilaya; dareenka maanseed ee ka dab-qaata waayaha nolosha aadamiga, hadba waxyaalaha la taaban karo ee socda; waxa dhacay oo dhacaya ee goob, goor, mid mid iyo hadba wejiga ay u dhacday ku kala duwan; ka dibna intaas oo dhanba ka tuujinaya nuxurka xaqiiqda iyo qiyamta guud-marka iyo duuduubka ah ee ka koraysa waaqica la taaban karo iyo waayahiisa maalinba wejiga goonnida ah la yimaadda; ama diirka iyo midabbada ku kala duwan leh; ugu danbayntana jidkaasi waa ka hoos mar kale u soo dega ee la muquura faraha jiritaanka adduunka, jiritaanka aadamaha iyo waaya-aragnimada taariikhda iyo dhaxalkeeda aqooneed, wixii ay fan iyo suugaan lahayd, wixii ay sheekooyin iyo ustuurooyin*

*lahayd iyo intii ay lahayd murti iyo hawraaro nuxur wax laga taransado leh. Marka uu intaas oo dhan uga ood gooyo, waa ka waaqiciga nolosha dadka iyo maalinba sida ay u taallo tib iyo mooye u qaada ee inta uu baal qaado lafta iyo dhuuxa jebiyo adduunkana dhisme kale u celiya, una yeela xidhiidho sansaan iyo hab cusub leh oo hannaan kale u warramaya.*

*Halkaas ayay ka soo jeedaan suurooyinka iyo sarbeebaha hadalka dadban ee habkaa u-yaal iyo u-dhiganka u soo ururinaya ee hoga-tusaalaynaya nuxurka murtida ma-guuraanka ah ee xaqiiqada nolosha aadamiga iyo jidka hayaankeeda joogtada ah. Halkaas ayay maansadani ugu tagtay ma suulaanka qiyamta xaqa, runta, samaha iyo inta ka soo hor-jeedda ee nolosha aadamaha dhexdeeda kula hirdamaysa, sida beenta ama baaddilka; sharka iyo inta hirdankaasi dhalo. Isla mar ahaan, dhismaha cabbirka ma-guuraankaas murtiyeed ayaa dhalay fan cusub oo qaayo iyo qiimi farshaxannimo oo qurxoon leh.*

*Hab-dhigaalka murtida ma-guuraanka ah ee aadamigu wadaago, ayuu ku jiraa mugga weyn ee qotana u gunta dheer, dadabna u kala baxsan, taas oo maansadan awood u siisay, in ay si wacan uga bogato qaddiyadda bulshada Soomaaliyeed, gobannimadeeda, qarannimadeeda iyo dhismaheeda ummadnimaba, taas oo ay weliba ula gudubto oo ay ku hoyso hoyga qaddiyada dadnimada guud ahaaneed.*

*Aynu ku soo gebagebeyno qodobkan, saddex dhinac oo ku lug leh wax maansada Soomaaliyeed ku cusub oo ay maansadani soo kordhisey ama u sii durkisey hirar hor leh.*

*Waxaad maansada ku daabacan diiwaankan ku arkaysaa, gaar ahaan, qaybteeda labaad, ee tixda Daalacani ballaysimayso, astaamaha afka Carabiga looga yaqaan "Malxamada".[2] Waxaa lagu tilmaansan karaa, mawduuc-qaadashada tixda aan ahayn hal keliyaalaha ee ujeeddo badanta ah, ee faraqyada iyo laamaha badan leh; adduunka ballaadhan ee ay hadba dhinac iyo weji hor leh, ka deymoonayso ee ay marba si u lafa-gurayso, murtidana ugala soo baxayso; socodka geeddiga tixda aan meel qudha taagnayn ama ku wareegaynin iyo dhadhanka daraamada sheekada ah ee ay leedahay. Astaan guud ahaaneed ka sokow, waxay maansadani leedahay tixo malxamo toos ah, sida Dibadyaal iyo Goljanno.*

*Ta kalena, waxay maansadani meel marisay oo gaadhsiisey hirar durugsan, soo noolaynta iyo reer gelinta hanti luqadeed iyo suugaaneed oo dhaqanka Soomaaliyeed lahaa, ha yeeshee ku socdey duugow, tasow, iyo ilaa inay aakhirka dhimasho ku dambeeyaan. Waxaa raaca oo xusid mudan, ka xoraynta in badan oo ka mid ah miisaanka maansa-da*

---

*2 Mar haddii aan Af Soomaaliga laga heli karaynin erey u dhigma ereygaas Carabiga ah, ayaan sidiisa ugu qaatay halkan.*

*Soomaaliyeed, fan-hiddoodkii heeso ciyaareedka iyo heeso hawleedka oo qudha badiba u dabranaa; taas oo ay*

*Maansadani in badan oo miisaankaas ka mid ah gelisey una adeejisey hawraarta maanseed, tallaabooyinna hore ugu sii wadday halkii raggii Hadraawi hortii bilaabay arrintaas ku simay.*

*Waxaa iigu danbeeya oo aan kaga hadhay; maansadan waxaa gunteeda u dhaadhici kara oo sirteeda soo heli kar, qof garasha ballaadhan oo caqliyeed u leh waaqica nolosha bulshadaSoomaaliyeed iyo adduunkaba, kashiisuna qaaddo, oo dareen-danqasho u leh wanaaga dadnimada guud; ka dibna, ah qof aan maansadan ula iman maqalka dhegta oo qudha, kana sugin war, wixii maansayahanku ku talo-galay oo aan wax dheer lahayn; balse fakiriya, maskaxdiisa la fal gelinaya maansada, la doodaya oo tiisa ku darsanaya. Taas ayaa qof walba u jideynaysa in uu obocda maansada kala qalo oo sida ay isaga ugu qumantahay u kala saafto, oo kala soo baxo murti iyo ujeeddo, isagu goonni uga sahansaday.*

***Rashiid Sh. Cabdillahi Xaaji Axmed***

# EREYGA CURIYAHA

## I

*Way fiicnaan lahayd in aadamuhu isku aragti ka yahay waayaha nolosha kala soo dersa ee soo xidhiidhsanaa intii nololi dunida ka soo jirtey, sababaha dhaliya dhibaatooyinka iyo xaaladaha kobciya, isla mar ahaana wada tashi ka yeesho habkii xal waara loogu heli lahaa mar kastoo ay ahayd, marxalad kastoo la marayo hadday tahay heer caalamiya, qarameed, goboleed, degmo, urureed ama kooxeed ama heer kastoo ay gaadhsiisantahay.*

*Mar haddiise, wadarta dantu midaysaa is weydo, oo ay hawshii wax ka qabadka dhawareyseyna halkeedii tahay wixii la qaban lahaana, go'aan qaadashadii iyo fulinteediba ay noqotay wax ku xidhan dedaal shakhsiyeed iyo wax ku kooban keli keli iyo qof iyo sida ay isaga la tahay, oo xataa hadday tan ugu haboon tahay nuqsaanteeda leh, natiijada cidda u iilanaysaa waa himiladii danta guud. oo marin habawda.*

*Sidaa awgeed, ayey maansooyinka buuggan ku urursani yihiin ra'yigayga qofeed oo ka dhashay aniga iyo la-fal-galkaygii nolosha, sidii aan u arkaayey, inta fahamkeeda ay garashadaydaaqooneed iiga goysey, iyo intii waaya aragnimadu i tustay, goor iyo xilli kasta oo ay ahaydba, iyo sawirka aan ka bixin karayey, wax yaabihii ka dhacayey hareerahayga, ifafaalaha hadba waayaha ka jira, nuxurka awaalaha xilliga, sababaha iyo tiraab celinta iyo jawaabaha aan ka bixin karayey su'aalaha nolosha, iyo sida xalku ku jiro oo aanan marnaba lahayn waa tii kama danbbaysta ahayd iyo dariiqada qudha ee lagu gaadhi karo ujeedada sugan.*

## II

*Waxa xus iyo xusuus mudan arrin sida aan aaminsanahay qof kastoo dareen dadnimo iyo daymo u qalanta garasho caqliyeed ku qiimeeya, maan-dheelliyayo markay hor yimaadaan xaaladihii murugada lahaa ee taliska Siyaad Barre geyeysiiyey umadda Soomaaliyeed. Ayaan darrooyinkaas oo aanay jirin meel ay seegeen iyo cid ka badbaadey, ka dib markii qofka denbi looga dhigay ku dhaqanka xaqiisa muwaadinnimo, agaabaynta dantiisa iyo aalaynta ra'yigiisa qof ahaaneed. Taas oo uu ka lahaa inuu ku hor joogsado tix-maanseed madax bannaan iyo cabsi gelinta ciddii ku dhirran lahayd wax intaas ka sii durugsan.*

*Kala qubnaantii iyo kediskii xadhiggu ku yimi cadaadiskii i saarraa iyo daba galkii Ciidamada amniga, qaabkii aan kaga oo baxay dalka markaan ku soo biiray halganka iyo dagaalka hubaysan oo qudhiisu qarsoodi ahaa*

*awgood ayaa maansada halkan ku qoran qayb ka mid ahi gacantayda ka baxday.*

*In kastoo aan isku deyey inaan xusuus ku halo wixii iga lumay, haddana waxaan jeclahay inaan akhristaha xusuusiyo in gaar ahaan qaybta kowaad iyo qaybta labaad iyo guud ahaan wixii is dhaaf lagala kulmo ay leeyihiin sababaha aan kor ku soo qaaday. Waxaa iyana soo hadal qaad mudan in afartaneeyo maanso oo badidoodu koob koobantahay ay halkan ka maqanyihiin.*

## *III*

*Waxa qiimaheeda leh oo meesha ku jirta inaan halkan ku sheego, waxa weeye, duruufihii adkaa ee aanu ku sugnayn xilligii aanu isku raacnay in maansooyinkan qaab buug loo daabaco. Ka sokowwelwelkii xaaladda guud ee aanu la wadaagney ummadda Soomaaliyeed, iyo gaar ahaan intii halganka iyo aragtida danta guud na midayso, marka laga yimaaddo, waxaa xusideeda leh, arrimo gaar u ah Diiwaankan, iyo daabacaaddii aqoon, fan, farsamo, iyo dhaqaaleba leh iyo xaaladaha fara madhnaanta ah ee aanu ku sugnayn, oo aanu u sii dhigi karo sida hoos ku qodobbaysan.*

*1. Iyadoo aanay gacanta noogu jirin wax qalab daabacadeed sheegtaa, teebna Alle ha ka yeelee.*

*2. Iyadoo aannaan u haynin wax miisaaniyad iyo dhaqaale ah oo lagu fuliyo hawsha daabacaada oo ku siman wax qalin iyo waraaq la siisto.*

*3. Duruufaha nololeed ee aanu ku sugnayn oo aad u adkaa, ahaa xaalado aanu qoraal baaxaddan le'egi ka suuro geli karo, xaalado degganaansho aanay jirin, qoraal iyo hawlihiisu ku ansixi karaan, guri iyo Qalab fududeeya hawshan oo kale.*

*4. Iyadoo aanaan tahli kareyn hawl gelinta dad khibrad iyo takhasus gaara u leh hawlahan annaguna aannaan sheegan karin ama buuxin karin shuruudaha iyo awooddii cilmi iyo cududeed ee hawshan qabyo tiri lahaa, hase yeeshee midda taasi aanu kaga gudubney waxay ahayd go'ansigii in loo hawl galo sidii Diiwaankani u soo bixi lahaa, ficilkii lagu guda galay iyo adkaysigii wax kastoo naga hor yimid, iyo ummad farabadan oo aanu gacan ka helley ayey ku suuro gashay in hawshani wakhti dheer ka dib fusho.*

***Maxamed Ibrahim Warsama***

***(Hadraawi)***

# TILMAAN

*1. Axsaab:-*

*Waa is bahaysi ka soo hor-jeedey*
*Diinta Islaamka. (Heesta Ergadii Furqaan).*

*2. Arraweelo:-*

*Waa magac ay leedahay shakhsiyadda*
*ku jirta sheeko fan hiddood ah oo*
*magacaas leh kana mid ah dhaxalka suugaaneed*
*ee hiddaha Soomaaliyeed, Waxay shakhsiyadaasi*
*tilmaamaysaa haweeney bulshadeeda u talin jirtey,*
*Kuna caan-baxday cadaadinta iyo cabudhinta ragga*
*(Magaca Maasada Arraweelo).*

*3. Awr-rayaal:-*

*Ciidammadii qaaday hawl-galaddii*
*ugu horreeyey dagaal hubaysan oo*
*lagaga hor-tago taliskii Maxamed Siyaad*
*Barre oo ay fuliyeen Naftood hurayaal*
*ka tirsanaa Ururka SSDF Gobollada*
*Dhexe ee Soomaaliya Magacu wuxuu ku*
*baxay iyada oo ciidammadaas gaadiidkoodu*
*awr ahaa. (Maansada Daalalley).*

*4. UNITA:-*

*Waa jabhad ka soo hor-jeedda dawladda*
*Angoola. (Maansada Isa-Sudhan).*

*5. Batar:-*

*Waa ciyaar ka mid ah ciyaaraha hiddaha*
*iyo dhaqanka Soomaalida oo laga ciyaaro gobollo ka mid ah*
*Soomaaliya*
*(Heesta Baaq).*

*6. Barshin:-*

*Waa geed la qoro oo Gobollada*
*Soomaaliya qaar ka mid ah barkimo ahaan*
*badiba geel jiruhu u isticmaalo.*
*(Heesta Baaq).*

*7. Baarliin:-*

*Caasimaddii jarmalka oo ahayd goobtii 1884kii lagu*
*saanyaday Afrika. (Maansada Gabadh Madow).*

*8. Bari, Nugaal, Mudug:-*

*Waa Gobollo ka tirsan dalka Soomaaliya oo uu taliska Siyaad Barre ka fuliyey falalkii xasuuqa shacbi iyo burburin hantiyeed isagoo u aanaynaya inay taageersan yihiin ururka SSDF (Maansada Heeliyo).*

*9. Banaadiri:-*

*Dhar hiddood ku caana gobolkii hore loogu yiqiin Banaadir. (Heesta Baaq).*

*10. Baaweeye:-*

*Shakhsiyad khuraafi ah oo looga yaqaanno Soomaalida dhexdeeda inuu ahaa nin awood weyni iyo xukun qalafsanaan caan ku ahaa. (Maansada Barabaraale).*

*11. Beder, Uxud, Xunayn:-*

*Waa Goobo ka mid ah goobihii muslinka iyo gaaladu iskaga hor yimaadeen, xilliyadii Jihaadka loogu jirey taabba gelinta Diinta Islaamka. (Heesta Ergadii Furqaan).*

*12. Beerdhiga:-*

*Goob ka mid ah goobihii dagaallada kululi ku dhex mareen, ciidammadii Daraawiishta iyo ciidammadii gumaysigii Ingiriiska. (Heesta Tuke Baal Cad).*

*13. Beerrey, Kabeebey:-*

*Ciyaar hiddoodyo laga ciyaaro Gobollada koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan dhulka beeraleyda ah' ee labada webi Jubba iyo Shabeelle. (Heesta Baaq).*

*14. Birjeex:-*

*Xaruntii Qaybtii 26naad ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo ku taalla magaalada Hargaysa. Dhacdada ahmiyadeeduna waxay ahayd "Hawlgalkii naftood hurayaal ka tirsan ciidammada xoraynta ee SNM 12kii Abriil 1983kii ay ku soo badbaa-diyeen Col. Cabdillaahi Askar Barkhad oo goobtaas ku xidhnaa". (Maansada Daalalley).*

*15. Birigaato Roosa:-*
*Guutada Cas. Waa koox argagixiso ah oo ka jirta dalka Talyaaniga. (Maansada Isa Sudhan).*

*16. Binyaanfuu-Dien Fou:-*
*Waa meel ka mid ah dhulka Fiyatnaam oo ku caan baxday jabkii xoogaggii xornimo-doonku ugu geysteen ciidammadii gumaysigii Faransiiska 1954kii. (Gabayga Galangal).*

*17. Bullo:-*
*Ciyaar hiddood laga ciyaaro Gobollada koonfureed ee Soomaaliya-Hiiraan iyo degaanka kore ee webiga shabeelle. (Maansada Barabaraale).*

*18. Xiddigta Oktoober iyo Ogaal:-*
*Waa Wargaysyo talisk Siyaad Barre u adeegsado khalkhalinta ra'yal caamka iyo marin-habaabinta Shacbiga Soomaaliyeed. (Maansada Isa Sudhan).*

*19. Darfooley:-*
*Waa dermo-gogoleed ka mid ah kuwa loogu jecelyahay ee ay haweenka soomaaliyeed sida fal-samidu ku jirto u falkiyaan (Heesta Baaq).*

*20. Dijaal:-*
*Waa magaca uu leeyahay qof ama makhluuq suuro qof leh oo sida Diinta Islaamka la inoogu sheegay imaantinkiisa ifku ay ka mid tahay calaamadaha qiyaamaha, waana beenaale sheegan doona inuu yahay Nebi Ciise Nabad iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee) taasoo uu dadka qaar beentaas ku hallayn doono;hase yeeshee wuxuu halligmi doonaa oo sidaas ku bixi doonaa, marka Nebi Ciise (Nabad iyo naxariisi korkiisa ha ahaantee) uu dhab ahaan soo dego. (Maansada Dibadyaal).*

*21. Durya, Daalaco:-*
*Waxay ka mid yihinn Saldhigyada ciidammada xoraynta ee SNM ay kaga duulaan ciidammada cadowga. (Maansada Daalalley).*

22. *Raage Ugaas, Salaan Carrabey, Sayid Maxamed, Cali Dhuux, Gammuunte, Faarax Nuur, Qamaan Bulxan:-*
*Waxay dhammaantood ka mid ahaayeen raggii salka u dhigay gabay-hoyaaleedka Soomaaliyeed-Classical Poetry-(Heesta Hal-abuur).*

23. *Saylici:-*
*Waa ciyaar ka mid ah ciyaaraha hiddaha u ah Soomaalida oo badiba laga ciyaaro meelo ka mid ah Gobolka Woqooyi Galbeed iyo Jamhuuriyada Jabuuti (Heesta Baaq).*

24. *Dhabbad iyo Galdogob:*
*Tuulooyin ku yaalla Gobollada dhexe ee Soomaaliya oo ay ciidammada SSDF ka fulin jireen hawl galo joogto ah. (Maansada Daalalley).*

25. *dhagaxtuur:Dhacdadii taariikheed ee ku magac baxday kacdoonkii 11kii jannaayo 1948kii ee shacbiga Soomaaliyeed dhagax ugu badheedheen ciidammadii hubaysnaa ee gumaysiigii ingiriska. (maansada jiitama).*

26. *Dheg-Dheer:-*
*Waa sheeko caruureed soomaaliyeed, laga yaqaan badanka dhulka soomalidu degto, waxayna ka mid tahay suugaanta hiddaha Soomaaliyeed eesoo-jireenka ah. Waxay ku saabsan tahay habar dad-qalato ahayd. (Maanasada Dhahar).*

27. *Geeddi-baabow:-*
*Sida la weriyey wuxuu ahaa gar-ma-gaate kakan oo wakhti hore ka talin jirey gobolka Jubbada Sare gaar ahaan degaanka Buur Xakaba. (Maansooyinka Barabaraale, Goljanno iyo Gud-Gude).*

28. *Ganaane:-*
*Waa magac labaad oo uu leeyahay webiga jubba (Maansooyinka Galangal, Durdur iyo Goljanno).*

29. *Mandheera:-*
*Waa Tuulo ka tirsan degmada Berbera oo uu ku yaallo xabsiga ugu weyn Wogooyiga Soomaaliya oo ay hawl-gal guuleed ka fuliyeen naftood hurayaal ka mid ahaa ciidammada xoraynta ee SNM oo uu hoggaaminayey Mujaahid*

*Maxamed Xaashi Diiriye (Lixle) laguna soo badbaadiyey maxaabiis fara badan oo cadowgu ku eedeeyey in ay taliskiisa ka soo horjeedaan, 02/01/1983kii.*
*(Maansada Daalalley).*

*30. N. F. D:-*

*Waa gobollada Woqooyi Bari ee dalka Kiiniya oo ay ku dhaqan yihiin Ummad Soomaliyeed (Northern Front Districts).*

*31. Wareegto:-*

*Waa ciyaar hiddood laga ciyaaro Gobolka Banaadir iyo meelaha ku dhowdhow (Heesta Baaq).*

*32. Wilwilo:-*

*ciyaar ka mid ah ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka ee Soomaalida oo laga ciyaaro meelo ka mid ah Gobolka Wogooyi Galbeed iyo Jamhuuriyadda Jabuuti(Maansooyinka Barabaraale iyo Waxyi).*

*33. Hanna-haybsan:-*

*Ciyaar hiddood laga ciyaaro meelo ka mid ah Wogooyiga Soomaaliya, gaar ahaan Gobolka Sanaag.*
*(Heesta Baaq).*

*34. Hawaara, Harga-cuna, Haarriya:-*

*Waa abaaro caan ku ah taariikhda xooolo dhaqatada Soomaaliyeed, oo aad loogu riiqmay waayo hore.*
*(Maansada Heeliyo).*

# QAYBTA KOWAAD

# SULEEKHA

*Idaa subag laga lulaa*
*lo' baa saan laga baxshaa*
*geel baa sidig loo ogaa*
*sengaan orod lala ekayn*
*sareedo Ilaahay baa leh*
*hablaa Soomaaliyeedna*
*haddaan quruxdooda saanyo*
*haddaan miisaanka saaro*
*sagaal tobankii adaa leh.*

*Suleekhaay araggaagu*
*nafta waw samir-siiso*
*saddex bay ku qaddaaye.*
*Ha ka goynin salaanta*

*Sansaankaagiyo jaaha*
*sara-joogiyo tooska*
*dhexda soohane tooxda*
*sayn fardoodda ka dhuuban*
*biixiyaa isa saaran*
*garaaraa kala soocay,*
*sanqaroorka la dhiibshaa*
*nafta aan sasabaayo*
*somal haad gelinaaya.*

*Suleekhaay araggaagu*
*nafta waw samir-siisoo*
*saddex bay ku qaddaaye*
*ha ka goynin salaanta.*

*Saatirkii ku abuuree*
*saluuglaay indhahaaga*
*saldhiggooda qorsheeyee*
*saxarkii ka daboolee*
*baalashooda ku saabshee*
*Suunniyaa ku hadheeyee*
*hareeraa kaga seeraa*
*hibo gaara ku siiyoon*
*cidna kuula sed qaybin.*

*Suleekhaay araggaagu*
*nafta waw samir-siisoo*
*saddex bay ku qaddaaye*
*ha ka goynin salaanta.*

*Saatirkii ku abuuree*
*qoortan aad samay mooddo*
*cabbaadhyaa ku sargooyiyo*
*sidrigaagiyo laabta*
*timahaagan ku seexdee*
*kolka aad doc u saydho*
*sararaa ka degaayee*
*sabarkaaga tegaayaan*
*samayskooda la yaabay.*

*Suleekhaay araggaagu*
*nafta waw samir-siisoo*
*saddex bay ku qaddaaye*
*ha ka goynin salaanta.*

*Saarey baanad ahayne*
*saancad weeye jacaylku*
*surradaan la dhigaynin*
*heeryo weeye ku saaran*
*soodh halbowlaha gooya*
*seef ku guud sudhan weeye*
*nin ka saahidey oonta*
*aawadaa uga soomay*
*saymo looma horseedee.*

*Suleekhaay araggaagu*
*nafta waw samir-siisoo*
*saddex bay ku qaddaaye*
*ha ka goynin salaanta.*

# AMAL

*Dadku kala ayaan roon*
*ama kala aqoon dheer*
*ama kala asluub weyn*
*haddaan eed la doonayn,*
*ama deeq Ilaahay*
*asaraar ka taagnayn*
*dadku eexo kaa gelin*
*inanyahay la'aantaa*
*dumar lama abuureen*
*gabadh lama ammaaneen*
*jacayl looma ooyeen.*

*Geed beer udgoon iyo*
*ku dhex-yaal ugbaadoo*
*ubax iyo man fuulaay.*
*Ulihii madheedhkee*
*Iimey ku yaalliyo*
*ilo wada xareedoo*
*nafta lagu illaawaay.*
*Dayaxoo iftiimoo*
*arladoo dhan gaadhoo*
*afar iyo tobnaaday.*

*Qorraxdoo aroortii*
*dhulka soo abbaartoo*
*sagal iid dhex joogtaay.*
*Waxaad tahay adduunyada*
*dhexda udub ka haystoo*
*xejiyoo adkeeyoo,*
*af-gobaadsan maayoo,*
*qurux lama amaahdee*
*ashkir geenyo ugubey.*

*Adhaxdiyo laf-dhabartiyo*
*sanbabbada agtoodiyo*
*ililaha halbowlaha*
*eebaa ku mudanoo*
*arrintii cuslaatoo*
*naftu aammusnaantii*
*iimaansan weydoo*

*Amaleey jacaylkii*
*soo dhaafyey uurkoo*
*afku haysan waayoo*
*goortaan ogaadee*
*arammidu dillaacdaan*
*ooddii ka leexshee.*

*Axdi jaba, abaal luma*
*kaa eegi maayee,*
*igadh iyo maqaarkeed*
*innagoo ahaannaan*
*hadalkii ku ururshee,*
*adiguna dheh aammiin.*



# GOD MADOW

*Dumar geesi dhaaxay*
*gooyeen heddiisoo*
*ragna garabsi moodkood*
*ka gaboobi maayee*
*gunburreyda hoosaan*
*gurrac uga jarmaadoo*
*darantiyo gulaankaan*
*gebagebo ku dhaafoo*
*Guban xeebaheedaan*
*sii maalin gaaloo*
*qorraxdoo godkeedii*
*la gelaysa fooddaa*
*luguhu i gabeenoon*
*socodkii gadaashoo*
*Geriyaad dhexdiisaa*
*gudcur igu ballaadhoo*
*garan waa kaskaygii*
*geesaan u jeedoo*
*gabaddano naf joogtaa*
*gogol doonimaysee*
*dhaxantaan go'aygii*
*garbaha iska saaroo*
*good iyo abeesaa*
*igu soo gurguurtoo*
*gool qawdhamaysaan*
*gondaheeda seexdoo*
*naftu guure mooyee*
*gama'yeeli weydoo*
*guntigaan adkayston*
*marada isku giijoo*
*waagoo guduutaan*
*gooddiga abbaaroon*
*geyi laga hayaamiyo*
*guri madhan is taagoo*
*sida goraya cawshoo*
*galab hoos u jeeddoo*
*gu' barwaaqadiisiyo*
*Gaaroodi joogtoo*
*baydari gantaalii*
*geed ugula dhuuntoo*

ku gilgiley fallaadhoo
meel halis ah gooyaa
gucle iga dhammaadoo
godollaan ordaayon
sida awr gabraareed
geeddiga higsanayo.

Gobolkaan u jeedaa
guulluhu i keenoo
gabayoox duleedkaan
weheshadey go'aygoo
anigoo gandoodoo
is-guhaadinaayaa
waxaan geystey mooyee
birta layla gaadoo
inantaan gardaadsheen
gaadiid sidiisii
ku xambaaray guudkaa
wedka ii guddoontee.

Godob-reeb ha joogee
lay diid garawshoo
giddi habar-dugaag baa
waydaydu gaadhoo
gorgorka iyo haddaa
ilmo gabax ka siiso
garanuugta aydaa
geedaha ka soonto,
ma hallayn gartaydee
gacal baan u waayoo
golahay lahayd iyo
geedkeeda keenee
guddidaan u dhiibee
guudkeed xil-saaraa
i gargaari weydoo
gaaliyo Islaamkaan
gacan-siin ka waayoo
god madow dhexdiisaan
ku gunaanad seegaa
geeraarku joogaa.



# TOG-DHEER

Ninba wuxu ku taamaa
ama hees ka tiriyaa
tixo gabay ku sheegaa
halka lagu tallaalee
hawadiisu taallee
uurkiisu tebayee,
dumar taan ka sahansaday
waa gabadh Tog-dheeroo
Maxamuudi toox weyn
saddex-qayd ka tolatoo
tusbax luqunta gelisoo
tafta daraya-muuskii
taakiyo badh muuqdoo
dhaclihii tarraxayoo
sida boqorad taash xidhan
hadalkeeda tirisoo
kolba erey tukubisoo
toddobaatan jeer baan
soo toosay xalayoo.
Sidan timo haldhaaley
ugu tebey hurdada xalay
anigaba Tog-dheer baa
tusku iiga muuqdaa.

Ninba wuxu ka taahaa
ama talal ku sheegaa
ama gacan ku taabtaa
halka laga taftaafee
Burco waxay ku taallaa
xididdada tin iyo cidhib
tebinaaya dhiiggee
hadba dhan u tallawshoo
dayax taabba-qaadoo
toban iyo shan joogiyo
xiddigaha tartamayee
isku taxay dushiisaa
tahan iiga hirayoo
Tusmo barashadeediyo
taltallaabsigeediyo
tarantarinta laafyuhu

*meeshay i turuqdiyo*
*tawstay i gelisaa*
*igu sii tarmaysoo,*
*Sidan timo haldhaaley*
*ugu tebey hurdada xalay*
*anigaba Tog-dheer baa*
*tusku iiga muuqdaa.*

*Tuke Bari ka yimi baan*
*tusay boogahaygoo*
*u tilmaamay beeshoo*
*tebi idhi dhambaalkee;*
*taarkii ma geynoo*
*isma tarin dedaalkuu*
*u tabaabulshaystoo*
*taab-gaabnidiisay*
*naftu xadhiga tawseed*
*ugu turunturrootoo*
*la tawaawacaysaa.*
*Miyuu tuuray hadalkii ?*
*Miyuu tiray jacaylkii ?*
*Mise tulud raqdeeduu*
*ugu taaganyahay geed ?*
*Mise wuxu tukanayaa*
*Faral iyo Taraawiix ?*
*Mise wuxu taraarkii*
*kala dhacay Tabciyo Sheekh ?*

*Sidan Timo haldhaaley*
*ugu tebey hurdada xalay*
*anigaba Tog-dheer baa*
*tusku iiga muuqdaa.*



# GUDBAN

*Waa duni la gaadoo*
*iyadoon gabow iyo*
*geerida ka dhow iyo*
*geeddiba ku talo-gelin*
*seeftii qudh-gooyada*
*galka looga siiboo*
*soo guur la yidhiyoo*
*waxay gaaxsanaysiyo*
*khasnadii guraysoo*
*daba goosanaysoo*
*is-gunaanadaysoo*
*waagii guduutaba*
*ged kalaad ku aragtaa*
*gurrac lagama waayee.*

*Sheekadu ged iyo xeel*
*af-gobaadsi weeyoo*
*Raagaa sar-gooyoo*
*Cali baa gardaadshoo*
*Gedihii Qamaan iyo*
*gabaygii salaan iyo*
*gudbantii darwiishkiyo*
*murti weeye gibilloo*
*isku-joog gun iyo baar*
*midabkii is-gaadhiyo*
*inan gacan farshaxanii*
*harraray garaariyo*
*gaashooyin marisiyo*
*googoos la saaroo*
*nin gardaadsha mooyee*
*ruuxii gulaanii*
*ka sal-gaadhi maayee*
*googgaa abwaankow.*

*Gabadh caana nuugoo*
*gugan maanta dhalatoo*
*dhul gurguurad mooyee*
*garanaynin socodkoo*
*gosha lagu xambaaroo*
*hayaanka iyo geeddiga*

*awr loo gureeyoo*
*gaadiid la saaroo*
*misna guudka dabatoo*
*garka aan furaynoo*
*debcinayn garayskoo*
*guurguurka noloshiyo*
*godadkii isdaba yiil*
*iska garab maraysoo*
*goormaan lammaanaan*
*ama lay gelbinayaa*
*taladeed ku gaw tidhi*
*waa xaal gurracanoo*
*gurranoo la yaablee*
*waxaan uga gol leeyahay*
*ruuxii gartow sheeg.*

*Geel aan irmaan iyo*
*gabno iyo candhooliyo*
*madi guuto deeqdiyo*
*gaaniyo horweyn iyo*
*awr goola wadannoo*
*gaban daadahaynoo*
*gallad cidi ku qabinoo*
*lala gelin hadhuubkoo*
*geedaha aqoonnoo*
*garow loo bisleeyo*
*geeslow Biciidkiyo*
*Garanuugta seenyoon*
*loo soo gabraaroo*
*misna guul-darraystow*
*ganac loo wardheeroo*
*cidi gaadhi weydoo*
*ninna goosan waayoo*
*dhaqankiisu gaar yahay*
*waa xaal gurracanoo*
*gurranoo la yaablee*
*waxaan uga gol leeyahay*
*ruuxii gartow sheeg.*

*Waayeel gadoodoo*
*gacalkii ku duuloo*
*guluf weerar saaroo*
*gamcihiisa dhiiggii*



*gororshoo ku maydhoo*
*ma hadhooyin geystoo*
*misna loo garaaboo*
*godob reeb la siiyoo*
*inan loo guddoonshoo*
*gudbiyoo is-dhaafshoo*
*gocor aan xil hanan iyo*
*nin labaad u guurshoo*
*ka gabbaati qaatoo*
*yidhi gaari maahayn'*
*waa xaal gurracanoo*
*gurranoo la yaablee*
*waxaan uga gol leeyahay*
*ruuxii gartow sheeg.*

# AXADDII

Waa lay addimey
axaddii sidaan
kuu eegayee
araggeeda taan
ku il-doogsadaay
ma illawsan tahay
axdigaad martiyo
meeshaad i tidhi
waan imanayaa.

Immisaad farriin
ergo soo dirtood
oontiyo biyaha
hurdo aawaday
uga soommanayd.

Eed layga keeniyo
midna amar Ilaahay
kuma aad maqnaanine
adigayska baaqde.

Haddaad i tidhaahdo iman maayo
ma aadeen halkaad ogsooneyd.

Anigaa isla hadloo
mar waxaan idhaahdaa
ku illaawi maysoo
way imanne sii joog,
mar waxaan idhaahdaa
axdigaydin dhigateen
kolla oofin maysee
samir Eebbe qaadoo
ka fogow agteedaan
uurkayga geliyaa.

Aramida jacayl baa
i hogaaminaysoo
misna kuma adkaystoo
kama hoydo aydoo
naftu olol ma deysee.



Indhahaa habeenkii
ku ilaalinaayoo
dhammideed addunyada
afarteeda waaxood
hadba gees u eegee.

Aammusnow habeenkii
ugbaadka iyo dooggaa
tiiraanyo ooyoo
idilkood xiddigahaa
afar qaaday socodkoo
Ubax baan guroo
soo ururiyoo
amranow golii
ooddii madhnayd
ku ag daadiyoon
ku ilaa xidhoon
weheshada idhee.

Eedaanka diiggoo
oogsadey salaadiyo
waagoo iftiimaan
keligey inaan ahay
asaraar ka saaroon
addimada cuskadayoon
dib u soo arooree.

Qof ammaano lumiyoo
iibsadey xilkeedii
samo ugama aayee
aan kala war haynaan
ku afgooyey heestee
maxay adiga kula tahay?

# BAAQ

*Adigaan cirka u bixin*
*ama boodin leexada*
*ama badaha waaweyn*
*nafta aan ku biimayn.*

*Baariis adaan tegin*
*ama Boon ka sheekayn*
*barashada dalkaagaa*
*horta laga bogtaayoo*
*beryo laysku hawlaa.*

*Dhulku baaxad sooriyo*
*banan miidhan weeyaan*
*ama waa bus iyo oon*
*ninka buug ku haystow*
*beentaada weeyaan.*

*Balcad Jawhar Shalanbood*
*barakada Qoryooley*
*waxa canab bislaadee*
*Baydhabi u gaar tahay*
*Boosaaso iyo Beer*
*Bixin Duule Laaleys*
*Biyo Guure Kala-baydh*
*beeraha Wajaalee*
*lagu reebay baahida*
*Baar-dheere iyo Jilib*
*waa boqol kun oo mayl*
*dhulka lagu badhaadhee*
*beeyadu ku taallee*
*badar lagu abuuree*
*lagu ridey bariiskee*
*balka lagu tallaalee*
*muuskiyo babaygii*
*barkadeen xareeddoo,*
*Waxa taa ka sii badan*
*dhulka bari-samaadkee*
*beesheennu daaqdee*
*barta aynu dhaqannaa*
*barqo dhereg ka joogtee.*



*Iyadoo barwaaqo ah*
*balliyada xareeddii*
*ku bariisanaysoo*
*bidix midig dhan loo dayo*
*barigiyo galbeedkaba*
*buuruhu is haystaan*
*waaberi cadceeddii*
*soo saartay baallaha*
*bilcilkiyo maraagii*
*shinbiruhu bulxamayaan*
*indhihii basaasow*
*Boorame ma aragteen?*

*Ma ogtahay barbaareey*
*heesaha Barawn tumo*
*adigaan bogga u lulin*
*Beerrey Kabeebey*
*Bismillaahi Saylici*
*Hana-haybsantii bari*
*Batar iyo Wareegtaa*
*kuu baadi soocee.*

*Ma ogtahay barbaareey*
*qalabkana bud dhumucliyo*
*waran iyo billaawaa*
*kuu baadi soocee.*

*Ma ogtahay barbaareey*
*huga maro Banaadiri*
*saddex qayd bidhaantiyo*
*bafto laba dhudoodaa*
*kuu baadi soocee.*

*Ma ogtahay barbaareey*
*barshin iyo darfooley*
*bayluuli xaradhlaa*
*kuu baadi soocee.*

*Ma ogtahay barbaareey*
*waxa loo buseelaa*
*ama qurux ku caan baxay*

*ama laysku baantaa*
*ama lagu bogsoodaa*
*kal bugtaa ku faydaa*
*kugu deeqa baashaal*
*guri bila ku magac dheer*
*hablaheenna bilicdiyo*
*biligiyo il-waadka leh.*

*Bilcantii shisheeya ah*
*ninka beegsanaayow*
*waxaan kaaga baqayaa*
*inaad baadi noqotee*
*cidla baylah keligaa*
*yaanu bahalku kaa helin.*

*Isu buri geyaankaa*
*barta gogoshu kuu taal*
*bahda lagama maarmaan*
*bud-dhiggaaga koowaad*
*baaqaygu waa kaas.*



# ERGADII FURQAAN

*Nebiggi Ilaahow*
*Nuurkii Islaamkow*
*adigoo adduunkiyo*
*ifka weli ka maqan baa*
*lagu sii oddorosoo*
*ishaarooyin badan baa*
*dadku kaa arkeenoo*
*Maal maha Illaahay*
*qaar baa astaanlee*
*toddobada ayaamood*
*Isniin baad ka dhalatoo*
*adduunyada xuskaagii*
*ololaa ka dhacayoo*
*urur-weyne goortii*
*ugxantaadu bururtaa*
*xiddiguhu ifeenoo*
*dayaxaa ilayskii*
*arladoo dhan gaadhoo*
*onkodkiyo hillaacaa*
*araggiyo wax maqalkii*
*ashqaraar ku ridayoo*
*Insigiyo jinkaa farax*
*Abshir dhaha la yidhiyoo*
*inta haadda duushiyo*
*idil habar dugaag baa*
*abaabuley ciyaaroo*
*dhirtu oogadaadiyo*
*afartaada geesood*
*ubax iyo caleen bay*
*ku ilaa-xidheenoo.*

*Ab tirsiimadaadiyo*
*meeshaad ku ababtaa*
*dadku wada ogaayoo*
*Aaminatu[3] Wahab baa*
*kugu qaaday uurkoo*
*weli soo if bixin baa*
*adoogaa xijaabtoo*

*3 Aamina Waa Aamina Bintu Wahab. Waa Nebi Maxamed hooyadii (Nabad iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee).*

*nafta laga aroorshoo*
*Amran hooyadaa baa*
*ummushii ku dhimatoo*
*Allahay Xaliimuu*[4]
*igadh kaaga dhigayoo*
*iyaduu xilkaagii*
*adhaxdeeda saaroo*
*iyadaa laf-dhabartiyo*
*kugu qaaday adhaxdoo*
*abuurtaada Nebiyow*
*ulajeeddo weyn buu*
*ka lahaa Ilaahoo*
*hadba guri ammaanuu*
*Rabbi kugu ogaayoo*
*arrintaada meel buu*
*ku ilaalinaayoo*
*adigoo agoonaad*
*Maka adhi ku raacdoo*
*oon iyo harraad iyo*
*arrad iyo cagaag baad*
*u adkaysanaysee*
*Nebigii adeerkii*
*Abu Daalib koriyow.*

*Nebigii Ilaahow*
*adoo jooga keligaa*
*buur oogadeedoo*
*Adduunyada sirteediyo*
*ifa-faalaheediyo*
*ku dhex jira ammuuraha*
*ka qarsoon addoomaha*
*sow uur-ku-baaliyo*
*Malag kuuma imanoo*
*Iqra kuuma dhiginoo*
*Aayadaha Quraankiyo*
*magacyada Ilaahay*
*kuma odhan guddoomoo*
*runta kuma ogeysiin.*

*Dabadeed ayaantaas*
*Xaruntii Ilhaamkaa*

4 *Xaliimo-Waa Xaliimatu Sacdiya.*



*idan kaaga yimiyoo*
*waxa Eebbe kaa wacay*
*cirka oogadiisoo*
*Nebow geenyo uguboo*
*amranoo la yaabloo*
*Ashkiraa ku qaadoo*
*Carshigaa il-bidhiqdeed*
*irriduhu furmeenoo.*
*Alaaheenna weyn baad*
*afti kala hesheenoo*
*noloshiyo iftiinkuu*
*kuu soo egmadayoo*
*Gaaliyo Islaamkuu*
*u arrimi ku yidhiyoo*
*urur-weyne waa taad*
*ka akhriday dhambaalkee*
*ummadoo dhan shirisee*
*arrintii dhacsiisee*
*ulajeeddo hadashee*
*oosha tidhi hoggaansama.*

*Inkastood wax yaabliyo*
*tustay dhawr astaamood*
*waa tay addoomuhu*
*afar iyo shan mooyee*
*kaa aamuseenoo*
*iimaansan waayeen*
*Aayadaha Quraankee*
*dhegahana ka awteen*
*ulajeeddadaadoo*
*adyadaa carruurtiyo*
*gardarada abwaanada*
*ushu kuma damqaynoo*
*samirkii Ayuub baad*
*kaga uur samaydoo*
*eeddooda waataad*
*u adkaysanaysee.*

*Waan-waanta Eebbiyo*
*amar baad sugaysee*
*goortii af daalee*
*odayadi Quraysheed*
*ergo lagala qaustaa*

*abbaanduulayaashii*
*ka irdhoobey Diintee*
*Ashahaada diidiyo*
*arbayaashi qooqaa*
*Beder lagu umaadoo*
*lagu adhax wareemoo*
*ajar iyo jihaad baa*
*birta loo afaystoo*
*waaberi arooryaa*
*Uxud laysaka helayoo*
*eebiyo gantaal baa*
*lagu wada idlaadoo*
*dhiiggii ordaayaa*
*oodaha la tegayoo*
*ololkii Xunayn baa*
*boqorkiyo ugaaskii*
*indhashoodi duushoo*
*goobtii Axsaab baa*
*axan loogu kariyoo*
*utin kaa maqnayd baad*
*aarkeeda gudatoo*
*Kabcaada ajarankii*
*nafta lagula eertoo*
*libta lagu aroostaa*
*Xarameynku iidoo*
*uskagii ka maydhoo,*
*waxa laysku aaminay*
*"Aaway ku aaway*
*ambaqaad higgaadoo*
*Addin yaa Bilaal".*

*"Dhammideed adduunyada*
*afarteeda waaxyood*
*Eedaanka gaadhsii*
*Addin yaa Bilaal".*

*"Awliyada qarsoon iyo*
*iilkiyo xabaalaha*
*Aammiinta maqashii*
*Addin yaa Bilaal".*



*Allaahu Akbartii bay*
*daateen asnaamtii*
*Abu Jahal rumeeyoo*
*'Ilaahyadi' la beeree*
*ninba toban abuurtaa*
*Eedaanki dumayoo*
*Allahay sir iyo caad*
*inu yahay mid keliyaad*
*asaraar ka saartoo*
*udubbada Furqaan baad*
*ku adkaysay ciiddoo*
*xididada u aastoo*
*ummad kala qab-weynoo*
*Ashahaada karinoo*
*anbatoo hallawdoo*
*abtirsiimo lumisoo*
*is addoonsanaysoo*
*utin kala dhex-taalliyo*
*aar-doon ku madhatoo*
*usha laysku dhacayoo*
*ooduhu dhex-yaalliin*
*soo urursihiiyow.*

*Dunidoo la iibshoo*
*dadku kala irdhooboo*
*dhasha aabbayaashii*
*nolol aasayaanoo*
*qof kastaa itaalkii*
*ku adeeganaayoo*
*ruuxaan awood-layn*
*la addoonsanaayoo*
*dadku ooyayaanoo*
*umal-taah ku seexdaan*
*Nebigii axsaantiyo*
*galladiyo abaalkiyo*
*soo rogey ammaankow.*

*Xaqa kama ajoodow*
*runta kama adkaystow*
*ammaanada ma lumiyow*
*dadka uma abtiriyow*
*ammaantaada Nebiyow*
*afku koobi maayee*

*waxaad olol bakhtiisiyo*
*waxaad eedo reebtiyo*
*waxaad iin daweysiyo*
*waxaad eel bogsiisiyo*
*waxaad aafo damisiyo*
*illinkaad bannaysiyo*
*dhaqankiyo asluubtiyo*
*garaadkiyo aqoontiyo*
*iimaanka sugan baa*
*dadku kaaga aayee*
*axdigaagu waa tiir*
*ummaddaadu mudantahay.*

*Rabbow adiga mooyee*
*Illaah kale ma jiro.*
*Marka xiga aqoonsani*
*Nebi Maxamed Eebbow*
*Ergadii Furqaan iyo*
*inuu yahay ma dhaafaan*
*Ambiyadda dhammaantood.*

*Allahayow ha nagu xilin*
*noloshiyo adduunyada.*
*Eebbow sinnaantiyo*
*Islaamnimada xooggee.*
*Udgoonow Rasuulkii*
*ummaddiisa naga yeel*
*na illaali weligaa.*
*Rabbow iilka nagu dhawr*
*ifka nagu xannaanee.*
*Eebbow hortaadiyo*
*aakhiro qiyaamaha*
*Rabbiyow il debecdoo*
*naxariis leh nagu eeg.*



# WACDARAHA ADDUUNKA

*Walaac anigoo ku seexday*
*maxaan walbahaar la toosay*
*wareer anigoo la liita*
*maxaan werwer jiifi waayey.*
*Maxaan sida weer cadhaysan*
*saqaa dhexe gaaf-wareegey,*
*intuu waqal ii hillaacay*
*maxaan kula rooray weelka,*
*u baydhay wadiiqo leexsan*
*wakhtigu i tilmaami waayey.*
*Jacaylku muxuu i wiiqay*
*muxuu wadnahayga shiilay*
*Maxaan shimbiraa waraystay*
*u dhiibey waraaq daboolan*
*haaddii wacdigayga qaadday*
*cid weeye tidhaahda weydey.*

*Waayeel dadow*
*inan waalanahay*
*duni weer siddoo*
*weligeed dhintoo*
*wacadkiyo xadhkii*
*weydaarataan*
*weetaynayaa.*

*Wadeeco maxaan ilaashey*
*waraabe ka soo xereeyey*
*sac weyda maxaan u dhaanshey*
*Walwaal ugu soo arooray,*
*halkiisa ku soo waraabshey.*
*Maxaan weli soo kexeeyey*
*wadaaddo maxaan u yeedhay*
*u loogey wankayga fiican.*
*Waxyeello halkay u taallo*
*naftayda maxaan ka waanshey,*
*walaalkay nimaan u haystey*
*muxuu waddo ii fadhiistay.*
*Qof aan wehelkayga moodey*
*ka qayb galay weerarkayga*

*ruuxaan la wadaagey oontu*
*ku wiirsadey dhiilladayda.*

*Waayeel dadow*
*inan waalanahay*
*duni weer siddoo*
*weligeed dhintoo*
*wacadkiyo xadhkii*
*weydaarataan*
*weetaynayaa.*

*Maxaan wacdarha adduunka*
*u soo jirey waayaheeda*
*warkeeda la ii dhammeeyey*
*maxaa waran layla doonay*
*habeennimo layla waayey*
*nasiib kaga waa bariistey,*
*maxaa dabin lay wareejey*
*wedkeyga la ii shir-qoolay,*
*maxaan dacar lay walaaqay*
*waabeeyo ku caafimaaday,*
*Maxaan wacad layla qaatay*
*rumaystay Wallaahi beena.*
*Maxaan webiyaal is-jiidhay*
*dhexdooda ka waab-samaystay*
*wanaag anigoo sameeyey*
*maxay wadhi ii dambeysey.*

*Wayeel dadow*
*inan waalanahay*
*duni weer sidoo*
*weligeed dhintoo*
*wacadkiyo xadhkii*
*weydaarataan*
*weetaynayaa.*



# INA SULDAAN

*Axdiyohow ha lumin*
*ugxanyahay ha dhicin*
*ashkiryohow ha jabin*
*ubaxyohow ha dhiman*
*udubyohow galool*
*oggolow dhigaa.*

*Nin cuskaday Ilaahay*
*Eebbow ku magan galay*
*Kuma qado agtaadee,*
*Arrimaha Rabbow*
*soo ururiyeey.*
*Adduunyoy hadduu*
*nin ku aamminaa*
*helo aayatiin*
*ha lagaa arkee*
*ishaarada nin goba*
*ha ka eexanneey.*

*Iima badan naftaydaay*
*dadku waaya-arag buu*
*hadba awr ku guuraa*
*wax Ilaahay kuu qoray*
*cidi oolin maysee,*
*ukuntii dillaacdoo*
*ababtoo fogaatoo*
*kambalkiyo ardaagaad*
*ku ogeyd ma joogtoo*
*shimbir ay ku nooloo*
*laba baal aroortii*
*urur kale la duushaad*
*umal taah naftaydaay*
*ku ugaadhsanaysaa.*

*Ruuxaan aqoon iyo*
*axdi naga dhaxayn bay*
*dadku igu sidkeenoo*
*Eebbow runtii bay*
*asaraarayaanoo*
*qof ammaanadaadiyo*

*wacadkaaga iibshay*
*addin iigu xidhayaan.*
*Anna xuural-caynaad*
*Rabbiyow abuurtoo*
*amranoo la yaabloo*
*ka qarsoon adduunkoo*
*cirka oogadiisiyo*
*abataqan ku nooloo*
*qof ilaasha mooyee*
*cidi aanay aragoo*
*maalmaha Isniineed*
*iyo labada Iidood*
*eedaanka subaxdii*
*dhulka soo abbaartoo*
*Awliyada jacaylkee*
*arammidu ku mudantahay*
*marta aqalladoodoo*
*wadne abur tufaayoo*
*olol iyo dab yeeshoo*
*aslanoo casaanoo*
*ooyaaya dhiigoo*
*dhexda eebo kaga taal*
*ku afura tidhaahdaa,*
*indhahaygu haystaan.*

*Ul madheedhahoon*
*hor Ilaahay iyo*
*abaal laysu siin*
*orod lagu heleyn*
*awood lagu hantiyin*
*ayaan iyo nasiib*
*ma ka adag yihiin ?*

*Adduun iyo kalgacal*
*hadday wada ordaan*
*hal-abuur tolow*
*wax ma iibiyaa?*
*Beer oodanoon*
*irrid furan lahayn*
*haddii ubax jacayl*
*ula sare ku yaal*
*naf oggoli talooy*
*illinkee martaa ?*



*Nin abwaanahoo*
*ka arradan gacmaha*
*ka irmaan dibnaha*
*tolow Ina Suldaan*
*afku maw gudaa ?*
*Hadday weli Alliyo*
*uur-ku-baalle tahay*
*hadday aawadeed*
*adhaxdiyo wadnaha*
*waxaa iin ku yaal*
*ka il-sugan lahayd*
*indhaheeda tolow*
*ilmo lagu samraa*
*ma ka iman lahayd ?*
*oday lama filee*
*afti iyo haddii*
*ergo loola tago*
*tolow aabbaheed*
*muxuu odhan lahaa ?*

*Urugiyo xusuus baa*
*asaraarka faallada*
*saqda dhexe abuuree*
*umal iyo ladh soo kaca*
*wakhtiyada inkaarta ah*
*maxaa lagu illoobaa ?*

# SAXARLA

Ku sinnaan dharaartii
la sargooyey dunidee
Rabbigay sameeyee,
cirka sare u taagee
xiddigaha siraatiyo
dayax suudi meeriyo
lagu sugay cadceeddee
sagalkiyo daruurtiyo
lagu xidhay sitaacee.
Dhulka gogol la seexdiyo
sabo lagu negaadiyo
laga dhigay sin-dadabkee
buuraha la saaree.
Dhirta samayda ciiddiyo
salka loogu joojee,
saddex laab bad iyo webi
lagu yidhi sabbeeyee.
Dabadeed la saanyee
qofba meel la siiyee
saldhiggeedu qaydnaa.
cidi uma sinnaynoo
dadku ruux sabooloo
saranseer ku raagiyo
guryo-samo nin yaalloo
sidka dhalay ku haystoo
helay seer-ma-weydiyo
laba kala sed-roon baa
subax nolba joogee.

Waan soo socdaa kow dheh
waxna waan sidaa laba dheh
samir yeelo weligaa,
saxarlaay ha fududaan.

Sal-fudaydku Xaawu
Jannadii ka saree
ruuxaad sugaysoo
maqan waa la saadshaa
sahan waa la dhawraa.
Ha sahwiyin ha salelin



sarka-dhaban ha noqonnin,
ha saluugin qaybaha
qalin baa saxeexee.
Waxan Saatir kuu qorin
ha u suul-dhabaalayn.

Kala saar run iyo been
kala garo sir iyo caad.
In salaadu weligeed
kal tahay Sunni iyo Faral
u ogow sax iyo maan.

Inaad saamo jiiddiyo
sanqadh tirasho kala daa.
Naf jacayl sawaaboo
sanka kuu dalooshoo
kuu sudhay hoggaan baad
u siddaa maqaarkee,
ha ku daba-saqlaysee
ha u gaabin seetada
sogsogtiyo cadaaddiyo
ha ku saydhin laamaha.

Waan soo socdaa kow dheh
waxna waan sidaa laba dheh
samir yeelo weligaa
Saxarlaay ha fududaan.

# DARYEEL

*Markaan daafta hoosiyo*
*arko daymo-bogashada*
*araraha la daadshiyo*
*dhirta lagu daleeyiyo*
*waxa buuro daah weyn*
*lagu daabay ciiddiyo*
*bado laba-dibleeyaa*
*ishu damac i gelisaa.*

*Markaan daawashada guud*
*dayaxiyo cadceeddiyo*
*dildillaanka fadadkiyo*
*onkodkiyo dayaankiyo*
*danab laba dhacaayiyo*
*dardaraa hillaaciyo*
*arko hogol darroortaa*
*runtu igu duxdaayoon*
*derejada Ilaahay*
*dib u soo xusuustaa.*

*Haddaan doogga cawskiyo*
*deegaantu saarrayn*
*dhulku duug ma yeesheen,*
*diihaal ma reebeen*
*qofna kuma danaysteen*
*Rabbiyow dushiisoo*
*dunidaada Eebbow,*
*adigaan cid diran baad*
*toddobaad ku dadabtoo*
*iyadoo danbarisoo*
*sida doonnan gabadheed*
*inta timaha loo dabay*
*dunta lagu afmeershaa*
*laga furay daboolkoo*
*dalaggaad ku beertaa,*
*qofba weel darsanayaa.*

*Inkastuu qof diintiyo*
*dar Ilaahay jecel yahay,*
*laba daan af-yeeshaa*



*kolley waa danbaabaa*
*haddaan kaa abaal daro*
*dadka kaad u roontahay*
*adigaa dul qaatee,*
*Rabbow aanu nala degin*
*dhulka aannu daaqnaa.*
*Rabbiyow ha nagu dumin*
*cirkan duudka weynoo,*
*Rabbiyow ha nagu didin*
*bahalaha derderanoo,*
*Rabbiyow ha nagu dirin*
*dabaylaha cartamayoo,*
*Rabbiyow ha nagu dilin*
*duufaannadaadoo,*
*Rabbiyow ha nagu darin*
*durdurrada rogmanayoo*
*daad-xoor ha naga dhigin.*

*Rabbow duunyo nool baan*
*ka awow dugsanayoo*
*dibnahaygu caaniyo*
*dux baruur leh mooyee*
*uma baran wax doorshee,*
*Rabbiyow diraaciyo*
*Jiilaal dab kululoo*
*dibad-joogta cawshiyo*
*dabar-gooya xoolaha*
*dibirtooda naga hay.*

*Rabbow duumadaadiyo*
*inta cudurro duushee*
*doc wareenka feedhaha*
*sambabbada dalooshiyo*
*daacuun ha nagu ridin.*

*Rabbiyow dagaalliyo*
*dabley gaatamaysiyo*
*belo laga ducaystiyo*
*ma-naxaan ha noo dagin*
*duullaan ha noo jebin.*

*Rabbow dawladnimaduna*
*kuma iman dalxiisoo*
*door-roonayaal baa*
*u deldeley naftoodoo*
*dumar baa hugoodiyo*
*dahabkii u iibshoo*
*doon-doonisteedii*
*dhiig baa ku daatee,*
*Rabbow daawad curatoo*
*dakharrada bogsiisoo*
*ubadkeeda deeqdiyo*
*ka dhig malabka doocaan.*

*Rabbiyow dirkaygana*
*dan-wadaag is-jeceloo*
*derejeysa qarankiyo*
*bulsho laga dab qaatoo*
*Carro-Edeg ku dayatiyo*
*ka dhig ul iyo diirkeed.*

*Rabbiyow dugaalkiyo*
*dugsi waa dhul hooyoo*
*nin da'diisa tuugoo*
*dewersadey asaaggii*
*doqonniino weeyoo*
*dibad ruux u sahan tegey*
*dulli waayi maayee,*
*dalkayga Ilaahow*
*dhereg iyo daryeel iyo*
*wax na deeqa nagu sii.*

*Rabbow doodda Aakhiro*
*marka ay durbaankiyo*
*dawannadu is-dhaafaan*
*dadku kuu yimaaddaan*
*darka soo fadhiistaan*
*Rabbiyow ha nagu darin*
*inta aad ku digatee*
*u dareera Naartoo*
*labadaada daarood*
*Rabbiyow ta door roon*
*kuwa degaya naga yeel.*



# HUDHUD

*Boqorkay huq iyo ciil*
*hagardaamo lumisow*
*hadimada kalgacalka leh*
*Cilmigii u hoydow*
*heesaha baroorta ah*
*halqabsiga jacaylkow*
*hambalyiyo salaan iyo*
*hibo iga guddoomoo*
*kolley waan hubaayoo*
*hawlii adduunyada*
*heshay aayahoodee*
*hal yar aan ku toydee*
*jannadii ma hurudaa ?*
*Hadh qabow ma jiiftaa?*
*Hoobaan ma gurataa?*
*Hablo xuural caynii*
*sow kuuma heesaan?*
*Waxa aad la haysaba*
*hoo kuma yidhaahdaan?*

*Wedka lama huraayee*
*reer soo hayaamiyo*
*hayin raran ma kulanteen?*
*Hor llaahay adigiyo*
*Hodan maysku aragteen?*
*Ma is-dhaafsateen hadal?*

*Bal maxaan haweenkiyo*
*dumar ugu hiloobaa?*
*Ama kula heshiiyaa,*
*ugu hagar la'aadaa?*
*Sowtay hir beeniyo*
*ku tuseen hillaacee*
*hogol aan da'ayn iyo*
*hanfi kuu aroorsheen*
*Hirwo kuu garaaceen*
*hungo kuugu baaqeen!*

*Sowtay ku hawleen*
*ku jareen halbowlaha*
*haadaan ku koriyeen*
*hore kuugu riixeen*
*hogga kuu dabooleen*
*hoos kuugu tuureen!*

*Sowtay ku heereen*
*hengelaa ku saareen*
*gudcur kuu hillaabeen*
*ku dhigeen habaaskee*
*cidla kaaga hoydeen*
*hororkiyo waraabuhu*
*hilbahaaga jiiteen*
*haadda iyo xuunshadu!*
*hanbadooda feenteen.*

*Waxan ugu hamranayaa*
*hooyaa ka dhalatoo*
*naaskii habreed baa*
*iga hiilinaayee*
*Wallee hawlahaan galo*
*iyo heegantaan dhigo*
*dumar lama haweysteen*
*ragba ma hungureeyeen*
*hanti lagama dhiibeen*
*guri laguma hoysteen*
*hadal lalama yeesheen!*



# HAATUF

*Cilmi sow hoggiisii*
*hindi suhu imuu geyn*
*hambalyiyo salaan iyo*
*sow hees umaan tirin*
*halka uu ku nool yahay*
*hanti wuxu guddoontee*
*hor llaahay ugu tegey*
*hubi sow is maan odhan*
*Hodan sow ma weydiin.*

*Sow waa nin hoydoo*
*ifka taar la haystee*
*kama helin jawaabtii.*

*Xalay fiid horaadkii*
*sow haatufkiisii*
*hudhudkii u soo diray*
*gacan haadiskiisii*
*kama halacsan sheeddoo*
*hurin bayla socotee*
*kama hadhin barbaartii.*

*Sow maan hor-gelinoo*
*hayhaato maan geyn*
*dabadeedna haybtii*
*haye kow ma aan odhan.*
*Wuxu yidhi halyeygii*
*ama haadda soo faray*
*ku bilaabay heestii:-*

*"Ninka ila hadlaayee*
*ii soo hiloobee*
*hawdkiyo xabaalaha*
*hiilkaygu keenee*
*hamabalyada i siiyee*
*hogga iiga yeedhow;*
*hab-dhaceeda maansada*
*adigaa higgaadshee*
*anigana war iga hoo."*

*"Waxa hawli joogtaa*
*ama lagu harraadaa*
*hanad lagu cidhiidhyaa*
*hanti lagu gumeystaa*
*dumar hoodo leeyahay*
*ragga hoos u eegaan*
*hoogtada adduunyee."*

*"Qofka samir hambaystaa*
*godka kuma hungoobee*
*ifka hadimadiisiyo*
*dhibtu way horraysoo*
*ma huraanta aakhiro*
*anigaa ku haystoo*
*hogol bay kor joogtoo*
*onkod iyo hillaac baa*
*dusha iga hadheeyoo*
*haro aan go'ayn baan*
*darayaa hadhuubkoo*
*hoobaan bislaataan*
*haqab li'i dhex joogaa*
*ishu halacsanaysaa*
*guri hoos qabow bay*
*halabtaydu taallaa,"*

*"Nafta waxan u habayaa*
*sida hooyo wiilkeed*
*naasaa horaadkiyo*
*haaneedka siisiyo*
*nirig hooto-nuugoo."*
*"Hodan iyo jacaylkeed*
*dani igama haysoo*
*hablo Xuural-caynaan*
*haasaawiyaayoo*
*huwanahay taftoodoo*
*lagu yidhi u heesoo*
*geelii hor weyn baa*
*igu soo hormanayoon*
*uhayaa waadaanto*
*hawl bay sugaysee*
*haye nabad walaalow."*



# SIDDI-QABAX

*Saaxiibkay Qaysow*
*marka hore salaan guud*
*marka xiga sedkaagiyo*
*waxa aad ku sugan tahay*
*waa inaad na siisaa,*
*marka xiga silsiladdii*
*murtidaadi soocnayd*
*subciyoo dhammeeyoo*
*solayoo bisleeyoo*
*dabadeedna siistee*
*saaxiib ma nabad baa?*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*roob saaka da'ay baa*
*sar-ka-dhaban la yimiyoo*
*anna seexan maayee*
*saaxiib ma nabad baa?.*
*Sumaddeedu waxay tahay*
*heestaydu waa siin*
*sidig weeye dihinoo*
*waxa loo saddexa maray*
*dadka haw sinnaatoo*
*ruuxii saboolii*
*caanaha ha saydhee*
*saaxiib ma nabad baa?*

*Heestaydu waa siin*
*waa sooryo xididoo*
*saxar laga ilaashoo*
*laga sugay bidhiiqoo*
*la saluugi maayee*
*saaxiib ma nabad baa?*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*saxan saxo ma roob baa?*
*Seed geel ma hilib baa?*
*Seko adhi ma xoolaa?*
*Far-dhexaad ma suul baa?*
*Sakaraad ma lool baa?*

*Biyo sare u jeedaa*
*halka ay sal-dhigayaan*
*sahan raacay weydii.*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*Cabdiyow sabeenii*
*way sumal-xadeenoo*
*midi haysa sidatee*
*saddex dhalay warkoodiyo*
*waxay saaka joogaan*
*xogta aan ku siiyoo*
*sarta kaaga jeexee,*
*Saaxiib ma nabad baa?*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*sheekadu sal-fududaan*
*ama socodka qaarkiis*
*kuma sama-falaysoo*
*Cabdiyow ka saan weyn*
*saabkaad u goysoo*
*Guban iyo Saraar bay*
*suxullada la gaadhoo*
*sinta waxay ku haysaa*
*subulaha galbeedoo*
*ninka saylac joogaa*
*sanqadheeda mooyee*
*ma yaqaan sirteedoo*
*orgi sarara weynoo*
*sogoboo dhufaaniyo*
*inay tahay ri'seenyoon*
*kala saari maayoo*
*haddii looga sacab tumo*
*Salmihii Gurracaneed*
*selel kama baxaysee*
*ha la boodin seeftee*
*saaxiib ma nabad baa?*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*inta waranka sooyaan*
*samaydii ka maqan tahay*
*intay laba su'aalood*



*sakaluhu dhex yaalliin*
*inan dunida saabkiyo*
*laga saarin tiirkoo*
*qorraxdana siraadkiyo*
*laga siibin nuurkoo*
*la afuufin suurkaan*
*Rabbigay ka sugayaa.*

*Sumaddeedu waxay tahay*
*ninka ootay seeraha*
*saxarlana ku guursadey*
*haddii uu nin sare yahay*
*aan laga sed qaadayn*
*saadaasha mooyee*
*si kalaan ka yeelaa*
*suuroobi maysee,*
*aniguna sidaydaba*
*soddohaa rag kale qabo*
*kuma toobbad seegee,*
*sumaddeedu waxay tahay*
*siddi-qabax shan maalmood*
*sahay loogu talo galay*
*soddon laguma gaadhee*
*hadal lama sudhnaadee*
*saaxiibkay Qaysow*
*waxad Suubban leedahay*
*saca Faarso nacayow*
*sagaal beri adoo qaday*
*Samsam yo Bullaalaa*
*saarkaagu kaa hayn*
*saxarlaay ma kula tahay?*

# JEEGAANTA DHALATAY

*Jeegaanta dhalatee*
*cirka lagu dhexrooree*
*dayaxoo dhammaysoo*
*dhulka dacal ku haystiyo*
*qorraxdoo dhacaysoo*
*dhiganaysa baallaha*
*midba dhool ku mudataay.*

*Weli waxan dhafoorkiyo*
*dhabannada la haystaa*
*heegadan dhaqaaq-joog*
*waxay dheelli-socotaba*
*soo caana dhuratee*
*kugu qabatay dheeggee*
*dhammidaa tin iyo cidhib*
*kugu dherersanaysiyo*
*ta kalee ku dhaaftee*
*dhinac kaaga guratee*
*dhudhun kaa fogaatee*
*ka hillaacday dhuuxee*
*dhibic iyo mahiigaan*
*ku dhirbaaxday ciiddee*
*dhirta wada ruxaysoo,*
*waxa dhaygag ii diley*
*midabadan dhinbiilaha*
*dharka wada xariirta ah*
*dhexda kuugu duubee*
*midba dheeha gaarka ah*
*xubin kaaga dhiibshoo,*
*waxa adiga kaadhigan*
*ama baro ku sii dheer*
*qurux kaaga sii dhow,*
*middan dhaxanta jiilaal*
*dabka iga dhex shidatee*
*wadnahayga dhilatee*
*dhillow yahan sidiisii*
*dhan kastaba u raacdee*
*xididdada u dhaaftee*
*dhiiggii ka shubatee*
*xinjirtii ka dhuratee*
*sida dhaanka jiilaal*



*dhabarkayga raratee*
*dhoomaha i saartee*
*jidka aan dhammaanayn*
*igu tidhi ku dhererrow.*

*Waxba yaan ku dheeraan*
*arrintayda dhabaqdiyo*
*sunta igu dhalaashiyo*
*dhigtan udubka weydiyo*
*lurka dhaawacaygee*
*dhallinyaro rag iyo dumar*
*dhawr baan aqaannaa*
*dhugatada kalgacalkiyo*
*wada qaba dhukaankoo*
*dheehashada jalleecada*
*isu dhaafi waayee;*
*dhude xidid ahoo qudha*
*dhaayaha ku wada yaal*
*inkastay dhaqmaadkiyo*
*dhalashada wadaagaan*
*dhayal iyo fudayd baa*
*wed u kala dhaqaajaa*
*mid dhacdaa halkeedii*
*ta kaleeto dhaxashaa.*
*Nafta laba dharaar qudha*
*isu dhiibi laayoo*
*sida dhegaha oo kale*
*isu dhiman lahaabay*
*dantu oodo dhacameed*
*midba dhinac u saartoo*
*arrintoodu dhiif iyo*
*dhul-ku-foorar joogtaa.*

*Kala dhiman adduunyooy*
*ninkaad dheriga siisa*
*intuu dhuxusha hoosiyo*
*dhardhaarrada ku maqanyaa*
*dhagarta iyo geeridu*
*dhoobada u qooyaan.*
*Dadba wuxu dhammaadaa*
*intuu dharabka doogga leh*
*dhutis ugu tukubayee*
*hadba meel ku dhaxayee,*
*maxaan kaaga dhololaa ?*

# ARAG MAQAL

*Ergaduu farriintiyo*
*ku adkeeyey heestee*
*egmadaannu kulannoo*
*looxii ilhaamkaan*
*sida uur-ku-baallaha*
*indhahayga saaroo*
*warku waa ammaanee*
*adna Maxamed Moogow*
*aakhiro halkay tahay*
*Cabdi Qays ogeysii.*

*Ayadaha Quraankiyo*
*Arraxmaan siday tidhi*
*hadalkii Ilaahay*
*ruuxii Islaamii*
*sida uu aqoonsaday.*

*Waa oomman hawdoo*
*waa guri abeesoo*
*edeg weeye hoosoo*
*abataqan ku yaalloo*
*waa iil madow oo*
*Rabbigay addoomaha*
*kaga aar gutaayoo*
*waxa laga arooraa*
*irridaha xabaashoo*
*anban maayo ruuxii*
*qabri lagu adkeeyaa.*

*Marna oogadeenniyo*
*waa oosha guudkoo*
*waa beer udgoon iyo*
*duni wada ilaysoo*
*waa ceel irmaan iyo*
*togag wada ordaayiyo*
*ilo wada xareedoo*
*lagu oon baxaayoo*
*naftu eegmo sugashada*
*ashqaraar ka qaaddoo*
*toddobaatan ooryood*



*lala aqal galaayoo,*
*Rabbigay addoomaha*
*ku abaal marshaayoo*
*dhibta lagu illaawaa.*

*Afhayaha barbaartow*
*ababshaha dhallaankow*
*taliyaha abwaankow*
*aabbaha jacaylkow,*
*adigaan ogeyn baan*
*uurkaaga baadhoo*
*ula jeeddadaadaan*
*ka arkaa dhul dheeroo*
*arrintaadu Qaysow*
*af gobaadsi weeyee.*

*Aakhiro Cabdow*
*way aasantahay*
*iilkay jirtaa*
*aakhiro Cabdow*
*anbatoo luntoo*
*ururkiyo laxaa*
*awrkii cirkay*
*ku ag-xidhan tahee*
*dadku yuu ku eedayn*
*ha dhex gelin ammuuraha*
*isha xidho afkana dhawr*
*arag maqal warkana ood.*

# BELED-WEYN

*Bi'i waa jacaylow*
*boodhari inuu diley*
*been baan u haystee.*

*Bi'iwaa jacaylow*
*boog aan la dhayinoo*
*cidi baanan karinoo*
*beerkiyo wadnaa iyo*
*bogga kaaga taalliyo*
*inuu yahay bir caashaqu*
*been baan u haystee.*

*Webigoo butaacoo*
*beeraha waraabshoo*
*dhulka baadku jiifoo*
*dhirta ubaxu buuxshoo*
*canabkii bislaadoo*
*badarkiyo galleydii*
*laga tuuray baalkoo*
*Bulladiyo ciyaaraha*
*lagu waa bariistoo*
*beeluhu gu'joogaan*
*sow beri-samaadkii*
*Beled-Weyne maan tegin.*

*Dhanka bari magaalada*
*sow boqorad joogtoo*
*biyo dahab la moodoo*
*bilicdii haweenkiyo*
*bili loo dhammeeyoo*
*timo boqonta joogoo*
*baal goray la moodoo*
*baarkana casaankii*
*bidix midig is gaadhoo*
*bul-cad lagu xiddeeyoo*
*badh ku seexanaysoo*
*barkanaysa qaaroo*
*huwanaysa baaloo*
*igu beertay lahashoon*
*u buseelay maan baran.*



*Sow goor barqa ahoo*
*bishu ay siddeed tahay*
*aniga iyo Beer luli*
*isku maannu soo bixin.*

*Sow bariidadaydii*
*iyo bedashadeedii*
*buundada ciyaartee*
*Beled-Weyn ku taallee*
*biyo lulata guudkood*
*badhtankeeda maahayn.*

*Sow bixiso weeyee*
*ballan maannu dhigannoo*
*berri joog imay odhan.*

*Sow bayd go'aygii*
*layguma bushaareyn*
*"maantaa la baxayaa"*
*bulshadii imay odhan.*
*"Sow waa bastey oo*
*socod beegsan maayee*
*ina baaja caawoo*
*i baxnaansha," maan odhan.*

*Sow taliye baasoo*
*ba'anoo war-moogii*
*taydii ma beenayn.*

*Sow badiba kooxdii*
*goortay badheedhee*
*baabuurki fuuleen*
*anna baal kamaan korin.*

*Boholyow daraaddii*
*sow baraq nuglaantii*
*belo lagu ducaystiyo*
*baryo kuma maqnaynoo*
*"biri may xumaatuu*
*baadroolka daadshoo*
*ka wadaa bukoodoo*

*bogsan waayo",maan odhan.*
*Sow beriga waagiyo*
*barqo kulul dhexdoodii*
*geed baaxad weynoo*
*dherer iyo ballaadh-loo*
*la yidhaahdo baaroo*
*bilig dheer hirkiisii*
*ma bidhaansanaynoo*
*bulxankiisa yeedhiyo*
*ma maqlaynin baaqii.*

*Sow baaxad soorii*
*iyo laba boglayntii*
*maan noqon bestey oo*
*bacadkii ma dheelliman.*

*Sow galab-boqoolkii*
*annagoo barwaaqiyo*
*meel baadle joognoo*
*tumanayna Beerrey*
*sow maan baraarugin.*

*Riyo beena weeyee*
*sow baalla-daymii*
*baabuur lalaayood*
*haad baalle mooddoo*
*fananaaya buur dheer*
*isma odhan ka boodoo*
*nafta sow ma biimayn.*

*Nin Banaadir joogoo*
*Beled-weyn la haystoo*
*waxaan ahay la baabee*
*sow baadi doonkii*
*weli baafis maan ihi.*

*Beled-Weyn Allahayow*
*ka dhig xero badhaadheed.*

*Beerlula Allahayow*
*belaayada hareer mari.*



*Beled-Weyn Allahayow*
*ka dhig guri barwaaqeed.*

*Beerlula Allahayow*
*beryo samo ku noolee.*

*Beled-Weyn Allahayow*
*ka dhig beerta raaxada.*

*Beerlula Allahayow*
*ka barii wax yeellada.*

# MULIYA

*Muliyaa saasey*
*hay saasey*
*Muliyaa saasey*
*hay saasey*
*Muliyay saasaa*
*hay saasaa*
*Mulliyay saasaa*
*hay saasaa.*

*Yaa mullaaxda galool*
*maydhax looga jaraa ?*
*Yaa Masaarriyo Hawd*
*maadha looga guraa ?*
*Yaa mageyno irmaan*
*dhasha looga maraa ?*
*Yaa hadhuub madaleed*
*moroh looga tolaa ?*
*Yaa maraa hadh qabow*
*maydal loogu xidhaa ?*
*Yaa marleyda haween*
*taan maqaarka lahayn*
*looga maarmi karaa ?*
*Qurux aan masanuun*
*male loogu tegeyn*
*yaa macnaysan yaqaan ?*

*Miyireey dhibtaydiyo*
*meeraysigaygii*
*dhegahaad ka maratoo*
*hadal mooyi keliyaad*
*ma huraan ka dhigatoo*
*maya baad ku koobtoo*
*il muggeed wax joogiyo*
*midig baad ka talisee,*
*hawraar magooshoo*
*ubax iyo man bixisaan*
*kugu meherin-laayoo*
*marriinkaaga hees iyo*
*maahmaaho yaabloo*
*nin magtii ka culus iyo*
*murti baan ka dhigilaa.*



*Mudan baad u noqonlayd*
*dumarkiyo marleydoo*
*masallaha jacaylkaad*
*maamuli lahaydo,.*
*gabaygaan madhxinayee*
*hore ugu masuugaan*
*kugu madhin lahaayoo*
*cidi kulama maasheen*
*maskaxdaydan curatoo*
*malyan kula gudboonoo*
*muuqaaga aragoo*
*maqlay sheekadaadaa*
*ku majeeran-laayoo*
*inta gabadh is mooddaa*
*masayr kuugu iman layd.*

*Murankaagu duniduu*
*maan dhaaf ku ridi-laa*
*kuwa maqasha raaciyo*
*ma-kastaa ku baranlayd*
*jidka waxad ku marilayd*
*sacab iyo mashxaradoo*
*miyi iyo magaalaad*
*maamuus ka heli-layd.*

*Midabbada dhabeesha ah*
*quruxdaadan maydhee*
*Rabbi kugu manaystaan*
*hadba meel ka sari laa.*
*Madaxuu ku socon laa*
*mar qofkii dhegeystaa*
*meexaanahaygoo*
*midho laysku baantaan*
*kuu marin lahaayoo*
*Muqdishiyo Hargaysaan*
*madaddaalo waayeen.*

*Hadba mahadnaqaagaan*
*mirta dhexe la kici laa,*
*gacalkiyo mataanaha*
*wedka kala muquunshiyo*

*haddii mawdka geeridu*
*iga kaa hor mariyaan*
*kama aad maqnaateen*
*maankayga gelinoo*
*magac baad ka dhiman layd.*
*Marti soorka Eebbiyo*
*inta meleg ag-joogtiyo*
*marwadii Rasuulkaan*
*magan kaaga dhigi laa.*

*Qabrigaaga maansiyo*
*murugiyo xusuus iyo*
*mahadhaan ku qori laa*
*Maka iyo Madiiniyo*
*halka Maxamed yaallaan*
*calan kuugu mudi laa.*

*Muliyaa saasey*
*hay saasey.*
*Cishqi baan mirayoo*
*kolba mayracayoo*
*muddo dheer isagaan*
*majaraa u hayoo*
*guntii soo murdiyoo*
*kal gacaylkan madow*
*aan murwaadka lahayn*
*waan ka maydhanayaa*
*ninkii meel u hayee*
*ku muraadsanayow*
*hoo muftaaxa jacayl.*



# HOOYO

*Hooyoy la'aantaa*
*adduunyadu hubaashii*
*habeen kama baxdeenoo*
*iftiin lama heleenoo*
*dadku uma hayaameen*
*xiddig hawd ka lulatoo*
*sida haad ma fuuleen*
*dayax heego joogoo*
*hubka laguma tuureen*
*hawo laguma gaadheen*
*cirka hirar ka muuqdoo*
*hooyoy addoomuhu*
*halkay maanta joogaan*
*adigow horseedoo*
*intaad hanad xambaartee*
*haaneedka siisee*
*horaaddada jaqsiisee*
*habtay baan xisaab iyo*
*tiro lagu heleynoo.*

*Marka aad nin hiilloo*
*laga baqo hashiisiyo*
*halyey diran dhashaabaa*
*hooyo lagu xusuustaa*

*Marka aad nin hoo-loo*
*gurigiisa habaqluhu*
*isku soo halleeyoo*
*hayntiisa quudhoo*
*hor ilaahay geystiyo*
*lama hure dhashaabaa*
*hooyo lagu xusuustaa.*

*Marka aad nin himilada*
*hilin toosan mariyoo*
*hir markii la gaadhoba*
*ku labaad hilaadshoo*
*haga maatadiisoo*
*la higsado dhashaa baa*
*hooyo lagu xusuustaa.*

*Marka aad nin hooggiyo*
*ka hor taga dagaalkoo*
*garta hubin yaqaanoo*
*xaqa hoos u eegoo*
*halistiyo colaadaha*
*dabka hura bakhtiiyoo*
*ku haggoogta dhiiggoo*
*dadka kala hagaajoo*
*kala haga dhashaa baa*
*hooyo lagu xasuustaa.*

*Markaad hoobal caaniyo*
*hindisaa farshaxanoo*
*hab-dhaca iyo luuqdiyo*
*hawraarta maansada*
*heensayn yaqaannoo*
*Rabbi hibo u siiyo*
*labadaba hannaanshiyo*
*hal-abuur dhashaa baa*
*hooyo lagu xasuustaa.*

*Dumar iyo haween baa*
*nolol lagu haweystaa*
*kuwa lagu hammiyayee*
*sida hawd caleen weyn*
*rag u wada hamuumee*
*ishu halacsanaysaa*
*hablahaaga weeyee*
*marka guur la haybshee*
*gabadh heego dheeroo*
*hoobaan la moodoo*
*karti iyo hub-qaadloo*
*quruxdana ka hodaniyo*
*Hira laga aroostaa*
*hooyo lagu xusuustaa.*

*Hooyoy la'aantaa*
*higgaad lama barteenoo*
*hooyoy la'aantaa*
*hadal lama kareenoo*
*ruuxaanad habinoo*



*kolba aanad hees iyo*
*hoobey ku sabinoo*
*hawshaada waayaa*
*hanaqaadi maayee*
*hoygii kalgacalkee*
*naxariistu hadataay.*

*Hooyoy dushaadaa*
*nabad lagu hubaayoo*
*hooyoy dhabtaadaa*
*hurdo lagu gam'aayoo*
*hooyoy taftaadaa*
*dugsi laga helaayoo*
*waxa lagu hal-maalaa*
*hooyo ababintaadee*
*hayin lagu badhaadhaay*
*hogol lagu qabooobaay*
*gogol lama huraaneey*
*dugsigii hufnaantaay*
*hidda lagu arooraay.*

*Intaad hooyo nooshahay*
*hambalyiyo salaan baan*
*hanti kaaga dhigayaa*
*hamrashiyo xaq-dhowr baan*
*dusha kaa huwinayaa,*
*Hooyo dhimashadaaduna*
*hooggayga weeyoo*
*hiyiga iyo laabtaan*
*kugu haynayaayoo*
*weligey hoggaagaan*
*ka dul heesayaayoo*
*hengel baan u xidhiyaa*
*inta haadka duushiyo*
*idil habar dugaaggee*
*ifka hibo ku noolow*
*aakhiro halkii roon.*

# TODDOBAATAN MIDABLEY

*Dadka muuqa guudkiyo*
*Magac kala sinnaadaay*
*Marwo dumar garayskiyo*
*Marta kala sinnaadaay*
*doqontana masayrkiyo*
*mukur kala sinnaadaay*
*miidaamo dhegalaay*
*badda mawjadeedaay*
*kolba maayad keenaay*
*ruuxaan malaynayn*
*dhiiggiisa miirtaay*
*maasaar afweyney*
*mindi lagu qadhaabtaay*
*marti uma shidheeyaay*
*magan kuma hagoogtaay*
*mahadhooyin reebaay*
*maahmaahda yaabkaay.*

*Maandeeq irmaanoo*
*maraqeeda xoortoo*
*nacabkeedu maaloon*
*maqasheeda korinneey*
*mayey iyo hillaaceey*
*miiraale roobaan*
*manjaroor biyeyneey.*

*Maydali fardoodeey*
*ashkiraan murkucanneey*
*madow iyo casaaneey*
*maarriin dhalaalaay*
*magarkii la sheegaay*
*toddobaatan midabeey.*

*Geedaan magool iyo*
*midho iyo caleen iyo*
*ubax iyo man dhalinoo*
*aan maydhax laynoo*
*lagu oodan maalkoo*
*milic laga hadh gelineey.*



*Maartii dhalaashee*
*aan moodey dahabkee*
*milantee caddaatee*
*isku miir dillaacdaay.*

*Meydyohow qoslaayee*
*milgihii xishoodkiyo*
*maamuuska weydaay.*
*Manjihii ku daaloo*
*madaxaad ku socotaa*
*meelaad ku nooshiyo*
*muslinka iyo Gaalada*
*midka aad la dhaqantahay*
*mooyaan adduunkoo*
*ma-huraanka aakhiro*
*madhax kuuma yaalloo*
*maantay xisaabtiyo*
*miisaanka joogtee*
*naftu kugu mudduci tahay*
*maanlay afkaagaa*
*kugu marag furaayee,*
*sawtaad i mudatee*
*igu muusannawdaan*
*fartan malabka kuu daray*
*sawtaad melmelateed*
*murdisada ka leefteed*
*mahad iigu celiseed*
*igu tidhi macaanaa.*

*Ma filayn abaal laay*
*maxrashoon kaliileed*
*ama maangad iyo hawl*
*Waxaan kuu maleegtee*
*danahaaga maamulay*
*muran inaad ka keentoo*
*midiggeys u baydhoo*
*moqorraysi baratee.*

*Mugdigaan u heesaay*
*gudcurkaan majeertaay*
*maansooyinkaygiyo*

*murtidayda lumiyaay*
*madaddaalo beeneey*
*maaweeladaadii*
*meexaanahaagii*
*iyo muhashadaydii*
*maankaan ka saaroo*
*kaa maydhay laabtoo*
*masallii jacaylkiyo*
*kuu dhigay maqaarkaad*
*maydhaamanaysoo*
*nafta kaa muquunshee.*

*Ruuxii merganayaa*
*miyir qaata soortee*
*laba midig ku daaqaay*
*kolla miigan mayside*
*caawa yaad miraysaa*
*tolow yaad ku maqantahay*
*cidhibtee ku mudantahay*
*miciyaha ku haysan.*



# HOOBAL

*Ninkan hirarka dhaadheer*
*dadka kala hadlaayee*
*qof kastaba la haystee*
*ugu taga halkiisow*
*kolley waan hubaayoo*
*haasaasahaagiyo*
*waxa aad had iyo jeer*
*la haloosiyeysaa*
*hibo gaar ah weeyee.*

*Hiddo maxaad ku dhaqantaa?*
*hanti maxaad ka leedahay?*
*hub maxaad ka sidataa?*
*adduunyadu hir weeyee*
*maxaad haabanaysaa?*
*maxaad haybinaysaa?*

*Waxa hoobal lay yidhi*
*aan kuu higgaadshee*
*hiddo waxaan ku dhaataa*
*afkii hooyadeennoo*
*hanti waxan ka leeyahay.*
*suugaanta hodanka ah*
*hubna waxaan ka qaataa*
*hal-abuurka midhihiyo*
*hannaankiyo sargooyada*
*qalab lagu hufaayoo*
*lagu haadiyaayoo,*
*hugunkayga yeedhaa*
*lagu hawl galaayoo*
*heellooyinkaygaa*
*bulsho lagu hagaayo*
*ka hallawsan weligii*
*lagu hoga-tusaayoo*
*hawraarahaygaa,*
*dhasha lagu habaayoo*
*dadku hadalladayduu*
*ka dhigtaa hal haysoo*
*dhegtu heesahaygay*
*hanqal taag ku maqashaa.*

*Hayhaato meelaan*
*halistiyo wax yeellada*
*ka arkaa hog dheeroo*
*hoydayda yeedhaa*
*nacab soo hillaabtiyo*
*horor lagu ogaadaa.*

*Birta waxan u haystaa*
*hubka waxaan ku laayaa*
*qofka himiladaydiyo*
*neceb horu markayg oo*
*hagar-daamo taliyee*
*jecel hadimadaydoo*
*horseed sheelan baan ahay.*

*Hammi baa i lumiyoo*
*hogashiyo waareer baa*
*hilbahayga laastoo*
*haraggiyo laftii baan*
*ku hadaafayaayoo*
*ma haleelo dhaymaha*
*heensaha korkaygoo*
*ma hadhsado kaliilaha*
*mas ku jiro hoggiisoo*
*cawa daran la hoydoo*
*hurdo loo mar dhigay baan*
*anna Haro-walwaaleed*
*Hora hora idhaahdaa.*

*Inta aan higgaaddiyo*
*hindisaha ku jeedaa*
*dadku iga hayaamaa*
*hore layga guuraa.*

*Inkastaan u heegnahay*
*xilka aan hagoognahay,*
*misna habaqlahaygay*
*haaddii ka dheregtoo*
*hanbo feena mooyee*
*hor dhac kuma badhaadhoo*
*hayinkaygu ima geyn*



*weli hogol da'aysoo*
*haaneedka uma qaban*
*weligey hal curatoo,*
*duco iyo habaar baa*
*i hareera yaalloo*
*waxan ahay nin hodanoo*
*hayntana ka madhanoo*
*adoo igu hamiyayaan*
*waxba ii huraynoo*
*halac laygu dhaafiyo*
*gacan-haadis mooyee*
*qofna iima hagar baxo.*

*Adduunyadu hir weeyoo*
*hanti uma dudaayee*
*halse iga dardaarana*
*nafta haysan maynoo*
*mar qudhay hallowdaa*
*furataa hoggaankee*
*dadka ii han weynow*
*marka aad i hoysaan*
*hogga ii banaysaan*
*waa in lay hagoogtaa*
*waxan hiil ka geli jirey*
*ama hoo ka tari jirey*
*hengel lagu taxgeliyaa*
*hadhow lay xasuustaa*
*hebbel lay yidhaahdaa.*

# KA ROG OO HADDANA SAAR

*Sabkax oo haddana seed*
*seemman oo haddana sulan*
*sidkan oo haddana sagan*
*sahlan oo haddana sudan*
*sal leh oo haddana sigan*
*sillan oo haddana sugan*
*subkan oo haddana solan,*
*af soomaaligaygow*
*lagu saari waayoo*
*wax sawaaban noqotee*
*maxaan kuu sameeyaa?*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Waa lagu sugaayoo*
*lagu saadinaayee*
*Cabdiyow ma socotaa?*
*Xeebaha sintoodiyo*
*ninka Saylac joogow*
*sagalkiyo daruuraha*
*wararkaagi saaraa*
*Xamar bay bishii soon*
*saxal-qaaddu keentoo*
*sahankaagi noo yimi*
*sahaydiina noo keen*
*xagayaga sareediyo*
*waa Seer-ma-weydee*
*maxaad saaka joogtaa?*

*Ka rogoo haddana saar.*

*Tiro siman sagaal tuur*
*soddon keen sideed hoo*
*waxa hadhay bal suuree*
*ma so'baa ma saan baa*
*saddex iyo shan waa kee?*
*Sakalaha ha laga guro*
*laba sulub ha lagu daro*
*guryo samo ha lagu furo.*



*Ka rog oo haddana saar.*

*Siinleyda maansada*
*haddii saami loo dhigo*
*dadku uma sinaadoo*
*suugaanta hadalkiyo*
*Cabdiyow sargooyada*
*lagu kala sed roonoo*
*Rabbi wuxu ka siiyiyo*
*sida ay la noqotuu*
*ninba seylad keennee,*
*ha saluugin Riiraash*[5]
*Ina Saalax*[6] *haw dudin*
*Af-Qallooc*[7] *ha saamayn,*

*Soomaali weyn baa*
*xaajada la socotoo*
*iyagaa ka seegiyo*
*ka sugaaya garanoo*
*kala sooci doonee*
*laba seeble yeelkii*
*ha ku lumo sursuuraha*
*sixirkiyo shan xuubluhu*
*ha ka dhaco sallaankee*
*xidho saanadaadoo*
*sulufkiyo colaadaha*
*samaydaadu yay jabin.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Gabadheena Saaqiyo*
*Samawada ku magac dheer*
*rag saluugla ula baxay*
*marna Suuban lagu yidhi*
*sumaddeedu waa caan*
*kula siistay Baaruud*[8]

---

5 *Riiraash-waa Maxamed Cabdillaahi Riiraas*

6 *Ina Saalax: Waa siciid Saalax Axmed*
7 *Af-Qallooc: Waa Xaaji Aadan Axmed.*
8 *Baaruud: Waxa looga jeedaa cabdi Aadan Qays.*

*adna haygu sara tegin*
*waa Saxarla sheekadu.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Hararada sal iyo baar*
*lagu taxay sitaacee*
*loo soohay baarkiyo*
*saddexlaha ujeedaa*
*dhigta loogu saabboo*
*marti sama falkeedaa*
*koramada sagaal jirey*
*loo sudhay hoggaankoo*
*sooryaa la hurayaa*
*safar baa la furayaa*
*sumallaa la qalayaa*
*xididkiyo sokeeyaha*
*laga seexan maayee*
*salliyada xariirta ah*
*socotada u kala roga.*

*Ruuxii saboolow*
*xil ku saari maayee*
*saca maatada u godol*
*saadaal ku noolow*
*samirkana ha moogaan.*
*Ruuxaan wax sidinoo*
*shirka soo salaamow*
*adigaa wax sugayee*
*sarar iyo leg iyo badhi*
*kee baan ku siiyaa,*
*sacabkaagu qaadaa?*
*Iimaan sed weeyee*
*mid haddaad saluugtana*
*saddexdaba bal iga hoo.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Sidig maqan ninkeedii*
*talo waw sar go'antahay.*
*Jid Siraad korkiisiyo*
*suudaa la marayaa*



*sanadaa la dhaxayaa*
*sahay lagama maarmee*
*ha la jiro sibraarada.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Saanteena guudkiyo*
*suntu hilibka dhaaftoo*
*sal waxay ku leedahay*
*saableyda uurkiyo*
*sambabada dhexdoodoo*
*maal baa la sarayaa*
*selel looma baahnee*
*kii seexdayow toos.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*soodhkiyo billaawaha*
*sinta midig ha lagu xidho*
*faraskana silsiladdiyo*
*seetada ha laga furo,*
*seefaha ha lala baxo,*
*seeraa la furayaa*
*saryan baa la dabayaa*
*wiyil baa la sabayaa*
*xaajada sal fudud iyo*
*sakatiga ha laga jiro,*
*sahwi yaanu kala ridin*
*sahal yaan wax loo odhan*
*dhulku waa sanqadhayaa*
*cagta saari maynee*
*socodkeenu xeel iyo*
*ha ahaado laba suul,*
*sirna yaan la faallayn*
*murtidana ha saafina.*

*Ka rog oo haddana saar.*

*Maansadu ha socotoo*
*sida daad mahiigaan*
*dhulka haw sabbaysoo*
*kolba sabo ha gaadhoo*

*culimada salaaxdaa*
*senge hawgu joogtoo*
*ninba subax ha maalee,*
*ruuxii suldaarow*
*garo inad sabooltahay.*

*Soddoh weeye xeedhadu*
*ragna waa u simantahay*
*ninka suunka taabtee*
*ka sal gaadhi waayow*
*garo inaad sabool tahay.*
*Waa gabadh su'aal iyo*
*hal-xidhaale sidatee*
*ninka Abu sarmaantiyo*
*saddex qayda boqorka leh*
*kaga fura si-dalagtee*
*male kaga sinaystow*
*garo inaad sabooltahay.*



# CAJEB

*Cajebey Cajiibeey*
*cawo iyo ayaaneey*
*caqligaad xadaysaa*
*caku barashadaadii*
*iyo caabuqaagee*
*sida faras cag fududoo*
*cadda-horor yaqaannoo*
*gulufkiyo colaadaha*
*ninka lihi cad-goostaa,*
*raggu kuu cugtamayaa*
*anna caashaqaagaan*
*hadba weel u culayaa,*
*cimri-dherer hadhkaagaan*
*riyo kula caweeyaa.*

*Dhulka oo cagaaroo*
*cosobkii dul-saarraa*
*isagaan car-jabin weli*
*cabbanaan daraaddeed*
*ciidda hoose raantiyo*
*kula ciiray fooddoon*
*cagta meel la saaroo*
*la cuskado lahaynoo,*
*calcalyada xaareeddii*
*halka godan cuslaysiyo*
*fiid-cawl horraantii*
*cirka oo daruuruhu*
*midab wada cillaaniyo*
*ku dhigeen canjiidaha*
*xilli ay cadceeddii*
*dhar cashmiira xidhan tahay*
*sagal caasha saaraad*
*la wadaagtey caanoo,*
*haddaan caado kale jirin*
*cidi kaama garateen.*

*Geed cal iyo buur dheer*
*carro-hodan ku yaalloo*
*cokanoo irmaanoo*

*dhirta kale ka caynoo*
*cimilada agtiisiyo*
*rugtu qurux ku caan tahay.*

*Dusha sare caleentii*
*laamaha is-celisoo*
*hoobaan casuus lihi*
*cartamayso dhinacyada,*
*ubaxuna tin iyo cidhib*
*kaga dhigay cabbaadhyaha,*
*shimbiraha ka ciyayaa*
*intay heeso curiyeen*
*isku camal wareereen*
*dabadeeto carashada*
*markii laysku cayn go'ay*
*isu ciidan doonteen,*
*hal cabbaara goortay*
*isu calan walleeyeen*
*cadho kala maqnaayeen*
*cadcadiigsi geedkii*
*ciddiyaha ku qariyeen*
*codka luuqda heestiyo*
*carrabkoodu kala tegey,*
*carcaraha is-daba maray,*
*cudur jirey ku baaba'ay,*
*Dhallin caana diiddoo*
*guryihii ka caagtiyo*
*cadraddiyo barbaartii*
*sida goob ciyaareed*
*ugu soo carraabeen,*
*calaf waa halkiisee*
*hadallada cawayskaas,*
*kucalmaday u badan tahay.*

*Carshigaa nasahan baad*
*biyo wada cabteenoo*
*haddaan lay cadaabayn*
*Rabbi ii cadhoonayn*
*dadku inu ku caabudo*
*madowgiyo caddaankuba*
*ku caleemo saaraan,*
*sow kuma canaanteen.*



# BEERAAD

*Aan baab tusaala ah*
*ku bireeyo heestee*
*waxa iga ballaysina*
*Bismillaahi waa kow*
*Cabdiyow ba'lagu yidhi*
*beertii jacaylkow*
*haddii siinki buuq iyo*
*badhax iyo cindiid dhalay*
*kaftankeenna baalliyo*
*ba'ba aan u rogannee*
*waynoo baloolley,*
*lugta bidix ka jaamee.*

*Barni iyo Saluugliyo*
*Basradii Hargeysiyo*
*Burco Saxarladeediyo*
*Cabdiyow ma beenayn*
*ballankii Suleekhee*
*sed bursiinyo doon baa*
*Beled-weyn i geysoo*
*badhidaan leggeedii*
*is lahaa ku biirsoo*
*waxaan buuxi leeyahay*
*haantii barwaaqee*
*bi'i waaye Qaysow*
*hawshayda baahdiyo*
*baylahdayda kala quban*
*xilka aan u baydnahay*
*barashada xusuusta leh*
*ha ka dhigin bar kuma taal.*
*Ana baadi hadaftoo*
*iska badalli roortiyo*
*hayga dhigin nin biya-dhacay,*
*sheekada bu'deediyo*
*baaceeda sii raac*
*gunta hoos u sii baadh*
*i baxnaani saaxiib.*

*Ruuxaad ba'iisiyo*
*iintiisa baratee*

*bedenkiyo calooshiyo*
*kuu baadha feedhaha*
*boogtiisa Qaysow*
*lama sii banneeyoo*
*bacda lagama jeexee*
*i banbaani saaxiib.*

*Beerlula warkeediyo*
*buundada korkeediyo*
*baaxaa deggaygiyo*
*kalgacaylka beermiyo*
*taliyaha i badhi-furay*
*berigaas wixii dhacay*
*bandhiggii nin joogow*
*sheekada ka bogatoo*
*uma baahnid faallee*
*adiguba barbaartiyo*
*bulshadaad la socotoo*
*barbar baad ka saarrayd*
*baabuurka dhoofoo*
*batarkiyo ciyaartaba*
*adigaa ka boodee*
*Cabdiyow baroortuba*
*ka badh weeye meydkee*
*beybeysigaagiyo*
*beeraadka iga daa.*

*Ragna biime weeyee*
*taladii bir lagu jaro*
*hadday baydu furatoo*
*xadhkaheedu buubaan*
*lama baraq nuglaadoo*
*bishmahaaga Qaysow*
*baqe lama qaniinee*
*waxaa loo badheedhaa*
*biyo dhiijinteedee*
*haddaad bayr ka leedahay*
*biyo jira kashaadiyo*
*buro adiga kugu taal*
*boholiina lagu dhacay*
*ma bir baynu xidhannaa.*



*Iska booqi maayoo*
*bulxanka iyo qayladu*
*wax bilaasha maahee*
*beesheenna weyn baan*
*ku baxaan baxaayoo*
*hadba dhinac ka booqdaa*
*hablaheenna biligiyo*
*bilic lagu majeertee*
*loo soohay baarkaa*
*timahaa ka badanoo*
*iyagaan bad iyo webi*
*uga baaqayaayoo*
*anna biligta laafyaha*
*baxsanaanta jaahaan*
*ku baraarugaayoo*
*hadba tii i baabtee*
*boholyow i gelisaan*
*kalgacaylka Boodhari*
*ku bariidiyaayoo*
*boogaha jacaylkaan*
*siiyaa Badhkeedee*
*waxa kuu bushaara ah*
*berritana Jamaamiyo*
*Baar Dheere iga eeg.*

*Ido boqol kun gaadhoo*
*barqanaaya doog baan*
*hadba baal u rogayaa*
*bahalaha ka rebayaa*
*barkan maayo gacantoo*
*baashaali maayee*
*Cabdiyow bal ila soco.*

*Aan baab gunaanada*
*ku bisleeyo heestee*
*waadigan ba'iyo siin*
*labadaba bilkeedee*
*anna baadi doonkiyo*
*budulkaan ku joogaa*
*belo waa danbaysaa*
*ha is boobin saaxiib.*

# HAL LA QALAY

*Hal la qalay raqdeedaa*
*lagu soo qamaamoo*
*qalalaasihii baa*
*ninba qurub haleeloo*
*laba waliba qaybteed*
*qorraxday ku dubatoo*
*qoloftiyo laftiibaa*
*lagu liqay qallaylkee;*
*qosol wuxu ka joogaa*
*qubanaa dambeeyee*
*weli qaba hamuuntee*
*buuraha qotada dheer*
*ka arkaaya qiiqee*
*qarka soo jafaayee.*

*Qalwadii mas baa galay*
*qodax baase hoos taal*
*fule quudhsigii diid*
*geesi qoorta soo dhigey*
*faras qaayihiisii*
*qurux buu ku doorsaday*
*qab qab dhaafay baa yimi*
*qosol qoonsimaad noqoy*
*qabyo waa halkeedii.*

*Qarandidu libaaxay*
*ku qadhaabataayoo*
*soo qabo tidhaahdaa*
*qaankiyo biciidkoo*
*qaybtana shan-laab bay*
*qoondaysataayoo*
*isagana qorshaha guud*
*qanjidhkiyo xumaystay*
*ha qawedin tidhaahdaa*
*aarkuna ma quustoo*
*ma qarsado xanuunkee*
*hadba qaran-jabkiisiyo*
*qiirada xosuustuu*
*kolba dibin qaniinaa.*



*Qalwadii mas baa galay*
*qodax baase hoos taal*
*fule quudhsigii diid*
*geesi qoorta soo dhigey.*
*Faras qaayihiisii*
*qurux buu ku doorsaday*
*qab qab dhaafay baa yimi*
*qosol qoonsimaad noqoy*
*qabyo waa halkeedii.*

*Weligey cad quudheed*
*anna qaadan maayoo*
*qalanjadan faraa dheer*
*wax la qaybsan maayee*
*bal inay qubuuruhu*
*saddex-qayd ka maarmaan*
*ama qoor-tol jeexaan*
*labadaas mid quudhaan*
*xil ka qaawan saaraan*
*hadba qaylo-doon baan*
*ka-horow qiyaamaha*
*ku qulaamin maydkee*
*aan qoofallaadee*
*qarqarsiga ha iga furin.*

*Qalwadii mas baa galay*
*qodax baase hoos taal,*
*fule quudhsigii diid*
*geesi qoorta soo dhigey*
*faras qaayihiisii*
*qurux buu ku doorsaday*
*qab qab dhaafay baa yimi*
*qosol qoonsimaad noqoy*
*qabyo waa halkeedii.*

# WADNAHAAN FAR KU HAYAA

*Wahe dhalashadaadaan*
*farxad waalan gaadhoo*
*weedhkiyo dabaylaha*
*ama weriyahaagii*
*goortaan waraystaa*
*werwer ii dhammaadoo*
*wahab layga qaadoo*
*lugtu weerar mooyee*
*wahsigii illowdoo*
*wadar iga lib-haysaan*
*is-lahaa ku wiirsoo*
*wiil curad sidiisaan*
*wanan kuu bireeyoo*
*waayeel duceeyaan*
*wacayoo u yeedhee*
*walqashaadi maadaa*
*cunay waaxyaheedii?*

*Weger iyo ka waaweyn*
*tani waa ka waasacan*
*hadday ceel Walwaaleed*
*ku go'aan wadaamuhu*
*waan waani dhacantee*
*wadnahaan far ku hayaa.*

*Inkastaanu weydeyn*
*waranlaha ilaashaa*
*waadaasha xooluhu*
*iyadaa waraabaha*
*wehelkeeda mooddoo*
*woohowda diiddee,*
*waddo halaq nin moog baa*
*waabay ka leefee,*
*wed hadday ka nooshahay*
*waageed ha gaadhoo*
*waxaraaha raacdaan*



*wakhti kuugu simayee*
*goormaad wadaadkiyo*
*weliyada sidoodii*
*ii waaninaysaa*
*wacdi ii furaysaa*
*werdi ii rogeysaa.*

*Weger iyo ka waaweyn*
*tani waa ka waasacan*
*hadday ceel Walwaaleed*
*ku go'aan wadaamuhu*
*waanwaani dhacantee*
*wadnahaan far ku hayaa.*

*Isla-weyn qabkeedaa*
*wiyil aan jaraysnayn*
*ugu wadha maqaarkoo*
*lugta webi u geliyee,*
*haddaan weel gun laga tolin*
*waayaha adduunyada*
*xog-ogaal la weydiin*
*ruuxii gu' kaa weyn*
*lagu odhan wax ii sheeg*
*taladaadu wiilooy*
*dalab waayi maysoo*
*qofna waari maayee*
*mudanaha walaalkaa*
*haddii weerar lagu dilo*
*isha lalama waabtee*
*weerkiyo baroorta*
*dadka lala wadaagaa.*

*Weger iyo ka waaweyn*
*tani waa ka waasacan*
*hadday ceel Walwaaleed*
*ku go'aan wadaamuhu*
*waanwaani dhacantee.*
*wadnahaan far ku hayaa.*

# QAYBTA LABAAD

# DAALO

*Daaloo korkeedii*
*figta iyo daruuruhu*
*isku soo durkeenoo*
*ceeryaamo daahii*
*ku dallaallimaysoo*
*dirir gaaxdey mirayoo*
*toddobaad ku da'ayoo*
*danabkiyo hillaacii*
*isu daba mareenoo*
*onkodkuna dayaankii*
*dhulka dakharro yeeloo*
*casar gaaban daadkiyo*
*durdurradu kulmeenoo*
*isku soo darmeenoo*
*isla dulundulceeyeen*
*jarar moosa dumiyeen*
*hadba daw samaysteen*
*shinbiruhu mar duuleen*
*marna soo degeenoo*
*damaloo dhan qariyeen*
*dananka iyo foorida*
*darandoorri heeseen*
*dayaxiyo cadceedduna*
*dacallada ka joogaan*
*isha daawanaysaa*
*kolla daali maysee,*
*dibnahay cuncunayoo*
*lahashada dareenkaa*
*ila sii durkaysee*
*bal aan daaha aan rogey*
*halal kale ku sii daro.*

*Dal ahaanna waa gobol*
*dullo iyo bannaanba leh*
*badna way la deris tahay*
*duni weeye cimiladu*
*dardarteeda dhigatoo,*
*waxaa loogu daray taas*
*inta qurux u damac roon*
*cirku doobta kama dhigo.*

*Degmo weeye hodanoo*
*dooxooyin madhaxliyo*
*deegaan ma guurtiyo*
*ilo wada darrooriyo*
*doog aan is dhalan rogin,*
*dayib geed la magac baxay*
*dahab hoosta yaallaa*
*dalag looga dhigayoo*
*cudur kama dilaacoo*
*dulin kama abuurmoo*
*dabar-gooye kama dhicin.*

*Waa degel qabow oo*
*qorrax diib is marisoo*
*jidhka aan damqayn baa*
*loo soo deldelayoo*
*dadku kuma gabooboo*
*nimankii Darwiishkii*
*kula jirey dagaalkoo*
*weli doob la moodaa*
*birta daabka haystoo*
*gala duullimaadkoo*
*iyagaa dorraatiyo*
*taariikhda duugga ah*
*dhul fog looga doontaa.*

*Duunyadiisu waa geel*
*daran iyo tigaad cuna*
*ido deexda lagu dhaqo*
*ardo lagu dabbaal dego*
*carro weeye dihinoo*
*dirka magac ugaadheed*
*lagu soo dareershoo*
*farow iyo dibtaag baa*
*derrimaha ku fara badan*
*cawlaan didaynoo*
*cidi aanay dilinoo*
*qofna aanu dabannoo*
*dibindaabyo aragoo*
*dannigii ka ba'ay baa*
*dugsanaysa xoolaha.*



*Dad ahaanna waa qaran*
*waa duul is wada dhalay*
*qalo iyo dir sooc ma leh*
*dab dhexdooda kama huro*
*weligood ma diriraan*
*isma doca-doceeyaan*
*dumar kama baroortaan*
*dooxatiyo wareentiyo*
*budhcad duusha kuma maqal*
*daandaansi ma oggola*
*xumo uma dulqaataan*
*nabaddana ma diidaan*
*deeq kuma masuugaan*
*doodna waa yaqaanniin*
*diricyaa ka kacay badan*
*damdamtiyo mashxaraddiyo*
*sacabkana ma daayaan*
*danna kama fogaadaan.*

*Nin dabayli wadatoo*
*waxaan ahay dalxiis iyo*
*doolaalo keentoo*
*degdeg baa i soo galay*
*dibna waan u kacayaa*
*dunta gabaygu leeyahay*
*kama xulan hal-doorkii*
*dulucdiina kama bogan*
*balse daymo halacsiga*
*kolley doorkan maanta ah*
*halkaas aan ku dagagaro.*

# SHAN UBAXLEY

*Ugubey ma seexdoo*
*iintaada hoosaan*
*uur-baadhayaayoo*
*toddobada ayaamood*
*kolba ood ka rogayaa.*
*Meel uurku tebayoo*
*ergo kuugu maqantahay*
*indhahaagan haystaad*
*ku illowdey ruuxaan*
*cidi kula arkayn iyo*
*eegmadan jacalkiyo*
*ilmadaadan qubatee*
*dhabannada ordaysiyo*
*dhirtanaad arradisee*
*ubaxii ka madhisiyo*
*waxan kaa ambaday baan*
*indhashooda waayee,*
*arrintaada gabadh yahay*
*udubkeedu dheeraa !*

*Waxaad tahay qof uguboo*
*iimaanku buuxoo*
*sidan qabo Allaylehe*
*aqalkaad ku dhalatiyo*
*gurigaad ku ababtaa*
*Alla lagu xusaayoo*
*awliyadu ku kulantaa.*

*Badi wuxuu arooraa*
*arday macallinkiisee*
*edebtiyo xishoodkana*
*idil hooyadaabaa*
*kugu tidhi adkeeyoo*
*malaa aammusnaantana*
*iyadaad ka wadataa.*

*Sida ruux abwaaniyo*
*waaya-arag da'weyn baad*
*arartiyo tilmaamaha*
*kolba madax unkaysaa*
*hadba dhinac abyeysaa,*



*malaa aabbahaa baa*
*taliyoo arrimiyoo*
*gabadhyahay af-tahamada*
*isagaad ka wadataa.*

*Timahaagan adhaxdiyo*
*ka arooray dhabarkee*
*garbahaaga ootaan*
*erey lagu tilmaamiyo*
*hadal lagu ammaaniyo*
*wax asteeya waayoo*
*afartaada waaxood*
*indhal baysu haysoo*
*luquntaadu inanyahay*
*waa aaran geriyoo,*
*sanku waa abuurtii*
*fardo Adari joogiyo*
*ashkirkii Nugaashoo,*
*indhahaagu ruuxii*
*sal-fudayd ku eegay*
*ashqaraar ku ridayaan.*

*Afkaan midabka luulka leh*
*mahadhada ilkaa furan*
*labadaba Allaylehe*
*ninka eeday waa ani.*

*Dadkanuu Ilaahay*
*ka abuuray ciiddee*
*goblantada adduunyadu*
*ka idlaysay dheehee*
*dhaxantiyo awaaruhu*
*araggooda doorsheen,*
*oday lama wadaagtide*
*ma cadceed arooryoo*
*sagal oogadeediyo*
*agagaarka geesaha*
*kaga taxay aleelaad,*
*uur wada gasheenoo*
*ma cir-jiidha oogtiyo*
*xiddigaha iftiimaad*
*dhalad kula aroortaa.*

*Ma hablaa af-saarkiyo*
*indha saabka qaatiyo*
*Amran xuural-cayntaad*
*isir hilib wadaagtaan ?*

*Ubaxley shan Ubaxley*
*magacaagu waa ugub*
*gacmahaagu eegmada*
*waa laba uloodoo*
*N. F. D. ku yaalloo*
*unuunkaagu waa Xamar*
*adhaxdaadu waa Herer*
*addimmadu Hargeysiyo*
*Obokh bay ku beermeen*
*abtirsiimadaaduna*
*Afrikoo dhan weeyaan.*



# XAMAREEY MA NABADBAA ?

*Xayaabkii cir da'ayeey*
*daruur shalka xayddaay*
*xulad geenyo ugubeey*
*darmaan xoosh u dhalataay,*
*xil-dhibaanka nabaddaay*
*Xajkii Geeska Bariyeey,*
*cadceeddoo xab-bururtaay,*
*marna xabag-barsheeddii*
*nafta xiisa gelisaay.*

*Xudduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*Xamreey ma nabad baa ?*

*Xiddigtii bahdeediyo*
*xubnaheeda kala maqan*
*u ahayd xusuustee*
*sumaddooda xaynkiyo*
*shanta gees ku xidhataay.*

*Xudduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*Xamareey ma nabad baa?*

*Laamaha xorriyaddiyo*
*xayn-daabka calankee*
*xejinaaya dhalashada*
*xididkay ka beermaan*
*xinjir laga waraabshaay.*

*Xudduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*Xamareey ma nabad baa ?*

*Carra-Edeg xanteediyo*
*xaska weli dhex-yaalliyo*
*xaskulaha in laga guro*
*danahooda xigashiyo*
*xagal-daac in laga jiro*
*tii loo xil-saaraay.*

*Xudduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay,*
*Xamareey ma nabad baa ?*

*Isticmaarku xeel iyo*
*xanaf iyo wax-yeelliyo*
*xanan iyo dhibaatiyo*
*xadhko miidhan weeyoo*
*sida geed xajiinluu*
*xagxagtaa korkaagee*
*xadantada gumeystaha*
*Xaram lagaga maydhaay.*

*Xuduntii dhulkaygaay*
*Xarunrtii dadkaygaay*
*Xamareey ma nabad baa ?*

*Danta inay xaraashaan*
*dembi inay xambaartaan*
*ama sharafka xooraan*
*isticmaar la xididaan*
*ama xeer la yeeshaan*
*nimankii ka xila-furay,*
*naftu waxay u xilataa*
*dhegta xeerinteedee,*
*nolol aan xarrago wadan*
*nimankii xanuunkiyo*
*xabsiyada ka door-biday,*
*gobannimo xaq weeyee*
*inta geesi loo xidhay*
*ama xawda laga jaray,*
*geerida xalaasha ah*
*nimankii xantoobsaday*
*halka lagu xormeeyaay.*

*Xuduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*Xamareey ma nabad baa ?*

*Shinnidii Xumbaaliyo*
*sida xaydha-weyntii*
*nimankay Xawaashiyo*



*xaab-qaaddu keentee*
*xagga sare ka soo degey,*
*dhulka xaabadii tiil*
*nimankii xambaartee*
*dhirta xaalufka u rogey,*
*dunidaan is-ximinnoo*
*xasillooni loo yaal*
*dadku kala xishoodaan,*
*nimankii xaduurkiyo*
*xadaafiirta geliyee,*
*inta ay xifaaliyo*
*xumo iyo colaad iyo*
*xiisadaa ku kiciyeen*
*xolad daba ku olosheen*
*xadhkaheeda kala furay,*
*xidid iyo tol wada yaal*
*nimankii hub xoogliyo*
*xakamaha ku kala raray*
*kala xaday walaalaha .*
*Marwadii xanjeerrayd*
*nimankii xabbaadhee,*
*xawawaray dhasheedii.*
*Kuwa midabka ximiyee*
*xaqlahana addoonsada*
*xistigiyo gumeystaha,*
*birta loogu xiiriyo*
*halka lagu xabaalaay.*

*Xuduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*Xamareey ma nabad baa ?*

*Sida xuur wedkeedii*
*xan ahaan ku maqashaan*
*amba xiisahaagii*
*Xamarey la dhuubtoo*
*xalay waxan baraarugey*
*iyadoo xiddayseey*
*inta xaysku kuu da'ay*
*dhulku wada xareed iyo*
*xamash iyo ugbaad iyo*
*xilli yahay barwaaqoo*
*dayaxaagu xaynkiyo*

*xuubkii dillaacshoo*
*inta uu xanjaadkiyo*
*xagal qudha la soo baxay,*
*dusha sare xinnaystoo*
*dhallinyaro xariiriyo*
*hablo Xuural-caynii*
*isasoo xusheenoo*
*xeebtaada yaabka leh*
*inta ay xaraaraha*
*laba laba u xaadheen*
*xusullada dhigteenoo*
*xeerkii kal gacalkiyo*
*lagu jiro xisaaboo*
*xantu hoos u socotoon*
*aniguna Xayaad iyo*
*xiddigtii jacaylkee*
*shanta xaraf mid lagu daray*
*xog-waraysanaayoon*
*kolba xaada cududdiyo*
*xaradhkiyo garaaraha*
*il-badhkeed ku xadayee,*

*Xudduntii dhulkaygaay*
*Xaruntii dadkaygaay*
*maxaad aniga oo xidhan*
*lahashada xanuunka leh*
*ii xusuusinaysaa ?*



# HABLAHA GEESKA AFRIKA

*Ma geyoon ma gamashiyin*
*ma gommodin ma gaaggixin*
*ma gabloolin maan gudhin*
*mana gabin halkaygii*
*gabaygiina maan deyn*
*geeraarradaydii*
*imminkaan gardaadshoo*
*weli maan gunaanadin.*

*Murti nimaan gunteediyo*
*baran gogol-dhiggeedoo*
*gonda degi aqoonnoo*
*garab-daar lahayn baa*
*gawlgawla hadalkoo*
*kolba dhinac garoocdee*
*sida Webi Ganaanoo*
*cirka godollo maaloo*
*biyihii ku gaaxdiyo*
*gebiyadi ku soo degey*
*ku darsaday gufaaciyo*
*guulaamo diriroo*
*galli jabay habeenkii*
*kolba gacan ma soo rogey,*
*Qudhaciyo galoolkii*
*gunta xididka maw jaray*
*dhulka wada galaal iyo*
*gabbalaha ma kaga tegey.*

*Afartaa geddaydii*
*dhaha laygu garan jirey.*

*Gurmashada dagaalkiyo*
*gulufkiyo colaadaha*
*goobaha naf waagiyo*
*halka laysku gawraco*
*marka gorodda lays daro*
*haddaan dumarku goonyaha*
*guubaabo kicinayn,*
*sida galowga dhiilloon*
*illaa geesi qayrkii,*
*birta kuma gumaadeen ?*

Gu' hagaagey oo da'ay
dhulka geedo jiifaan
gurya-samo barwaaqa ah
haddii geeddi lagu furo
dhallinyaro is gurataa
gurdan-raaca fiidkii
gole weyn ku kulantoo
cagta garan-garteediyo
isu geysa jiibkoo
googooska luuqdiyo
gedda sacabka loo jaro
hablahaa u gaaroo
garashada codkoodaa,
qof gaboobey kicisoo
gelbiskiyo mashxaraddaa
gama' kaa ilaashee,
haddaan gabadhi boodeyn
illaa gegi ciyaareed
wax ma dhaanto geriyaad ?

Haddaan guudka laga jirin
gudihiisa xaabkiyo
cayayaanka laga gurin
marwo dumar garka u xidhan,
illaa guri dugsoon ma leh ?

Gaadaha habeenkii
kelidaa galgalashiyo
ged-geddoonka dhalisoo
adigiyo go'aagaa
hadba dhinac u guuroo
barkintaad gabbood iyo
gaashaan ka dhigataa,
haddaan guud haldhaaley
kolba gacan la saarayn,
illaa gogoshu wehel ma leh .

Kuma galo adduunyada
ninna goonni-socodkoo
marwo garasho dheer baa
ninka raga u gudinoo
iyadaa guddoonkiyo



gadh-hayaa naftaadiyo
gaadiidka reerkiyo
gurgurshaaga noqotoo
arrin kula gorfaysee,
haddaan gaari kula jirin
illaa noloshu guul ma leh .

Go'i waa barbaareey
Gobi waxay ku dhaqantaa
garab waxay ka dhigataa
gallad waxay ku dheeftaa
samo waxay ku gaadhaa
gololada haweenkee,
hiddaheenna gaarka ah
hablihii gabowgiyo
geerida ku sugi jirey,
hablihii garayskiyo
xidhan jirey guntiinada
hablihii gu' iyo dayr
sida baarqab golongolay
dhexda xadhig ku goyn jirey,
hablihii garaaraha
gaatan-socodka laafyaha
sida gorayga ciideed
gelbin jirey tallaabada,
hablihii gun iyo baar
isha gacalo-eegtaa
gama' aanay ledi jirin,
hablii talada guunkiyo
gunti jirey xishoodkee
hadalkoodu gaabnaa;
hablihii gef hooyiyo
qarsan jirey guhaaddee
hadday goddollo soomaan
ama gaajo liitaan
cidi aanay garan jirin,
hablihii gammaan faras
iyo geela ugubka ah
guur-doon ka bixin jirey,
hablihii Gargaariyo
Guleed ku curan jirey,
goldaloolo iyo ceeb
hablihii ka guban jirey,

hablahaan gankoodiyo
hilbahooda gadan jirin,
haddii aad gumeysaan
guul guul ku laysaan,
gelin qudha ku mooddaan
gabbalkooda dumisaan
hadba tooda goosha ah
ganacdeeda jebisaan,
dadku gabanno-xooriyo
garacyaley yidhaahdaan,
innagoo gumowniyo
dhaqan guurey weeyee.

Gocashada xanuunka leh
waxaan uga gol-leeyahay
godob aabbe falay baa
ubadkiisa gocondhiyo
gumar shidan ku noqotoo
gebi dheer ku dumisee
ninka inan ma-geyda ah
gurrac kaga danaystee
gol-qaniin ku maalow,
gefka aad falaysiyo
waxaad gaaxsanaysiyo
gashigaad cunaysaa
ruuxay ka go'antahay
gabadhaada weeyoo,
xumahaad geleysiyo
waxaad geysanaysaad,
galab kale ka sheekayn.

Gebagebada sheekada
bal aan soo gunaanado
guddoonsiyo jiiftada,
hablo weerar geli kara
hablo geesi dili kara
gobanimona hanan kara
hablo talada goyn kara
garta madal ka niqi kara
garashana iskaga mid ah
quruxdana ka wada goba.



# TUKE BAAL CAD

Dhulku waa boggaygiyo
beerkiyo wadnaha oo
baradaan ku ababee
ku barbaaray weeyaan.
Dadku waa bahdaydii
bulshadaan dugsanayiyo
noloshayda beeshaan
ku baxnaaninaayoo,
Rabbaa ii sed buriyoo
murtida iyo baanaha
iima barin Ilaahay
danta inan ku bi'iyoo
badhi furo hayaankoo
himilada burburiyee,
kuma wado billaawaha
lugta loo barkinayee
wax kalaa babinayoo
belo aan la garan baa
boholaa qodaysiyo
booraanta hadimo.

Burka lay filaayiyo
balliyada agtayda ah
gelin kuma bariistoo
baxsanaa habeenkii
ama badiba maantii
boqollaal kun jeer baan
ka baxaa dhulkeeennoo
sida biligta roobkiyo
gaaraa-bidhaankaan
hadba meel ka baaqaa.

Mar dabaylo buubiyo
baqayaan ku joogaa.
Mar ballaadhka ciiddiyo
waxan baac ku tiriyaa
dhulka baaxaddiisoo
mar badaa guntoodaan
baashaal ku marayaa
bahalaha ku nool baan
bun-salool u qubayaa.

*Mar bahaa dugaaggiyo*
*inta boqonta hoosiyo*
*baabaco ku oroddiyo*
*bog intii ku socotiyo*
*waxaan beretansiiyaa*
*baalleyda haadda.*

*Marna beer jacayloo*
*ku bislaata hees baan*
*hadallada baroorta ah*
*biyo uga dhigaayoo*
*dad bukaanka caashaqa*
*baaxaa-degaayoo*
*boholyow la jiifaan*
*boogaha u dhayayaa.*

*Marna sheeko biirtiyo*
*Beder iyo Xunayn iyo*
*Beer-Dhiga dagaalkii*
*birta laysku gooyiyo*
*beri hore wax jirey baan*
*hadba baab akhriyaya.*

*Marna beenta feleggiyo*
*baxnaanada adduunkiyo*
*berritiyo wax maqan baan*
*saadaal ka bixiyaa.*

*Marna hawli badatee*
*suuradaha buruudka leh*
*mid ballaysin keedii*
*waxa looga boodee*
*Bisin looga waayaan*
*arrinteeda baadhaa.*

*Marna baahi-laawaha*
*waxan buun u tumayaa*
*yaajuujka buuraha*
*baal dacar ku qodayoo*
*bandhig laysu yimi baan*
*jinka baar-qabkiisiyo*
*bulbulleyda shaydaan*
*billadaha ku taxayaa.*



*Marna dawlad buuxdoo*
*barigiyo galbeedkaba*
*ka buruud sarraysoo*
*ba'an baan u taliyaa*
*boqortooyadaydaan*
*marna beri samaad iyo*
*bilo kheyr ka dhigayaa,*
*marna baaxad-sooriyo*
*basan baas u rogayaa.*

*Marna baahidaydiyo*
*waxan baylah tirayaa*
*bilicdii afkaygoo*
*gabay baan badhaadhiyo*
*ka hayaa barwaaqoo*
*isagaa bar xoolaad*
*banka iigu foofoo*
*nafta waxan ku baantaa*
*badhidiyo leggiisee*
*maxaa beydantaydiyo*
*gabadhayda baydiyo*
*boqorkiyo dhaclaa xidhan*
*bidix loogu rogayaa ?*
*tolow waxan bireeyaba*
*maxaa booli tuugiyo*
*bakhti looga dhigayaa ?*

*Dadku beretan guuleed*
*u biyeysey weelkoo*
*baroor iyo ninkiisii*
*ka baxsade habaaskee*
*haddii boodhku igu dhaco*
*baqalkay la gaabshee*
*nin bursaday halkiisee*
*intayada baraarkiyo*
*burrusyada ku joogtaa*
*barbarraannu noqonnee*
*maxaa aniga baas iyo*
*tuke baal cad iga dhigay ?*

# HAL-ABUUR

*Hal-abuurku waa geed*
*hufanoo udgoonoo*
*higil iyo caleen iyo*
*hoobaani fuushoo*
*ubaxuna kor iyo hoos*
*hilqadaha ku dhigayoo*
*hadh qabow ku darayoo*
*shinbiruhu hiraabtii*
*ka haloosiyaanoo*
*cidi aanay hurinoo*
*ishu haybta meel dheer*
*uga soo hilowdoo*
*higsi lagu yimaaddoo*
*la habaarin weeyaan.*

*Hal-abuurku waa diin*
*bulsho hadalladeediyo*
*haasaasaheediyo*
*hinqashada dareenkiyo*
*hibo weeye Eebbahay*
*hanti aan la gadinoo*
*halladaad ku gelinoo*
*la hagoogto weeyaan.*

*Waxa lagu habeeyaa*
*hiddahaad ku dhaqantiyo*
*himiliyo ujeeddoo*
*waxa lagu hayaanshaa*
*hagarli'i dadkaagoo*
*waxaa loogu hiishaa*
*lama hure dhulkaagoo*
*haqab-beelka noloshaa*
*horta lagu yagleelaa.*

*Hal-abuurku waa roob*
*hogol weeye curatoo*
*waa heego diriroo*
*ka hillaacday meeloo*
*dadku ruux hilaaddiyo*
*hindisaha yaqaannoo*



*jidka toosan hubiyoo*
*dhakhso ugu hayaamoo*
*hela doogsinteediyo*
*qof habaaba socodkoo*
*ku hungooba weeyaan.*

*Hal-abuurku waa deeq*
*waa Haro Digeedoo*
*is harraatiyaysoo*
*dadku ruux hal adagoo*
*horu socod ku darayoo*
*ka hirqada xareeddiyo*
*hawo niman ka qabinoo*
*hayin gaadha waayoo*
*ka harraaddan weeyaan.*

*Hal-abuurka guul aad*
*nacabkaa ka hanatiyo*
*libin aad la hoyatoo*
*ku haloosiyaysaa*
*dabka loogu huriyaa.*

*Marna hoga tusaaliyo*
*maahmaah hawiranoo*
*noloshuba ku hiratiyo*
*murti hodana weeyaan.*

*Marna haan gun dheeroo*
*hilanoo lingaxanoo*
*habaqlaha dhextaalliyo*
*hal-xidhaale weeyaan.*

*Marna hoy bulsheedoo*
*ku habboon caweyskiyo*
*halab lagu bariistoo*
*laga helo naruuriyo*
*haasaawe weeyaan.*

*Marna hugunka uurkiyo*
*hadimada ku gaadhiyo*
*hogashada gandoodkiyo*
*hiyi kaca calooshiyo*

*nafta hibashadeedaa*
*kugu huriya naaroo*
*hal-abuurka nabar baa*
*hollo kugu yidhaahdoo*
*dacar kugu hulaaqdiyo*
*hiirtaanyo murugaa*
*hadba lagu bakhtiiyaa.*

*Marna hadashadaadiyo*
*isha halacsigeediyo*
*hengelaha jacaylkiyo*
*waxaa loogu heesaa*
*hablihiyo kal-gacalkoo*
*marka aad hawootaa*
*lagu hoodo sheegtaa.*

*Marna geenyo hororoo*
*hardaf waal ku socotoo*
*halis iyo wax yeelliyo*
*hagar daamo badanoo*
*heddu saarantahayoo*
*nin bartaa ka hadhinoo*
*ku hodeysa weeyaan.*

*Marna waa hummaaggii*
*qofka kula hadlaayoo*
*intuu soo hankaabsaday*
*iska rogey hillaabtoo*
*kugu yidhi hankaygiyo*
*habka maansadaydiyo*
*hiyigaygu waa kaas.*

*Hal-abuurku waa awr*
*sita heeryadiisiyo*
*hirar kala shisheeyoo*
*waa hilib mergiyahoo*
*isagoo hal keliyaa*
*dadku harag shabeel iyo*
*ka dhigaan hariiryoo*
*qof kastaa hab gaaruu*
*u higgaadsadaayoo*
*waxay ugu habboon tahay*



*sida uu u haystiyo*
*halka uu la doontoo*
*gabadh weeye heensaha*
*hore loogu xidhayoo*
*shaqalkiyo hagoogtiyo*
*huga way ku dhalatoo*
*sida naas hablood buu*
*horaad iyo danbeed yahay.*

*Hal-abuurka niman baa*
*hawraar u bixiyoo*
*toddobaatan hebeloo*
*hana-qaad is-xigey baa*
*hasha maali jirayoo*
*haaneedka Raagaa*
*qaban jirey hadhuubkoo*
*Cali Dhuuxna hooduu*
*ragba kaga horreeyoo*
*hidda raac Qamaan bay*
*habar wada jaqeenoo*
*ha'da gabay Salaan baa*
*dhigi jirey higgaaddoo*
*hammi Faarax Nuur baan*
*ledi jirin habeenoo*
*hitiqsiga Gammuutaan*
*hamrashada aqoonoo*
*mahadhada kal gacalkiyo*
*Hodan iyo xusuusaha*
*Cilmi haadka duuluu*
*fari jirey hayaydoo*
*Sayid Maxamed hawlaha*
*halgankiyo dagaalkuu*
*u hor kacay Daraawiish*
*hurintiisa jiiftaa*
*u ahayd hal-haysoo*
*ha noolaatadeennii*
*hubka lagu dagaal galay*
*murti baa halbowliyo*
*u ahayd hoggaanoo*
*Soomaali hurudday*
*hoobey ku kicisoo*
*Xamar iyo Hargeysaba*
*dhagax iyo hangool iyo*

*heellaa xoraysoo*
*Wallee hoobalkaan jirin*
*libi sooma hoyateen.*

*Anna heesta luuqdiyo*
*hawraarta maansada*
*kuma xidho hunguriyoo*
*kama taliyo hoodoo*
*ummaddaydu haabkay*
*ugu heellantahay baa*
*hanti iigu filanoo*
*hanqal-taagga xoolaha*
*waxan uga han weynahay*
*hambalyada salaantiyo*
*hadal-haynta magacoo*
*hindisaha wax sheegiyo*
*hoga gelinta jiiftada*
*ma hawaawi tiriyee*
*halka aan furaayaan*
*u horseed tagaayoo*
*horta waan u sahanshaa.*

*Marka aan hoggiisiyo*
*feleggiisa hubiyee*
*habaskiisu yeedhaan*
*hudi hudi idhaahdaa.*



# ARRAWEELO

*Ooshu waa halkeedii*
*cirku waa engegan yahay*
*naxariisi kama iman*
*dhulku waa arradan yahay*
*oogadiisu damac ma leh*
*waa abaar dad qalata ah*
*waa sabaan la adhax-jabay*
*ma aloosna geedkii*
*afti baana sii tiil*
*dadna waa ogsoonaa*
*anna baanahaygii*
*ku adkaysan waayee*
*sow iimahaygiyo*
*alabkayga lama baran.*

*Olol-reenka hibashada*
*uugaanka baxayaa*
*ma naftii asqowdaa*
*mar labaad arrumisoo*
*agabtii xidhxidhatoo*
*awrkeedu raran yahay?*
*Ma awaalihiibaa*
*asmadiyo xanuunkiyo*
*aynfaadku saarraa?*
*Ma abaabulkii baa*
*oohowda waallaa?*
*Ma dabkaan afuufee*
*aasee bakhtiiyaa*
*ololkiisu baxayaa?*

*Kalgacaylku aafiyo*
*urugiyo dhib badanaa*
*kasha nugul ka adakaa?*
*Soo aaryey nabarkii*
*ma alwadey sidii geel*
*edeg madhan ma deydeyey*
*sida bahal ma oogsadey*
*ma illaday kabtii jaan*
*ma ku jiitey awdalan?*
*ma arooryadii baa*

waabayda udugga leh
idan laygu shidi jirey?
Abbaartayda saakana
ma adeeridii baa
sidaan aar libaax ahay
araggaygu didin jirey?

Arraweelo dumareey
arrimaha dhexdeenna ah
asaraari maayee
igu tidhi "ha ii iman".
Anna waan hubaayoo
inaan uurka kaa jaro
afar iyo shan goor baan
axdi kuugu qaadoo
misna oofin waayee
isma ogiye goormaan
tolow aqalka soo galay?

Ma naftii ku eeddeed
obocdeeda wadhateed
axankeeda karisee
ishu kaaga fagantaan
usha kaaga reebaan
igdhayee sabaayee
Uubaale geeyeen
meelaanay kaa arag
ku ilaalinaayaa
soo jiidhay ooddii?
Ma adaahidii baa
addinkaaga hoos taal?
Aburkiyo xarraankiyo
orka iyo mashxaraddiyo
alalaaska baxayaa
ma ujeeddadaasaa?
Ma addoonsigeedaa
ajar kuugu suganyahay?

Arxanlaay karkabaddiyo
araggaygu murugiyo
yaanu umal ku saaqoo
anfariir ku geliyiyo



kugu noqon af-kala qaad.
Arrintayda gabadhyahay
nin ambaday ka soo qaad.

Naftan oonku shidayee
deyn weydey ololkaa
amankaaga dhalisee
abhin iyo tusaaliyo
ergo waaya hadashiyo
imisaan karaankay
la cuskaday aqoontay?
Ma waxaanan odhannoon
ka illaawey baa jira?

Hadday diiddey amarkii
ka irdhowdey taladii
oggolaatay dala'siga
eelka maanigaa dhigay ?

Indhahaagu kululaa
eebadaadu toganaa
warmahaagu adakaa
arammida ku haysiyo
aanadaadu weynaa
yaad ka aarsanaysaa
ma nin aabbahaa diley?

Nin astaamahaagiyo
quruxdaada oog iyo
ubax dharan ku sheegoo
ammaantaada koobaa
eed beeli waayee
erey tuurleh ruuxii
afka kaa yidhaahdiyo
utin nimaad ku leedahay
waa maxay abaalkii?

Sow ma tihid ilayskiyo
iidaanka noloshiyo
iimaanka lahashada
sidaan kaaga oolaa?

*Immisaan ku jiri baaq*
*heestii ukulidiyo*
*cabashiyo abla-ablayn?*

*Xeerkii Islaamkiyo*
*wixii Eebbahay faray*
*olloggayga godobtiyo*
*aanfada ka doortoow*
*aabi loo badheedhiyo*
*ansax maaha digashadu*
*yaan inkaari kugu dhicin*
*ashqaraarka kibirkiyo*
*yaanay iiddu kula tegin*
*ha ku tuman aleelaha.*
*Ha afduubin xaajada*
*isirkeeda doon doon*
*ka ummuli tusaalaha*
*alif macallin weydii*
*bal abuurta dunidiyo*
*shalay iyo awaasheed*
*aashaa dib ugu noqo*
*bal oddoros hilaadaha*
*bal malee wax iman kara*
*berritiyo ayaamaha*
*ifafaale daymood*
*bal iskaa ka sheekee*
*wixii aadmi soo maray*
*taariikhda uur-baadh.*
*Ugub maaha jamashadu*
*ma ishaaran keligey*
*kalgacaylku waa oday*
*asalkiisu waa geed*
*ab abkii lammaanaa*
*nabar oof wareemuu*
*la abloobo mooyee*
*abidkii ma qaran jabo.*

*Gabadhyahay adduunyada*
*waxaa loo agaasimay*
*aayatiinka dhaqashada*
*agan maaha gamashiday*
*ma idlaan hankeedii*
*gabno ibo kuryowdoo*



*abdo lagala quustoo*
*maaha laga inaabsaday*
*weli way irmaantahay*
*waa aroos toddoba baxay*
*oori weeye qurux badan*
*waa ammaano dhaxal gala*
*aayadaa ka soo degey*
*Rabbi baa aqoolkiyo*
*abyiddeeda labadaba*
*ka afeeftay beri hore*
*duminteeda ma oggola*
*haddaad siibto udubbada*
*soo dhaafto Alamtara*
*miyaan eedda keligaa*
*cidi kuugu imanayn?*
*Maadigaa awoodda leh*
*taladiyo ummuuruhu*
*ma sidaad u aragtaa?*
*Ma llaahay baan jirin.*

*Ulajeeddadaydii*
*arar baan ku lumiyoo*
*warka waan agmarayoo*
*irbad baan ku qalayee,*
*uus-miirka dulucdiyo*
*amba-qaadka geeddiga*
*waxaan guurti ku egmadey*
*hadalkana ku urursaday*
*irrid waliba kuu furan*
*haddaan iisho gabadhyahay*
*marna waa ayaankaa*
*marna waa itaalkaa*
*sheekadayda iib gee*
*aahdayda faallee*
*arladoo dhan gaadhsii*
*unuunkaygu waa hibo*
*kuma haysto aakhiro.*

# DEYN MAAYO HEESAHA

*Laabtu way hugmaysaa*
*afku way hud-hudayaa*
*hadal buu i leeyahay*
*anna waan hor joogaa.*

*Wax la hado shil baw roon*
*Wax la helo lib baw mudan*
*wax la huro naf baw culus*
*Wax la hubo wed baa jira.*

*Senge hoohadaa baxay*
*habaqlaa ka daba tegey*
*inkastay habaaskiyo*
*ka dhergeen huq iyo ciil*
*hafashada asqoobeen*
*boqol jeer hungoobeen*
*weli way handanayaan.*

*Ma hillaabni laan-deyr*
*ma hagoogni waabay*
*hagar-daamo kuma jiro*
*hurin diiddey nabaddiyo*
*wadar ii heshiisoo*
*huminaysa dhagar baa*
*hubku iigu tumanyahay.*

*Sacabkiyo haloosiga*
*hogolaha ku soo degey*
*haradiyo jidhaamaha*
*waxan hooyi-waalaha*
*ugu shubay hadhuubbada*
*dadku inu hamuuntiyo*
*kaga baxo harraadkee*
*hilin kale in lala maro*
*ama hawdka lala xulo*
*haanraawe daba galo*
*foolaadka kala hadho*
*hororradu bakhtiistaan*
*hiyigayga kuma jirin.*



*Hiirtaanyo lagu dhacan*
*haaraanku fara badey*
*higil iyo faq dheeraa*
*hurdadii la deyi waa*
*habar wacasho lays gurey*
*hebel hebel canbaaree*
*hebel kale ka marag dhigey*
*nin hayaanka beeshiyo*
*danta guud ku hawshoon*
*hafarkiisa lagu dhaqan*
*hilbo ceedhin lagu waab*
*ninba harag u saynsaab*
*hataq madaxa loo geli*
*hoosaaso lagu qaley*
*beladii la halabsaday*
*hugunkeedu dami-waa*
*nin hinaasay deyn-waa*
*hibashada qumbacashada*
*hengeshiina furi-waa.*

*Hor Allaa la tegayaa*
*wax hanbaysta baan idhi*
*garta hubiya baan idhi*
*runta lagama hiishee*
*xaqa halacsadaan idhi,*
*hawraarsan laga waa*
*haye way ku adag tahay*
*wax hallaaba mooyee*
*wax hagaaga ma oggola*
*qaska way horseedaan*
*xanta waw hiloobaan*
*guusha ay hufnaantiyo*
*si haboon ku waayaan*
*xisti bay ku hooyaan*
*hunguraa wax lumiyee*
*hawadoodu kama foga*
*haasaasa maalmeed*
*murtidoodu huubiyo*
*hal dhac bay u badantahay*
*ma karaan higgaadiyo*
*hal-xidhaale toolmoon*
*haamaha gun-dheerta ah*
*hilaygiyo lingaxa sudhan*

ma helaan sarbeebtiyo
isha hoga-tusaalaha
sugaanta hodanka ah
hindisaha aloolka leh
ereyada hal-doorka ah
hab kalay u weriyaan
hawraar nin tiriyoo
hanaqaada ma oggola.

Ninka hooto-dhegaley
nabar hoos ka tuuroo
dadban igu halgaadow
hangaraarac baan ahay
lugo habay hal iyo laba
kuma hadho tummaatida
dabka aydin huriseen
hakin maayo socotada,
hoogaansigaygiyo
hebednimada guudkiyo
hayal-samida muuqiyo
haaheyda malabka leh
ha ku dagan sabaalaha
hayin aan la raranoo
lagu qaadin heeryoo
la hoggaansan baan ahay
hamrashada asaaggey
hooyaday iguma dhalin
fula-guulka harawsiga
hanjabeadda kuma dido
hataqaha si dalagta ah
haadaanta kuma jabo
dabin haad ka roor dhigay
yaan hilaaddu kaa lumin.

Halla waa ogeysiis
inta hoogga dacarta ah
ku halaan-halaysaay
hunbanida is gurataay
ladhka soo hinqanayow.



Nin hadaafa lama odhan
haybta nolosho kaa xidhan.

Nin habsadayna kama tegin
himilada adduunyada.

Nin la hago xil kama dhicin.

Aniguna hed mooyee
inta hibada Eebbiyo
hawraarta maansadu
i hareera yaalliin
hal-abuurku ila jiro
hiyigaygu nool-yahay
hammigaygu shidan-yahay
hanku igu lammaan-yahay
waxa aan higsanayaa
dhul fog iiga hirayaan
haasaawe furan-yahay
qodob laga hadlaa jiro
deyn maayo heesaha.

Hollashada majiiraha
nin hannaanka gabayada
hanan waayey naaskow
hashu waa ammaanee
haaneedka sii daa.

Hogga aad daboosheen
halistaa maleegteen
shilka aad habayseen
habbisada falkiinniyo
isla hela awaytida,
habaarkiinnu ima karo.

# JACAYL DHIIG MALAGU QORAY

*Jacayl dhiig ma lagu qoray*
*weli dhuux ma loo shubay*
*qofna saanta dhabarkiyo*
*ma u dheegey feedhaha*
*dhabannada cad laga jaray*
*hadalkii ma lagu dhigay*
*xinjir aan is dhalan -rogin*
*midabkeedu dhiin yahay*
*laga dhuray halbowlaha*
*weli dhiil ma lagu shubay*
*laba mays dhansiiyeen*
*sida dhayda xoolaha*
*dhag dhag maw wadaageen.*

*Weli laba is dhaarsaday*
*beryo dhacan nasiib iyo*
*dhul ku kala cillaalaa*
*subax dharabku kowsadey*
*dhedaduna cuddoon tahay*
*cidla aan dhir mooyee*
*wax dhaqaaqayaa jirin*
*jabaq maysku dhaadeen.*

*Kulankii dhabta ahaa*
*riyo dhiifi keentiyo*
*dhalanteed ma moodeen*
*sida ay dhadhabayaan*
*dhawr jeer ma seleleen*
*af dhabaan dhab jamashada*
*ma ka dhoofay hadalkii*
*bal dhawaaqna kay tahay*
*dhihiddii ma waayeen*
*ma ka dhabaqday xaajadu.*

*Ilmo dhalatay xiisuhu*
*sida dhibic mahiigaan*
*ma ka qubatay dhaayaha*
*ma ku qoyey dharkoodii*
*naxariis ma dhidideen.*



*Iyagoo dhanqalankii*
*dheel dheelli mooyee*
*dhegna aanay kaga jirin*
*kolba erey dhex-roorkiyo*
*dhumucdii ka maqantahay*
*dhitinaaya keligii*
*ka dib toban dharaarood*
*carrabkiyo dhanxanaggii*
*dhirindhiris ma ku heleen.*

*laba guul u dhalatoo*
*isu dhiganta weeyee*
*dabadeed dhabeeshii*
*hanadkii ku dheeraa*
*Dhudi mays bariidsheen*
*dhubbad qaadka sheekada*
*qofba dhagarta caashaqa*
*wixii dhaaxo soo maray*
*ma dhex galay kalkiisii*
*ma akhriyey dhambaalkii*
*warka maysu dhiibeen.*

*Kalgacayl dhito ahaa*
*dhamac iyo dab huriyeen*
*dhuxuliyo ladh soo kacay*
*hadba dhoon ma buuxsheen*
*kolba dhacan ma jiideen*
*dhacdadiyo ujeeddada*
*qofba dhaadashada guud*
*qofka kale dhankiisii*
*inaan looga soo dhicin*
*ma ku dhaabadeeyeen*
*sannad mays dhegeysteen.*

*Ma dhammaaday hadalkii*
*gelin mays ku dhaacdeen*
*dhaygag iyo dareen shidan*
*gabbalkii ma ugu dhacay*
*ma dhaxeen habeenkaas*
*sida dhaan ma guuleen*
*dhaxantiyo mugdiga jira*
*dhabatada xanuunka leh*
*ma u dhabar adaygeen.*

*Ma dhalaalay waagii*
*dhag ma tidhi cadceeddii,*
*intay soo dhaqaaqeen*
*iyagoon ka dheeraan*
*dhaqankiyo xishoodkii*
*dhaymana u jeel qaba*
*iyadoo dhexdoodii*
*dhulka suxul bannaan yahay*
*dhibta maysla taageen*
*wax intaa ka sii dhow*
*ma ku dhiirran waayeen*
*dhayal laysu taabtiyo*
*dhallinyaro habkeedii*
*ma ka dhega adaygeen*
*dhadhansiga miliilica*
*isha mayska dhawreen.*

*Dhabbaday is taageen*
*qofba dhaabaddiisii*
*sara joog dhankiisii*
*kun habeen ma dhererraa!.*

*Dhudhummada aboorkii*
*dhulka hoose kaga baxay*
*dhilashada jidhkoodii*
*ma dhanbalay sartii guud*
*ma dhammeeyey hilibkii*
*xididdada ma dhaawacay*
*ma u dhaafay seedaha*
*lafta hoose maw dhacay.*

*Dhiilluu ku geliyaa*
*ama waad dhalliishaa*
*dhagartiyo wedkaagee*
*dhimashada kal iyo laab*
*ma ku soo dhoweeyeen*
*dhoollaha ma ka qosleen.*

*Ubax dheelka subaxdii*
*naxariis ku dhaashtoo*
*afka dhiin cas mariyoo*
*dhaddigiyo labkiisii*



*laba dhude isugu maran*
*ma is dhaafsadeenoo*
*dhaxal maysu siiyeen,*
*dhuuni kawlka caashaqa*
*maysu sii dhadhamiyeen*
*ereygii dhinaa hadal*
*dhegta maysu saareen.*

*Dhafan dhaaf aboorkii*
*ma dhufsaday cammuuddii*
*ma u qaatay dhoobada*
*dhab-dhabkiyo kab-kabiddii*
*labadaba ma dhalan rogey*
*dhismo kale ma soo baxay*
*ma ka dhigay wax yaabliyo*
*dudun dherer ku caanoo*
*dhumuc iyo laxaad weyn.*

*Dhalan-dhoolka maantii*
*dadku dhacarta jiilaal*
*ma hadhsaday dharaartii*
*ma ka dheelmay galabtii*
*iyadoon la dhaadayn*
*sheekada dhabteediyo*
*dhabar-weyntan hooska leh*
*in dhexdeeda laba ruux*
*runta kaga dhur sugayaan.*

*Haddaan laysu dhimanayn*
*nafta laysu dhiibayn*
*ama dhaxal tis qaadiyo*
*dhismo aqal la taagiyo*
*ubad iyo dhaqaaliyo*
*dhaqan reer la kala sugin*
*dhunkashiyo ujeedaddu*
*tahay dhaayo guudkood*
*waabay la dhabaqsado*
*dhereg iyo markaas qudha*
*ama sida dhurwaayada*
*hilbo gabadh dheg roonoo*
*higlo loogu dhuuntoo*
*dhakhso loogu kala baxo*

*ninba waxa dhabbacashada*
*dabinkiisa ugu dhaca*
*dhidar iyo xabaashii*
*sharaf lagu dhabcaaliyo*
*dhawrsooni laga tegey*
*dhalanteedka beenta ah*
*bulshadaa u dhaawacan!*

*Hab jacayl u dhaqan galo*
*ma holladay ka ugu dheer*
*maamuusna ugu dhow*
*mise weli wax baa dhiman.*



# HEEGO MUUQ DHEER

*Is helloo gabadhii is heli mayno*
*huminnoo taladii hunsami weydey*
*halyeynimadayda kuma hadhin*
*hayntayda yaraatay bay hagratay*
*dan baa ka hor timi heshiiskii*
*hoh iyo caku heegantaydii.*

*Hilowga arradan bir baan ku hiloo*
*kashaydu hubaal ma heellana*
*henggel baan ka sitaa haween dumar*
*markaan ku hungoobey baan huray*
*haankiyo wadnahaa biyaa habaya*
*hantaaqo i gaadhey baan la hurdey*
*huq iyo ma fileyn hayaan kedisa*
*ha yeeshee hayaaydi baa badatay*
*hammiga kalgacaylku waa habaqle*
*hed iyo waa dabayl hab soo tidhi*
*hiyigii lingaxnaa ma huriyeen*
*ma halabsaday geenyadii Hudi.*

*Hindisaa wax kalaan halkawgu socdee*
*hurintaan weheshaan ka hadhi waayey*
*codkiyo hugunkaa i soo hagey*
*hoosaasada mayla hiishadey*
*haasaasaha muuqda hirigooda*
*caawana hambadaydu waa halis.*

*Horyaalka da'day hadhuub la dhantaay*
*hiddiyo dhaqan baad hagoogantahoo*
*waxaad huwan tahay hugii sharafka*
*sidaad u habaysay heensaha*
*hadoodilka muuqa higilkaaga*
*haldhaaga sidiisa hooshaarka*
*hilbaha kugu yaalla heemaalka*
*hanqalkaad la kacdiyo hubkaad sidato*
*hab-jooga timaa hal-qooqa leh*
*hufnaanta xishoodka aad hogatey*
*hawaarta ku saaran heeraarta*
*hilqadaa boqorkiyo hariiryaha*
*habuurka,udgoonka, soo haadka,*

*sidii hayin haamo culus sida*
*hubsiino dhaqaaqa hanashada*
*hormaynta hannaanka laafyaha*
*hal qaadka tallaabadaad hollatay*
*lugtaad hakisaan hoggaansamey !*

*Dhul habatacay ciidda oo hodantay*
*dhirtoo hamashowdey doog hadhsaday*
*xareed hilo iyo harooyin degtey*
*hantidoo dhashay deyladoo horratay*
*haleello maqasheeda heel ku furtay*
*horweyno ku foofay meel hadow leh*
*haloosiga baarqab hoobala*
*higtiisa higgaadda dhiillada*
*haadkii diday keenay hoosiis*
*hibaaq ka dhalaalay Haadaamo*
*hareeri ka muuqday Heegaale*
*hoobaan ka bislaatay Hawd sare*
*dayaxoo himir iyo huruud marsadoo*
*caweys ka hinqaday hoggiisii*
*horseed la socdiyo hoggaanno wata*
*qorraxdoo halabtiyo hillaabta dhigtay*
*daruuro ka hooray hoosteeda*
*fad iyo hogol loolli habar wacatay*
*hillaac iyo heego soo curatay*
*sidii hir fog baan ku soo higsadoo*
*indhuhu ku harraade halcdaada .*

*Hubsiinadu way hagaagsantahee*
*hadhow iyo mooyi hawlo danbee*
*hor jooggaagu heello igu dhali.*

*Hugiyo dharku haybta waa ka badh*
*hablihii kacay qaar hawaa lumisoo*
*xilkii hooyo way ka heermeen*
*hummaagay run moodayaan hodaya*
*hebliyo hebla hiil ka sugi maayee*
*hankaagu ka weyn hinaasaha*
*waxaad haysataa jidkii hore*
*sidaan hubo waad hal adag tahay*
*hambalyaan kugu siiyey hirashada.*



*Hawraar murtiyeedda hadalkayga*
*waxaan hidiyaaba waa hees,*
*hortaada gadaal hareeraha*
*hibaan ku daleeyey hilinkaaga*
*habeenkaagu waa mid hooda leh*
*ku hoyo nabad Heego-Muuq-Dheer.*

# INDHA BADAN

*God abeeso ninkii*
*illinkeeda degow*
*taladaadu iyaa*
*ma Allow sahal baa?*

*Arraweelo markay*
*laba eefka lahayd*
*igadh geela haddii*
*nin aroorsan lahaa*
*amarkeedu hor yiil*
*odhan mayno kolley*
*awooddii rag dhintay*
*sii agaasimatoo*
*aakhiruu ku maqnaa*
*ugaaskay dhaxashoo*
*arrimii dhacay qaar*
*utintooda haddeer*
*lama oogi karoo*
*abba looma hayoo*
*sheekadaaba iskeed*
*ma amaahan karree*
*halka aahdu ku taal*
*waa la sii axadhaa*
*godob oofa ruqdaa*
*aabudhkeeda riddoo*
*aloolkay jaratoo*
*ibahay furatoo*
*aslimayno dhalliil*
*idhankeedu durkee*
*imminkaynu hubnaa*
*waxa eegga jiree*
*awgayow taladii*
*ifka maw rogannaa.*

*Naca jooji arbow*
*eela weynta hambee*
*ayaxow ayaxow*
*ayaxow weligaa*
*ayda waad dhilataa*
*eelna waad ka tagtaa*



*aafadaada miyaan*
*aagna looga gudbayn?*

*Ashkirow farasow*
*aayar baa la socdaa*
*orodkaagu labaa.*

*Ban aroori kaxaa*
*mar ugbaadku simaa*
*dhal aboodi halkuu*
*ogxantiisa dhigtaa*
*aadanuu mar jantaa*
*meel aboor degey baa*
*mar iftiin ka baxaa*
*gole aammus badnaa*
*mar mar baa idhi taas*
*anda-qaad ku bataa.*

*Ma aqaan ma aqaan*
*ma aqaanno darkii*
*isagii han-hinnaa*
*waxa loo egmadee*
*in dhoweydba sidaas*
*afartiisa rugood*
*agab baa la dhigtoo*
*oommanaa fadhiyee*
*ifafaalaha guud*
*abshir baa dhalatee*
*waxan awda hayaa*
*ma ishaara san baa!*
*Ma abaabul shar baa!*
*Onkod gaaxdey miyaa*
*ma cir soo olkamaa*
*ma illiilo socdaa*
*ma xer tuugi Allaa*
*ma hayaan ulan baa*
*ma dagaal uganoo*
*laysu eeba gurtaa*
*ma col awdalan baa*
*ma ibleys qaxayaa*
*ma insaa ma jinnaa*
*ma ardaa ma shinnaa*

ma aleelo qubtaa
ma adeeri dhashaa
ma arraa ma urraa
ma awaare kacaa
ma ufaa ma dabayl
ma asmaa ma xanuun?

Ubaxeey Ubaxeey[9]
indha yaab badanaa
kugu eegmo batee
maxay soo uriyeen
May ayaamaha qaar
kugu soo ururaan
Immisaa jirey waa
oontu kuu tirsanayd
Immisaa jirey waa
arradkaagu sinnaa
Immisaa jirey waa
noloshaadu adkayd
Immisaa jirey waa
ajarkaagu furraa
Immisaa jirey waa
abaalkaagu sugnaa
Immisaa jirey waa
ayaankaagu dednaa
Immisaa jirey waa
adduunkaagu madhnaa
Immisaa jirey waa
ishu kaan han-fogeyd!

Wax aqoolka haddeer
uskag baa kuu jiree
may ayaamaha qaar
korka kaa asturaan
May ayaamaha qaar
wuxuun ku illiyaan
Uurku wuu kuu madhnaa
may waxuun Ubaxeey
afka kuugu ridaan
Adoogaa dabadii
may agoonnimadii

9 Ubax-waa Ubax Xaaji Cumar Buraale



aabbe kaaga noqdaan
May Illaahay hortii
irbad kuugu huraan
Alif waa derejee
aqoon may ku geshaan
erey may ku faraan
loo adeegsado meel
aayahaaga hor yiil
may ammaan ka dhigaan.!

Abeer baanad ahayn
oogadaan ku billayn
awrtan qooqday haddeer
abaar baa kulanteen.

Ummaddeennu jidkii
kii Islaaminadii
ahabtii faralkii
asalkii dhaqankii
isirkeedu lahaa
way ka soo ambatoo
aarankay dubatoo
Ubaxeey hablihii
ololaa ku socdoo
Ubaxeey sannadkii
boqollaal ugub baa
axankooda qashoo
ammintiiba kolley
inan baa dhimatoo
aqal baa dumayoo
udub baa jabayee.

Arartaydu malaa
asaraar ma gashee
Ubaxeey warar baa
agahaaga jiroo
olloggaaga badh baad
xog ogaal u tahoo
adigaaba yaqaan
gabdho oodda rogtee
bal albaabkan garaac
ummul baa huruddee,

*wax ku oogan xanuun*
*aamanuun gubayoo*
*umal baa shidayoo*
*ammuurii dhacay bay*
*la asqaysantahoo*
*ilmahay dihataa*
*xalay eydu cuntoo*
*naxariista illayn*
*anshax baa dhaliyee*
*haddii uurka habreed*
*astaan gaara lahaa*
*hooyadii amranayd*
*arxan goysey markuu*
*xeer illow ku dhacoo*
*ubadkii magantaa*
*haadku eeganayaa.*

*Eerashoy bi'i waa*
*iil dhexdiisa haddaan*
*obocdeedu qubnayn*
*sow ma soo olosheen*
*aaway beer debecii*
*aabi baa lumiyee*
*arladeena miyaa*
*naas irmaani jiraa ?*

*Shan afraad shan afraad*
*birta kii ka aslaa*
*oori deydeyayee*
*aroosow magacaa ?*
*Ilka dhiigle maxaa*
*lagu aaminayaa*
*dhego awdmey miyay*
*odayayntu gashaa*
*irdha qaado ragow*
*naftaad aasi taqaan*
*waad abuuri kartaa.*

*Rag miyaad Ubaxeey*
*alabkiisa taqaan*
*asaydaada mar buu*
*ashqaraar huwiyaa*



*al-alooska gobeed*
*waa ka aar gudashoo*
*lama ooyo dhurwaa*
*ishinkuu legdadee*
*gabadh iilatay hooy*
*ayaanteeda madow*
*alwadkeedu ninkuu*
*alalaas geliyaa*
*uur ku taallada wuu*
*wuu ka iidsanyahoo*
*iman maayo halkuu*
*ka alaabo gurtee,*
*ool waxay ka sidaan*
*ergo waa ta dhahdee*
*eedi hayga hadhee*
*waan afeefanayaa.*

*Ubaxeey bahalaa*
*ku ilaashanayoo*
*Ubaxeey hororraa*
*ku ugaadh sanayoo*
*araraa kugu dhow*
*orgobaa fadhiyoo*
*aarna waa gudayaa*
*iimo kaa deyayaa*
*geenyo aamus taqaan*
*tuugba waa eryadaa*
*mar baa ayrada geel*
*oohow loogu digaa*
*anfariirka dareen*
*adhigaaba didee*
*ahmin baa la gataa*
*hilbahaaga Ardooy*
*lama iibsan karee*
*aanadaada ha deyn*
*rag ul baa celisoo*
*ka adkayso qudhay*
*ammaantaadu tahee.*

*Waa arooryo horoo*
*orka kuu baxayaa*
*amba qaadka salaad*
*weeye loo addimoo*

*hadal waa la abyaa*
*waa la soo urursha a*
*arrintaada marwooy*
*wixii iiga ekaa*
*horaan kuugu idhee*
*arbacuunkani waa*
*abhintayda danboo*
*waa ilayska halkuu*
*addinkaagu halkuu*
*ku abbaaranyahoo*
*waa ammaano dadeed*
*amarkaan ku faroo*
*waa asaaska halkaan*
*ka awaala digoo*
*axdigaas culus baan*
*adhaxdaada furee*
*sheekadaada ogow*
*idlaadkeeda hadhow*
*adduunkaa sugayee*
*af-dhabaandhab haddaad*
*oofin weydo xilkaas*
*way ahaan jirtey saas.*



# DURDUR

*Maansaba dir bay leedihiyo*
*daabac gooniyahe*
*Ninba wuxuu ka doontaa halkuu*
*gaar u daaqsado'e*
*Dadka uma gudboonee ragbay*
*duunyadiis tahaye*
*Deebaanka ruuxii hayaa*
*lagaga daydaaye*
*Kani waa dux iyo sooryo iyo*
*malabka doocaane*
*Waa dood macaanoo nin raga*
*lagu daweeyaaye*
*Waa gabay da'weynoo sannado*
*dabaqu saarraaye*
*Waa doog Masaarriyo ku yaal*
*Doollo iyo hawde*
*Waa damal hadh weynoo midhaa*
*daafta soo dhigaye*
*Waa ceel dad liqahoon fudayd*
*loogu daadegine*
*Waa danan Ganaanoo fatahay*
*dirirka cawleede*
*Waa dayr Shabeelloo dhulkiyo*
*doojey beeraha e*
*Waa daad rogmadey oo hadhsaday*
*dooxadii Herer e*
*Waa duhur Togdheeroo hugmoo*
*kiciyey duufane*
*Waa doonbir lagu oon-bixiyo*
*daran Nugaaleede*
*Waa Haro Digeedoo biyuhu*
*dhinac ka daateene*
*Waa geed Dayibahoo ka baxay*
*sabarka Daaloode*
*Waa doobi xoorliyo karuur*
*lagu durduurtaaye*
*Waa deer-cad geeloo rintiyo*
*dahabta qaalmoode*
*Waa faras dakano raadisoo*
*duullimaad galaye*

*Waa geesi ciil dirirayoo*
*doog haruu qabaye*
*Waa gabadh da'deed joogta oo*
*guudka loo dabaye*
*Waa daraya-muuskiyo dhaclaha*
*Daado xidhataaye*
*durdur weeye laga dhaansadaa*
*daayin abidkiiye*
*Waa gabay dihnaayoo wax badan*
*ibo daboollaaye*
*Waa gabay sagaal dabin galoon*
*Eebbahay diline*
*Waa gabay duqii aabbihii*
*dayro ka ahaaye*
*Waa gabay dorraatiyo ogaa*
*dakharradeediiye*
*Waa gabay durbaankii la tumay*
*diif la soo kacaye*
*Waa gabay ku diirsaday markuu*
*waagu daalacaye*
*Waa gabay dagaar iyo ka yimid*
*diillintii Guraye*
*Waa gabay dushaa sare jiroo*
*caawa soo degaye.*
*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay*
*Toban iga dardaarana hadduu*
*hadal wax daaweyne,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Beri baa dadkuba qaawanaa*
*dibad ku noolaaye*
*Oy daaqayeen cawska iyo*
*darista geedaaye*
*Dareemada mar bay ugu koreen*
*duudka buuraha e*
*Dalanbaabi iyo guuldarriyo*
*doogga cuniddiisa*
*Dan baa gelisey inay raadiyaan*
*nolol ka door roone*



*Dugsi iyo markii ay heleen*
*dab u iftiimaya*
*Ugaadhiyo markii ay dabteen*
*deeradiyo cawsha*
*Duunyada markii ay dhaqdeen*
*bahalihi duurka*
*Beeraha markii ay degeen*
*orodki may deyne*
*Damac baa hoggaanka u qabtoo*
*door labaad raraye*
*Daariyo markii ay dhisteen*
*aqallo daah weynle*
*Markab aan degeyn iyo markii*
*doonyo lagu dhoofay*
*Sabareyn dabbaashiyo markii*
*qalab la sii daayey*
*Nin waliba markuu daadsadee*
*kibir la daanshooday*
*Yaa niman dalxiis ugu keceen*
*meel dusheenna ahe*
*Sawaariikh dillaantiyo rag baa*
*guudka loo diraye*
*Duhur keliya bay sii socdeen*
*daalla may arage*
*Dayaxay habeenkoo badh tegey*
*degel fadhiisteene*
*Maantana dhul sii durugsan baa*
*dirir ka muuqdaaye*
*Dabagaabahaa lagu socdaa*
*awrka doobta lehe*
*Daalaa-dhac adigoo ahoo*
*cudur ka soo doogey*
*Nin tunkiisa daawaday hadduu*
*kuu dardaar weriyo*
*Libta looma daayee ushaa*
*lagu dillaacshaaye*
*Innagiyo nin dahab sheegtayoo*
*qubaya Doollaarka*
*In dagaalku labadeenna yahay*
*dib u xusuusnaada.*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay,*
*Toban iga digniinaan ninkii*

*dagan ogaysiinne,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Dibnaheedda waxa dhaafayee*
*gelaya daankeeda*
*Yey doqoni eexaysataa*
*dux u taqaannaaye*
*Ma ogtahay ninkii doora baa*
*hadalku deeqaaye*
*Ma ogtahay sursuur daahan baa*
*dabinku yaallaaye*
*Ma ogtahay dalluun baa ka qodan*
*doox hortaada ahe*
*Ma ogtahay xadhkaa daadsan aan*
*lana dareemaynne*
*Ma ogtahay inaad door heshaan*
*lagula doonayne*
*Ma ogtahay rag kula doodayoo*
*kuu dan laa jira e*
*Ma ogtahay shisheeyuhu nin dagan*
*waa kuwii dila e*
*Ma ogtahay digtoonaan la'aan*
*dacar inaad leeftay?*

*Diga-rogadka maanta ah gacmuu*
*ways dugsanayaane*
*Dawgaad banaysaa ka kale*
*deylo soo marine*
*Degelkaad furtaa baa ka kale*
*deyr u soo jariye*
*Dabka aad shiddaa baa ka kale*
*saari dogob weyne*
*Wadaantaad dar keentaa ka kale*
*laaska soo dariye*
*Dagaalkaad gashaa baa ka kale*
*duub u soo xidhanne*
*Derejada laguu dhiibey iyo*
*guusha kugu deyran*
*Ma ogtahay dallaallimada waa*
*kugu deyeynaaye*



*Caleemaha ninkii daadiyow*
*dan iyo xeeshaada,*
*Ma ogtahay nin daastow inaad*
*dib ugu aayeyso.*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay,*
*Toban uu dalkii sheegtayuu*
*daw u leeyahaye,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Wuxu yidhi badh baa dibad ku maqan*
*degelladaydiiye*
*Cadaawuhu haddaan dooh la odhan*
*dib uma laabmaane*
*Shisheeyuhu dux buu iga heloo*
*laygu soo durugye*
*Dahab iyo batrool aan dhalaa*
*daaha loo furaye*
*Derrimaha madheedhka leh halkuu*
*daaqi jirey geelu*
*Doogaygu meeshuu ku yiil*
*waa la duudsiyaye*
*Nacabkay wuxuu weli degaa*
*Doollo iyo hawde*
*N.F.D[10] ninkii doonayow*
*daabcad loo tumaye*
*Obokh[11] dawyadii laga xidhyoo*
*deyrka lagu gooye*
*Sidii geesigii[12] looga diley*
*waa dumaal weliye*
*Hadal laguma daale waxaan*
*idin dareensiiyey*
*Ban daleela, degel qaawan iyo*
*oodo kala daadsan*
*Guri aan duggaal iyo gabbood*
*daahna lagu reebin*

10 N.F.D.- Gobol loo aqoonsan yahay dhul soomaliyeed oo maqan oo ku jira gacanta Kenya.
11 Obokh - Magaalo Jamhuuriyadda Jabuuti ka mid ah, halkanna waxay ugu jirtaa dhulka Jabuuti.
12 Geesigi-halkan waxa looga jeedaa Maxamud Xarbi.

*Guri aan dulsaar iyo lahayn*
*dadabta loo xeero*
*Oo aan darrooraha cirkiyo*
*daadka celinaynin*
*Guri uu shisheeyuhu degoo*
*daaqi ka idlaystay*
*Guri looga sii daray markuu*
*dawladnimo qaatay*
*Guri daallin iyo weerar iyo*
*dulin abaareeyey*
*Guri ay dabayluhu galaan*
*amase duufaanku*
*Maska duula haaway derderan*
*dagan ma dhaafaanka*
*Dawac iyo dhurwaa iyo shabeel*
*daacuflaha aarka*
*Guri aan dad-qaad iyo orgobe*
*bahalku deynaynin*
*Guri duugmay oo aasmayuu*
*daacay udubkiisu*
*Guri debed bannaan iyo dhul dheer*
*lagaga soo duuley*
*Guri hoosta doofaar qotoo*
*diinku ku caweeyey*
*Guri Eebbahay daba qabtiyo*
*doorka iyo xooggu*
*Adna aad Diktoorkiisa tahay*
*waxa daweynaaya*
*Idinkaa Diblooma u sitee*
*dan uga faallooda.*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay,*
*Toban uu dadweynuhu i yidhi*
*duqayda gaadhsiiye,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu dhuulin.*

*Rag baa weli dushaa laga rartaa*
*sida dameeraaye*



*Daandaansi joogto ah rag baa*
*loogu daw galaye*
*Dibindaabyo niman baa ku lumay*
*debec la'aaneede*
*Dacwaddooda niman baa dhegaa*
*laga dabooshaaye*
*Dayaxaba rag baan arag siday*
*dab uga baydheene*
*Degelkooda niman baanu helin*
*dirirka hooraaye*
*Duunyaba rag baan lagu ogeyn*
*xoolo daaq taga e*

*Dambarkeeda niman baa ka qaday*
*dihinta Maandeeqe*
*Niman baa dalluun lagu ridoo*
*daaha loo rogaye*
*Niman baa sidii awr dib jirey*
*bahalo dooxeene*
*Niman baa halkii lagu deldeley*
*daawasho u yaalle*
*Gumaystuhu dirkaa kula dhashay*
*laba-dibleeyeene*
*Labadaadi daan iyo afkii*
*daadku kala qaadye*
*Toban doora, toban daacadoo*
*wada dedaaleysa*
*Iyo toban danaa guud jiroo*
*dayrshey noloshooda*
*Iyo toban dadweynaha ka jira*
*cadawga soo duula*
*Iyo toban billaawaha wax dila*
*daabka wada haysta*
*Iyo toban diyaarado watoo*
*ina dul-meeraaya*
*Iyo toban sinnaan doonayoo*
*xeerka daba jooga*
*Iyo toban sabool daadahshoo*
*midigta deeqsiiya*
*Toban dudaya, toban uurka daba*
*toban kaloo doorsan*

*Toban didaya, toban duuf-cunoo*
*nacab la daaweysta*
*Toban dabata, toban duur-xuloo*
*garab ku daaqaaya*
*Dushaa toban ka wada fiicanoo*
*duunka milil jiifo*
*Iyo toban da'dii soo kacdaba*
*dubata beerkooda .*
*Dadqal iyo abees iyo orgobe*
*diir wax xaganaysa*
*Iyo toban dibnaha leefayoo*
*damacu heeryeystey*
*Dib u socod dillaal tuuga iyo*
*daallin iyo gaade*
*Toban daallan, toban daahan iyo*
*toban kaloo duuban*
*Diif iyo xanuun toban qaboo*
*duumo wada hayso*
*Mid dakaansan, mid dayeysan iyo*
*toban deddoonaaya*
*Toban socodka dugukuurayoo*
*duq iyo waayeel leh*
*Toban dalab leh, toban loo dawero*
*toban daleel joogta*
*Toban daasadaa wada sitoo*
*xagal ka daacaysa*
*Toban daadsan, dibadaa mid jira*
*toban dabayl raacday*
*Toban xoolo daba joogta*
*oo doogsin cararaysa*
*Intaasoo is wada doonatoo*
*ul iyo diirkeeda*
*Intaasoo gudmaha daabatoo*
*degelka soo oodda*
*Intaasoo darkiyo ceelka dheer*
*dawlis wada jiidda*
*Intaasoo danaa guud jirtoo*
*daawo wada qaata*
*Intaasoo fadhiga deysa oo*
*wada dedaaleysa*
*Intaasoo ladnaan wada degtoo*
*daacadda ogaata*



*Intaasoo daryeel wada heshoo*
*gaajo dabar goysa*
*Intaasoon dagnaan loogu iman*
*ama digtoonaata*
*Intaasoo is daba taaganoon*
*cadow la doodaynin*
*Intaasoo dagaal wada gashoo*
*dab iyo baaruud leh*
*Taasaa la wada doonayaa*
*dan uga faallooda.*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay*
*Toban uu Darwiishkii*[13] *i yidhi*
*duqayda gaadhsiiye,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maah maahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Wuxuu yidhi Darwiishkii Taleex*
*barasho waa doore*
*"Dagaalkaan abaabuley raggii*
*duubka wada qaatay*
*Daraawiishta nimankii la baxay*
*waxan u sii daayey*
*Daliilkii Ilaah iyo waxaan*
*diinta ugu dhaarshey*
*Xeer laba dibleeyiyo waxaan*
*daawo ugu yeelay*
*Waxaan daabcad iyo soodh af badan*
*ugu durduuraayey*
*Haddii duullan loo baxo waxaan*
*ula dardaarmaayey*
*Kolka ay dareeraan waxaan*
*duco u taaraayey*
*Waxaan duhur Ilaahay baryee*
*jiriyey deeqdiisa*
*Waxaan Daayimow idhi habeen*
*doqonta oo jiifta*

13 *Darwiishkii-Waa Sayid Maxamed Cabdalla Xasan*

*Darfooley la ii dhigay waxaan*
*gees isaga duubay*

*Dug madow waxaan keli ahaan*
*umal la dooyaystay*
*Dibnahayga waxaan ciil saq-dhexe*
*foolasha u daayey*
*Dawankaygu qaylada wuxuu*
*gelinna deyn waayey*
*Dood iyo heshiis iyo waxaan*
*nabad u diidaayey*
*Waxaan duubi weynow sengaha*
*ugu dullaalaayey*
*Dirkii Xiin finiin iyo waxaan*
*seef isula doontay*
*Dabkaan shiday, waxaan gaal cad diley*
*dabatadaan laayey*
*Dabayl ii cad goysiyo waxaan*
*kiciyey duufaanno*
*Danab iyo hillaac iyo waxaan*
*weedh is daba joojey*
*Dillaalkiyo gumaystaha waxaan*
*gooyey dabarkooda*
*Dulmadoobe iyo Cayn waxaan*
*dhiigga ugu daadshey*
*Nolol dalab leh oo jaban waxaan*
*geeri uga doortay,*
*Gobanimo daryeel baan lahaa*
*dawladnimo taage*
*Doorkiyo barbaartaan lahaa*
*dawliska u dhiibe*
*Deegaanta Hawd baan lahaa*
*Goray ha daajeene*
*Maatada ha deeqdaan lahaa*
*sidigta Doolaabe*
*Dadkii dhaxal la'aa baan lahaa*
*doogga haw hadho e*
*Shanta kala dab raacdaan lahaa*
*degel ha ooteene*
*Dakharada bogsii baan lahaa*
*doogta kugu taalle*
*Ha yeeshee sidaan damacsanaa*
*Daayin odhan waaye*



*Dagaallamaye daad xoog leh iyo*
*daafi bay ridaye,*
*Halkii laygu duugiyo anoo*
*jiifa duni hoose*
*Ayuun baa daboolkii sanqadho*
*iga dul qaadeene*
*Calankoo deldelan baa habeen*
*daaha lay furaye*
*Danwadaag heshiis iyo is raac*
*darammal yeedhaaya*
*Laba deristayoo guul heshoo*
*dawladnimo qaatay*
*Dadkiiyoo xornimo iidayaa*
*daawo lay yidhiye*
*Dawaad iyo waraaq baan ka helay*
*meel docdayda ahe*
*Hambalyada intaan deexday baan*
*taarar soo diraye*
*Dibnahoo qoslaayaan gam'on*
*seexday dabadeede*
*Gabbal dumey habeenkoo dam yidhi*
*aan dayaxu joogin*
*Dab bakhtiyey kul iyo dayro-dhaaf*
*diqim wax laynaysa*
*Dibindaabyo xeer dabar go'oo*
*doorashiyo beena*
*Dumar iyo caruur ooyayoo*
*dugeydu yeedheyso*
*Xaq daguugmey, daa'imo la dhacay*
*dunida oo qiiqday*
*Gobannimo daryeel iyo xil iyo*
*daacadnimo weydey*
*Dan hallawday, guri daad watiyo*
*dawladnimo qaawan*
*Calankoo ushii diidayoo*
*daabku celin waayey*
*Fin dillaacay, doog soo kacdoo*
*arami soo daacdey*
*Ayuun baa dareenkii labaad*
*daaha lay furaye*
*Intaasoo darxumo oo dhacdaa*
*daawo lay yidhiye*

*Dibindaabyo, uurxumo waxaan*
*dugul madoobaado*
*Ilmadaydu waxay yaab da'doon*
*ciil isaga duugo*
*Garab daar maruun baa carshiga*
*layga soo degaye*
*Maruun baa xabaalii dednaa*
*wada dayaameene*
*Dhaaxaan deddiyo taah kacoon*
*soo dingiigsadaye*
*Dorraad tawradii dhalatay baa*
*daaha lay furaye*
*Allaylehe durbaankii la tumay*
*waan ku diirsadaye*
*Godkaygaa digniin iyo farriin*
*laygu soo diraye*
*Anigoo darmaan fuushan baan*
*soo dabbaal degaye*
*Waagoo dillaacaan arkoy*
*duushay dhaxantiiye*
*Dayax soo iftiimaan arkoo*
*nuuray duunidiiye*
*Dantii oo la helay baan arkoo*
*loo dab shidayaaye*
*Deegaan is gaadhaan arkiyo*
*xoolohoo dihine*
*Dadkiiyo badhaadhaan arkoo*
*reebay dacaskiiye*
*Dulmigoo carraabaan arkoy*
*daacaddii timide*
*Dikri iyo Quraan baan maqliyo*
*diin la caabudaye*
*Dacar iyo rag dhuxul daacay baa*
*daawo lay yidhiye*
*Door-roonayaashiyo raggan*
*anigu doonaayey*
*Duqa Janan Siyaad baan arkiyo*
*dawladii sare'e*
*Dihin curatay oo igadh ah bay*
*ii danbariyeene*
*Kolkii aan dardugey een dhergaan*
*dooxay hadalkiiye*



*Dooddaan u jeel-qabey kolkaan*
*madaxda deeqsiiyey*
*Yaan idhi dan baan leeyahoon*
*duubtay gogoshiiye*
*Degdeg baan xabaashii ku tegey*
*daal la'aan socode*
*Dacallada intaan feyty baan*
*hoos u daadegaye*

*Inkastoon dalluun awdan iyo*
*joogo duni hoose*
*Albaab ii daloolaan carrada*
*diirad ku hayaaye*
*Degmadiinna waxa ii fadhiya*
*duulan la aqoonne*
*In dardaarankaygii fulaan*
*helay daliilkiiye*
*Caawana mid daw iyo jidoo*
*doora iga hooya.*
*Inay dunidu hawl tahay sidii*
*Daayinkuba sheegay*
*In dedaalku dhaxal waara yahay*
*duugna laga dheefo*
*Inuu samuhu door dhalo hadday*
*daacadnimo raacdo*
*Oy dhaqasho ruux doona tahay*
*dib u xusuusnaada.*

*Cirka oo daruuraha marshoo*
*darara mooyaane*
*Inaan roob da'aa laago rogin*
*dib u xusuusnaada.*
*Haddaan meesha doog iyo tayale*
*duunyo lagu raacin*
*Inaan doobi loo culan hantida*
*dib u xusuusnaada.*
*Ruuxaan dantiisiyo aqoon*
*waxa daryeelaaya*
*Inuu deeqda Eebbahay ka qaday*
*dib u xusuusnaada.*
*Daayeer jarmaadiyo qadhaab*
*gelin hadduu daayo*

*Inaan ruuxna soor uga durkayn*
*dib u xusuusnaada.*
*Hadday dunidu beri dheef lahayd*
*dux iyo haaneedsi*
*Dufankii in laga laastay iyo*
*dalaggi hoos yiilley*
*Oy maanta dabagoosi tahay*
*dib u xusuusnaada".*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay,*
*Waa toban dastoor tawriyoo*
*deel ku wada yaalle,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Dardarta iyo geeddiga socdee*
*meella degi waayey*
*Gaadiidka dadabtii sidee*
*rarada loo duubay*
*Dabageliska baydiyo ratiga*
*caynka lagu duugey*
*Beelaha dareeriyo hantida*
*deyrka laga leexshey*
*Dibnaa sheekadii laga xidhee*
*hadalka loo diidey*
*Daabkiyo gudmaha laysu tumay*
*waranka loo deyley*
*Daawada la wada qaatay iyo*
*hawsha lagu daastey*
*Danta loo dhaqaaqiyo fadhiga*
*dabarka loo gooyey*
*Doorkiyo abwaanada kulmee*
*laysla wada doontay*
*Ma daalaha hoggaanka u hayiyo*
*cuurka daba taagan*
*Dabka shidan, dayaxa soo bixiyo*
*dirirka loo gurey*



*Deegaantu meeshay ku taal*
*doqoni waa mooge*
*Dhul dabayshu toban sii dhaxdoo*
*durugsan weeyaane*
*Daanshood waxaa lagu tagaa*
*boqol diraacoode*
*In la duulo mooyee si kale*
*looma ood dego'e*
*Digdigtiyo hayaankiyo guclaha*
*deeddankiyo heesta*
*Daruuraha in laga dhaansadaa*
*laysku deyayaaye*
*Ma dekaame awr daabbadaa*
*lagu dul joogaaye*
*Doox baa la marayaa, badweyn*
*dulin ka buuxaaye*
*Inkastaad dabbaashiyo taqaan*
*duurka xuliddiisa*
*ood dabin ka bood tahay nimaan*
*cidi dareemaynin*
*Waxa daadka lagu dhaafayaa*
*daacaddoo qudhahe*
*Ninkastaa dawaar xiimayuu*
*dacalka haystaaye*
*Doonnidu ninkii ay riddow*
*dan iyo xeeshaada.*

*Afartaa daleeyaye waxaan*
*dib ugu soo laabtay,*
*Toban ay Digriidiinnu tidhi*
*sii diktorrada'e,*
*Ninka caawa loo dadab dhigow*
*maqal dabuubtayda,*
*Diktoorkaan u maahmaahayow*
*hadalku yuu duulin.*

*Waxay tidhi dalkaan wada aqaan*
*labada daamoode*
*Deyn nimaan ku leeyahay hadduu*
*daw i marin waayo*
*Waxay tidhi xaqii iga durkaan*
*doonan karayaaye*

*Waxay tidhi gammaan doobir leh*
*oon daalin baan ahaye*
*Waxay tidhi halkii didib ah baan*
*dibi ku jeexaaye*
*Waxay tidhi dixdiyo buurahaan*
*dalag ka beeraaye*
*Waxay tidhi durduurtiyo khamriga*
*waan ka daahnahaye*
*Waxay tidhi Darmaan curatay baa*
*lay dambariyaaye*
*waxay tidhi surwaal duluc-lehoo*
*daadsan ma aqaanne*
*Waxay tidhi go' duugaan xidhaa*
*dacal hagoogtaaye*

*Madaxayga deeb uma oggoli*
*waxaan daweyneyne*
*Darro iyo malaas baan timaa*
*ugu dedaalaaye*
*Duunyadu haddii ay gudhoo*
*doogga la idlaysto*
*Waxay tidhi diraacaha dhacaa*
*ima durreeyaane*
*Waxay tidhi dibtaag naaxday baan*
*daban aqaannaaye*
*Waxay tidhi galleydaan dubtaa*
*duraha jiilaale*
*Digir iyo hadhuudh lay karshaa*
*wayga degayaane*
*Dantu waxay i siisaan gutaa*
*Daayin mahadshaaye*
*Waxay tidhi digaaggiyo ma cuno*
*hilibka doofaare*
*Darib iyo mud baan kaga baxaa*
*diifta gaajada'e*
*Waxay tidhi haddaan guur damcoo*
*dumarka xiiseeyo*
*Dabagaab shisheeya ah ma geyo*
*imana deeqaane*
*Waxay tidhi hablaa diibka-laa*
*aniga ii doonnan.*



*Intaasoo hal oo dood ah iyo*
*faallo daba joogta*
*Oon Deel ka wada sheegay baan*
*daacad kuu idhiye*
*Waanada ha diidina rag waa*
*lala dardaarmaaye.*

# QAYBTA SADDEXAAD

# TAAWILO

*Takri fale ma maqasheen
afkii toori dhooblaha
markuu gacan togaalaha
ku madhsaday tigaaddii
tusmadiisa gogashiyo
tuugeysi kaga baxay
xagashada tammuuxdii
gujadiyo tantoomada
kaga tuujey mililkee
sida qalin tahliileed
tutuwaha cantuugee
yidhi "toojo wiilkaa
tooggadiisa kaa waa
isna tuurin kuu qorey
hadba tiisa kugu maal
taana waa naqaannaa
toobbadayna yeelkaa".*

*Isagoo tigtiganoo
tawan oo werwerayaa
teelifoon ku soo dhacay
wahan tooxan loo dhiib
teneg iyo qabqaba maqal
taammilooyinkii dhawr
ka taweli astaamaha
wuxuu yidhi "tartiib hoos
igu timi cadceeddaan
toban guuradeedii
iyo weliba taartaar
u tumaayey saantoo
waanigan tin iyo cidhib
tifta dhididka hooree
Allaylehe tus baa jira "!*

*"Wuxuu taa ku sii daray
weedhaydi tooxnayd
warankaygi toosnaa
tubihii qorshaysnaa
u tallaabi waayoo
tabahaygi maalmahan*

*togog soo rogmadey baa*
*dib u soo tufaayee*
*maxaa toobiyii helay"?*

*"Wuxuu taa ku sii daray*
*tarmi weydey beentaan*
*taabba geli is idhiyoo*
*tiradaydu meel bay*
*ka takoorantahayoo*
*marka aan toddoba jeer*
*toban toban u geeyaba*
*taf kalaa furmaysoo*
*wadar aanan tebin baa*
*tahan aanan filanayn*
*iska kay tusaysee*
*bal tabaaladaa daya"!*

*"Wuxuu taa ku sii daray*
*tahar aan liq idhi baa*
*igu turunturrootoo*
*waxay taagan tahay meel*
*taladeedu dhimatee*
*tolow yaa farreeya ah"!*

*"Wuxuu taa ku sii daray*
*wakhtigii tin laga goo*
*wax tashiilo igu yidhi*
*anna taawintaydii*
*idhi hay tafaafulin*
*isagayga toosnaa"!*

*Gaarriyow tareenkii*
*lagu tacab khasaaree*
*taabka riixi waayee*
*tamartiisu guuxiyo*
*tallan qudha ku koobnayd*
*mar horuu tol-weynii*
*guradiisa tuurraa*
*tarab tarab u daadshee*
*tun-ku-shaashlayaashay*
*hasha wada tadcaarteen*
*ninba toogti garangari".*



*Tawstii bacaadkaa*
*teedkii hoggaankiyo*
*taxanaha wareeggiyo*
*tolommada burburisoo*
*tayo socod ka dhimatee*
*biro wada tafiir go'ay*
*wuxuu soo tukubiyaba*
*markuu taaggi hoos yimid*
*toolmoonayaashii*
*tuugna aanu xadi jirin*
*inuu daafta kaga tago*
*ayay sheekadii timi.*

*Waxay ugu tiraabeen*
*"dhaaxaanu tiirkiyo*
*tiska culus Samaalow*
*kaa tiirinaynee*
*hanna tuurin jaallow".*

*Wuxu yidhi "maxaan tari*
*ama idinku taakulin*
*iyadaygu turatoo*
*ina kala taxaabtee".*

*"Wuxuu taa ku sii daray*
*waxaa toogta feleggiyo*
*toommantiyo guhaankiyo*
*tusbaxaygu igu yidhi*
*xiddiggaagu tuuxee*
*toommo oodan buu galay*
*galbashada ku tiigaal*
*kula dhacan taraarkii*
*waad is tukhun tukhaysee*
*ama taarka kala goo*
*ama tab iyo xeeshaa*
*ka tallaabso oodaha".*

*"Taxanaha awaalkiyo*
*toyashada ayaamaha*
*taawilooyinkaygii*
*runta iiga tudhi jirey*
*toddobaad ma gaadhay*
*tafta iigu laabeen".*

*"Wuxuu taa ku sii daray*
*haddii yoolka lays tubo*
*nafi taada weeyee*
*anba waxaan hor taagnahay*
*taariikh i neceboo*
*qayrkayba taashkiyo*
*billadaha u tiriyee*
*haddii aad tasawdeen*
*anba tegey sidiinnee*
*maxaa igu tuhmaysaan !?*
*Bal tafeenahaygiyo*
*taagtayda milicsada".*

*"Aniguba tib culus iyo*
*tukubaan cuskanayaa*
*kuma taagni lugahee*
*haygu tiirsan Laangadhe".*

*Dhan kalay ka taabteen.*

*Ninkii taarta Libaan*
*uma tooggo qumiyee*
*ma tix gelin dhegoolee*
*talan-taalli laafyaha*
*caga jiidka taran tari.*

*Wax la yidhi "Tin caarow*
*looxa waad ku taallaye*
*haddii Alifki kaa tiray*
*Ta'da yaa u magac dhaban "?*

*Wuxu yidhi "sir baa taxan*
*tartarkay ka mudan tahay*
*taban-taabshaheeduna*
*nin tar sheegta ma oggola*
*waxse teeyo lagu dhaqay*
*halaan awrba loo tu'in*
*ninkii tuudiyaa falan".*

*Wax la yidhi "Tinniixow*
*tu Allaba ku biirsoo*
*xaggee taadu sudhan tahay*
*warka nooga tibix sii "?*



*Wuxu yidhi "tibaaxdiyo*
*toyashadu gar weeyee*
*hadday tuludi caadkeed*
*takar dhabasho badan tahay*
*nin turxaan ka filayaa*
*ka tabaabulshaystee*
*miyaan laba tagoogood*
*garashada u taba baray "?*

*Boqorkii tilmaannaa*
*mar labaad tareenkii*
*tooc tooci keligii*
*hadba dhinac u tooree*
*Tabca saar qalfoofkii.*

*Markuu tiiradii koray*
*ayaa taayir boodoo*
*tafan toofe waa kaas*
*dib u soo taraaree*
*Alla taako yaw dhiga !.*

*Isagoo tarwadhayoo*
*tarshaduhu sitaan buu*
*tan-tannida ka soo degey*
*tacsidii dad baa yimi*
*tiiq tiiqsi digashada*
*turqe meydka weli nool.*

*Wax la yidhi "gol taahiyo*
*tiic tiica murugada*
*adigaa tallaashoo*
*tiiraanyo beeree*
*ka cantuug tif iyo daran".*

*Adigays taftaafee*
*ha ku taamin shaalkii*
*taabka aad ku haysee*
*siduu kaaga tegey sheeg ?*
*Tub hayowna aashaa*
*ha is taawin keligaa*
*waannu kaa tab haynaa*
*bulshadaa tixraaciyo*
*taladiyo gudoonka leh.*

*Wuxu yidhi "tawaawacay*
*turubkana sukaan degey*
*wax kaloon tammediyoon*
*tobanlaha ku waabshaa*
*taabkayga kuma hadhin*
*tuur tuurka geba gebo*
*toddobaale igu dhiga*
*lixle dhiirran igu tuma".*

*Boqorkii tilmaannaa*
*taagtiisa kibiryoo*
*qayrkii ku tanaxwee*
*tagganaan ku raacdee*
*inay tiisa noqotee*
*tartankaa ku dheeraa.*

*Wuxuu tiigsanaayiyo*
*tuuntuunsigiisii*
*taabba qaadi waayoo*
*tafa xaydadkiisii*
*iyo toodhadiisii*
*labadaba tukaa cunay.*

*Duni toocsi mooyee*
*ninna taab ku qaban waa*
*qofba wuxu ka taransaday*
*teel teel ku noqotoo*
*inkastuu ku talax tago*
*wuxu tabanayaa badan*
*tagtadiisa xiise*
*tiisa joogta haaraan*
*kaga daran timaaddadu*
*tixdu waa abbaartaas.*



# KALAMAAN

*Sidii maansha loo yidhi*
*Allahayow mariiqiyo*
*aanu maanku naga tegin*
*miyirow na kaalmee*
*dhaxan baa melmelatee*
*dabka aan malkadiyee*
*madagtiyo usha i sii.*

*Muqdhishiyo Hargeysaay*
*kol haddii mar iyo laba*
*muudaa ku gaadiyo*
*maalooti qaxayaa*
*muska kaaga soo dhacay,*
*kol haddii mar iyo laba*
*makri iyo xaqaagii*
*khasab lagu maroorsaday,*
*kol hadduu mar iyo laba*
*kula tegey mahiigaan*
*kol haddii mar iyo laba*
*maxlal lagugu qaybsaday,*
*kol haddii mar iyo laba*
*moqorraysi lagu baday,*
*kol haddii mar iyo laba*
*mooyi mooyi lagu yidhi,*
*kol haddii mar iyo laba*
*muurmuurris dala'siya*
*muhmal lagugu soo wadey,*
*kol haddii mar iyo laba*
*mashqac lagugu deydeyey,*
*kol haddii mar iyo laba*
*bir ma-geydadaadii*
*iyo mudanahaagii*
*lagu diley kas iyo maag,*
*kol haddii mar iyo laba*
*cudud lagugu meersaday,*
*kol haddii mar iyo laba*
*haanraawe kugu mamay*
*sida malabka doocaan*
*miish-miishad kugu liqay,*
*libta kaa murkucatiyo*

*gobanimada kaa maqan*
*maal baad ku furatoo*
*meyd baad ku bixisoo*
*midnimaad ku dhalisee,*
*kol haddaanad moogeyn*
*masalooyinkaas dhacay*
*muddaduna ka badan tahay*
*in sidii ma-yeedhaan*
*isha miirta laga dhigo,*
*maxaa weliba kuu hadhay!*

*Alla magane sheekadu*
*si kastaba u murugtoo*
*muggeed dhaaftay xaajadu.*
*Haddii layska dhega maro*
*runta kugu mudduciga ah*
*murugaa ku dhaxashoo*
*saqda dhexe ku miratoo*
*sharaf iyo marwaad dhimey.*
*Noloshaan milga lahayn*
*horaa looga maarmee*
*Muqdishiyo Hargeysaay*
*muruqiyo laxaadkaan*
*kala maarmi jirinow,*
*taariikhdu waa marag*
*waxay maanta joogtaa*
*yaa maali jirayeey,*
*ama waa la muuqdaa*
*ama waa la maqan yahay,*
*labadaasna kala miyo.*

*Haddaan lays maqmaqashiin*
*midho hore u caan baxay*
*qorigiyo masaartana*
*madfac loogu jilib dhigin*
*maahmaahna lagu darin*
*maya mayana lagu odhan*
*ninka cunay magtaadii*
*maandeeq la soo dhicin,*
*anuun baa mataanaha*
*mooyaha u tumayee*
*madiixayga luuqdiyo*
*masafada gadooddiyo*



*malahaygu waa been,*
*sidaan moodayaan jirin.*

*Muqdishiyo Hargeysaay*
*cirka meelo ka onkodey*
*milliqsiga hillaaciyo*
*hanqarkiyo mardaaddiga*
*meexaana carashada*
*majaraha ha dherersado*
*maanshaynta gobollada*
*maadhiinka gaaxdiyo*
*miyi sumuca haw xidho*
*ha ku fido magaalada*
*dalka subax ha wada maro*
*ha ka maydho daafkiyo*
*meegaarka qaybtiyo*
*waabayda lagu mudey*
*mirta hawgu kuur galo*
*habartii masayrrey*
*halka macandideediyo*
*maxasteedu yaalliin*
*ha jabsado misciriraha*
*ha dhufsado mareegaha*
*maqashana ha kala tago*
*iyadana ha maraqsado.*

*Muqdishiyo Hargeysaay*
*mukhawigu ha kaashado*
*maaweeladiisii*
*wuxuu maalintaa falo*
*dadka hawga marag dhigo*
*kolba dhagar ha mehersado*
*ha ka dhigo marriinkana*
*mucsur iyo waxba la'aan,*
*ha ka dhigo minxiiskana*
*murugiyo jar soo dumey;*
*ha ka dhigo mashxaraddana*
*muusannawga ooryaha*
*martidana hadhkiisiyo*
*ha ka dhigo malluugaha*
*muunaynta xididkana*
*ha ka dhigo macsiyo dhiig.*

*Mahwi laysu soo baxay*
*madal iyo shir lays wacay*
*marta hayska wada furo*
*hayska dhigo mudh iyo gacan*
*heesaha maraadka ah*
*ha ku marin habaaboo*
*masanuunka beenta ah*
*musaraarka selelka ah*
*murugada shallayga ah*
*hawadiisa meydka ah*
*meermeerka quusta ah*
*falka meehannawga ah*
*hanka mala awaalka ah*
*ha ku maararrooboo*
*runta muran ha geliyee*
*makallaha u saynsaab*
*sakalaha u maydhaan*
*mindiyaha u soofee*
*maddanaha dabkaw geli*
*nabarkana u miisaan*
*madhaxii u yiilliyo*
*dhiilashii milaallaa*
*ha maggaabiyee sii,*
*dabadeeto meeshaas*
*inay maalintii tahay*
*madmadowgu kaga jirey*
*adna macallinkeediyo*
*tahay mudanaheedii*
*hadal miiggan ugu sheeg.*

*Wallee maadi waa meel*
*qabsoo waana meel dhow*
*cagtan maagi weydee*
*malafsiga ku dhacantee*
*manka tiigsanaysiyo*
*sida mool u qodan-yahay*
*waxay muujinaysaa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala-nahay.*

*Madaddaala beenlow*
*muhashada ku haysiyo*
*macal saad u baratiyo*



*macaluusha kuu taal*
*waxay muujinaysaa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala-nahay.*

*Xadhkahaad maleegtiyo*
*sidaan kuugu meel deyey*
*waxay muujinaysaa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala-nahay.*

*Waxa aan mag iyo qaan*
*gashi magac leh oo jira*
*iyo xoolo kugu maqan*
*isu soo minguurshiyo*
*sida aad u madhan tahay*
*waxay muujinaysa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala-nahay.*

*Waxan anigu maagiyo*
*waxaad mooye qooqaar*
*ku malaysanasaa*
*waxay muujinaysaa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala-nahay.*

*Laabtayda milantiyo*
*magligaan afaystiyo*
*guntigaan maleegtiyo*
*maydalkaan jaraystiyo*
*sida Moora duugow*
*martu kaaga furan-tahay*
*waxay muujinaysaa*
*sida aynu Moogow*
*kala maan u kala nahay.*

*Wakhti baa muddaysnaa*
*musku waa sanqadhayaa*
*masna waa ka urayaa*
*miciyaanay ku ogtahay*
*meel dheerna kama jiro*
*mundulkuna kor iyo hoos*
*mugdi oodan weeyaan,*

*habartuna mandheer iyo*
*marjo weeye naafa ah,*
*muslin-yohow islaantii*
*malmal-li'ida haysiyo*
*wedka hoos marmarayaa*
*mashaqiyo dhib badanaa!*

*Gabay waa mullaaxoo*
*mergi weeye leexdoo*
*adigoo midhcaanyiyo*
*maygaag u jeedaa*
*moxor loogu dhuuntaa*
*micnahaan gurracayaa*
*xaalku waa maqaar saar*
*midho dahab haddaad tahay*
*maar baan shillalayaa*
*marso aanad geyin baa*
*hal-qabsigu i mariyee*
*Gaarriyow miliilica*
*marba daad rogmanayaa*
*igu soo mir kacayee*
*in yar Maxamed ii noqo.*

*"Maxaan kugu idhaahdaa"?*
*Ma wax aanad odhanoo*
*hore ugu masuugtood*
*ila maagtay baa jira?"*

*"Mayee taas la soo dhaaf*
*hadday maanso dacar tahay*
*suugaantu milil iyo*
*tahay maal qarsoon iyo*
*nabar adiga kugu mudan*
*hadal madhey Suldaanow*
*lagu yidhi muggaagii,*
*midse aanan falinoo*
*marar hore i seegtoon*
*kula maagay baa jira."*

*"Ku maqlaye bal soo daa*
*waxa igaga kaa maqan."*



*"Marka diriro hooraan*
*dhulka oo mucsur ahaa*
*gobannimo marriimaan*
*dhirtu wada magool iyo*
*ubax iyo man saaraan*
*miiraale gaaxdiyo*
*mayay godol la sara-kacay*
*rugta dhibic ku miisaan*
*Alla magane sawtii*
*kuwa maqasha raacaa*
*muxubbada riyaaqada*
*yididdiilo milicsiga*
*muunsoodka faraxa ah*
*maadays ku odhan jirey,*
*aannu madida foosha ah*
*morohyada u culanee*
*ka bax minanka jiilaal:"*

*"Xaalku waa maldahan yahay*
*mugdi baa igaga jira*
*mana garan ujeeddada."*

*"Haddii mawdku kedis yahay*
*naftu way ka maagtaa*
*godka lagu muquunshoo*
*maaray ka dhigataa*
*inay maahda caal waa*
*meermeerka badisoo*
*marmarsiinyo keentee,*
*hugunkaad maqlaysiyo*
*maroodiga cartamayaa*
*maatadaad dhufaantiyo*
*waa midiidinkaagii,*
*muuqa kuu warramayaa*
*ninkaad mooddey weeyaan.*

*"Sida aad milshi la'aan*
*mudha iigu soo tidhi*
*muran bay i gelisee*
*meesha aynu joognaa*
*marka hore xaggay tahay?"*

*"Meeshu meeshi weeyaan*
*meegaarki weynaa*
*ciidankii majiirraa*
*kugu meersanaayeen*
*Madaxtooyadaadii*
*iyo mooradii baas:"*

*"Hadday meeshu meeshii*
*tahay aan ka magan galay*
*inta midab shar leeyahay*
*mudantaan u hagar baxay*
*xaggee baa la soo maray?"*

*"Mawjadaa ka soo lalay*
*iyo maayad xoog weyn."*

*"Gartu waa maroortaa*
*xaajadu mutuxanaa*
*mirta yaa isku ogaa?"*

*"Mirta waxa isku ogaa*
*xilligiyo mudducigii*
*muddadiisu laallayd:"*

*"Maxaa kuu daraa sheeg?"*

*"Anaad ii macsuun tahay."*

*"Marti-qaad wakhtigan jira*
*waa lagu mergganayaa*
*waxba hay macaaneyn*
*meleggiyo heddeydee*
*muraadkaaga ii sheeg:"*

*"Maraan kuu sidaa hoo."*

*"Taasi waa muddaahano*
*iyo lama maleeyaan*
*waa musuusuqaagii*
*iyo geed is marintii*
*miyaan anigu Jaallow*
*maryo kaaga baahnahay?"*



*"Tani waa ma dhaafaan*
*ma-huraanki weeyaan*
*meel baanay kuu tiil*
*waana lagama maarmaan*
*madaxiyo minjaha geli*
*waa meerto duniduye*
*miiddiiba shubatee*
*miidaddawso huubada*
*muudmuudso gocashada*
*murdi weelka godob yahay*
*mahadhooyin reebtee*
*yaanay maadi kaa hadhin!"*

*"U danbayna meydkow*
*madi tegaya waw door*
*inuu meeris duugliyo*
*duluc madhaxle reebee*
*hal-muceed yadaadii*
*Rabbi kugu mannaystiyo*
*maah maahahaagii*
*bal xusuus mid iyo laba*
*miisaan leh ii sheeg*
*maxaan kaa guntaa hadal?"*

*"Maqal waxan ku haystaa*
*Muslinkiyo waraabaha*
*madmadowga tuhunkiyo*
*mashaqada dhex taallaa*
*inay tahay is maan-dhaaf."*

*"Muudaaga xooluhu*
*marka ay la kulantee*
*muuqiisa aragtay*
*lugaheeda maashaa."*

*"Isna wuxuu majiiraha*
*uga daba maleegtaa*
*celi maganta baadida,*
*is maqiiqiddiisiyo*
*mintidkiyo dedaalkaa*
*hadba muruq u siibtaa*
*dee muxuu sameeyaa*

*ilkahaa u midigoo*
*micidaa u gacanee."*

*"Aniguna mudducigow*
*waxaan meel la joogaa*
*muran li'i dhurwaagaas."*

*"Muddadii xilka lahayd*
*haddii maamulkaygii*
*malaa kadeed iyo*
*mixnad iyo shil laga dhigay*
*maankayga garashada*
*maaraynta hawluhu*
*siday iigu muuqdeen*
*waxba inanan maandhaw*
*ku masuugin baan furay*
*inta maqanna gaadhsii."*

*Gudbey Maxamed Xaashow*
*mahadsanidna lagu yidhi*
*maamuusna kugu ladhay*
*masalooyin xidhan baan*
*meelayn u deyayoo*
*mayalkaan xejinayee*
*hadda kuguma maakumin*
*ninka aad la magac tahay.*

*Miyir iyo xilqaad iyo*
*malko iyo hufnaan iyo*
*milgo iyo xishood iyo*
*madal iyo gar-soor iyo*
*maskax iyo aqoon iyo*
*mintid iyo dedaal iyo*
*mabda' iyo falaad iyo*
*murti iyo tusaaliyo*
*inta mudan adduunyada*
*marinada hal-doorka ah*
*sina uma midowdaan.*



# BARA BARAALE

*Iyadoon bartiro jirin*
*wax la yidhi lixlaha biig*
*haddii Baashe lagu dilo*
*marka qaybta laga baxo*
*boolaynta laga dhigo*
*shaxda booli-tuugiyo*
*sharci boob ah lagu wado*
*afar turub nin barashada*
*ka bogtaa ku gacan gala*
*baandheeya weligii*
*wax ku beela qaabkaas*
*waxa adag ka bowsadey*
*isagaana badin kara.*

*Shaashowdey bilicdii*
*ban martoo la garan waa*
*badhxantoo la maydhaan*
*waxa lagu ballaysimay*
*indho buuryo-goyseed.*

*Buurrantu muuniyo*
*barkhad kaydsan maahee*
*barar taws ah weeyaan,*
*bugtadiyo xanuunkuna*
*haddaan baadhay waa ciil.*

*Bahalow Shabeelow*
*hooy bara baraalow*
*waaryaa nin buureed*
*bulshu waxay ku leedahay,*
*beri waxan ogsoonaa*
*adigoon ka soo bixin*
*casha boholaheedoo*
*dhirta baaxad-weynta ah*
*baarkeeda seexdee*
*maqlay inad bannaanniyo*
*timi badhaha hawdkoo*
*bulbullow libaaxii*
*boqortooyadiisii*
*duhur ugu badheedhoo*

burjigii ka furatoo
bili qaadi weydee,
beelahan agtaadaan
kaa soo bariidshoo
budulkay la soo galay
barkintaad ku jiiftee
waxba baadi xoolaad
beryahaas ma kulanteen?

Bahalow Shabeelow
hoy bara baraalow
waaryaa nin buureed
bulsho waxay ku leedahay,
Beri waxan ogsoonaa
adigoon baruurtiyo
cunin bulad Ammaankoo
riyahaaga baadhee
bishan iyo bisheedii
boqol iyo lag baa maqan
wanankii Ba Ceeblee
badhi iyo leg goormaa
boholyowgu kuu galay?
Balse waxa la yaab dhalay
nin barwaaqo haystoo
ka engegan badhaadhee
bishmahaagu Caarrow[14]
maxay kuu basaaseen
ma buskaad is-marisaa?

Bahalow Shabeelow
hoy bara baraalow
waaryaa nin buureed
bulsho waxay ku leedahay,
dadka baylahdiisiyo
baloolleyda tebiska ah
koromada berdaa-le'eg
iyo dibida beyga leh
barbarriiji weligaa
tarab tarab u boqon goo
isku biirso liqanyada
isku baano yeelkaa;

14 Caarrow: Waxa loo jeedaa Maxamed Siyaal Barre.



balse waxa la yaab dhalay
barta aad ku qalatiyo
baradaada caydha ah
raqi kama bidhaantee
ma laftaad burburisaa.

Bahalow Shabeelow
hoy bara baraalow
waaryaa nin buureed
bulsho waxay ku leedahay,
badda iyo nafleydii
balliyada ku noolayd
bogan waaye jiifkoo
wadnahaa babbanayoo
beerka legdamayee
xaggay bayr ka yeesheen ,
biyahana ma joogtaa ?

Bahalow shabeelow
hoy bara baraalow
waaryaa nin bureed
bulsho waxay ku leedahay,
maxaa haadda buubtiyo
baqayaha daruuraha
balwadiisu noqoteen
wax la baratamaa jirin
ama booddo lagu qaban
baqdintaada awgeed
bogga uga qadhqadhayaan
miyaad baalal leedahay ?

Bahalow shabeelow
hoy bara baraalow
waaryaa nin bureed
bulsho waxay ku leedahay,
Bari iyo Galbeedow
haddaad baahdey aashaa
qalwo bogox ku leedahay
bidixdana ku furan tahay
midigtana badhkaa yaal
nin boqol ku tala-galay
dhankee kaaga baydhaa ?

*Dhinaceed u badan tahay ?*
*Barbarkee ka maqan tahay ?*

*Bismillaahi yaahuu-*

*Degelyohow bar-kuma -taal*
*bulsho waxay ku leedahay*
*Bisiq iyo xangey iyo*
*Banji iyo dharkayn iyo*
*Bilcilkaaga hawliyo*
*dhirta boocda mooyee*
*tolow baad la daaqiyo*
*miyaan cawsna kaa bixin ?*

*Degelyahow bar-kuma-taal*
*bulsho waxay ku leedahay*
*beertaadu hoog iyo*
*bacad iyo habaas iyo*
*bacow iyo qaniin iyo*
*badso iyo shirqool iyo*
*burso iyo khiyaaniyo*
*beeraadka samihiyo*
*u buseelka godobtiyo*
*boqon goynta nabaddiyo*
*booraanta jarankiyo*
*boholaha asaydiyo*
*cabsi iyo ma been baa ?*

*Biyaheedu dhiig iyo*
*xinjir bururinteediyo*
*ma baroorta dumarkaa ?*

*Balka iyo sabuulkuna*
*ma banbaane ololiyo*
*waran iyo billaawiyo*
*baaruudda huguntiyo*
*birta lagu idlaadaa ?*

*Baaq baaqu daab iyo*
*bishil iyo ma soofaa ?*



*Waxa laga bislaystiyo*
*badarkeedu dhimashiyo*
*baga iyo ku digashiyo*
*ma busaarad dhegalaa ?*

*Bahalow shebeelow*
*hoy bara baraalow*
*waaryaa nin buureed*
*bulsho waxay ku leedahay,*
*beryahaagan ka horow*
*bahda habar-dugaag yahay*
*marka ay biciidkiyo*
*koran buuran loogtaan,*
*inta boodhku qariyaa*
*waxba yay badhkoodiyo*
*helin bawdo hiliblee*
*kolay biixii ruugaan*
*marka biidhi-qaatiyo*
*qawluhu is-boobaan*
*mid afkii ka buux samay*
*wax ka bililiqaystaan*
*badanaa ma qadi jirin*
*raqda baallaheediyo*
*badka kama maqnaan jirin*
*saw tan Buulalleydii*
*ku bakhtiday ag-taadii .*

*Burrusow Dameerow*
*biyo-ceel ma keenow*
*hadba dhaan ku biirow*
*beelaha aroorka ah*
*iska daba boqoolow*
*bulsho waxay ku leedahay*
*geela baadi soocdiyo*
*bisha iyo hareedkiyo*
*sumaddiyo birqaabka leh*
*boodaanta wada xidhan*
*meeyey baarqabkiisii*
*baqal looma tu'iyee*
*yaa baacso kugu yidhi ?*

*Bahalow shabeelow*
*hoy bara baraalow*
*waaryaa nin bureed*
*bulsho waxay ku leedahay,*
*bilahaaga jiilaal*
*in berdaan-is-celisiyo*
*boqol iyo labiyo laba*
*wax kalaa ku biiree*
*adoo baaqday dhawr jeer*
*ka bursaday shinkaagii*
*misna bixitinkaagiyo*
*is ballaadhintaadani*
*kala baab fogaadoo*
*iyagaa is buriyoo*
*adigiyo baxnaanadu*
*igu bayda furatee*
*haddaad ii bushaareyn*
*ama baanahaagii*
*bacarida ahaan jirey*
*igu badawsanaysoo*
*ballankaagu weli yahay*
*berritiyo is araggeen*
*horaan kuu bilkeedoo*
*barashaa ku filan quus.*

*Siday buugag sheegeen*
*intii baaca waayaha*
*Bani Aadmi soo jirey*
*baahida ma dheregtada*
*iyo boogta keli talis*
*bir afaysan mooyee*
*wax bogsiiya lama arag.*

*Dadku inu baraarugey*
*birmadkana isku og-yahay*
*baqdintiina laga koray*
*bullashada Hargeysiyo*
*baaqaad ka garataa.*

*Bahalow shabeelow*
*hooy bara baraalow*
*waaryaa nin buureed*



*bulsho waxay ku leedahay,*
*aafaadka buubaa*
*intuu buulal soo gubey*
*ama burunji xaabsaday*
*ama buun ku tumay reer*
*baashaal iskaga jira*
*ama baday asaaggaa*
*Bacalluul,is-weydii.*

*Adaa beri-samaadkiyo*
*berrinsadey ladnaantee*
*ilaa barashadaadii*
*ba'u sow ma taagneyn?*
*Adigoo bedqaba sow*
*dad bayaafka kuma lumin?*

*Haddaad baaji leedahay*
*basan baaska ku hor yimi*
*barbarkaaga mooyee*
*baro uu ku laabtoo*
*galladuu burburiyiyo*
*ku og-yahay wax baaqsaday*
*miyay beeshu leedahay?*

*Baryo-nacasle maalmahan*
*bunka waxad u dubataa*
*wed inaad ka baridoo*
*subax nool beddelashada*
*shil barbaaray noqotoo*
*malaa waad u baahnayd*
*inaad sii badbaaddee*
*belo laba qaddaan jirin!*

*Bahalow shabeelow*
*hooy bara baraalow*
*waaryaa nin buureed*
*bulsho waxay ku leedahay,*
*haddaad geesi ba'an tahay*
*bara-dheer asaaggii*
*boolaystay keligii*
*buro iyo dakano qaba*
*godobtiisu badan tahay*
*marka buuro daataan*
*badda mawjaddeediyo*

*duufaan is-beegsaday*
*is-baxaalli jiidhaan*
*umal biiray sara-kaco*
*lama baraq-nuglaadee*
*burddayohow cabbanidaa*
*burjigiyo kulkii mee?*
*Ha ka boodin doontee*
*horta yeedhi bigillada.*

*Haddaad baaci leedahay*
*wiyil furatay baydaha*
*biimayntu xoogaad*
*ban-dhigayso maahee*
*meel looga baydhiyo*
*waxan jirin bannaan furan.*

*Dab ku kacay shin buuxsamey*
*isna lama bakhtiin karo,*
*indho bururay talo ma leh,*
*bixisana ka hadal ma leh,*
*nin is-bidayba soo liic,*
*inkastay buruudkii*
*Baaweeye* yeeshaan*
*boqorrana hungo u daa.*

*Weligaaba bood bood*
*Bullo* iyo Wilwilo*tumo*
*bulxankana is-moodsii*
*inad tahay badraan nool*
*dhinacayga Baabbow*
*beri hore jiraad tahay.*

*Haddaan been la sheegayn*
*runta lagu bakhaylayn*
*burburkaaga kama nixin*
*bud-dhiggaaga ruuxii*
*wax-ku-beelay yeelkiis,*
*bulshadiyo dadweynaha*
*is-bogaadin mooyee*
*kuma lihid baroor-diiq*
*biya raro nin jeedow.*



# DAALACAN

*Ma da' furin ogaalkay*
*xaska dabada maan gelin*
*derejada ilhaamkiyo*
*hibadii dalaysnayd*
*uma dhiibin duuduub*
*weli dalawadaydii*
*doobigeedi may dhimin*
*dib u dhigasho mooyee*
*wax is doorshey may dhicin.*
*Afartaa xan durugtiyo*
*danni jira wax sheegii.*

*Rag hadduu dagaal galo*
*danta guud xilkeediyo*
*u dareero fuullaan*
*ashkir deeddan badiyaan*
*xakamaha la doontaa*
*duullaanka kama hadho.*
*Gaarriyow duggaalkiyo*
*shaxda damalka taallee*
*daawashiyo ciyaarba leh*
*sir ma qabe ku diirsaday*
*aniguna hog baan degey.*
*digba waa digteedee*
*Deelleydu waa laba.*

*Afartaasi waa duud*
*arrin wadata diirkeed*
*dulmar gabaygu leeyahay.*

*Marka dooddu kulushahay*
*daldaloollo muuqdaan*
*doogaha qabiilkiyo*
*dacar iyo ladh soo kaco*
*nabarradu dillaacaan*
*dadku kala qaloodaan*
*marka dhidar ku daaddego*
*booraan dahsoono*
*hilbo laga diqoodoo*

*damac beelay yaalliin*
*dabadeedna uuskiyo*
*duufkiyo xumaystii*
*dibadda ula soo baxo*
*dadku shaamareeraan*
*neecaw delleganoo*
*doorsoontay uriyaan*
*waxan ahay dareenkii*
*noqon jirey daruurtee*
*sida roobka di'i jirey*
*dalka wada dhammayn jirey.*

*In dhaweyto daaf iyo*
*cudur daansho socodoo*
*duulduulay baa jirey*
*daacuunse maahee*
*asal tiro ma doorshuhu*
*dureygey abuureen*
*ma ogtahay nin doorkiyo*
*inta neceb dirsoocee*
*derejeysa qarankiyo*
*durdurrada aqoontiyo*
*qalinkiyo dawaaddiyo*
*Deelleyda curatiyo*
*innagaa ka daba tegi*
*durbaankay tuntumayaan*
*dawankaynu sidannaa*
*sida danab u baabi'in.*
*Dugsadaha qabiilkiyo*
*dib ka naaxa shaac baxay*
*digo-rogashadeennii*
*iyo dawladnimadii*
*dib inay u celiyaan*
*qorshahayga kuma darin.*
*Nin kastaa ha duudsiyo*
*ama dala'si haw xado*
*ama duurka haw xulo*
*ama dabino haw xidho*
*ama duhur ha weeraro*
*ama damac ha dhaafsado*
*gobannimadu waa degel*
*dayax iyo iftiin nool*
*dumi mayso weligeed*



*anigaa dabkow sida*
*daljirkeedi baan ahay.*

*Ninka xagal ka daac iyo*
*gol daloolo iga hela*
*isagiyo digtoonkii*
*anigiyo dagnaantay*
*taariikhdu duuggeed*
*diiwaanka qarankiyo*
*wixii deyn cad ii qoran*
*dirirtiyo rogaalkay.*

*Dahabka iyo maadhkiyo*
*lacag aan dur wadannoo*
*laba daabac sidatiyo*
*dalagga iyo beeraha*
*dacallada Shabeelliyo*
*webiyada dugsanayee*
*dambarsada labeentee*
*diriradu habaaskiyo*
*dusha sare ka maydhaan*
*daaraha casuustiyo*
*kolba midab la doortiyo*
*diibka lagu marriimee*
*shanta Daatsan yaalliin*
*hanti aan dal dheer iyo*
*laga keenin dibadaha*
*karti iyo dedaal iyo*
*dardar lagula soo bixin*
*duullaana loo gelin*
*duco waalid soo hoyn*
*carshigana ka soo degin*
*deeqdaas la yaabka leh*
*ninka weel darsanayee*
*digashada saboolkiyo*
*ku darsaday badheedhaha*
*miyaan eedi daba ool ?*
*Godobtiisu dedanaa.*

*Bulshadeennu waa duul*
*daacad iyo xishood badan*
*dun xariira weeyaan*

*qofna uma darraadaan*
*dar Allay ku dhaqantaa*
*dareen waw dhegweyn tahay*
*ogow doqonse maahee.*
*ninka maamul dalabliyo*
*dabbaal joogto hoosiyo*
*dibindaabyo ugu maqan*
*degdeg uma tilmaamaan*
*nabar kulama duulaan*
*dib bay ugu muddeysaa*
*dulmigiisu waw kayd.*

*Afartaa dun quruxliyo*
*diillimaha biciidkiyo*
*dildillaha farshaxankiyo*
*sida delebka maw dhigay*
*mid kalaase ii dihin*
*weli dooddu ii furan.*

*Maansadan dabayshiyo*
*duufaan sidiisii*
*dalandool u socotee*
*dalladdii qabiilkiyo*
*xidhan waranki deylaa*
*laga furay daboolkee*
*lagu gado dukaannada*
*miyaan xeer dabbaaliyo*
*sharci laba dibleeyiyo*
*dar u qaybsan loo hayn ?*
*Tolow daaya yaa yidhi ?*
*Duumadan xanuunka leh*
*kuwa luuqda daba dhigay*
*dembi miyaanu qabanayn ?*

*Dulucdiyo ujeeddada*
*runta aan u daadego*
*duxda hadalku waa hee:-*
*Inta gaajo doob tahay*
*derbi tahay laxaad weyn*
*dufan jecesha ururtiyo*
*dabatadu sed roon tahay*
*dibna leefta tarantee*



*doorkan maanta soo baxay*
*waxa yaal daldalayaan*
*danyartiyo saboolkuna*
*diingaraaro jiifaan*
*dadku kala sarreeyaan*
*in qabiilku dabar go'o*
*ama dumo ha eegina.*
*Cilmi diiddan baa jira.*

*Deegaanta noloshiyo*
*darantiyo samaantana*
*ninkii doonayow taas*
*daw loo maraa jira.*

*Ummadyahay daryeelkaa*
*isku duubnidaadiyo*
*madax daacad noqotiyo*
*adigiyo dedaalkaa*
*dawadaadu waa taas*
*dhan hadday ka debecdana*
*gabbalkaa dam weeyaan*
*ma dardaaran baa hadhay ?*
*Deexashada tusaalaha*
*ama talada deeqda ah*
*miyaad dood ka leedahay ?*

*Geenyadaydi Daalacan*
*dabar saari maayee*
*dibso aan idhaahdoo*
*dagagaro ayaamee*
*sumalkii darbane mee ?*
*Dalandaaliska naylaha*
*doonnanteenna boqorka leh*
*Deelleyda baaqa ah*
*darka laaska beeshiyo*
*duunyadu isugu timid*
*dalbashada wadaantiyo*
*adaa doojinteediyo*
*haya dawliskeedoo*
*dunqulaalka xanankiyo*
*dogobta iyo ruuddiyo*
*waxaad tahay bir daaqeen*

*ardadiisa dooddiyo*
*deeqsiiya hadalkee*
*sangahaagi Doolaal*
*mar labaad ha dananee*
*majaraha u sii daa*
*sheekadu ha durugtee*
*dawi Maxamed Xaashow.*

*Aniguna ku dayashada*
*haddaan dayro kaa dhigo*
*anaa daawadii furay,*
*waynoo dantaas guud*
*deelka xeel la'aaneed*
*carrab dalab la'aaneed.*



# DHAHAR

*Dhamme Maxamed Xaashow*
*Ina Xaashi Dhamacow*
*dhaadmada dareenkiyo*
*dacdada iyo waayaha*
*ninka ila dhadhamiyow*
*jiilaalku dheeraa*
*dhulka xaabki ka idlaa*
*dhalma deys cirkii noqoy*
*dabka dherigi saarraa*
*dhagxantii bislayn waa*
*inkastoo dhir xoogliyo*
*dhamac yaab leh lagu shiday*
*ma dhadhaab nuglaadoo*
*sida dhaylo suulkiyo*
*lagu goosto dhooshoo*
*hilib laga dhishaa jira.*

*Dhamme Maxamed Xaashow*
*Ina Xaashi Dhamacow*
*Dhahar waa ninkiisii*
*garashadu dhibtiisiyo*
*dhaawaciisa weeyaan*
*dhalanteedka beentiyo*
*dhaymihiisu waa faan*
*shilka dhacay ma moogee*
*isagiyo dhanqalantada*
*dhacantaa u kala rogan.*

*Wuxu yidhi "dhibaa jira*
*dadku baahi dhigatoo*
*lafahooda dhuuxdiyo*
*dhugatay la jiifaan*
*arrin aan dhegeystoo*
*i dhacaysa maahee,*
*waxa aad dhafoorkiyo*
*dhabannada la haysaan*
*maqashay ka dhegalee,*
*hadday tahay dhaqaaliyo*
*hadday tahay dhismaa guud*
*ka dardaarmay dhawr jeer,*

*hadal kuma dhabcaalayn*
*dharaartiyo habeenkii*
*dhawaaqaygu ma hakado*
*waxaa weliba ii dheer*
*dhanbaalkiyo wareegtadu*
*weligood is-may dhimin.*

*Anaa guusha dhaliyee*
*dadka wada dhergaan idhi*
*waxa hadha dhigtaan idhi*
*dhadig iyo lab waan simay*
*dhux-dhux iyo faq hoosiyo*
*dhagar qabe ha joogee*
*weli ruux dhammaysoo*
*i dhalliila maan arag.*
*Dhugashada kormeerkiyo*
*dhaabaddiyo fagaaraha*
*dadku sacab is-dhaafiyo*
*dhag-dhag iyo mashxarad bay*
*igu soo dhoweeyaan.*
*Dhan kastaba magaalada*
*inta ay sar dheer iyo*
*dhabbo iyo jid leedahay*
*waxa dheeh farshaxan iyo*
*sawir wada dhalaaliyo*
*waxa iigu dhigan faan*
*dhaayihiinnu ha arkaan.*

*Dhug u yeesha maansada*
*dhubbad-qaadka heesaha*
*abwaan dhaartay suu yidhi*
*"miyaa ruux i dhaamoo*
*lay dhaafsho haysaan ?"*

*"Dhallinyariyo waayeel*
*dhabba aan u hadallee*
*haddaan dhigo xilkaan sido*
*yaa u dhiibanaysaan"?*

*Dhamme Maxamed Xaashow*
*Ina Xaashi Dhamacow*
*kolley buuxsan dhiilkii*



*toban saniyo dheeraad*
*lagu dhurayey ciilkoo*
*lugtu jeeni dhaaftee*
*dhaadashadu ma sugantahay*
*dhumuc iyo ma xoog baa?*

*Dhillowyahankan geedkii*
*lagu beeray dhiiggiyo*
*dheecaanka wadhatada*
*dhexda tolow iskaga maray*
*dhirta maw abtiriyaa*
*sida dhalashadeediyo*
*dhaqankeedu kala yahay?*
*Mise wuxuu ka dhigan yahay*
*habartii mar dhooftee*
*doonnidu la dhacantee*
*badda dheelligeediyo*
*dhaxantiyo dabaylaha*
*dhawawalan ka qaaddee*
*iyadooy dhaqaaliyo*
*nafba kala dhaqaaqeen*
*ka dib dhawr ayaamood*
*salka dhigatay ciiddee*
*dhulow kaama kaco tidhi.*

*Dhamme Maxamed Xaashow*
*Ina Xaashi Dhamacow*
*cashaday dhaharatee*
*geelu dhimo hadhuubkee*
*dhaqayiyo galoof yahay*
*rag ka dhoofa baa jira.*

*Dhamac iyo hannaan iyo*
*saddex dhaqan wadaagtoo*
*isu dheelli-tirantaa*
*dhuuni lagu bislaystaa*
*Gaarriyow dhardhaarrada*
*kol haddii mid laga dhigo*
*rag dhuyaala baa jira.*

*Maalintay dhanaan tahay*
*rag dhirbaaxo quudheed*

*inta ay ku dhaashtaan*
*xiddigaha is-dhalan roga*
*u dhufaanan baa jira.*

*Inta qaran dhiskiisiyo*
*dhidibkiisu taagnaa*
*dheeraad nin dooniyo*
*nin ku dhega xaqiisoo*
*dhacsanaayey baa jirey.*

*Dhederbiga colaaddiyo*
*rag hadduu dhabiiltamo*
*fule dhimashadiisaa*
*dhawr jeer noqnoqotee*
*wax la yidhi dharaartaas*
*ninka dhiirran geeridu*
*isagay la dhalatee*
*hasha dhaxal-wareegtiyo*
*dheeha furashadeedana*
*keligeen dhunkaashiyo*
*higta caara dhuubtiyo*
*dhugtan kuma go'aynee*
*haddii laysu jilib dhigo*
*kumanyaal dhigeenoo*
*waxba dhawrsanaynoo*
*sida awrka dhaameel*
*dhoomuhu gubeenoo*
*dhibta kula wadaagoo*
*isu dhaarsan baa jira.*

*Dhamme Maxamed Xaashow*
*ina Xaashi Dhamacow*
*dhidarkuba xabaalaha*
*kuma dhaadhaceenoo*
*kuma dhiirradeen ruux*
*celinkara dhawaaqee*
*kolkuu meydka dhiilliyo*
*dhaqdhaqaaq ka wayuu*
*hore ugu dhowaadaa*
*dhinacyadiyo feedhaha*
*muruqyada ka dheegtaa.*



*Kol hadduu dhawaaqii*
*dhicisoobey gabaygii*
*dheg-ka-maqal ha joogee*
*lumay dhaqan-galkiisii*
*sheekadu Dheg Dheer iyo*
*dhoor-daalis noqotee*
*Gaarriyow dhammaadkiyo*
*halka ay ka dhowdahay*
*dhakhso mawgu gudubnaa.*

*Bulbullahan dhabbacashada*
*ku madhsaday dhallaankii,*
*lafta dhabarka ka habsadey*
*waayuhu dhirbaaxeen*
*dhaadhaada taahiyo*
*dhuun-yeedhis mooyee*
*sida kale u tamar dhigay*
*beri buu dhinbiil iyo*
*dhuxul daba ka kululaa*
*weli lagaga dhawrsado*
*xaajadu ha dhabaqdee*
*dhabba maw abbaarnaa*
*dadka dhiillo culus iyo*
*dhakafaar ma gelinaa*
*wedka maw dhadhaminaa*
*dhagar maw badheedhnaa ?*

# BULSHO

Talooy go'an baydahaa
xujooy taran bedenbedkaa
hawooy balaggaa furfuran
sengow dhimey badalligaa
biddow camalkaa ku sheeg.

Badeey adigana muggaa
hirkaagiyo baaxaddii
buraashad miyaan ku dhuray
ballaadhkiyo mawjaddii
bilaale miyaan dardaray
shantaa hore bidix lisee.

Caroog kulul baa balwadey
babtiisii baa la naxay
dad baa isu soo bulladay
dhankee babbisadu jirtaa
baquhu yuu saaran yahay
ninkee boholaha Xargega
balbalo u daboolan tahay?.

Bulshaale wed buu sidaa
Bahdoon buu maaggan yahay
ul boocuu ugu tukubey
berdaa lagu kala negaa
dhexdoodii buu ka baxay
dhammaa beybeysigii
ban weyn baa layska helay
fallaadhuhu gun iyo baar
bartii shiishkay hayaan
biciidkuna wuu arkaa
xaggeese la beegsadaa
badbaado miyay dhacdaa?.

Belaayadu yaab lahaa
wax bay buunbuunisaa
nin jeeday bararisaa
shantaana ballaysinkii dheh.



Bulshooy adigaa milga leh
ninkii boojimo ku yidhi
shalaad barataannu nidhi
bayluulida haw furfurin
bariidana kaama geyo.

Ninkii ballankaaga qaaday
ka baaqday xilkaad u dhiibtey
ka baydhay ujeeddadaada
ku boobay adoo sabool ah
ku wiirsadey baabba'aaga
adoo bogan waayey taada
ninkii u buseelay raaxo
huwadey bulbushii libaaxa
buruudkiyo shaashka qaatay
u boodey cirkaas dusheenna
bilkeedey laboontidiisa
buurtuu koray waarin mayso
heddiisana baajin mayso
kub iyo bawduu ka jabay.

Shantaas umal fool bashiishtay
berdaanka xusuusta ii dheh.

Bulshooy adigay bokhraday
beerkayga adaa gogladey
bogeyga adaa huwadey
wadnaha adigaa barkaday
bishmaha adigaa furfura.

Baxaalliga hawlahaaga
bidhaansiga waayahaagaa
bisaylkaba iigu wacan.

Markii lagu bililiqaysto
markii baaqaagu yeedho
ayaan boholyow gabyaa
dareenku baraarugaa.

Bulshooy adigay bokhraday
adaa bili igu shakalay
buruudka adaygu xidhay

*haddaan ahay wiil bir kulul*
*burjiga adigaa iska leh.*

*Badheedhka adaa i faray*
*dagaalka adaa i baday*
*belaayo haddaanay dhicin*
*dantaada haddaan la bi'in*
*haddaan baradaadu guban*
*garsoorka haddaan la burin*
*aqoontu baraar shishiyin*
*kacaannimo lagu beddelin*
*miyaynu is baran lahayn.*

*Haddaan wanka badhida weyn*
*baraarkana loo qalqalin*
*ninkii cunay booligaaga*
*haddaan buro loogu darin*
*saboolka haddaan la badin*
*haddaan boqol ruux la korin*
*dhulkii beeraha lahaa*
*haddaan basan baas ka dhicin*
*bal iyo xaab laga idlayn*
*dadkii qabey beri-samaadka*
*haddaan badhax loo shushubin*
*barwaaqadu tuugsi noqon*
*haddaan badar loo kaltamay*
*biyaha sixin looga dhigin*
*basaasta ninkii huwadey*
*badhaadhnay haddaanu odhan*
*naftiisana been ku furan*
*miyaynu is baran lahayn.*

*Haddaan waa kuu beryaa*
*bayuur iyo umal ku tarin*
*haddaan berritiyo sed maqan*
*bushaara lagaaga dhigin*
*baxnaanadu kugu adkaan*
*haddaan sida baar caddaa*
*baloolliyo badowyaley*
*naftaadu ku ciil belbelin*
*qabiilka haddaan la bilin*
*haddaan boodhka laga tuntumin*



*haddaan is bahaysigaaga*
*is-biirsiga wada-jirkaaga*
*budh iyo xoog lagu furfurin*
*bartaada haddaan la dhicin*
*bukaanka haddaan la nicin*
*haddaan bogso lagu daweyn*
*miyaynu is-baran lahayn.*

*Barbaarta haddaan la layn*
*billaawuhu dhiig mantagin*
*ninkii ku bud dhigi lahaa*
*haddaan baqayuhu ku lalin*
*halyeyga badbaadadaada*

*haddaan bahaluhu ku shirin*
*haddaan bir ma geydadaada*
*rasaas loo beretansiin*
*waraabuhu baan ka dhigan*
*baroorta qofkii lahaa*
*haddaanu u rogan bil-khayr*
*belaayo xijaab ka dhigan*
*wixii hadhay baylahdaada*
*haddaan buntukh loogu talin*
*xanuun lagu baraq nuglayn*
*nin bayr lihi salow ku gelin*
*miyaynu is baran lahayn.*

*Basaas iyo oon dartii*
*haddaan dhulku baali noqon*
*haddaan sida bagagidii*
*Banaadir indhuu ka nixin*
*bariiso haddaan la qixin*
*boqoolku is-daba taxnaan*
*bugaan bugtu gelin Xijaas*
*badroolka haddaan la yu'an*
*hablii boqorkiyo dhaclaa*
*baftada lagu wada yiqiin*
*Baxreyn laga soo qabqaban*
*haddaan boqorrada Carbeed*
*Amiirrada baalka xidhan*
*kun jeer baryo loola tegin*
*miyaynu is baran lahayn.*

*Haddaan Bari ina qalayn*
*haddaan Bogox ina fantayn*
*beelaa agaheenna yaal*
*haddaynaan buro ku noqon*
*tukii baallaha caddaa*
*adduunyadu baadideenna*
*bannaannada kaga xeroon*
*boogteenniyo dhaawaceenna*
*haddaan baga layna odhan*
*miyaynu is baran lahayn.*



# QUDURO

*Culayskii iyo xanuunkii shacbiga soomaaliyeed kaga yimi nidaamka cadowga ah, ayaa waxaa lagama maarmaan noqotay in la helo xal iyo farsamooyin lagu furdaamiyo xanuunkaas.*

*Wakhtigaas Maansadan Quduro soo baxday, bishii Oktoobar 1980kii, ayaa in ka mid ah shacbiga oo xaqiiqo ka carar ahi waxay xalkii masiibada dalka iyo dadkaba ku habsatey lagaga bixi lahaa ka raadisey dhul khalad ah. Waajibaadkii uu qofka nooli lahaa ayaa waxay ugu yeedheen ama ku halleeyeen cid aan waxba ka qaban karin, sida qabuuraha, Sheekh Hebel, Weli Hebel, foox iyo riyo.*

*Cabdi Aadan Qaysow*
*qolfi soconayaan ahay*
*qaro iyo laxaad iyo*
*qoton waa halkoodee*
*ul qallalan umaan dhalan*
*qurux kama madhnaan jirin*
*hana qaad filkaygiyo*
*ka da'weyni qayrkay.*

*Hilbahayga qoonmiyo*
*qayaxnaanta jaahiyo*
*sida qaansadii godan*
*jooggan soo qandoodsadey*
*qutubsiga tallaabada*
*qalqalloocan igu dhacay*
*ma lahayn qallaafee*
*qoontayda hoosiyo*
*waxa qaabkan iga dhigay*
*qisadaas ma haysaa?*

*Maxaa iga qabyo ah hawl*
*wax ka qabashadeeduna*
*qayrkay ku xidhan tahay.*

*Maxaa qalinku sheekiyo*
*qubanaha dharaartiyo*
*kolba qodob la yaabliyo*
*mahadhooyin qorayaa!*

*Maxaa feedho qaaxiyo*
*qulub kala kexeeyeen*
*qoomammadu damqaysaa.*

*Maxaa ciin la qooshiyo*
*waabay qadhaadhoo*
*dacar lagu qasaasiley*
*iyo quudhsi dabayaal*
*afar aan is qabannoo*
*ninna hore u qaayibin*
*cabsi loogu qumayaa.*

*Qamuunyada dibnaha iyo*
*qacda labada fool iyo*
*maxay qaawinta ilkuhu*
*qanja barar isku hayaan.*

*Maxaa qiiro hoosiyo*
*ilmo qubatay gocashadu*
*ha i qarin ku leedahay*
*isaguna qabaal iyo*
*qaba dheer ku shubayaa.*

*Maxaa ruux qaldhebayoo*
*qormadii rugtiisiyo*
*qudha laga toleeyoo*
*misna quusan waayoo*
*nafta quudhi waayoo*
*qarandida sideedii*
*qodanaaya booraan*
*godka meel qarkiisa ah*
*qoobley ordaysiyo*
*fardo qaxay ku jiidheen.*

*Maxaa seefo qawliyo*
*gudmo lagu qadhaabtaa*
*damal adag qarqooreen.*

*Dadku dhagar qaboobaa*
*qaantoodu fududaa*
*qarqarsigu ku adakaa*
*ninka qoofashee yidhi*



*qoorta hoos u wada roga*
*qoontooda badiyee.*

*Iyagoo qiyaamiyo*
*bad qaloonbiyaysiyo*
*ku dhex jira tog qawlay*
*qoyanaanta diidaan.*

*Iyagoo qaldhebayoo*
*qatannoo arradanoo*
*gabaddano qadhqadhayoo*
*nolol qaawan joogay*
*burka qaraf ka dhawraan.*

*Qawdhan waa nin keliyee*
*haddaan qaybta loo burin*
*wiyil qoodh ah laga dhigin*
*qaran kuma hoggaansheen*
*qaadhaan gumaystiyo*
*qalle lagu hungoobiyo*
*qalam jalam hadoodilan.*

*ma lafaa qandoodiyo*
*saadaal qallalanoo*
*lagu qiil banaystiyo*
*riyo qabaxtankeediyo*
*qaadaa dhiggeediyo*
*qashar iyo salool baan*
*qalalaasahaan gabay.*
*ii qumiya leeyahay.*

*Ma quruumo ciiddiyo*
*qawlallada aboorkiyo*
*inta dulin qadhaabtiyo*
*qablantadu ku kulantee*
*canka lagu qadhiidhiyo*
*qabri laga ducaystay*
*qabyaday ku xidhan tahay.*

*Ma qorshaa badheedhkiyo*
*quxub lagu hirgeliyee*
*qori tuurka Saadooy*

*lagu kala sed qaatay*
*qadder dhacay u haystaan?*

*Jidku qarar xidhiidhiyo*
*qodax iyo dhib badanaa*
*qarnigaynu joogniyo*
*qarda-jeexa yays baray?*
*Dadka yaa qareenkiyo*
*qolo qolo u kala raray*
*qoqobbada dhex yaalliyo*
*tolow qalada yaa baray?*
*Qarannimada waa tii*
*qoor-gooyo laqan iyo*
*qaryad weer cad xidhatiyo*
*lagu helay qisaastee*
*hadmaa qaabkan loo rogey?*
*bulsho qudha la saanyadey*
*qaydar iyo galool iyo*
*qansax miidhan laga dhigay?*

*Qandigiyo mareegtaay*
*qalwadiyo sursuurtaay*
*iyadoo qaskaagiyo*
*raggii aad qalqalatee*
*qawlaha u loogtee*
*tidhi qaybi dacawada*
*qoyan tahay raqdoodii*
*qummanii degaankiyo*
*qadhadheytidiisii*
*qumanyada dabkeediyo*
*lagu shiilay qaxankee*
*qunbeyaasha lagu shubay*
*adigoo qudhqudhiyoo*
*ku qubeystey dhiiggii*
*iyadoo qalfoofkiyo*
*hadhadoodu quban tahay*
*haddaad soo quturan tahay*
*ama weli qor kuu hadhay*
*qoysku waa hadhiinoo*
*qabku maaha beentaa.*



*Qudha loo kal tiriyaa*
*qusur kama fogaatee*
*Ina Qayte yeelkii*
*ha qudhqudhiyo caanaha*
*qadda-riixna haw dhamo*
*haddaan qaamudkay gelin*
*anigiyo rag ila qaba*
*qoomaasha murugada*
*qodkan bixiyey laamuhu*
*danba wuu u qolof dhici.*

*Qaybdiid haddii uu*
*qado wadari leedahay*
*qoondaystay keligii*
*Gaarriyow nin qadanaa*
*qiimeeya noloshoo*
*weligii qadderiyee,*
*qaska iyo colaaddiyo*
*kama naxo qulquladaha,*
*qarfihiyo abaaraha*
*rati qooqan baan ahay,*
*maskaxdayda qayliyo*
*qiiq baa ka baxayoo*
*bulsho qawqab diiddaan*
*bal inay qamaamaan*
*qabqabaha u tumayaa.*
*Nin qab ii dhigaayaan*
*anna qool u xidhayaa*
*qoortaydu waa iib*
*wax ka qaaya-weynoo*
*u qalmaan u hurayaa.*

# GALAAL

*Googgaa libaaxow*
*gaaddadaada dhiiggiyo*
*xinjiraha galshaystee*
*gaasheeyey laabtiyo*
*gocomada da'aayiyo*
*waa maxay gal-dhiidhigu*
*yaa fallaadha kugu ganay?*

*Waa maxay gabiibtiyo*
*gegidiyo dabayshiyo*
*dhaxanta iyo gawraha*
*gabayooxa dhacayaa*
*geriyaadkan maadaa*
*gawdiida keligaa?*

*Wuxu yidhi "gabboodkiyo*
*hadh galbeedka ii jiid*
*soo gaabi toyashada*
*hadalkana i gees mari*
*goobtana wax weyddii".*

*Waxan idhi "gubtahanyada*
*maxaad uga gol leedahay"?*

*Wuxu yidhi "miyaan gabay*
*wixii ila gudboonaa*
*maanigaa gabaabsiyey*
*gudan waayey taydii*
*mise gumaradaydiyo*
*giddi habar dugaag baa*
*libta geesigoodiyo*
*tira guulihiisoo*
*gantaday u siibaan*
*geedkay hadhsanayaan"?*

*Waxan idhi "miyaad garan*
*waxa goobtan kugu furay"?*



*Wuxu yidhi "guddoonsadey*
*saymaha go'doonka ah*
*gocashaase igu maqan".*

*Waxan idhi "ka soo gudub*
*gooraanka taahoo*
*ka gadaal sarbeebtaas*
*warka aan Galaalow*
*googoos ka dhigannoo*
*is la sii gorfaynoo*
*sii gaasa bixinnee,*
*guul guulka kugu dhacay*
*haddaad mooddey gaadmiyo*
*kamma' uu wed geystiyo*
*wax ku yimi garaad li'i*
*gaban iyo falaadkii*
*haaway is guratiyo*
*nacab iyo giniis iyo*
*hadhadii gumestiyo*
*intii gaalku reebaa*
*shilka wada gorfaysoo*
*nabarrada ku gaadhiyo*
*gawl gawlka xagashada*
*waa lagu guddoonshee,*
*haddaad geesi leedahay*
*maxaa laygu gaasiray?*
*Garta anigu maan niqin*
*taladana wax kama goyn*
*godobtana wax kuma lihi".*

*"Anaa goobta joogoo*
*waxa dhacay guntaayee*
*kuma gabin bahdaadii*
*bulshadaadu kuma goyn".*

*"Geeridaadi sawtii*
*gobollada dalkoo idil*
*dadku wada gadoodee*
*la gilgiley fallaagada".*

*"Waxa Deeqa[15] lagu galay*
*ama gaadhey awgaa*
*ma ogtahay Galaalow"?*

*"Gabadhaada sawtii*
*gooheeda yeedhiyo*
*guubaabadeedii*
*galowgii ku sara kacay"!*

*"Gabadhaadu sawtii*
*garba-saarta xoortee*
*ganbadii ka carartee*
*marta sare u guratee*
*saqda-dhexe gadoodiga*
*gacan dhiigla-yaashii*
*ku garaacday aqallada.*

*Sawtii la gawdhshee*
*seefaha gardiidka ah*
*galka lagala soo baxay".*

*"Gabadhaadu sawtii*
*gumucyada rasaasta ah*
*warankiyo gamuunkii*
*hadh cad lagugu soo ganay*
*u daruurtay gaashaan".*

*"Gabadhaada sawtii*
*iyadoon Galaalow*
*u gargaariddaadiyo*
*gurmadkaaga mooyee*
*gef kaleeto loo hayn*
*garka lagu muquunshee*
*xilka laga guddoontee*
*cidla' lagu galaaftee*
*lagu goobtay keligeed".*

*"Gabadhaada sawtii*
*ilmadii ka gabax tidhi*

15 *Deeqa-Waa Deeqa Colujoog*



*naxashkaad Galaalow*
*gudihiisa jiiftiyo*
*kafantii ku gobo tidhi".*

*"Hibashada guhaaddiyo*
*gedgeddoonka ciilkiyo*
*goroddaad lulaysaa*
*kugu gooni maahee*
*waxa kula gudboon taas*
*gobannimada ciirtiyo*
*qarannimada guurtiyo*
*himilada gablooshiyo*
*danta gebi dhacaysiyo*
*runta galan galcawdoo*
*geba geba is dhaafiyo*
*guri laga baroortiyo*
*naf gunaanad weydiyo*
*guurti cayn wareegtiyo*
*gebi ruqa sidaadiyo*
*immisaa gulcubo dhacay*
*geeskeennu Muusow*
*immisuu gurracan iyo*
*gudcur soo hawaariyo*
*gabbal dumey u taagnaa"?*

*"Haddaad geesi leedahay*
*maa la ii abaal gudo*
*horta yaa Galaalow*
*geesoole geel baray"?*

*"Goormaad ogsooneyd*
*dawac gooddi joogiyo*
*wan baruuri goobtoo*
*gacalnimo ku wada nool"?*

*"Goormaad ogsoonayd*
*gendigiyo dhukaankiyo*
*guudaanka cudurkiyo*
*gawracato raacdoo*
*geel bukooday lagu dhayo"?*

”Goormaad ogsoonayd
faras gedaha duullaan
gurmashada ku caan baxay
iyo geeddigii dheer
baqal aan geyoonoo
guluf qudha ku wada jira”?

”Goormaad ogsoonayd
goonbaarta dumarkoo
gaarida haweenka ah
garab siisa Muusow”?

”Goormaad ogsoonayd
giiryaale fulaygoo
weheshada nin geesiya”?

”Ma ogtahay Galaalow
waxa lagugu gaasiray
goldaloolo maahee
waa geyfanaantiyo
gudashada xilkaagoo
guumeys masayrtoo
gumartiyo dharkaynkiyo
garaska iyo boocdiyo
gocondhada wax saydhiyo
gommoshaaga jeceloo
dhebigiyo galoolkiyo
gobka iyo madheedhkiyo
inta geed san neceboo
dhirta gaara ximisaa
kugu soo galgalatee
ha ka guban tummaatida
hana gocan abwaankow
”ha u dudin Galaalow
dhidar meydka daba gura”.

”Galab qudha nin noolaa
galabtiina Muusow
gashi iyo dadkiisii
gacmo qaawan kala tegey
wuxu galabsadaa yaal
murugada gadhoodhka ah
ninkii gaaxsadaa shuban”.



Godku wuxu canaantaa
ama gogol ku ciilaa
go’a qudha ka diirtaa
ama badi guhaadshaa
hadba giir u kiciyaa
gaafaha ku laastaa
geesaha ku feedhaa
gibilkooda loogaa
gungumaha ku sooraa
giiryaala-yaashoo
goblan baa xijaabtee
miyuu geesi hoydaa
garashadu wed leedahay?

Damalyohow gardhaystee
laamaha gandoodiyo
hoobaanta ganacda leh
guudkiisa saaree
dabadeed gilgilashada
garangarinta laafyaha
galaxyada casuusta ah
gaankiisa hoosiyo
inta gaararkiisiyo
gartallawga buuxshee
dhulka wada guduudow
gedo iyo fac labadaba
ummad kala gu’weynoo
galab noolba joogtaa,
midhahaaga guratoo
nin gardaadshey maamuus
ummaddiisa guul iyo
gallad waarta kaga tegey
gebigeed adduunyada
afarteeda geesood
si kasta u galaa baxay
geyigoo dhan joogoo
guryahoo dhan yaallaa
miyuu geeri leeyahay
hilbihiisa goodkiyo
dulin gaajo haysiyo
miyay ciiddu geydaa?

*Ha la gabo xilkaagee*
*horta yaa Galaalow*
*magacaaga gadi kara*
*guulahaaga qarin kara*
*kutubtaada gubi kara?*

*Goodaaddo la hantiyo*
*inta gaabinaysee*
*dadka gaws danbeedkiyo*
*gabbashada ku laysiyo*
*fule lagu gabraartaa*
*golxobbada ha ramiyeen*
*ninka raga ha gaadeen.*
*Reer guura raaciyo*
*inta golon gol Muusow*
*is gamaarinaysaa*
*filanwaa ha geysteen*
*gamasyada shirqoolka ah*
*ha la soo gurguurteen*
*nin gurrani ha kula dhaco*
*af gammuurta liicdiyo*
*rawisaha galoofta ah,*
*Taariikhdu waa guun*
*qorrax aan gaboobayn,*
*ma gedmaan ayaamuhu*
*giiryaale weligii*
*ha gilgilo salkaagee*
*gondahaaga hoosuu*
*ku gataati ciiree*
*aaway Galaalow*
*gacantii ku ridi layd*
*gudintii ku jari layd?*

*Ummad goba hankeediyo*
*gunnadii dadkaagiyo*
*gaadh baa ku weheshee*
*miyuu kaa gol roon yahay*
*guuguule kugu ciyey?*

*Nin kastaa ha gooddiyo*
*gocorradu ha doobyeen,*
*godadliyo hinaasaha*



*waxad kaga gam'aysaa*
*runtu waa Galaalow,*
*murti garangarteediyo*
*goobaha tixraaca leh*
*haddii maanso loo guro*
*guddigeeda khaaska ah*
*gola jooga maantaas*
*adigaa guddoonsha ah.*

*Suugaanta guunka ah*
*af gobaadsi geediyo*
*gaal gaalka jiiftada*
*godka hoga tusaalaha*
*ninka gawda baanaha*
*gaawaha hayaad tahay.*

*Hawraar gahaydhiyo*
*maahmaah go'xidhatiyo*
*gololada sarbeebta ah*
*halka ay ku gorortiyo*
*godankiyo ishaad tahay.*

*Geeraar ka-hadalkii*
*gabay iyo ab-tirintii*
*jirridiyo guntaad tahay.*

*Gaadiidka dhaqankiyo*
*gurgurshaaga heesaha*
*garka lagu daleeyiyo*
*gibishiyo figtaad tahay.*

*Goobaha af tahammada*
*guga doogsintiisiyo*
*gudgudaa hillaaciyo*
*guulaamo caratiyo*
*galal buuxsamaad tahay.*

*Gudcurkiyo habeenkii*
*saadaasha guudkiyo*
*godadkiyo xiddigiskana*
*dayaxoo galshaystiyo*
*gabbalaha cirkaad tahay.*

*Geba gebada sheekada*
*hambalyada Galaalow*
*waxan kugu gelbinayaa*
*marti soorka gacalkiyo*

*geenyadii abaalkiyo*
*mahad aan gaboobayn.*

*Guntigaagu waa sharaf*
*goonyahaagu waa nuur*
*gogoshadu waa nabad*
*guushana dadkayska leh*
*dalka geesigiisiyo*
*galladana adaa mudan.*



# FIDO

*Nin fagaare Jaan-dheer*
*ficil heesay baa yidhi,*
*"inkastaad fariid tahay*
*haddaan cidiba kuu furin*
*fiicnaantu keligaa*
*maxay kuugu filantahay".*

*"Hadalkaan farshaxannimo*
*ama fiiro loo odhan,*
*caanahaan fal qurux badan*
*ama fiiqsi loo dhamin",*
*wuxu yidhi nin faaqidey,*
*"feedhahay wax yeelaan".*

*Faaraxow[16] halyeygii*
*Falastiin dabka u sidey*
*goobihii fas-loolkee*
*foolba foolka ka hor-yimi*
*ficilkuu ka geystiyo*
*faalladuu is daba dhigay*
*haddii noole faaqido*
*faahfaahin lagu daro*
*xaya calal falaax dhaha*
*Fatax iyo Idaajaa*
*fa'du qoran warkuna furan.*

*Haddaannaan fadqalalliyo*
*fiilooyin qoolayn*
*ama qolo ku foognayn*
*ama dhiig faraa gelin*
*waannaan fadhiyi karin.*

*Faaraxow gumeystii*
*waanwaanta faygiyo*
*faraceeda gooyee*
*fiiddiyo kurkii jaray*
*xididkeeda faadh faadh*

16 *Faarax -waa Faarax Axmed Cali Gammuute*

*laga feydyey maradii*
*belo fuursan loo yeedh*
*iyaduna fitiligtii*
*fannah orodka soo tidhi*
*fartu damaqday boogtii*
*ku fadhidey qunbacashada*
*Riigan sii faddaadee*
*fidmo qoriga loo dhiib.*

*Falastiin raggeedii*
*geerida hab faxalnimo*
*nafta ugu fideyn jirey*
*Faqash[17] waxay yidhaahdeen*
*inta Farow sakalantahay*
*Falastiin henggelantahay*
*dadka lihi fongoranyahay*
*belo wayska fududdahay*
*imminkaabay fidhatee*
*yaa fandhaal ba weli daray.*

*Kol hadday fogaatoo*
*faddarowdey nabaddii*
*annaguna nin fara-baxay*
*fasax baannu siinnee*
*Faataxaannu leenahay,*
*ninka cudud ku faaniyo*
*foolaad ha soo baxo*
*Fido waa naqaannaa.*

*Haddaa Faantom keentaan*
*bado soo faruurtaan*
*Beegan[18] foosas soo tubo*
*ciidan faylsan soo guro,*
*awel baanan fiicnaan*
*iyo qabin fayoobaan.*

*Ninka igu fekerayaa*
*inuu fooror igu helo*
*fadhi qusa igu dilo*

*17 Faqash, halkan waxaa loo jeedaa Ronald Reagan*
*18 Beegan-waa Manaaxim Beegan*



*doqonnino igu falo*
*mar horaan ka faashaday.*

*Cabsiyeey fur lagu geli*
*Riiganow[19] falkaa yeel*
*baaruudda firidhiyo*
*fidhadiyo dabaylaha*
*Naabaal ka fara-badan*
*fidh-fidh go'a hubka u diran,*
*sida fadhan fadh soo lali*
*fallaadh baan cirka u diray*
*fool bay la maqan-tahay*
*nin walowba ila filo.*
*Haye dee Faqdiirow*
*sharka aynu fuullee*
*awrka soo faruur-xidha,*

*Xaajadu falaad iyo*
*umal feedha jiifoo*
*furka ridey xanuunkiyo*
*farsamay ku socotaa,*
*hubka ficil ma lagu guray*
*fooxana ma lagu ridey.*

*Fud-fudaydka Geeshkii*
*dhigi jirey fajicisada*
*farta mawgu yeedheen,*
*markii foodda lays-daray*
*fagaxdiyo durduradiyo*
*fahda orodka booddada*
*fadal-boobka carashada*
*Geeshkii cir-fanashada*
*figta sare lahaan jirey*
*fakadii ma laga degey*
*fahma-guur ma lagu ridey*
*filan-waa ma ka hor yimi,*
*fatata'a rasaastiyo*
*falfaloosta Naatoo*

*19 Deeqa-Waa Deeqa Colujoog*
*19Reegan-waa Ronald Wilson Reagan Madaxweyne hore, Dalkaas Maraykanka (1980-1988).*

bir finiin-ka-joogaa,
fitir faatir gubatiyo
ma ka dhigay fataatiir.

Galaw fooridiisiyo
fiintu maysu yeedheen.
Geeshkii fasaadkiyo
furashada haweenkiyo
feenashada dhallaankiyo
dhiigga fuuqsigiisiyo
fantasaha ku caan baxay
fadh fadhiyo is-waalkii
iyo feejignaantii
dhulka loogu fidin jirey
ma fasakhay nin diiddani,
sixirkiyo falkoodii
falowgay yiqiinneen
tu ka daran ma lagu falay,
Ma fan-jeedshey Geeshkii
fule lagu cabsiin jirey,
dhabankii fayoobaa
shan farood ma lagu dhigay,

Caga-jiidka fiindhaha
dib u faana-gurashada
goobihii fantaysnaa
ma ka faadhumaysteen.

Beegan talo ma faaqidey
Faqash iyo walaalkii
Fiqigii gumeystaha
ma u diray farriimaha
falanqaynta sheekada
faqa maysku taabteen
feleggiyo xiddigihii
fiiro mawgu laabteen,
xaajada faruur-xidhan
ma furdaamin waayeen.

Xaajada fal-nacaska ah
faalkeedu bixi waa
fixiweydey beentii



runta filansho-waaga ah
food saaro loo waa
godob feedhanaysiyo
Finjil iyo Fajaajuur
faraqay is-haystaan.

Faanow waxba ha tarin
fooxaalligii mee!
togga soo faruurmiyo
webiyada fatahayaa
fooraha cartamayaa
fadadka is-galaa baxay
ma fidaa 'igiibaa
lagu qoray fallaaggee
Faaraxow gumeystuhu
beri hore faquuqee
faddaraa gar diidiyo
far-ku-tiris ku sheegeen.

Wedku faata-faataha
faad faatintiisii
hadduu meel ku foognaa
guryo sixin fatahayuu
ku ekeeyey foofkii
fakabkiyo baroortii
Falastiin ku koobnayd
wakhtigaa fogeeyoo
Faaraxow Talaabbiib
firka-naxa habeenkii
iyo labada fiid-cawl
fooladdeedu waa weer
meydku waa is-feedh yaal
Gaarriyow la fara badey.

Riigan faygarkiisii
falkintiyo shirqoolkii
falalkii iska hor yimi
wuxu ceeb ku foognaa
fool-xumooyinkiisii
ma la yidhi ku fool-dhaqo?
Boqorrada faxaaxsadey
faankii duleediyo

ma dhigeen is-fagallixis?
Fahad iyo bahdiisii
Falastiin cidlada dhigay
weji-dadab ma fiigeen?
Il-fashaqa ma dhuunteen?
Duubkii fatooshtiyo
shaalkii ma laga furay?

Ma fadeexaddii baa
laga feydey maradii?

Ma fadeexaddii baa
iyadoon fur saarrayn
fooruhu ku dhacayaa?
Ma fadeexaddii baa
fiddiggeeda haaddiyo
cayayaanku fagayaa!
Xaajadu farraarriyo
futo qaawan badanaa!

Fakashada gumeystuhu
Falastiin xilkeediyo
nabaddii fayoobayd
waa kii ka faaqdee
arrintuu fogeeyee
sakalaha Fardama sudhay
gartu fuli ma leedahay
dhegihii furaysnaa
baaruud ma lagu furay.

Isticmaarku fiix iyo
fin caloosha kaga yaal
ma is.yidhi ka faraxalo
nabarkii ma sii fiday
sida furuq tin iyo cidhib
ma ku faafay xididdada!
Ma fadhiistay dhuuntiyo
meel aan farsamo gelin.

Fara-saarka Bayruud
xinjir faartay mooyee
inaan faanaheediyo



faranteeda cidi marin
xilihii ma lagu furay
foodho yaa car soo gala!

Jiritaanka falasdiin
inaan xoog furfuri karin
Faantoomna ridi karin
Fiitoona tiri karin
geesigii u feydnaa
ma ku qoray far waaweyn.

Ma wareegey feleggii
In la tago fagaaraha
fursan-waa ma laga dhigay!
Runtu maysku filan tahay
farta dhiigga lala galay
shaxda laysku fay go'ay
turubkii faska ahaa
Falastiin ma haysaa,
Gaarriyow fajicisada
ninkii foodda dheeraa
fatar kiil ma lagu yidhi!
Guul baa la filayee
fooraddii ma lala tegey
gobannimo ma faral baa.

Falastiin raggeedii
figladiyo wadaamaha
foosba foos ma ku hubsaday
facfac maysu dhiibeen
filka xiga ma lagu simay
Cartan faylka maw baxay
Fadal maw xidh-xidhan yahay
Faaruuq ma korayaa
Fido uur ma leedahay
Faaqid maw calool galay
Faayo maw mataan tahay
Falastiin ma geed baa
halka faash ku laba-dhaco
laamuhu ka foofaan.

*Falastiin ma beer baa*
*waqal fool eryaayoo*
*laga guro fariidkoo*
*fufka dhala halyeeyada*
*hadba foodda laga jaro!.*

*Fooraha Lubnaan maray*
*ma ku fiday adduunyada?*
*fara wada ilaysiyo*
*ma ku ganay fallaadhaha*
*wakhti fagadh ma soo yidhi!*
*firxadkii is-waayiyo*
*filqantii ma urursaday!*
*Falastiin salkeediyo*
*fidda-baxa Amriikiyo*
*Fiyat Naam dusheediyo*
*Foqom iyo Rashiidow*
*togga Foolgo iyo Cadan*
*ilaa fayga Keeb Tawn*
*fadku maysu muuqdaa.*

*Fegendaha gilgilashada*
*falax falaxda laydha ah*
*fudad kale ma burureen*
*farxaddii ma tooseen!*
*Feeraarta Bari-dhexe*
*falladhkii madoobaa*
*faynuus ma sudhan-yahay*
*filashadu ma badantahay.*

*Falba waa falkiisee*
*anna faaja faajada*
*furashada Hargeysiyo*
*fooqa buuraleydiyo*
*fanaxyada Nugaaleed*
*dhulka mudug ka foorora*
*Faxfax-dhuun agtiisiyo*
*Faannoole iyo Xamar*
*faras mawgu joogaa.*



# DALLAALLIMO

*Qaranow daryeelkaa*
*xorriyooy u doodkaa*
*dulmiyow tilmaantaa*
*duudsiyow ka murankaa*
*xaqow daafacaaddaa*
*danyareey u hadalkaa*
*ummad yahay u digiddaa*
*gabayow dakanadaa*
*midnimooy u dirirkaa,*
*xadhig miiggan lay diir*
*dabar adagna lay sooh*
*keeno laygu daadihi*
*deli laygu seetee*
*duddo laygu oodee*
*darbo iyo guhaad iyo*
*digashiyo colaad iyo*
*durid iyo canbaar iyo*
*inta daranba lay mari.*

*Marar lay dardaar weri*
*birta daabka lay geli*
*ha la dilona lay yidhi*
*deel-qaafna ii raac*
*degelkiyo rugtaydii*
*iyo dahabadaydii*
*iyagana ka dibad baxay.*

*Ku darsoo ha yeeshee*
*degi waa ladhkaygii*
*dumi waa hankaygii*
*dhiman waa dareenkii*
*dami waa ilayskii*
*damqan weydey saantii*
*deebaaqdu ima karin*
*dawadiina lay waa.*

*Dufan iyo sabaaliyo*
*dux waxaan ku gelinayn*
*doqon baa u xilatoo*
*nacas baa ku dararoo*

*weligii ku deexdee*
*durdurrada xajiinta ah*
*ku dabbaalo lay yidhi*
*dadnimaanse ka xigsadey.*

*Nafta haw darraannoo*
*ha is-taagin daaftee*
*dusha soo kor lay yidhi*
*duug hadhaanse ka xigsadey.*

*Dabatada is-guratiyo*
*dooxatada is-wacatiyo*
*xerta aaran dubatada*
*daawo yeeshaa lay yidhi,*
*danyar baanse ka xigsadey.*

*Dabka aad shidaysiyo*
*dabra-weerarkaagiyo*
*debci hawsha lay yidhi*
*diidey baanse ka xigsadey.*

*Duunyo laygu muunee*
*damac layla soo qaad*
*duufna lay xalaale*
*runtu door ma keentee*
*been ku daakir lay yidhi,*
*daacad baanse ka xigsadey.*

*Demesh iyo xariir iyo*
*aqal daahyo dheeroo*
*bilic lagu daleeyiyo*
*dugsi laygu maamuus*
*debed baanse ka xigsadey.*

*Inta fudud dabayshiyo*
*duufaan ha qaadee*
*ka danayso la yidhi*
*doobi buuxu lay dhiib*
*daadi baanse ka xigsadey.*



*Dibnahaaga haysoo*
*da'fur oo ha qiiroon*
*qalinkiyo dawaaddiyo*
*Dulfiqaar dhig lay yidhi,*
*Deelley baanse ka xigsadey.*

*Ka deg faraska lay yidhi*
*dibso oo lugaa keen*
*dulli qaayib lay yidhi,*
*dirir baanse ka xigsadey.*

*Tolo derejo lay yidhi*
*deni noqona lay yidhi*
*waxaad adigu doontiyo*
*dantaa sheego lay yidhi,*
*dayraanse ka xigsadey.*

*Afartaas rugta u daa*
*dadbay oo ka jeedladay.*
*Ma dahaa ma daayaa?*
*Shirwacowma dooxaa?*
*dar Alle ma sheegaa*
*waxay dihatey buurtii*
*digta iyo hamteedii*
*qabqabtiyo dayaankii*
*iyo ducashadeedii,*
*dunidoo dhan la hinqaday?*

*Duhur baa la joogaa*
*damal bay malkadu tahay*
*duqey baa isugu timi*
*degdeg buu shirku ahaa*
*anna daawashaan ahay*
*iyo weriye daah xidhan*
*daljir aan la filanayn*
*belo aan la doonayn*
*dawan iyo caroog sida*
*lagu diirsan oo yimi*
*madalkana si dalag iyo*
*hab derderan ku soo galay.*

*Daymo halacsigeediyo*
*arar iyo ducaa dhacay*
*dabadeed warkaas guud*
*darka loo gur yeelkii*

*shaxda laysla daydayey*
*intaan looba daadegin*
*dulucdiyo ujeeddada*
*dul-ka-xaadsigii guud*
*durba laysku maan dhaaf,*
*duul-duulyey hadalkii*
*sheekada dib loo celi*

*Dooryaanle loo guur*
*ninba dooda baanaha*
*sida maanta doorka ah*
*dacallada ka dhaaf-dhaaf*
*utin duuga hibashada*
*dura soo cusboonee*
*deyn laysku soo oog,*
*ninba dakhar ka maahmaah*
*digo hore la faadh faadh*
*xaajada dorraatiyo*
*Daahyaale loo riix.*
*Idinkaa na daba guray*
*idinkaa wax dumin jirey*
*idinkaa na dagi jirey*
*idinkaa dellegan iyo*
*dibirooti nagu wada*
*diig-diigad carasharah*
*danan iyo rakaad-celin*
*onkod iyo dinnaahyeyn*
*wahad lays durduursii*
*garta laysku daadduun.*

*Door-roonayaashii*
*dabin madhan ku loollame*
*runta laysku deyi waa*
*daacaad loo ged-bixi waa*
*ninna damac ka wadi waa*
*daalaa-dhac hadalkii*
*carrab dalab leh mooyee*
*mayal toosan loo diid*



*habaqlii dayeysnaa*
*ninba duluglihiisii*
*meel baas u dalandali*
*dadabtana ku weegaar.*

*Garan waayey doogtiyo*
*halka xaalku deridiyo*
*isha daban ka leeyahay*
*doon doonayoo helay*
*waxa laysku dilayaa*
*in xumaa la doorshiyo*
*xil - dar-yeeliddiisiyo*
*dad-u-hiilin maahee*
*geenyada dakaanka ah*
*anna aan dul-buuxshoo*
*dala'sado kolkaygoo*
*daadka aan ku dhaafee*
*iiga soo deg weeyaan.*

*Waxan idhi, "dallaallimo,"*
*dibjir baa ku sugayee*
*danyar baa ku korisoo*
*iyadaa ku diratee*
*kulka , haamadaygiyo*
*yaan darroortu kaga iman*
*docda lagugu qaybsaday*
*ha ka leexan dawgii*
*ballankii ha sii deyn*
*dab ha soo hunqaacdee*
*dabarkiyo xadhkaha goo*
*danab dhacay sidiisii*
*dhulka dakharro gaadhsii*
*buuruhu ha daateen*
*ha ka daahin beeshii*
*waxa jirana deeqsii".*

*Waxay tidhi "dedaalkay",*
*"isku diidi maynee*
*diihaalka lahashada*
*dug madow habeenkii*
*marka aar Dabooliyo**
*orgob doolay kedisada*

deyrka reerka gaadmada
dardartiyo war-ma qabtada
halka dagan kasoo dhaco,
dadka kii ku toosiyo
cagta mariyo duunyada
kuwa kale duleedkiyo
dusha inay ka eegtaan
hadba xeelo dihin iyo
tab kaloo dil dila rogan
ugu soo duggaalaan
waa dabeecad soo tiil".

Hoos u daadeg baan idhi.

Waxay tidhi "haddaan dedo"
saddex goor nin diif iyo
dayac iyo lur gaadho
dalqo bahal ku jira weli
dibin daabyo lagu wado
diriciyo tusbaxa dheer
iyo xeesha daba taal
dummaddayda weeyaan".

Waxan idhi," kasii durug",

Waxay tidhi "ha ii dudo"
"weji dadab ha iga naxo
afka haygu daasheen
kuwa mililka duunkiyo
duumada qarsanayee
cadho-umal daraaddeed
dibnahooda cunayaa
waabay ha daaceen
inaan doogahoodiyo
damqo boogahoodaan
ugu dhaartay diintee
damacow dhegaa furo".

Dadku maaha kii hee
dawliilka beenta ah
duubka loogu xidhan jirey.



Dadku maaha kii hee
salfudaydka dalagta ah
dabinnada u geli jirey.

Dadku maaha kii hee
isagoon denbi lahayn
digoxaadh la marin jirey.

Dadku maaha kii hee
sida duunyo weer helay
dil-dillaan ku go'i jirey.

Dadku maaha kii hee
markay door sameeyaan
gabbalkoodu dumi jirey.

Dadku maaha kii hee
damdamtiyo mashxaraddiyo
ku burburay durbaannada.

Dadku maaha kii hee
maqli jirey daryeelkee
arki jirey darxumadee
saadaal ku degi jirey.

Dadku maaha kii hee
laga dhigay dac-wadhantiyo
danbaskii qaboobaa.

Dadku maaha kii hee
dabar lagu ilaashiyo
dooh lagu xasilin jirey.

Dadku maaha kii hee
dib waxay u eedaan
marka hore ku dagan jirey.

Dadku maaha kii hee
gudin lagu dulbaaxsado
daabka looga dhigan jirey.

*Dadku maaha kii hee*
*carrabkoodu daaleen*
*ducadoodu kici jirin.*

*Dadku maaha kii hee*
*darka ceelka horashada*
*dalawada irmaanta ah*
*afar-deeqda madida ah*
*dib intay u waabshaan*
*diran jirey candhoolaha.*

*Dadku maaha kii hee*
*midho daray had iyo jeer*
*duuduub ku liqi jirey.*

*dadku maaha kii hee*
*sida geel ku diday kibir*
*durdurada ku jabi jirey.*

*dadku maaha kii hee*
*laba goor dan seegee*
*shalay iyo dorraad jirey.*

*Dadku maaha kii hee*
*intay daaf ka guuraan*
*daacuun u raran jirey.*

*dadku maaha kii hee*
*diga-rogashadoodiyo*
*dalan-doolka geeddiga*
*dalka oo cadceeddiyo*
*dayaxiiba joogaan*
*xiddigaha dagaar iyo*
*dunqulaal ku gudi jirey.*

*Doogtu maaha tii hee*
*dibno lagu afuufiyo*
*maryo lagu dabooliyo*
*hadal lagu daweyn jirey.*



*waa maxay daloonbigu*
*codka lays dalbanayee*
*duur-xul laysku leeyahay?*
*Demman wayska huruddaa*
*docda bari ka laba gura*
*miyaan waagu daalicin?*

*Duulka laysku haystaa*

*illaa duunyo maahee*
*doob kaloo hawoodiyo*
*nin kaloo u dadab-gala*
*ku dumaala saynsaab*
*ka ilbaxe duruustaas.*

*Waxay taas ka doorteen*
*ama talo ku daasteen*
*inay dayrtan maanta ah*
*inta timaha loo dabay*
*ama daraya-muus xidhan*
*dalka gugan hablaa kacay*
*ta u ladan ka doortaan*
*cashaday dareemaan*
*daacaddeeda waayaan*
*dalqaddeeda siiyaan.*

*Nin daruur ku dhoofiyo*
*nin dabayli qaaddiyo*
*nin ku duula haaddiyo*
*nin diyaarad raaciyo*
*nin dabbaabad fuuliyo*
*nin darmaan ku boodiyo*
*inta dooddiyaysaay*
*daarta loo tartamayaa*
*daran iyo tigaad iyo*
*dirir lagu hayaamiyo*
*dalag loo kaltamayoo*
*laga furay daboolkoo*
*dadka loogu baaqiyo*
*durdurrada Firdawsiyo*
*Janno dagatay maahee*
*ninna waaba lagu diley*

*ninna waw deldelan yahay*
*nin u duuban tiisow*
*waxba hayska daba ridin*
*deegaanta laacdee*
*ma ogtahay dalluumaha*
*iyo deyrka hoos yaal*
*ha degdegine aashaa*
*sheekada dib ugu noqo.*

*Hadday debecdo qaansadu*
*duullaanku kala jabo*
*xagal-daac ku kala lumo*
*dannigiyo is-waagiyo*
*dawlis keli nin toocsaday*
*door keeni maysee*
*waxay daahinaysaa*
*dabku inu ku sii baxo*
*degelkii shufta ahaa.*

*Waxa iga dardaarana*
*haddaan laysu soo dumin*
*cududaha la kala diray*
*gaarriyow dad-qalatada*
*isku duubni lagu ridin*
*dunta boqorka shaashka leh*
*lagu simin dadweynaha*
*inaan daw bannaanayn*
*ninka diiddan taasow*
*weligaaba doon doon*
*derejada carbuunta ah.*

*Ka daryoo saceennii*
*dibi baabu dhali jirey*
*doorarkii horeetee*
*daalaa-dhaciisiyo*
*dacayda iyo caashiyo*
*daamankaan u jeedaa*
*dacar iyo dhunkaal bay*
*la dunuunucaysaa,*



*da'dan waxan ka baqayaa*
*inuu daba-ka ruub iyo*
*dabar-gooye fooshee*
*doobir ii dheh Yaasiin*[20].

*Inta Dahab nimaan geyin*
*u daddaabba xidhan tahay*
*gudcurkuna damtaa yahay*
*deyn maayo hadalkee*
*iga qabo Dallaallimo*
*iyadana ka dabagee*
*dir intay wadaageen*
*diiwaanka ii geli.*

20 *Yassin: Waa Yassiin Axmed Xaaji Nuur*

# WAXYI

*Weriyaha socdaalkaan*
*ka hayaa war subaglee*
*weeye weeye ii dhaha.*
*Wanankii mid baa jaban*
*mid kalay wad-wadataa*
*la walwaal Siyaadoo*
*shan wasiir la socotaa*
*laga wacay xabaashoo*
*wefdi baa baxaayoo*
*Waaleed u kacayee*
*ku dhakhsada waraaqaha*
*wararkiyo farriimaha.*

*Dogobyohow walhanayaa*
*malaa saaka waayuhu*
*ma sitaan wanaaggii*
*shalay iyo wacnaantii*
*wakhtigaaga buuxsamey*
*haddii weel ceshaa jiro*
*weyneyso xeedhada*
*wadhidaada dib u dhigo*
*dawliskii Walwaaleed*
*inaan waarna kuu hadhin*
*bal dadkoo dhan weydii*
*wir haddaad sal adag tahay*
*iska waabi geerida*
*wedka adiga kuu qoran*
*ku wareeji qayrkaa.*
*Inaad waarto goormaa*
*waxyi kuugu soo degey*
*haye dee wadaadkow*
*xil wareejintii hoo*
*iga qabo waliinjada*
*anba waalli heensaday*
*wadwadkeeda geeddee*
*adna sii walaandee.*

*In Wilwilo ciyaar tahay*
*is waraari badan tahay*
*wiglo iyo hab leedahay*



*marna walax dagaal tahay*
*warmo iyo hub leedahay*
*wejigeedu laba yahay*
*waayeelba noo sheeg.*

*Walle iyo Billaan maray*
*iyo wacad Ilaahay*
*wershadaa saboolkiyo*
*wadhatada la qaybsaday*
*wiilay dhashaan ahay*
*weeraarta hoosiyo*
*waaheel rug sare furan*
*marka laysu kala waco*
*ninka labada waaxood*
*danyar weheshadaan ahay,*
*waayo waayadeed dee*
*sow geel ma wadi jirin*
*weris caano kama dhamin*
*walacsiga nin hodaniyo*
*sow wiirsi kuma korin*
*sow aabbe weydiyo*
*wax ma hayste ima dhalin*
*Ina Walanwal maan ihi*
*Hurre[21] lama walaal ihi.*

*Derejooy wid lagu yidhi*
*wid widaanwid lagu yidhi*
*walahaana kugu raran*
*hantiyeyna kuma waco*
*woohowna kuma dhaho*
*weligeyna kuma sugo*
*wed haddaanad celinayn*
*nin ku sheegtay waarayn*
*maxaan kuu warsanayaa?*

*Waxaad aniga ii huri*
*kuwa kugu werdiyayee*
*sida weli ku caabuda*
*ku wanaaji qayrkay*

21 Hurre, Waxa halka looga jeedaa Hurre Ibraahim Warsame ,oo ah Hadraawi wa-laalkii.

*is wanneehintaadiyo*
*wadha hayla soo gelin*
*weysada ha iga jebin.*

*Alla weger haddana weger*
*weger iyo ka waaweyn*
*weger iyo ka waasacan,*
*ma wadiiqo lulatiyo*
*willataan mar marayaa*
*mise waalallowtiyo*
*waaq laan ku dhabar jabay*
*ma wartaan jidka ahayn*
*ma lugtaa wakala jedan*
*ma warkaan tilmaanayn*
*ma dhegtaan wax shubanayn*
*waar hooydu badatee*
*xaajadu wajaqanaa*
*ma waraabihii baa*
*Wadhan iyo ka ciyey Togan.*

*Walbahaarka gocashada*
*iyadoo wash iga tidhi*
*waxa dhacay Cabbaasow*[22]
*ila wabax taraareen*
*duni iyo wacaasheed*
*iyo werinta dhiilladu*
*wadnahayga shidayaan*
*ku wahsadey su'aashaas*
*weydiinna kula maqan*
*garashiyo war-celinteed*
*ayaa waaya waayaha*
*webiyada aqoontiyo*
*wacdaraha adduunyada*
*wixii laysla soo maray*
*taariikhda werisiyo*
*waayaale hagar baxay*
*wacyigayga koriyaan*
*waddo ii jideeyaan.*

22 *Cabbaas, Wuxu halqabsigan ugu jiraa mujaahid Axmed Cabbaas Axmed*



*Waayahay Diktoorkow*[23]
*hadday weedhu muuniyo*
*walanqiyo dux leedahay*
*anba sow walaalow*
*wadar kale ma kaashado*
*sow wawga jiiftada*
*dadka waayahoodiyo*
*wejigooda kama qoro.*

*Anigoo werwerayoo*
*talo iga wansiixdoo*
*waan waani lulatoo*
*wiswis leexadiisii*
*igu weehanaysoon*
*wadha reer galbeedkiyo*
*weysaaqa Naatoo*[24]
*la walaac asqooboo*
*welwel jiifi waayoon*
*sida wiira wiirada*
*warwareeg ku lumayoo*
*hadba way ku kacayaa*
*warac meel ka ciidmaa*
*wax la yaable geystaa*
*wahad laydho keenaa*
*walwal soo afyeeshaa*
*waaceeni dhalataa.*

*Anigoo wadeecada*
*wantataca gumeystaha*
*wakinaaya socodkoo*
*wiiwiida dumarkiyo*
*weehaadka maatada*
*la wareer sahsahayaa*
*dhulka waax madoobeyd*
*inta waa ku sara kaco*
*qorrax Gaandi*[25] *weheshaa*
*wac ku soo tidhaahdaa*
*bulsho weerka xoortaa*
*anigana wajiiniyo*

23 *Diktoorkow-waxaa loo jeedaa Dr. Maxamed Saalax Xasan.*

24 *Naatoo, waxa halkan looga jeedaa Gaashaan-buurta NATO (xulufada ciidammeed ee Dawladaha Reer Galbeedka).*

25 *Gaandi = Mahatma Gaandigii horseedka ka ahaa gobanima doonkii dalkaas Hindiya.*

waqal igu gadoodaa
wahabkii i saarraa
waanwaani dhaxashaa.

Dunidoo wajaqantoo
cagta lagu walaaqoo
inta weerayaal iyo
bahal iyo wareentiyo
kun waraabe boobeen
shan walleys u taliyeen
dad wanaag ku ledey xalay
inta weerar lagu furay
lagu galay war ma-qabtada
shil ku waabariistoo
wadhantooda haaddii
ku wishiirriyaysoon
anna wadhida dhiillada
murugada wahwahayaa
Weyrax meel ka toosaa
senge waalan fuulaa
isticmaar la wiiqaa
wabar lagula ciiraa
waydiisa taahaa
anigana wajaaf iyo
warmo layga siibaa.

Hadba laba is weydoo
kala weecanaysoo
nacab kala wareejoo
weji dadab is dhaaftiyo
sac warraaqa jiilaal
weyshiisa diidoo
weydaartey xeradaan
waanwaan dhex dhigayaa.

Hadba duul wahsanayoo
inta waayir lagu xidhay
wadhaf lala hor joogoo
wanshax meel la jiifaa
wacdigaygu sooraa.



Hadba wadar la dhacayoo
inta ay wisiisidey
warmaheeda gurataan
ina wadiya leeyahay.

Hadba wiilal baxayoo
wacad-qabe bahdiisii
Wallihii ku baajoo
waddadii ka leexdiyo
nin wabiina doontoo
wisin maqan ku duuliyo
waqle jiibka saaraan
wararkooda sugayaa.

Walamsade la tuuriyo
wadal lagu gadoodiyo
hadba meyd la wacay baan
digashada waddacayaa.

Hadba wacal la toogtiyo
dadqal cayn wareegoo
inta wegeradkii go'ay
waabay kabbaday baan,
warqaddiisa jarayaa.

Hadba waaq la ridey baan
weylaalistiisii
wilgaduu fadhiyi jirey
wasakhdii ka dhaqayaa.

Hadba damal wacnaayoo
webigii Ganaaniyo
salka gacanka Waaheen
waraqyada ku fidiyoo
inta wahan ka daba yimi
wiriqyada u bixiyoo
wakhti soo qandoodshoo
walcan go'a lalmanayoo
wegdihiisa laabtaan
ubaxii ku waabnaa

*maqal weyd la togantiyo*
*waxaraha u tumayaa.*

*Hadba Shaah la waayiyo*
*boqor weer cad goostoo*
*inta wiish la sara tegey*
*waaq waaq ka ridey baan*
*taajkiisa warasiyo*
*hanti shacab wadaagiyo*
*waqaf guud ka dhigayaa.*

*Hadba Janan wanjalanoo*
*dhulka laga wandaafshoo*
*cirka looga webiyoo*
*cidla dhex walhanayoo*
*wedku deydeyaayaan*
*waxa lumay ku darayaa.*

*Hadba feleg wareegiyo*
*yididiilo walacliyo*
*saadaal wil furatiyo*
*waaleeyo curataan*
*weelkeeda culayaa.*

*Wiyil dabarka goysiyo*
*hadba umal wallacay baan*
*werdigooda rogayaa.*

*Libin fool waliishiyo*
*hadba maalin weyn baan*
*wanankeeda loogaa.*

*Xinjir wararacdeediyo*
*hadba guul washiranoo*
*war wareen ku dhalataan*
*walqasheeda tiriyaa.*

*Onkodkiyo wannaaniga*
*iyo dhibicda weedhka leh*
*walanwalinta maansada*



*walwallanyta geenyada*
*wanqaraarka jiiftada*
*waxa looga jeedaa*
*ama loo wacwacayaa*
*wacdaruhu u dhacayaan*
*lugta waarrinaysiyo*
*isha waabanaysaa*
*ha ku waano qaateen*
*wegenkiyo colaadaha*
*nin dulmani ha weheshado.*

*Waddammada adduunyada*
*afarteeda waaxood*
*dhibta iyo wax yeellada*
*inta ila wadaagtaay*
*aan heeso weriyee*
*kici weerarkaagii*
*i waraabsha geedkii*
*waxyigaygu saarraa.*

# GALAN - GAL

*Gelbis dhacay, dadweynahan gabradey*
*gaafka igu meersan*
*Qurux ganac leh, gole dheehan iyo*
*bilicdan gaashaysey*
*Gargarraanta nuurkiyo shacniga*
*la isku googooyey*
*shir gobeedka, guurtida fadhida*
*garangar waaheelan*
*Marti[26] gacala, mudan laysu guray*
*gulufka heensaysan*
*Gololada mashxaradaysa iyo*
*sacabka guubaabo*
*Gallada iyo rayraynta iyo*
*gooha dami waayey*
*Iyadoo gorfayntiyo la taxay*
*doodda gudaheenna*
*Guddi werisayaa iyo nin kale*
*gooni hadalyaaba*
*Qofba kaalin goorteed ah buu*
*gaar u leeyahaye*
*Anna tayda ii go'an haddaan*
*galo abbaarteeda*
*Ma gunaanadaayee haddaan*
*jaro garraarkeeda*
*Gayaxaa haddii aan ka furo*
*madida ii gaaxsan*
*Godol-qaad hadday labada low*
*dib u yar gaalgaasho*
*Gaawaha hadday buuxissoo*
*weliba gaash daato*
*Ganuunkeeda xoorka leh haddaan*
*madalka gaadhsiiyo*
*Anigiyo garaadkay haddan*
*idin guddoosiiyo*
*Geestayda wuu iga dhan yahay*
*galangalkaygiiye*

---

26 *Marti waxa halkan looga jeedaa wafdigii jabhadda xoraynta Fiyat Naam ka soocdey ee xafladdii martiqaad-kooda gabaygan Hadraawi ka tiriyey.*



*Gadaashay ninkii odhanayow*
*gacanta ii haadi.*

*Afartaasi waa gogol-dhig iyo*
*maanso gedaheede,*
*Godkaan degey, warkaas guud haddan*
*kor uga sii guuro,*

*xaajada gondaha laaban iyo*
*godanka hooseeya,*
*Gunta iyo salkeediyo haddan*
*saro gunaadkeeda,*
*Gawdiyo ujeeddada ladhkiyo*
*caawa iyo goobtan.*
*Nimanyohow gantaalaha subkee*
*gamaska dhiigeeyey*
*Nimanyohow galkiyo seefta yidhi*
*gees u kala leexda*
*Nimanyohow sidii awr gurgura*
*caynku gubi waayey*
*Nimanyohow garbaha buuxsadee*
*raray gardaadkooda*
*Nimanyohow gadoodiga bartiyo*
*galow la-soo-jeedka*
*Nimanyohow habeenkii gudee*
*guura bahalleeyey*
*Nimanyohow gadiidkii socdee*
*meel hadh-geli-waayey*
*Nimanyohow sariir lagu gam'iyo*
*gogol ka dheeraaday*
*Nimanyohow guryaha diidey iyo*
*gaari lala seexdo*
*Nimanyhow gasiinkii ka tegey*
*gaws wax lagu qaato*
*Gudcur dama', cirkoo gibil xidhoo*
*dhibic is gaadhsiiyey,*
*Nimanyohow gudgude soo curtiyo*
*gooxu kari waayey*
*Gabaddanada nimanyow dugsadey*
*gooro laga hoydey*
*Nimanyohow gabboodkiyo fadhiga*
*gelinna hayn-waayey*

*Gudguduudka waagiyo saq-dhexe*
*maalin kala guurtey*

*Mugdi gaba', cadceed gaasa-baxa*
*waaga galacdiisa*
*Nimanyohow gumaystaha ku jaray*
*gaadmo iyo weerar*
*Miinada gumaadkiyo xeryaha*
*gaadhka lagu meershey*
*Nimanyohow sidii aarka guda*
*guudka kaga boodey*
*Nimanyohow guddoonsadey inaan*
*godobtu duugoobin*
*Nimanyohow ma guurtada xuska leh*
*geliyey diiwaanka.*
*Haddaydaan adduunyada gilgilini*
*xil ima guuleene*
*Laabtayda kama soo go'een*
*tix iyo geeraare*
*Gocashada dareenkiyo murtida*
*amase guurowga*
*Waxaad geysateen buu ku yimi*
*gabayga joogaaye*
*Taariikhda guunka ah haddaan*
*gelin wax weydiiyey*
*Allaylehe Galbeed waa ku jabay*
*goballadiinnaase*
*Indoo-jayna geerowga qoran*
*guuldarriyo hooge*
*Biyaanfuu[27] gulcubihii dhaciyo*
*galalki dhiigoobey*
*Faransiiska wiishkii la go'ay*
*saw la garan maayo!*

*Maantana geddii baa dhacdiyo*
*tii gefkii hore'e*
*gal dad-liqa ul baa lagu dayaa*
*lagu gun raacaaye*
*Garka xadhiga loo daadshey iyo*
*gedefka loo saaray*

*27 Biyaanfuu-Waa Dien Bien Fu, goobtii lagu jebiyey ciidammadii gumeysiga Faransiiska 1954 oo ku taal koonfurta Fiyat Naam*



*gaagaabnidiinniyo malaa*
*gibil basaaskiinna*

*Is gamaarintiinnii miyuu*
*gorodda soo dhiibtey.*
*Iyagays gunaanada intay*
*qool is geliyaane*
*Garanuugta laacii hodda*
*goodir tiigsadaye*
*Gashigii maqnaa buu is yidhi*
*gooshkan soo celiye*
*Baariis dabkii lagu gubaa*
*Waashindoon galaye*
*Geyigiina oo idil ilaa*
*gooddi iyo gooddi*
*Gargoor baa la moodaa timaa*
*ciidda guud qubane*
*Galaydhyays waraabiina xoor*
*gorofki caydheede*
*rag baruurtu goobtiyo leg iyo*
*goolal baw qalane*
*Gudur iyo baruur iyo mud iyo*
*goonji buu cunaye*
*Intaa gawracdeen iyo intii*
*goobo lagu laayey*
*Gorgor iyo intii baylahnimo*
*haad ku gabasleeyey*
*Garbaduub intaa ugu xidheen*
*gararka liilaysan*
*Way galabsadeen ciilka ay*
*golongol tiiceene*
*goldalooladay jecelyihiin*
*ciday galaaftaane*
*Gelin qudha ma daayaan ninkay*
*gaatir ku arkaane*
*Gacma hoorsi kaagama tagaan*
*kumana guuraane*
*Geesaabay yeeshaan haddan*
*waranku giirrayne*
*Dhegahay gufaystaan haddan*
*geesiyaal heline*
*Garta ay dhegeystaanba waa*
*gumuc rasaaseede*

*Gujaduu ku maalaa ninkii*
*geda yaqaannaaye*
*Gudin iyo warmuu kaga furtaa*
*gaadhi shaaximane*
*Gurracnaanta, iyo maagga iyo*
*laba gardaymoodka*
*Gafuur taagga, iyo tookha iyo*
*higilka gawdiidka*
*Gabgabtiyo is waalkiyo saskiyo*
*gooddigiyo faanka*
*Galoof ololka way leeyihiin*
*qab iyo guul guule*
*Dagaal laysu soo galay haddii*
*geylanku is dhaafo*
*Galaayuus qaboonada horay*
*gaban-rucleeyaane*
*Hadhow bay sidii guuyo nugul*
*gebi-dhacleeyaane*
*Marka runi runteed geydo way*
*gamashi-dhiiqaane*
*Gagsi ma leh haddii loo cuskado*
*tab iyo gaalleefe*
*Haddii laysku sii giijo way*
*galangal-coobaane*
*Gadaal bay u laabtaan haddii*
*good ku soo baxo'e*
*Weligoodba guul kalama tegin*
*meel garaad jiro'*
*Gubniyada la soo daadshey ee*
*gaatan caranaaya*
*Gurmad raaba-raabiyo col iyo*
*guuto iyo guuto*
*Wixii gaasas soo degey wixii*
*geesh is daba joogey*
*Ee tirada ay gaadhayaan*
*ruuxna garan waayey*
*Laf galluuban mooyee haddaan*
*goosan laga haynin*
*Maraakiibta goonyaha baddiyo*
*gaafka hoganaysa*
*Diyaaradaha gawdaa hayiyo*
*galacda baaruudda*



*Dabbaabbaadka goobyaalayee*
*gurada loo buuxshey*
*Garangarinta naabaalka iyo*
*gabaxda riigaanka*
*Gaaraa-bidhaankiyo dabkiyo*
*gugaca yeedhaaya*
*Galayaxa is dhaafiyo higtiyo*
*guuxa iyo reenka*
*Gudban iyo waxay tuurayeen*
*goosatada reebban*
*Waxay gaaxsadeen iyo waxay*
*godol ku keeneenba*
*Godannada kamboodiya tan iyo*
*Laa'us gudaheeda*
*Fiyatnaam galkeediyo intii*
*godanka saygoona*
*Indoo-jayna gees iyo ka gees*
*guudka iyo hoosta*
*Hub wixii galaa baxay haddaan*
*meella lagu gaadhin*
*Ninkiinnii gurguurtiyo intii*
*naafo gabargaashey*
*Ninkii gurun-gurcoodkuu dhaliyo*
*gacaladiis waayey*
*Nin goblamay, nimaan gaban u hadhin*
*gaar nin kelidiisa*
*Gallad qubatay, xooliyo dad iyo*
*garangar duugowdey*
*Gocashiyo xanuun ma leh wixii*
*guud ahaan lumaye,*
*Gobannimada waa loo dhintaa*
*goor iyo ayaane*
*Ummad gadata mooyee nin kale*
*waa ka garanuuge*
*Ma gabloosho beertii xab iyo*
*dhiig ku gororaaye*
*Damalkii la gooyaba mid baa*
*soo gadaal baxa'e*
*Guri laga baroortaba aroos*
*gaafan baa xiga'e.*
*Haddaan loo garraaddayninoo*
*waayo lagu guulin*

*Way gaagaxdaa talada aad*
*gola ka fuushaaye*
*Garab-qaadka faylkiyo dhismaha*
*oodda gurideeda*
*Gudintiyo hangoolkiyo habkiyo*
*gees u wada jeedka*
*Gadh-wadeenka, xeer-beegtidiyo*
*gaanka wadartiinna,*
*Gabadhiyo marwada heeganta ah*
*ee ganbada xooray*
*Gashaantida maryaha feydatee*
*geyfan diriraysa*
*Gaashaan-dhiggiiyo qorshaha*
*ama go'aankiinna*
*Guddoonkiinna hoosiyo ilaa*
*gun iyo baarkiinna*
*Goldaloolo kama muuqatiyo*
*gobor la sheegaaye*
*Xaajadu gun bay leedahiyo*
*xeedho sii godane*
*Farriin laysu geeyiyo ka culus*
*guubis iyo baaqe*
*Bulshadii gadoodaa mid bay*
*dhiillo gelisaaye*
*Markay gibisha xoortaa mid kale*
*dabarka goysaaye*
*Gobolkii xoroobaa mid buu*
*gamma'ka toos-shaaye*
*Jidkaasaa go'doonkii lumaa*
*geeddi mariyaaye*
*Gabbashada intii diiddan ee*
*geylan diriraysa*
*Galladiinnu inay nuur u tahay*
*geliya maankiina.*

*Waxba arartu yey ila gudbine*
*waxan ku soo gooyey*
*Gaar kuma tihiin hawsha iyo*
*goonidiin qudhahe*
*Garnaqsiga badheedhkiyo runtiyo*
*godolka maahmaahda*
*Golaa baanistiisiyo intii*
*geed innagu raacda*



*Gumaystaha intii diiddan baad*
*gacal wadaagtaane*
*Gammaan baynu wada saarannahay*
*gu'iyo jiilaale*
*Nolosha iyo geerida dirkaba*
*waw gudboonnahaye,*
*dhul guduudan, geediyo ugbaad*
*ubax ku guud yaalla*
*Xareed galac leh, galal buuxa iyo*
*webiyo guureeya*
*Ido gorod madow iyo fardiyo*
*lo'iyo geel foofa*
*Aar gooha, gool iyo shabeel*
*harimcad guuxaaya*
*Goobyaalka deerada mankiyo*
*gurata maajeenta*
*Geri jeenyo dheer iyo biciid*
*goray haldhaa qooqay*
*Wiyil gees leh, farow gaadda weyn*
*goodirkiyo cawsha*
*Maroodiga Ganaanee mirtee*
*gacanka laalaadsha*
*Shinbiraha galool iyo maraa*
*buul ka wada goostay*
*Umma goba, gabraartana u daran*
*gebi ahaanteeda*
*Oo waxaad gashaan iyo ogsoon*
*guurtinnimadiinna*
*Gacmo furan, salaan gaara iyo*
*gogol idiin taalla*
*Iyo guusha oo dhow haddaan*
*goorna laga seexan*
*Galabtaas ninkii jooga iyo*
*guri yagleelkeeda.*

# DAAHYALEY

*Ka dib markii silsiladdii caanka ahayd ee Deelley oodaha jabsatay, nidaamkii dalka ka talin jirey wuxuu si toos ah iyo si dadban labadaba isugu deyey inuu silsiladdaas wedka iyo waabeeyada ku noqotay u helo talo iyo xeel uu ku joojiyo ama farsamooyin uu ku kala daadiyo.*

*Markuu sina ugu guulaysan waayey ku talo-galkiisii ee ku hungoobay qorshayaashii ka-hor-tagga Deelley ayuu 8dii Maarso 1980 Xuskii Ururka Haweenka, Golaha Murtida iyo Madaddaalada ka hanjabay Jananku, kuna dhaartay in ragga Deelley hormoodka ka ah ee tiriya ama maamulaya la layn doono, qaar kalena la xidhxidhi doono.*

*Heestan Daahyaley oo soo baxday 11kii bishii 3aad, 1980, waxay ka jawaabeysey go'aankaa doqonka ah waxayna nidaamkaa u sheegaysaa in go'aanka shacbiga Soomaaliyeed beeninayo go'aankiisaas.*

*Daalacan warkeedii*
*iyo faraski Doolaal*
*dalan-doolka maansada*
*dar-dartiyo wacdarihii*
*sida danab u laba dhacay*
*dadku maqalyey shaalle.*

*Dedda kaca rogaalkiyo*
*Daahyaley car-caraheed*
*maantana dinnaahyaha*
*Dayax Weerar baa sida*

*Gaarriyow ku soo durug*
*malmalkiyo dab-qaadkii*
*iyo weliba deebaaq.*

*Dabray oo haddana furay*
*misna daah kalaan rogey.*

*Deelley wankeed qalan*
*daaheedu waa furan*
*hibashada dareen kacay*
*degmadeenna beer-qaad*
*sida daadka maanshee*



*hal-abuurku duunkiyo*
*dhul damqaday ka faalloo*
*ninba garashadiis direy*
*darka cagaha soo geli*
*sii durugtay sheekadu*
*dumarkiina* soo biir.*

*Rag darmaano soo fuul*
*ragna dalawadiisii*
*iyo doobigii keen.*
*Ragna deer-cadkiisoo*
*baar-qab doobyayaa wado*
*bandhigii ku soo daa.*

*Nin dameero soo horay*
*yaan la odhan denbuu galay*
*billay duunyadiis tahay.*
*Waxse iga dardaarana*
*ninka daaqsanaayow*
*dafac laa gosheediyo*
*dixda hayska joogtee*
*yaanay nagu dannaaniyin*
*ama geela naga didin.*
*Nirgo daaddah baradaa*
*derrimaha madheedhka leh*
*sida digirin jiifee*
*yaanay naga danbaabidhin.*

*Doqon yahay masayrkiyo*
*danni lagu abuuree*
*deeqdii Ilaahay*
*deelqaaf ka mudataay*
*adigiyo dangaladaa*
*da'kastaydin qooqdaan*
*waxa aydin dihataan*
*daratiyo ma caal baa ?*

*Maansada dunteediyo*
*waxa lagu dir-soocdaa*
*degelkiyo dhirteedee*
*heellada ma danadiyo*
*dibowgaa ka gurataan ?*

*Murtidiinnu dakhariyo*
*dalab iyo lanlleemiyo*
*daldaloollo badanaa ?*
*Ma dareere miirtiyo*
*duddun bahal galeenaa?*
*Dardartii aftahankiyo*
*dilladii farshaxankiyo*
*dux abwaan ma sidatoo*
*diiftii saboolkiyo*
*daal baa ka muuqdee*
*gabaygaba ma ducashiyo*
*dawersaa ku keentaan?*
*Mise dagan ma dhaaftiyo*
*duul baa ka gadataan*
*dhul dellegan ka soo xada?*
*Mise luuq dahsoon iyo*
*suuqa doqon ma garatiyo*
*ku-dhacdaa ka dayataan?*
*Marka geel dar loo horo*
*diin maxawgu heestaan.*

*Haddii reerku lama dego*
*meel daaq ka dheer yahay*
*degel oomman furan yahay*
*dadka guriga joogiyo*
*waxay duunyo haystaan*
*diihaalka wada qabo*
*daruurana ka hooraan*
*meel durugsan goortaas*
*maxaa daanka oo qudha*
*ula doogsin carartaan?*

*Gudin-yahay dulbaaxdiyo*
*dufan lagu afeeyee*
*dareenkeedu laaciyo*
*milicsiga ku deexdee*
*danbarsiga cadceeddiyo*
*dabayoodka luunka leh*
*weligeed ku darartaa*
*maxaad doodda beeshiyo*
*danta qaranku leeyahay*
*dusduskaaga foofkiyo*
*damac uga hor marisaa?*



*Noloshaba ma dirashiyo*
*damqashada calooshiyo*
*dalqadaa ka barateen?*

*Midha daray raggiinaa*
*duudduub ku liqayow*
*kolley geedka duuggiyo*
*taariikh la daastiyo*
*laga diirto magac hadha*
*sida diirta xagatoo*
*dadnimada arradisee*
*dib maxaa u dhigateen*
*duniduba ma maantaa?*
*Dab cunaannu idin nidhi.*

*Maansadu dan guud iyo*
*dalka hanashadiisiyo*
*dadka wada-jirkiisiyo*

*dawna way ku socotaa*
*dawladnimo u samafala*
*in kastoo dirkeediyo*
*dulucdeedu saas tahay*
*misna loo dardaar weri*
*ka hor yimi nin diiddani*
*deri iyo u yeel tuur*
*dunjigeeda maydhaan*
*xistigeedu daba gure.*

*Dabinada shirqoolka ah*
*inta boholo loo dedey*
*kaga gudubtey daanshood*
*digashadu ma saamayn*
*dhibta waw dul leedahay*
*dibindaabyo hoosiyo*
*dabra.weerar caabbiya*
*duullaanna waw hadhay.*

*Dibso aan nidhaahnoo*
*ha dekaanto mooyee*
*dabarkeeda geenyada*
*geedkee ka diirraa*
*qorshahaba laguma darin.*

*Doc wareenka sheelka ah*
*iyo saymo dawdilan*
*kuma dagato maansadu*
*xinka way ku darartaa*
*kulka way ku dirantaa*
*dabka way ku caratáa*
*haddii jeedal lagu dayo*
*deeddankay ku badisaa*
*dakharada la yeeliyo*
*hubka lagula daalee*
*ha ku debecdo laga wadot,*
*dardar bay ka qaadaa*
*haddii dayro laga dhigo*
*derejaabay tolataa*
*calan bay deldelataa*
*haddii seyga laga dilo*
*doqon geesigeedii*
*ninka daray billaawaha*
*i dumaal tidhaahdoo*
*dakanada illowdoo*
*dhanka kale u durugtoo*
*diga-rogata maahee*
*timahaabay dabataa*
*dunta waxay ku xidhataa*
*wiil dardaarankeed qaba*
*magaciis Dulmane yahay*
*duqa dhalay sabool yahay*
*danyar hooyadiis tahay*
*inta xeerka dumisiyo*
*deni waa ka garanuug.*

*Dacwaddayda Ciinow*
*dira dire umaan tirin*
*deel-qaaf ka xeel dheer*
*uma jeeddo daw dhaaf*
*daandaansi kama wado*
*ka da'weyni ruuxaas*
*derejiyo xil-qaadkeed*
*nin u dudaya maan ihi*
*damac wayga xaaraan*
*dilla gabay ku faankiyo*



*doqonniino hadalkiyo*
*i dayaay wax kuma falo*
*maba lihi dareenkaas.*

*Waxa qalinka igu diray*
*dadku way tirsanayaa*
*deyna waa ka maqan yahay*
*dana jirena waan ahay*
*danyartiyo saboolkiyo*
*anigiyo dac-wadhantuna*
*isku digato miihine*
*daawaannu leenahay*
*diilalyada cuslaysiyo*
*daalaa-dhacoodaan*
*aniguna damqanayaa*
*xaq haddaan ku daakiro*
*ma deyrkii Makaan gubey?*

*Danbarkiyo karuurkiyo*
*caanaha durduurta ah*
*dadku haw sinnaadeen*
*haddii laygu dilo taas*
*taariikhdu duuggeed*
*dirirrada sidkood go'ay*
*door-roone haw hadho*
*dibna mooyi say noqon.*

*Dar Allee Dharkaynow*
*haddaad maanta dagan tahay*
*ninka duunyo kaa wada*
*afka kama daboosheen*
*maxaad deelka maansada*
*dacar iyo dhunkaal iyo*
*duumo ugu arkaysaa?*
*Maxaad uga didaysaa*
*uga dhigi wax kuu daran*
*armay doorba kuu tahay?*

*Haddaan waayey roob da'ay*
*dayra-dhaafka jiilaal*
*guri laga dugaashado*
*aqal laba deryaala ah*

*dadabtiisu nooshahay*
*celin kara daroorraha*
*docaha iyo raartiyo*
*dhan kastaba ka dalab tiran*
*ummadduna dugsoonkaas*
*dermo qaran ku jiifaan*
*bulshadoo dar hoogiyo*
*taalla dooxa geerida*
*haddii daad u soo galo*
*miyaan waayey deelkiyo*
*dareensiinta dhiillada.*

*Duunyo waa la foofshaa*
*daaqna waa la geeyaa*
*doorna wa ilaashaa*
*isha daymadeediyo*
*digta luuqdu waw wehel.*
*Duhurkaa la urursha*a
*tiro lagu dabbaalaa*
*dabadeed la hooyaa.*
*kol hadday dareeraan*
*deegaanta raacaan*
*dildillaan ku goosmaan*
*wax daryeela waayaan*
*daaha hiimammowga ah*
*maqal-daaqda lagu tebo*
*cawa-daran la raad guro*
*dibjirtaye ma been baa ?*
*Shilna wayna daan-weyn*
*demmanaanta kama foga*
*xoolaha dayacanta ah*
*inuu daayoo mooyee*
*kama durugsanaan karo*
*doon-doonisteediyo*
*day-dayashadeeduna*
*darayada libaaxiyo*
*ninka damalka ka hadhsaday*
*Deleb waw gudboon-tahay.*

*Haddan waayey doobkii*
*xilka doonnantiisa ah*
*dayrada u noqonlaa*
*danyar habaqlaheedii*



*duddo bahalku kala tago*
*miyaan waayey deelkiyo*
*daba socodka qaylada ?*

*Hayin sida dadweynaha*
*dalaggiyo dhaqaalaha*
*duuggiyo wixii nool*
*haddii layska daba galo*
*hadduu aar dalaafiyo*
*arko belo ku soo diran*
*nafta dawdab roorka ah*
*daran doorri orodkiyo*
*durdurada ka buuxsado*
*maatada derderan iyo*
*deli iyo jar kala dhaco*
*doogaan la maarayn*
*dibna looga soo kaban*
*didmadiisu keentee*
*haddaan waayey dabarkii*
*dhacdo lagu daweeyoo*
*lagu dagagaraa jirin*
*miyaan waayey doohdiyo*
*doobirtii la odhan jirey ?*

*Danta guud mudnaanteed*
*gobannimo daryeelkeed*
*damaciyo hankaygii*
*haddaan waayey dawgaan*
*is lahaa ha lagu dego*
*berri degel ma dhaafaan,*
*dadka wada jirkiisiyo*
*isku duubnidiisii*
*lagu doorshey reer reer*
*kala daadsan laga dhigay,*
*mus duleedku xanan yahay*
*qarannimadu dagan tahay*
*gudahana dab kaga kacay*
*dawankiyo carooggiyo*
*miyaan waayey Daalacan*
*sengahayga Doolaal*
*ama faras dirkiisa ah*
*Dayax-weerar oo kale ?*

*Ragga daawadii furay*
*ama daacaddii jaray*
*ama qaranka duudsiyey*
*hantidii dadweynaha*
*dacallada ka buuxsadey*
*dalku eed ku leeyahay*
*rag la deydeyaayoo*
*dedan oo qarsoonoo*
*damacooda xeel iyo*
*ku darsaday tab hoosoo*
*wixii deyn ku soo baxa*
*berri diidi karayoo*
*dufankiyo karriinkii*
*iska duugey maahee*
*sida buurta Daalood*
*dal fog bay ka muuqdaan.*

*Diricaasi waa kuma ?*
*Dawdar weeye shalay jirey*
*durba sawkan jeedladay*
*dhistay aqallo daah weyn*
*tolow duubka yaw xidhay*
*hadmuu tobanka doonyood*
*dekedaha ku soo xidhay*
*hadmuu dunida gaarkeed*
*intuu daawashaw tegey*
*demesh iyo wixii yiil*
*sida daad u soo rogey?*
*kaftankaas dareenka leh*
*danyartaa ku heestee*
*dadka maanigaa baray*
*derejada hummaaga ah*
*magacyada dul-saarka ah*
*dorraad soo gadaal baxay*
*maxaa laygu digayaa?*

*Doodda aan ku soo xidho*
*bi'i waaye deylooy*
*adna darayga hays dhigin*
*xaajadu dalluun iyo*
*dalow bay ka lulataa*



*ha ka tuurin daaddeys*
*anna hay dardaar werin.*

*Deelleyna aan faro*
*duco iyo sidii roon*
*dawgaagu waa sahan*
*dadku waa abbaartaa*
*isku dira bahdeediyo*
*kala dila ha noqonnine*
*isku dara ha lagu dhaho.*
*Nin xumaa daneeyoo*
*waxa jira damqanayee*
*yaanu xagal ka daac iyo*
*gol daloolo kaa helin*
*xidho duubka nabadeed*
*daacaddiyo runtaba sheeg*
*daaraanta magacaw.*

*Cadowgaagu duurkiyo*
*hadduu doogga cawskiyo*
*dareemada ka badan yahay*
*adiguna dab baad tahay.*

*Digo shidan hadduu yahay*
*adna daad socdaad tahay.*
*Damal adag hadduu yahay*
*adna danab dhacaad tahay.*

*Baaruudda duushiyo*
*dubbe culus hadduu yahay*
*derbi soo ceshaad tahay.*

*Mugdi lagu dayoobiyo*
*gudcur dama' hadduu yahay*
*qorrax duluca furatiyo*
*dayax buuxsamaad tahay.*

*Hadduu aw dillaaliyo*
*qalin duurre faashiyo*
*yahay fiqi dammiinana*
*cilmi durugsan baad tahay.*

*Dulin dhiigga miirtiyo*
*dulmi hilan haddduu yahay*
*xaq dillaacay baad tahay.*

*Nin qabiil dafkiisiyo*
*sita daramalkiisoo*
*ku dan qaba haddduu yahay*
*qaran dawladaad tahay.*

*Hadday daana daaniyo*
*dawliil ku heesaan*
*waxyi soo degaad tahay.*

*Inta dunidu raarkiyo*
*deyrka hoose leedahay*
*qof dulmani ku nool yahay*
*ilays daaran baad tahay*
*wed jiraana kuma dilo*[28].

*Anigana bir danantiyo*
*dabran iyo melmelan iyo*
*deldelaad ha lay sudho*
*duuggaygu waa adi.*

28 dumarkiina (*Waxa la xusayaa Saado Cali oo ka qayb qaadatay Silsiladdii Deelley.*)



# GABADH MADOW

*Goonyahaygu waa dhagar*
*guudkaygu waa xeel*
*garayskaygu waa seef*
*guntigaygu waa ciil*
*gudahaygu waa yool*
*gondahaygu waa dhiig.*

*Weligay gu' iyo dayr*
*guul ooman baan ahay*
*hantidayda gawriyo*
*gabayooxna lagu reeb*
*geriyaadna lagu beer*
*dayaxay u gudubtaa*
*aniguna gelgelintiyo*
*garab rarato kama baxo.*
*Gadh wadeennadayduna*
*giddi inan-la-yaal iyo*
*guur-doonno weeyaan,*
*geyaankoodu waa damac*
*utintayda lama gudo*
*gashigayga lama bedo*
*galladayda lama karo*
*dibnahaa ka gaabsada*
*guubaabadayduna*
*kama foga guuraabaas*
*Guuguule yeedhii.*

*Badi waan gadoodaa*
*cidda aan galaaftaa*
*guurtidayda weeyaan*
*anigays gunaanada*
*hadba waxaan ku giirtaa*
*Guuleedka ii kaca*
*geeddigaygu sahan ma leh*
*geenyo hadaftey baan ahay*
*goobyaalka milicsiga*
*gabargaalka lahashada*
*gacan haadis bay diley*
*iyo laba gar-daymood*
*gurrantayda bidixdiyo*

*garabkayga midig baan*
*midba gelin u jeestaa*
*ka cabsaday god naareed*
*jannadana ma geli karo*
*gooddigooda ku anbaday*
*duniduna gabaabsiday.*

*Tiradaa gedmaysoo*
*i galaa baxaysee*
*maxaa goolal igu maqan ?*
*Dheeshan laygu goobtee*
*gefka lagu heshiis yahay*
*mee gar-sooraheedii ?*
*Geeddu xeer ma leedahay,*
*mise waa lug iyo gacan*
*labadaba ku garangari .*

*Goohu yuu ka soo baxay,*
*guurowga yaa wadey,*
*maxaa keenay gabayada ?*
*Inaan gabadh madow ahay*
*cadrad lagu gabood falay*
*malaa waad i garateen ?*

*Sheeko gaaban baa tidhi:-*
*"Ninay gaajo haysaa*
*guri yimi duleedkii*
*soddoh garasho dheeruu*
*gabadheeda qabey baa*
*dhito godollo sheellayd*
*ugu geysey meeshii".*
*Isaguna guddoon yidhi :*
*Laysu guud mar toyashada*
*caanaha gadhoodhaa*
*inay guurra guurraha*
*weelka gaararkiisiyo*
*gunta badi ku ururaan*
*waa ged lagu yaqaannaa,*
*godankii isugu tage.*
*Isaguna ka geyn waa*
*inuu dhiilka gororsado*
*gacantana ma diran karo.*



*Isagoo xil-gubashada*
*u daruuray gaashaan*
*Isma-gabe wuxuu yidhi:-*
*"Markii ay na Gelayeen*
*waa nala gilgilayoo*
*inta nala gun-dhebey baa*
*afka nalagu gaacsaday".*

*Wadnihiisu galow ma leh*
*ku gadaangad ceebtii*
*libintana ku geeraar*
*xeeshiina lagu garey*
*murti guun ah laga reeb.*

*Jiiftada gar-dhaladka ah*
*waxan uga gol leeyahay*
*Allahayow gurracanaa*
*marti goor-xun socotood*
*gobannimo ku soortoo*
*kugu tidhi gun baad tahay !*

*Markii aan garraaddaha*
*taariikhda kala guray*
*ilaa gogol-dhigginnii*
*galabtaad is-wacateen*
*taladana in lay galo*
*Baarliin ku goyseen*
*ilaa gooshkan maanta ah*
*hadimada i gaadhiyo*
*waxaad geysateen baan*
*gocashada xusuustee*
*maxaan Reer Galbeedow*
*godob kaa tirsanayaa ?*
*mise gabawar mooyee*
*tolow maba garawdaan !*

*Maxaa gaasas duuliyo*
*guutooyin xoogliyo*
*gurmad leedda-fuuliyo*
*guluf weerar tooxdiyo*

*dabley gaatan-socotiyo*
*geba-geba i saarteen ?*

*Maxaan goor la saahidey*
*habeenkoo gabbala-ridey*
*laba gelin is-raaceen*
*gaaf-meerka socotada*
*iyo guura-bahallaha*
*geesaaska fiintiyo*
*galow fooridiisiyo*
*galayaxa rasaastiyo*
*col gurguuranaayiyo*
*gellimaad ku sara-kacay.*

*Maxaad gaade hoosiyo*
*gurrac iyo shirqool iyo*
*tabo igu gantoobteen.*

*Maxaad garangartaydiyo*
*guryahayga bi'iseen*
*Gacal iyo tol wada yaal*
*gobol gobol u ooddeen*
*laba aan is-gooyeen*
*kala goonni yeesheen.*

*Maxaa laba gudboonayd*
*midna garabka siiseen*
*ka labaad u guusheen*
*isku go'a tidhaahdeen.*

*Maxaa wiilal gaammurey*
*intaa ugu guduuddeen*
*ha galgalan tidhaahdeen.*

*Maxaa Gaanni ciidmiyo*
*hanad aan gardaadshoo*
*ku goblamay birayseen,*
*golxobkiinnu ku afuray*
*Maxaa geesi aan dhalay*
*intaa gawrac mariseen*
*gorgor baahan siiseen.*
*Maxaa inan gashaantiya*



*gayaxaha ka siibteen*
*milgaheeda gawsheen*
*ka xil baxay geyaankeed*
*Maxaad gaari weer xidhan*
*godol-qaad ku daydeen.*

*Maxaa guul darraystiyo,*
*godadliyo hinaasiyo*
*Gocor igu hubayseen.*

*Giiba saw nin ma ahayn*
*geeskayga bari yimi.*

*Maxaa gacan ku dhiigliyo*
*gibil kala takooriyo*
*garma-qaate dhegaliyo*
*garac igu abuurteen.*

*Maxaa good mariidliyo*
*gungumiyo abeesiyo*
*goodaaddo jilifliyo*
*garangoorri socotiyo*
*inta bahal gurguurtiyo*
*belo igaga guurteen.*

*Maxaa gegi dabayliyo*
*gocondhaley cagaagliyo*
*galoof iyo candhooliyo*
*geyi lama degaaniyo*
*goonbaar habaasliyo*
*guban lagu asqoobiyo*
*gaajada rugteediyo*
*gabno igu tilmaanteen.*

*Goobtii harraadkiyo*
*gurigii cadceeddiyo*
*geedkii saboolkiyo*
*gudcur maararrawliyo*
*yaa go'doonka iga dhigay,*
*adduunyada geddaas faray,*
*gaasiray waxaan ahay*

*Maxaa gocayadiinniyo*
*intaa gaawihiinnniyo*
*gorof iga milaasheen*
*gudhan iigu yeedheen*

*Aaway guuyadaydii*
*geeliyo lo'daydii*
*faraskiyo gammaankii*
*goolashaydii soocnaa ?*

*Aaway gaaxsantaydii*
*dahabkii guduudnaa*
*macdantii goshaydiyo*
*buuraha guntoodiyo*
*gebiyada ku duugnayd ?*

*Warshaddiinna guuxdaa*
*midhahay gadaysiyo*
*miidday guntaysiyo*
*ganacsiga abeerka ah*
*xaggee looga soo guray ?*

*Guushkay tufaysiyo*
*dheecaanka gabaxliyo*
*xinjiraha galshaystiyo*
*dhiigga gobo'leh yayska leh ?*

*Immisaa gabaarrey iyo*
*garab-cas igu koray?*

*Maxaa gaatirtaydiyo*
*goldalooladaydiyo*
*sida lay gabraartiyo*
*garka laygu laylyiyo*
*gedda lay salaaxiyo*
*googgaa ku sabiddiyo*
*gobortayda barateen?*

*Dadku geed adaygiyo*
*gudintay kol iyo laba*
*lafa-geri ku dhuuxaan*



*waxba kuma garaacdee*
*miyaan tiinnu gaagixin?*

*Maxaan geystey ee dhimay?*
*Maxaan galabsadee falay?*
*anigoo la gamashiyey*
*gondahayga seetadu*
*waxay haar ku gedeftiyo.*
*Gurgurkii i saarraa*
*boqol gu' iyo taartaar*
*anigoo gun iyo baar*
*korku wada gunaad yahay*
*anigoo la golongolay*
*sida caynku ii gubey*
*gubuxsiga tallaabada*
*garba-beelay dhawr jeer,*
*goob-joogna ka ahaa*
*galab noolba waxa dhacay,*
*anoo uur-guluuluca*
*la gommodey dhibtaadii,*
*adoo gacan togaalaha*
*gardarriyo is-yeel yeel,*
*intaasoo gef muuqdiyo*
*guul darrooyin igu falay*
*maxaad weli guhaaddiyo*
*gaadhka iiga haysaan?*
*Maxaa gumuca boodiyo*
*gaaraa-bidhaankiyo,*
*hubka iigu gibisheen?*

*Maxaad saymo gadataa,*
*dab gamaaray hurisaa*
*Maxaad gawsahaagiyo*
*miciyaha golxaystiyo*
*ciddi wada garaara ah*
*hadba shaadh u gelisaa*
*maxaad gedagedeysaa*
*hadba geed is-marisaa.*

*Ummad geylamaysoo*
*gaarkooda taladii*
*inta ay gorfeeyeen*

*raba inay geyoodaan*
*kuwa jira gadaashana*
*gaadiid u celiyaan,*
*intaan gaasha-weyntiyo*
*cawa-darantu soo gelin*
*maxaa geeddigoodii*
*gujis lama filaaniyo*
*gal dad-liqa ku noqoteen?*

*Hadba ruuxa goolmoon*
*raba ina gunnaysaan*
*ama guufaf timiriyo*
*galley loogu sama-falo*
*maxaa geeridiisiyo*
*waran iyo gantaal iyo*
*gaalleef u siisaan?*

*U garbaynta noloshiyo*
*gacan siinta nabaddiyo*
*gudashada sidii roon*
*maxaa kaa gabbaanadey?*

*Afartaas god madaleed*
*gola-joog ku naanays*
*Gaarriyow ka marag noqo*
*ila gudubtey sheekadu*
*geba gebana doontee*
*bal aan soo gunaanado.*

*Ninka loo gol leeyahay*
*isagaa is-garan kara*
*sida goosan weer helay*
*igu gaabi tuurtuur*
*igu gado sir iyo caad*
*halkaad gaadho taagtaa.*

*Aniguna il-galaclaha*
*is-gamaarintaydiyo*
*gadh-salaaxa maahdiyo*
*gama' aan hurdo ahayn*
*goroddaan lalminayaa*
*gabbashiyo ma aha quus*



*gar-naqsaan ku jeedaa*
*talaan gawda ku hayaa.*

*Inkastaad gammuurteen*
*geedka aan ka beerrahay*
*ma qallalin guntaydii*
*ganto xidid leh baan ahay*
*gumar qodax leh baan ahay*
*dab baan soo gadaal-celin.*

*Gebi-dhaca i haystiyo*
*gaalgaalka dheelliga*
*ku guddoonsan maayee*
*waxaan goobayaa raad*
*jidkii guusha aadmiga*
*gelbiskiyo mashxaradaha*
*gafi maayo hawlaan*
*guryo-samo ku tegi karo*
*gobanimo ku hanan karo.*

*Guntashada xusuusaha*
*gudashada habboonkay*
*gabay gabaygan ciil-tira*
*u ged-baxa falaadkay*
*waxaan geysto magac-dheba*
*aan lahaanno goorteed.*

# HEELIYO

*Higlo weeye dulin badan*
*waana hoga kaliileed*
*hongorraha cadceedduu*
*ka hadh-galay qadhaabkii,*
*haylaa ka yara dhacay*
*hurdana wuu iskaga jirey.*
*Hillaac wax i tus bay tidhi*
*hilayguna indhaa qabey.*

*Intuu soo hanbaabirey*
*haab haabtay maradii*
*kuye Heeliyooy toos*
*iga eeg kor iyo hoos*
*miyaan hoolif mooyee*
*hal turxaana leeyahay?*

*Halacsiga sarbeebta ah*
*iyadoon u hagar bixin*
*wax-ka-sheegga Haaruun*
*ha ka yaabin bay tidhi.*

*Huuhaadu digashiyo*
*hab sabaale weeyaan*
*waana lays hunda ogyahay.*

*Iyadoon ku hawshoon*
*wax-ka-sheegga Haaruun*
*waxay hoos u sii tidhi:-*
*"Nin gumeysi habayoo*
*isticmaar habeeyoo*
*la hal maalay baad tahay".*

*"Hamrashada xaq-dhawrkiyo*
*haasaawahoodana*
*nin u heellan baad tahay."*



*"Markay heedhe waalaha*
*hirwo kuu tuntumayaan*
*hebed minaw san baad tahay".*

*"Halgan iyo waddaninnimo*
*inaad heerto mooyee*
*weligaa dab uma hurin".*

*"Marka aad nin hanadiyo*
*hor u socod murmaysaan*
*halaq laba af-laad tahay".*

*"Marka ay hufnaantiyo*
*qof hagaagsan joogtee*
*hebel kale la magac dhebo*
*nin hinaasiyaad tahay".*

*"Garta hoga tuskeedana*
*hiinraac gurracanoon*
*waxba hubinnin baad tahay".*

*"Midhka hoos ka tuurka ah*
*nin ragaa hilmaamee*
*naxli huursan baad tahay"*

*"Hadashada aqoontiyo*
*hinddisaha garaadkana*
*hungo qaawan baad tahay".*

*"Hayntiyo dhaqaalaha*
*gacmo hoorsadaad tahay".*

*"Hooda iyo deeqdana*
*hor Allaad ka joogtaa".*

*"Dadnimada hoggeedana*
*dibaddaad ka huruddaa".*

*"Hollashada dagaalkana*
*hooto rogasho maad lihid".*

*"Hayal waad ka madhan tahay
heemaalna kaa dhimey".*

*"Abaartii Hawaariyo
Harga cuna mar baad tahay
marna Haarriyaad tahay".*

*"Higil nuxurla' baad tahay
hirrig qodax leh baad tahay
hawo beena baad tahay
hadal kama dhergaad tahay".*

*"Nin ammaanta heesaha
u hamuumayaad tahay".*

*"Hibo iyo nin madaxnnimo
u haliilayaad tahay".*

*"Nin waxaanu hidin karin
isku hawlayaad tahay".*

*"Nin Waxaan la heli karin
u harraaddan baad tahay."*

*"Hawkar iyo dhib baad tahay
habaas iyo ufaad tahay
hummaag iyo riyaad tahay
habeen yuururaad tahay
mugdi hoganayaad tahay
hafar iyo cidlaad tahay
intaasoo hal baasoo
is hareer socdaad tahay
habaar biiray baad tahay".*

*Afartaas heshiiskii
huriwaa ku magacaw
hakad iyo tilmaan saar
hinji nabarka qalinyohow
hohe leebka igu mudan
waxba hawla kala hadhin.*



*Hoonbaro libaaxley
hoosaaso badanley
weligaa hunbaallee
huga dhagarta laga tolay
kolba midab ku hooshaar
dadka hawdka wada yaal
isma hurada kala gee
haan haan u kala sooc
hilqadlaha isugu dhiib
maadhiin holcaayiyo
hanti qaranku leeyahay
hayin rarato guurtoon
wax hallayn ku dabar goo
haweenka iyo maatada
hardafaha ku baabii'
hebel hebel u aanee
ma colaad hagooglliyo
hiirtaanyo reeb bay
hawraartu kaa tahay?*

*Halse waxad ogaataa
hiyigaaga gelisaa
haddeer waa la joogaa
hadhow waa la nool yahay
hordhacii qudhqudhisee
adigay hadhuubkii
huubadiisu kuu taal
waanad heensan doontaa.*

*Afartaas heshiiskii
huriwaa ku magacaw
hakad iyo tilmaan saar
hinji nabarka qalinyohow
hohe leebka igu mudan
waxba hawla kala hadhin.*

*Naalleeye habacsane
yaa horseede kaa dhigay
hayb baabad sidataa
maadigaa hoggaansha ah
gobannimo hawadin kara
haneedka qaban kara*

*higsankara asaaggaa*
*qarannimo hitiqin kara*
*isku duubni hanan kara*
*dad saboola hagi kara*
*himilada xil furan kara*
*taariikh la hadhi kara*
*hal-abuurka sharafka leh*
*murtidooda heli kara*
*hoodaale noqon kara ?*

*Maxaad boog horeetiyo*
*haydaar daweysaa*
*dadkii sawtan haadkiyo*
*haanraawe boobeen.*

*Afartaas heshiiskii*
*huriwaa ku magacaw*
*hakad iyo tilmaan saar*
*hinji nabarka qalinyohow*
*hohe leebka igu mudan.*
*waxba hawla kala hadhin.*

*Hal kalaan xusuustee*
*hogol yahay aduun baa*
*ku habsadey dushaydee*
*miyaan anigu heegooy*
*soo haabo kugu idhi ?*

*Baaruudda huguntee*
*ambbatee habawdee*
*habili'i sokeeyaha*
*ku hawaawi duushee*
*hadhka yeelataay yaad*
*hungo madhan inaad tahay*
*ka hadoodilaysaa ?*

*Hamta iyo digtaadii*
*dhulka hogag la yaabliyo*
*haaray ka jeexdoo*
*hanfariirka meydkaa*
*hayn waayey luxudkoo*
*Haabiil gilgilashada*



*hanqalkuu la boodoo*
*hanbadii aboorkiyo*
*harag iyo laf keliyaa*
*hanbaberey dareenkoo*
*hurdadii ka toosoo*
*hiyigayga waxa galay*
*nimankaad is hayseen*
*kala hoyatey guushee*
*Gaarriyow hireydiyo*
*hayayda iyo qaylada*
*dhul fog baan u haystee*
*ma hareerahaygaa ?.*

*Hooshaarka aarkiyo*
*huntutuulka dhidarkiyo*
*hangagaarka baqayaha*
*handashada waraabaha*
*raqda heelka taallee*
*laga haagay ii sheeg.*

*Hiyigayga waxa galay*
*nimankaad is hayseen*
*hadhadoodi weeyoo*
*waxad kala hufaysee*
*kala haadinaysiyo*
*hirka dhiigga muuqdaa*
*ma halbowlahaygaa ?*

*Haybad iyo xishoodlaay*
*waayeel habsooboo*
*hangabsiga dhawaaqiyo*
*higsanaaya beeshoo*
*hollashada culayskii*
*hadiwaayey socodkoo*
*hindiwaas tallaabada*
*hakinaaya jaantiyo*
*hablo maydhax diirtiyo*
*hibashada xanuunkiyo*
*haydaarta xanaftiyo*
*ma hadhada ajarankii*
*ummul fool hallawdoo*
*abidiyo hurgumadii*

*hoosteeda yaalliin*
*qaryad weerka hooggiyo*
*hengel iyo asay xidhan*
*hadal barad gurguurtoo*
*hawadiisu caaniyo*
*hooyo naaska joogtiyo*
*habaqlaha aroorkiyo*
*horashada ku jeediyo*
*jidib iyo hangoolliyo*
*habartana ma geydaa ?*

*Hawsaryohow gurxamayaa*
*hodaddaabadaadiyo*
*halkaan kuugu tala galay*
*hal-xidhaale noqotee*
*galley iyo hadhuudh iyo*
*ninka halo ku dhaafsaday*
*hayntiisa kugu gaday*
*hindisana ku talo galay*
*inu kugu hor joogsado*
*hororkiyo cadaawaha*
*hawo damac ka soo galo*
*hiddihiisa gobannimo*
*halistana iskaga jiro*
*haybaddaada gaarka ah*
*ma inaad heddiisiyo*
*hooggiisa joogtaa ?*

*Hadimada Garoowiyo*
*hanaq go'a Nugaaleed*
*halka aad tummaatiday*
*waxa kaga habboonaa*
*dar kaloo i hawlee*
*huqdaad reebtay weynaa*
*hibashiyo ladh kululaa .*

*Colka Bari harraatiyey*
*hubka Mudug ku talax tegey*
*Allaylehe hubsiiniyo*
*haki buu u baahnaa .*



*Adigaa halyeygiyo*
*hanaddada ku dabar go'ay*
*himilooy u baahnaa.*

*Hebelow laguu sheeg*
*ummaddaad hankeediyo*
*hilbaheeda gadataa*
*hiilka kaaga baahnayd.*

*Hawsaryohow gurxamayaa*
*caku halalacdaadiyo*
*habar wacashadaadee*
*ku hawirantey meeshaad*
*haab haabanaysee*
*kor u qaad hinaasaha*
*dadka haybi weligaa*
*hilimmadana kala baro.*

# JIITAMA

Dhudi geenyadaydii
dhex-yartii shakaallayd
dhirifkiyo wisiisiga
dharjadii ku tumatoo
jarihii ku dhabatoo
dhufsataye u sii daa.

Magaceedu waa dheel
heensaheedu waa dhiin
shalmad dhabaq-guduudiyo
dhowloosyo dahabiyo
sitaac dheeh leh baw xidhan
baal dhalaalayaa sudhan
kun hal bay u dhigantaa
dhanbaal bay siddaa culus
dhalandhoolka tiigta ah
hadday maagto dheemaal
ama dheelmad soo galo
dhudhubaha shareerka ah
iyo jararka dhiibta ah
iyadaa dhanbalatoo
dhabbadeeda falatoo
tubta sugan ku dhacantoo
abataqan dhoweysee
dhaxaad humhumatee
ma dhan tahay Sarmaanow ?[29]
Isma Dhiba ku soo bood.

Sida badowga haw dhiqin
dhiiftu way cabudhisaa
yaanay dhaadin guul guul
xakamaha sal uga dhawr
ha la dhicin rakaabbada
nabar kulul ka dheeree
dhengeddana ha ku adkayn.
Yaanay koora dheelliyin

29 Sarmaan-waa magac ugu jira halkan hal-gamaaga nafiisa u huraya xorriyadda shacbiga Soomaaliyeed.



dhacadiidka fara badan
dhabarkaa ku daalee
dhaqdhaqaaqa tarantari
tabahana u dhiib dhiib
dhabdhab orodka booddada
ha ku dhegin majiiraha.

Hadba dhaad isugu taag
hadba dheeg iskaga looh
uga suul dhabaalee
hadba dhinac u diga-rogo
dhudhun iyo badh sii soco
isku dhereri gaaddada
bogga dhaxanta kaga qabo
dhulka gacanta saar saar
hadba dhagax ka soo qaad
dhanka kale ka soo fuul
hadba dhool ka muunsood
dhoorka raanta tuurtiyo
taataabo dhabannada.

Dhaw-dhawda kala quban
hal-abuurka dhabaqda leh
hawraarta kala dhiman
tixahaan dhugta lahayn
way ku dhega barjowdaa
dhudda gabaygu leeyahay
ereyada dhexroorka leh
suugaanta dhaladka ah
kula hadal af dhawrsoon
ha ka dheregto maansada
dulucdana dhacdo u yeel.
Nin la dhawrayaad tahay
waa lagaa dhur sugayaa
yaan darmaantu kula dhixin
dhakhsaheedu waa laydh
badi soo dhirbaaxdee
dhag-dhagtiyo xawaaraha
yaanay dhaafin yoolkii
Ina dhamac[30] ku sugi jirey

30 1 Ina Dhamac-waa Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye)

*isba waa dhigaygee*
*Dhoodaanna* [31] *tala geli.*

*Dhugashada ayaamaha*
*haddaan dheehdo waayaha*
*sooyaalka dhaxalka ah*
*waxay dhaayo joogeen*
*hadda shalay ma dheerayn,*
*waxa dhacay ma fududayn*
*weli dhaar ma beenayn*
*maalmihii dhanaanaa,*
*wixii dhiif la soo maray*
*inkastoo la dhabar jabay*
*laysma dhiibin goobii*
*dhederbiga la geylamey*
*mana jirin qof dhawrsaday*
*dhaqan iyo hiddaa jirey*
*dheg la xeeriyaa tiil*
*dhaqashadu hal maahayn*
*dhimashadu shil maahayn*
*dhiigna waa la huri jirey*
*dhumuc waa la ridi jirey*
*badna waa la dhuri jirey*
*guulna waa la dhalin jirey*
*dhiirri buu hubku ahaa*
*dhaadashaa hanku ahaa*
*marka dhabi dhabteed tahay*
*dhidar wayska tegi jirey.*

*Miyaan dheelallaysnahay,*
*mise waan dhadhabayaa ?*
*Dhammaan guulahaygii*
*riyo iyo ma dholol baa,*
*ma dhibaad nin bixiyaa ?*
*Ma runtaan dhacdo ahayn*
*Dhagaxtuur*[32] *ma been baa*
*labadii dharaarood*
*mee ninkii is dhinac sudhay ?*
*Miyaan daayey dhagartii*
*mise dhiilladaan jirin*

31 2 Dhoodaan-waa Cabdillahi Macallin
32 Dhagaxtuur-Dhacdadii taariikheed ee 11kii Jannaayo, 1948kii Xamar ka dhacday



*mise tolow dhalooshaa*
*dhidibkeedu adag yahay ?*

*Dhirta waxa ku jira geed*
*wac wac iyo dhalaal badan*
*dhulka hoose kama baxo*
*dhuuni yaalla kama qado*
*damal dhuumo maaliyo*
*dhamastii hadhka lahayd*
*marka dhuuxu ka engego*
*ma ogtahay dhillowyahan !*
*hadduu dhaashto jiilaal*
*ama dhiibsho laamaha*
*naxariis la kala dhaco*
*dhardharraanta quruxdiyo*
*dhaaddanaanta liqanyada*
*si kaluu u dheegtaa.*

*Maan dhabtayda faaqido*
*dhubbad-qaad la daba galo*
*cidla maan is kula dhaxo*
*horta ooda dhacameed*
*maan tilmaan ku kala dhigo*
*dhalliishaydu waa tuma*
*dhaymahaygu waa maxay ?*
*Dhabadaan ku taagnahay*
*hadday laafyo dheer tahay*
*dhowrteedu badan tahay*
*mid ka dhow ma helayaa ?*

*Haddaan dhay la heli karin*
*ama sixin la dhami karin*
*maan dhunkaal ba heensado.*

*Dheeraad nin haystoo*
*aqalkiisu dhalo yahay*
*nabaddiyo ku dhaqankeed*
*hadduu tuuryo dhaafsaday*
*miyaan kiisa dhagax karin !*
*maan dhadhaabta xaabsado.*

*Hadday dheeshu laba tahay*
*anigiyo dhurwaagay*
*ka dhaxaysey guushii*
*dhiniciisa ka holladay*
*maan dhankayga ka guntado.*
*Qayla dhaanta sama doon*
*nin hadhkiisa uga dhacay*
*dhawaaqayga sahashadey*
*inuu ii dheg taagoo*
*i dhegeysto maan baro.*

*Haddii awr dhufaanii*
*isku saydhay dhibidii*
*dhirta maan jejebiyoo*
*anba dhoosha ka cartamo.*

*Haddii dhoobi fara baxay*
*dhoobeeyey taladii*
*anba maan hengelo dhigo.*

*Nin dhukani haddaa jiro*
*anba maan is dhega maro.*

*Nin dhibtayda magan galay*
*anba dhiillo maan bado*
*dhaawacayga hoog iyo*
*dhimasho maan ku soo bedo.*

*Ninkii Dheeha gawracay*
*hadduu dhuuni qaatiyo*
*hubkuu ciidda dhaafsaday*
*dhan kastaba iskaga xidhay*
*xilli aanu dhaadeyn*
*sida jibin dhinbilo kulul*
*ama danab dhanbala ridey*
*ama dhibic gudgude wado*
*dusha maan ka soo dhaco.*

*Hadday dhooftay nabaddii*
*cirka looga xero dhigay*
*dhoonbir maan ku soo rogo.*



*Hadday ceel dhexdiis taal*
*dhiigba maan ku soo guro.*

*Dhambaalkaasi waa baaq*
*dhawaaq weeye joogta ah*
*dhahay oo haddana dhahay*
*dhigay oo haddana dhigay*
*hadba dhinac ka soo diray*
*hadba midad u dhalan rogey*
*nin dhegaystey fara badan*
*ninse dhuuxay sheekada*
*wax ka dheegtey mooyaan*
*anna dhaawac igu gaadh*
*dhimashiyo hed mooyee*
*suugaanta dhacanta leh*
*dhibba haygu noqotee*
*inaan dhaafo lama sugo.*

*Ma intaan dhitinayee*
*arrintayda dhilayee*
*dhebigeeda qorayaa*
*bahalkii dhabbacan jirey*
*iga galay dhufayskii.*

*Dhayalsigu lur weeyee*
*ma dhabiibyey nabarkaan*
*dusha sare ka dhayi jirey!.*
*Dhulka iyo dadkiisii*
*intay dhiillo saarrayd*
*toban iyo ma dhawr baa!*
*Dhaqaaq joogsigaygii*
*sannad kale dib may dhigay.*

*Intaan hawlo kala dhiman*
*dhirin-dhiris ku foognaa*
*maygu dhalatay Jiitami*[33]
*Dhaylo dubato caawana*
*ma ku iiddey dheel-dheel!!.*

33 *Jiitama-waxaa looga jeedaa 21ka Oktoobar 1969 kii talisku toobay xykunka.*

*Goobtu dhaygag badanaa,*
*meydna waa dhex-yaallaa*
*dhiigna waa qulqulayaa*
*dhabataa la cunayaa*
*dhamac baa la tuban yahay*
*dheella waa la tumayaa.*

*Ma bishii dhabcaalkiyo*
*dhaar jiidhka fuleyga ah*
*dharaar-maalka tuugga ah*
*nin gumeysi dhaansado*
*taladii u dhiibtaa!!!.*

*Ma bishii ma dheregtada*
*iyo dhaysa weyntii*
*gobanimada dhaawacay*
*nimaan dheefta mooyee*
*dhiska qaran ku hawshoon*
*dheeraadka siisaa.*

*Ma bishaan dhoweystee*
*dhololee ku dhololee*
*dhawraayey sebenkee*
*sugey dhalashadeedee*
*dhiciddeeda raadshaa.*

*Ma bishaan ku dhaatee*
*dhidibkeeda taagee*
*dhismaheeda ficilkiyo*
*dhudhunkiyo laxaadkiyo*
*ku dhabeeyey kaarkee*
*dhoobadeeda ciidda ah*
*dheecaanka seeddiyo*
*ku waraabshey dhididkee*
*dhaxan igu bannaysaa .*

*Ma bishaan u dhacartee*
*u kal tiriyey dhaaxee*
*dhiilkeeda tolayee*
*ceeryaamo dhacantiyo*
*dhedo lagu hungoobiyo*
*dhalanteedka beenta ah*



*dhibicdeedu noqotee*
*dhicisee is nuugtee*
*waxba dhiiqi weydaa.*

*Ma bishii dhallaankiyo*
*dhallinyariyo waayeel*
*dhaddig iyo lab labadaba*
*dhammidood qalqalatee*
*waxba dhaafi weydaa.*

*Ma bishii dhaqaaliyo*
*dhaqankii burburisee*
*isku dhuuqday labadaa.*

*Ma bishii dhadhamadiyo*
*dhafandhaafka hogoshiyo*
*wax la mariyo dhuuntiyo*
*qaran lagu dhillaystiyo*
*dharabbada u xilatee*
*dhulka lacag ku gadatee*
*dhirta wada arradisee*
*dalku dhaxal wareegaa.*

*Ma bishii la dhuuntee*
*sida eeri dhabankii*
*dhabbadiyo jidaashiyo*
*lagu jiitay dhoofkee*
*dalka laga dhuyaalaa.*

*Ma bishii dhanqalankiyo*
*dhawa-welanka hooggiyo*
*xabbad dheelli socotiyo*
*qabri laysku dhacanshiyo*
*xabsi lagu dhabriiriyo*
*dhaca iyo colaaddiyo*
*dhagartiyo shirqoolkiyo*
*dhimashada jideysaa.*

*Ma bishii laf dhabarkiyo*
*afarteede kala dhigan*
*udubkiyo dhigtiisii*
*dhoomihii is celin jirey*

*dhaayihii is tebi jirey*
*gacal wada dhaqnaan jirey*
*hilbihii is wada dhalay*
*dab dhexdooda gelisee*
*dadku kala dhaqaaqaa.*

*Dhugucdada xajiinta leh*
*waxa loo dhab dhabayaa*
*toddobaatan iyo dhowr*
*ama boqol dharaarood*
*ama tiro wax sii dheer*
*nafta loogu dhibayaa*
*dadka loogu dhacayaa*
*dhaxan loogu joogaa*
*dhafar iyo hurdo la'aan*
*dibad loogu dhaxayaa*
*dalka oo dhan nuurkiyo*
*dharka loogu xidhayaa*
*dhaanto loogu tumayaa*
*dhaldhalaalka beenta ah*
*ayaan dhuux ka hoosayn.*

*Dheeha muuqa guudkaa*
*nuxur looga dhigayaa*
*haddii ay dhabeel tahay*
*dadka lihi ku dhaataan*
*wuxuun dheefa lagu qabo*
*dhag dhag iyo durbaan iyo*
*dharba looma baahdeen.*

*Ninka dhacanta jiitow*
*dharka ceebta qariyaa*
*hadal iyo dheh maahee*
*dhaqan suubban weeyaan.*

*Dhimashadu xabaashiyo*
*kafan laba dhudoodiyo*
*rubaddoo ku dhaaftiyo*
*iil dhexdiisa maahee.*
*Dhilashada jidhkaagiyo*
*sharafkoo dhantaalmiyo*
*dheg xumaanta weeyaan.*



*Haddaad dhuuxday bawdyaha*
*miyaa dhawrsi kuu hadhay,*
*Ma xanuun la dhaadoo*
*lala dheellintaa maqan.*

*Dhib waxaan ku marinlaa*
*adigaa dhammaystee*
*haddii dhoof ku soo galo*
*adigaan is dhalan rogin*
*ama dhuuman saas yeel.*

*Haddii mawdku kugu dhego*
*dhabaqsigu ku sii hodo*
*dhamme kuugu soo galo*
*dhakhso iyo si kedisa ah*
*isha oo ku dhugatoo*
*ku dhalliisha mooyee*
*dhoonbirkaygu kuma geyo*
*nabar geesi kaa dheer*
*birsol kaa dharaarow*
*kuma darin dhallaankiyo*
*dhasha oo ku ximisoo*
*dheesha maararrowga ah*
*kugu jiidha dhoohnaan*
*iyo dhoobo digasha ah.*

*Dhinbilaha i shidayaa*
*dhiciddaada maahee*
*dhulluxaad abuurtiyo*
*dhidhkaad reebtay baa badan*
*dhiilladaydu waa taas.*

*Hadal iyo dhammaantii*
*bal aan dhaarsho heestee*
*waxay dhaabaddii tahay*
*marka dhamac la huriyee*
*dhuxul iyo dab ololee*
*dhirta nooli gubataa*
*gari dhaaya furataa,*
*dhafoor taabashada qaar*
*ha is dhigan nin diidow*
*ha u dhuran waraabii*
*laftuu dhuuxay eersaday.*

*Adoo dhiibey hayntaa*
*dhaxdin iyo dalkii huray*
*adigoo dhashaadii*
*dhawaqiyo codkoodii*
*ku dhaqaajin waayeen*
*yaan ninkii ku dhaxal tiray*
*adoo caara dhuubtiyo*
*dhulka nabarku kaa yaal*
*dhaxan kaaga daba iman*
*dhillistiisa kugu dilin.*

*Yaan lagaaga soo dhicin*
*dhinacaan is bixin karin*
*dhacadiid iska ogow*
*dhagartana is weheshada.*

*hayska dhiman sidii neef*
*horta dhiig ku faraxalo*
*dhudhun kaa hor jeedaa*
*ku dhirbaaxi maayee.*
*Dhumucdaadu waar hooy*
*dhumucdaadu hooy hooy*
*dhumucdaadu yay hooy*
*dharab-roorka kugu jebin.*

*Inantaada dhega culus*
*dhiidhiibso kula tali*

*gacan baa wax dhalisee*
*ha dhur sugin ayaamaha*
*hana dhawrin maalmaha,*
*dheeshu xeego maahee*
*waa dhabiiltan gobannimo*
*dhidar fule gashaantida*
*boqorkiyo dhaclaa xidhan*
*yaanu kaaga dheerayn.*

*Daadi dhiilka buuxsamey*
*dhici guusha maganta ah*
*nidarkiina dhaqan geli.*



# QAYBTA AFRAAD

# ISA-SUDHAN

*Garan waayey sheekada*
*waxay gacallayaashay*
*Geed[34] iigu bixiyeen.*
*Dhirtu waysku gogol qudha*
*mase wada gudboonee*
*giddi maysku qaadaa*
*kay gaar u jeedaan*
*may goonni sheegaan,*
*maxay uga gabbanayaan ?*

*Gudub magacu waa hore*
*galbay oo la wada maqal*
*dunidoo dhan wada gaadh*
*gabdhihiina loo sheeg*
*iyadaan god loo deyn.*

*Gibishay i saareen*
*geestee u duubaa ?*
*Go'a lay huwinayaa*
*ma dhalliil gurracan baa ?*
*Gumar iyo ma ciin baa ?*
*Ma ganboor sunaan ahay,*
*mise lagu go'aankiyo*
*gawracatadaan ahay ?*
*Gaagaabka cilinka ah,*
*ma gadaal bax baan ahay ?*
*Mise gocondhadaan ahay ?*
*Mise gawlallaan ahay ?*

*Ma ammaan gayaxan baa ?*
*Gabre iyo madheedh iyo*
*ma galool mudhaan ahay ?*
*Mise tolow gobkaan ahay ?*
*iyo lama garaacaan ?*

34 *Geed-waa magac ay ugu yeedhaan Hadraawi asxaabtiisa gaar ahaaneed.*

*Ha ka guban mar baan idhi*
*gacan baaban u holladay*
*inaan geysto dhawr jeer*
*misna waxaan guddoonsadey*
*horta inaan u kuur-galo*
*halka loo gol-leeyahay.*
*Waa goorma goorteed*
*gef dhacaan u haystoo*
*godob baan tirsanayee*
*sow waa gartoodee*
*Garas jilif leh baan ahay.*

*Guudkayga boqorrada*
*garaareeya heesaha*
*gallad qurux cod iyo luuq*
*shimbiraha u gaarka ah*
*gashan labada qaybood*
*haddii ay galaydhkiyo*
*galgalkiyo fadhiistaan*
*geesigooda caan baxay*
*gunta iyo salkaygana*
*goodaaddo nacabiyo*
*maska goodka halista ah*
*inta bahal gurguurtiyo*
*gungumaa ku shiri kara.*

*Waxaan ahay ma guuraan*
*gantadaydu adakaa*
*gaashaan biraan ahay*
*goblan tala adduunyooy*
*gabay jaaba-jaaba ah*
*jajab iyo guraangura*
*geel-kiiska maansada*
*suugaanta gocorka ah*
*xulka inan gumeedka ah*
*ninka maalin gelinkeed*
*Maarkoos[35] ka gurayee*
*garcan waayey baan ahay;*
*Alla gaarisaniyaa.*

*35 Maarkoos-waa Ferdinando Marcos, keli-taliyihii xukumi jirey dalka Filibiin (Philipine) ee lagu ridey kacdoonkii shacbi 1986kii.*



*Oo maxaase iga galay*
*intuu Gaasir ii wadey*
*googaalihiisii*
*anba ways gujinayoo*
*markuu gooddi meershaba*
*garashaan ku dirayee.*

*Ninku ways galaalee*
*murti wax ka soo go'ay*
*bal aan soo godlee qabo.*

*Isagoo galgaladkii*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxuu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Samirkiyo dulqaadkiyo*
*naxariista badan bay*
*dadku igu ogaadeen*
*nafta aad sugaysaan*
*ma awoodahaygaa*
*yamyam iyo qadaad weyn*
*xataa caanaleydii*
*booc ugu tukubayaan*
*markaan diiri waayaa*
*laysii qodqodayaa".*
*"Doofaarka ficil li'i*
*naar loogu daayimi*
*kol haddii dubbiyo waran*
*duunkayga lala dhacay*
*yaa dabarka igu xidhay*
*horta maan dagaallamo*
*anigu maan is daafaco".*

*"Sow duruustu maahayn*
*mudankiyo hal doorkiyo*
*marka geesi laga dilo*
*dadku inay fadhiistaan*
*waatan geenyadii Diran*
*iska soo durdurisee*
*duufaanka wadatee*
*ma la waayey dabar adag*
*iyo wiil dardara qaba*

*ma inaan dumaalay*
*dantu igu khasbaysaa"?*

*Duqu wuxuu u haystaa*
*dilku inu qardhaas yahay*
*dulmi lagu adkayn karo.*
*Duqu waxaanu garanayn*
*inuu dhiigga daataa*
*yahay dogobbo waaweyn*
*iyo xaabo lagu daro*
*dabka qaran kulaalee*
*lagu shido dareen guud.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxuu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Soddoh-yahay la duufsaday*
*sowdigaan bannaankiyo*
*dibadaha u bixi jirin*
*sowdigii dusuuddiyo*
*weelkaaga xalan jirey*
*yaa ciyaarta kugu daray*
*kugu yidhi ku soo bood*
*yaase kuu cimaamaday ?*

*Ma Rashiid Gadh-weynaa*[36]
*kugu yidhi ganbooley*
*iyo guurti waayeel*
*garta waa u simanyiin"?*
*"Ma ogtahay xilkaan sido*
*ruuxa soo damaaciya*
*inuu kiis bileys yahay.*
*Meesha yaan habaaskiyo*
*gabayooxu kugu dilin*

*"Haddaad doonto gaadhsii*
*Gaarriyiyo Hadraawiyo*

36 *Rashiid Gadh-weyne waa Rashiid sheekh Cabdillaahi X. Axmed.*



*Gurxan*[37] *iyo Burhaan*[38]*iyo*
*ninkay Guush*[39] *yidhaahdaan*
*ama Boobe*[40] *ugu gee*
*gurigiisa Taywaan*
*bal aniga wax iga gura.*
*Horta garanba maynee*
*fara geliya yaa yidhi*
*arrimaha gudahayaga*
*xaggee bay ka kululyiin*
*may shaqaalahaygiyo*
*xaajiyo khamsiintiyo*
*caasi waalideyntiyo*
*jinka naagihiisiyo*
*anigiyo darmaanaha*
*isu kaaya daayaan*
*jaas aanu dheellee*
*nin la soo kiraystoo*
*lacag doona baan nacay".*

*Duqu wuxu jeclaan laa*
*ninkuu doono mooyee*
*dar kaloo ka geesii*
*daf inaanay soo odhan*
*dalan doolka Filibbiin.*

*Isba waxa ku dacal jira*
*dubatada dhallaankiyo*
*diin laawa-yaashee*
*wuxuu ii durkinayaa*
*wuxuu ii arkaa dool*
*nin dabaylo keeneen.*

*Duqu waxaanu garanayn*
*dunidaba sal iyo baar*
*inaan deyrku kala xidhin*
*ama diirku kala gurin*
*in dagaalka joogiyo*
*dadku laba bahood yahay.*

37 *Gurxan-waa Xasan Gurxan Ibraahim*
38 *Burhaan-waa Burhaan Daahir Afrax*
39 *Guush-waa Cali Jaamac Basaale*
40 *Boobe-waa Cabdi Yuusuf Ducaale.*

*Isagoo galgalad kale*
*dadka gooni ula shiray*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Qarafsiga aroortii*
*qadhaab doonashada guud*
*qofna looma diidee*
*haddii aan quwaax helo*
*dadka kalena wada qado*
*maxaa lay qaleeyaa ?*
*Ma wax baan qalloocshoo*
*qarankiyo dalkaan dhacay*
*ma wax qiiro kiciyoo*
*laga qoomammoodaa" ?*

*dalku lacag ma haystee*
*shilimada ka soo baxa*
*qof haddaan la wada siin*
*qiyaash maashka ugu weyn*
*miyay qaybsamaysaa ?*
*haddii laysku wada dilo*
*hadhow yaa mas'uul ka ah?.*

*Haddii berrito lay rido*
*ama geeshku igu kaco*
*anigaan wax meel dhigan*
*sidaan yeeli doonaa*
*miyaan tuugsan doonaa*
*ma waxaydin jeceshiin*
*inaan daasad qaatoo*
*ceebeeyo Filibbiin?.*

*Intii ay dhul weynaha*
*raggii dhoofay haysteen*
*sida awr dhufaanaa*
*usha laygu dhaqayoo*
*labadayda dhaban baan*
*mid markay dhirbaaxaan*

*ka labaad u dhigayoo*
*intaas waan dhursugayee*
*inta dhiisha qabada ah*



*wuxuun iigu dhacayaan*
*idinna maa i dhawrtaan ?.*

*Wixii roob ku di'i jirey*
*wuxuu doog jilbaha dhigay*
*Diihaal ma laqanyoon*
*dibnahaa qallalan weli.*

*Duqu wuxu ka marag kacay*
*danni horeba loo qabey*
*in dorraad gumaystuhu*
*dusha sare ka raran jirey.*
*Duqu waxaanu garanayn*
*kol haddii dabuubtaas*
*dibnihiisa laga helay*
*denbi kale inay tahay.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*dadka guud ahaantii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Tartan xaashi tiris galay*
*xujo socota weeyee*
*xabbad baaban haystaa*
*ma xashiish cab baan aha*
*bilaash-xaytayaashiyo*
*markaan naag asay xidhan*
*xilka anigu aan sido*
*u xayuubbinaayee*
*xafiiskayga kuul iyo*
*xinne iyo huruud iyo*
*lala tegayo googarad".*

*"Danyartay wad-wadatiyo*
*naagtan waalaneey maqal*
*dadka kuu gurmanayaa*
*shalay daahir yaa shamis*
*sawtay i doorteen*
*wuxu diino badanaa".*

*"Doorashadu mar weeyaan*
*nin la doortay baan ahay*
*sidii baan u doorrahay*
*doorashoo dhan waan xidhay*
*dabadayna lama furo*
*haddii kale dab baa kacay*
*imminkana digtoonow*
*dib u jeesta oo taga*
*ka su'aal ka keenow*
*magacaaga ii sheeg*
*amar diiddo weeyee*
*anti baan ku qorayaa".*

*Duqu wuxu jeclaan laa*
*midho daray had iyo jeer*
*duuduub in lagu liqo*
*waxse aanu kuba darin*
*in la yidhi ha laga dayo*
*dirxi inu ku hoos jiro.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Madaxnimada Filibbiin*
*ma dadkay u siman tahay*
*miyaan aniga lay siin*
*miyaan Riigan odhan hay*
*kun miyaanan shalay dilin*
*kuman kalena dhaawicin*
*kumanyaal xabsiga dhigin*
*duqa iga sarreeyaa*
*markii uu warkaas helay*
*sowkii mafsuudee*
*hambalyada qoraalka ah*
*deg deg iigu soo diray*
*hubka yidhi ha loo raro.*
*Haddii aanan toosnayn*
*sow muu cadhoodeen*



*anna ima canaanteen*
*ma duruusihiisaad*
*igu beeninaysaa"?*

*Dal hadday ku badan tahay*
*deldelaadda dhimashadu*
*dabar go'u bannaan yahay*
*hub markaaba soo dega*
*dawladdiisu waa caan*
*inaan doorkan maanta ah*
*deeqdaas cid kale bixin*
*dunidu way ogsoon tahay.*

*Duqu waxaanu weli garan*
*dabka Riigan bixiyaa*
*dadka inu garaad taro.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Naagtu qaylo badanaa*
*Ka fadhiisan weynee*
*miyaa nalagu soo falay"?.*

*"Qoftan waalan yaa qaba*
*tolow mee ninkeedii*
*muxuu noogu soo diray*
*hadba gees u carartee*
*ma carsaanyo falan baa?*

*miyaan kabuhu goynayn*
*haddii aan xanaaqoon*
*diinteeda caayana*
*hadhow baa islaantaas*
*loo barooran doonaa".*

*"Doollarkiyo waxaan xaday*
*maxaa adiga kaa galay*
*yaa xisaabi kugu yidhi*
*hanti-dhawr miyaad tahay*

*horta anigu yaabee*
*ma basaasad baad tahay*
*sheekhayga lacagtiyo*
*sirahayga gaarka ah*
*ha sheeg-sheegin adiguye*
*shuqulkaaga maahee*
*shalmadaha xariirta ah*
*kunka aqalka kuu yaal*
*meesha aad ka keentiyo*
*halka lagu sameeyiyo*
*qofka kaaga soo diray*
*bal cabbaar ka sheekee.*

*Duqu wuxu u haystaa*
*dabka ruuxa shidayaa*
*inuu Daado qudha yahay.*

*Duqu waxaanu garanayn*
*hadday deyso gabadhani*
*weli inaanay degin talo*
*degelkuna sawaxan iyo*
*dabra weerar jiidhiyo*
*dad cadhaysan waayeyn.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Adigays cajabiyee*
*car miyaynu simannahay*
*dhexir baabad sidataa*
*miyaad dhaadashada guud*
*Maarkoos u dhigantaa?*
*ab-tirsoo ayaad tahay*
*hooyadaa ma inan baa*
*aabbahaase magaciis*
*adigu maadigaad tahay*
*horta adigu yaad tahay"?*
*"miyaad janan ahayd beri?*
*xiddigiyo ma leedahay*
*billadiyo wax dereja ah?*
*Ragga iyo haweenkuba*



*haddii ay ku doortaan*
*meel laguugu soo shiro*
*maxaad sheegi doontaa?*
*Ma buraanbur tuuga ah!*
*maxaad keeni doontaa*
*dekedaha ka soo rogi*
*ma kensheliyo fara badan*
*biinan iyo muraayado*
*iyo toobab dhaadheer.*
*Sharikadina baabuur*
*kaa iibin maysee*
*maxaad fuuli doontaa?*
*Ma dameer la soo xaday".*

*"Miyaad suudhadh leedahay*
*niigtayno shucuba leh?*
*Miyaad Riigan keligaa*
*la qadeyn karaysaa?*
*hor fadhiisanaysaa?*
*Miyaad sheeko qurux badan*
*qosol loola wada dhaco*
*qaadaa dhigaysaa"?.*

*"Ma dharkii ninkaagaad*
*igu harowsanaysaa?*
*Maxaad aniga huunnooy*
*ii khashiinsanaysaa?*
*Orod shaadhadh soo tolo*
*dheddigyohow lab soo tumo*
*dabadeedna goortaas*
*kaalay aynu murannee".*

*"Bal calaacalaa daya*
*cagihiyo tafeenaha*
*ciddiyaha sibbaaqa leh*
*intay soo buskuxisoo*
*isa soo birkicisay*
*dadkan gelinba caynka ah*
*caashaqa digaaga ah*
*caammadan la soo xulay*
*i calmada ku leedahay.*
*Iyadoo cusburatoo*

*weliba cuudna shidatay*
*cugashiyo u socotaa*
*carshigiyo kursiga sare".*

*"Carmal yahay garoob yahay*
*Taadjar baa ku dhaantoo*
*meelahaas ka hadashee*
*waxaan kaa codsanayaa*
*qarankana ha ceebayn*
*calankana ha shaashayn.*

*Isba dahabadiisuu*
*u dedaalis badan yahay*
*inay duugga dhaxashee*
*Dulmar inay haween tahay*
*gol daloolo maahee*
*waxa uu u durayaa*
*damaq wuxu is leeyahay*
*goddobtii dorraad tiil.*
*Dirir baanu kaba filan*
*dermaduu xidh xidhay shalay*
*weli waxaan ka daadegin*
*dakharrada ku dhacayaa*
*misna inay docdii tahay*
*rugtii daaha loo rogey.*

*Duqu waxaanu garanayn*
*qof dadkiisu geenyada*
*u dallaallimeeyeen*
*inaan loo dardaar werin.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Hunguraa ku qaadoo*
*sawir baad run mooddoo*
*waxba war uma hayside*
*aqalkaad ku socotaa*
*janno dagatay maahee*
*god waraabe weeyaan*
*orod arag lafaa yaal*



*iyo meydka kala quban*
*wacadkii Ilaahay*
*haddaad aragto saamaha*
*madaxyada is biirsaday*
*inuu baalku kaa qoyi.*
*Meesha quud ma yaallee*
*yaan dhilmaanyo kugu cunin".*

*Duqa waa wadhiisii*
*waa kaas derderey buur*
*iyo meelan loo diran*
*dadqalnimada falatiyo*
*dufankuu u haystaa*
*diricnimo inay tahay.*

*Duqu waxaanu garanayn*
*meydka daarta yaallee*
*ku dib jirey agtiisiyo*
*madaxyada duggaashadey*
*inay deyn ku maqan tahay.*

*Isagoo galgaladkii*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Haweeney xun baad tahay*
*hooyo baaqataad tahay*
*huryo waalan baad tahay*
*hed la soo diraad tahay*
*belo hooliflaad tahay*
*huudhaydh ayaad tahay*
*seexaarad laga guray*
*hargab soconayaad tahay*
*hindhisiyo wax baad tahay*
*haddeer aanan sheegayn*
*biif-baaf ayaad tahay*
*koolba aariyaad tahay*
*isnidaamis baad tahay".*

*"Habar xaabo keentoo*
*intay qaar ka biisheen*
*laga wada amaahdoo*

*galabtii carrawdoo*
*kiishash madhan la noqotoo*
*isla sii murmaysoo*
*toban fooq dhisaysoo*
*is illowsan baad tahay".*

*"Malmalaado qubatoo*
*waxar caana nuugii*
*faddareeyey baad tahay".*

*"Wadhatiyo biyooley*
*laysku soo hoggaanshoo*
*mid caloola karisaa*
*firinbiga u haysoo*
*intay feedh tabciyo laad*
*isku wada daqiiqeen*
*daaduunki xiiqoo*
*hal cabbaara dabadeed*
*isku laba kacleeyoo*
*intay beer caddaadeen*
*cagahays la dhacayoo*
*ciid miidhanaad tahay".*

*"Dumar wada wallacayoo*
*cuntadii ka dhaartoo*
*intay liin cusbaysteen*
*dhuxul ruugayaad tahay".*

*"Qolo aanan sheegeyn*
*duqda lagu mannaystee*
*gurigooda joogtee*
*dharka maydha baad tahay*
*midda xoogga weynlee*
*dhulka xaadha baad tahay*
*labadoo kallahayoo*
*is hareer socdaad tahay.*
*Intaas oo dhan baad tahay*
*wax ka sii xun baad tahay*
*haash biiray baad tahay".*

*"Ereyada an kuu xulay*
*waan kuu khafiifshee*



*waxaan hoos u leeyahay*
*maqli maysid adiguye*
*duuduub ku qaadoo*
*hooygeeda ma xaslada*
*hengel baabad sidataa*
*maadigaa hoggaansha ah*
*nin halyey ah ridi kara*
*qaban kara halkiisii*
*midnimada burburin kara*
*dadka kala kaxayn kara*
*qolo qolo ka dhigi kara*
*hadba qoys ku tuman kara*
*qofkaad doonto cuni kara*
*sharcigoo dhan burin kara*
*sidaad doonto fali kara ?*
*hadda guulahaygaad*
*malaa sheegan doontaa"*

*Duqa waxan is leeyahay*
*dura iyo isguulkii*
*markuu diinta baran jirey*
*diiwaanka gabayada*
*iyo looxa doodaha*
*waxa loogu daabaco*
*dibadduu ka qaban jirey*
*show muxuu dudubin jirey*
*cilmigiyo daliillada.*

*Duqa waxaan is leeyahay*
*berigaas da'diisii*
*isagaa dafka u sidey*
*nacas iyo damiin iyo*
*kuwa daata maahayn*
*Alla muxuu diin abaahiyey.*
*Durba guulihiisii*
*deg deg buu u wada maray*
*erey beena kuma darin.*

*Duqu waxaanu magac dhebin*
*rag Allow duruustaas*
*dugsiguu ku baran jirey.*

*Isagoo galgalad kale*
*ka hor yimi gadood dhacay*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Sanad guuradaydii*
*la i doortay maahoo*
*maalintii xorriyaddiyo*
*gobannimada maahee*
*dadkan soo bannaan baxay*
*feesteeya yaa yidhi ?*
*Madax-weynenimadiyo*
*Maarshaal labeeyaan*
*muddo badan ku joogee*
*mugga waan dallacayaa*
*Boqor inaan noqdaa baa*
*saarkaygu doonoo*
*in la ii ciyaaroo*
*dadku wada raxleeyaan*
*u tabaabulshaystee*
*waxaad yeeli doontaan*
*keeg baa la dubayaa*
*billadaa la tumayaa*
*badda iyo dhulkeenniyo*
*samadaas dusheennaa*
*dhal-dhalaal la sudhayaa*
*kooxihii ciyaartiyo*
*ubaxii kacaankaa*
*maryo loo toltolayaa*
*dunidaa la wacayaa*
*maalintaa la yaabka leh*
*u diyaar-garooboo*
*farxaddiyo bakhaanbakha*
*cishadaa ha la la sugo."*

*Duqu wuxu u haystaa*
*in dabbaaldeggiisii*
*dadku farax u soo baxay.*
*Waxse aanu kuba darin*
*dhanka uu degmada yidhi*
*haw dareero geeddigu*
*inaan looba diga-rogan.*



*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi Guddoonshuhu:-*

*bishan iyo bisheedii*
*belaad soo eryeysoo*
*soo baacsanaysee*
*baradaydu Silimmiyo*
*ma bar laysku jiidhiyo*
*baytu Abu Sufyaan baa?"*

*Adna buuse naag yahay*
*"Malyannadan dar-leefka ah*
*adigaa magaaliyo*
*miyigaba ka keenoo*
*keligaa macsuumee*
*milicdiyo habaaskiyo*
*ha meermeerin suuqee*
*"Anba mudanayaal baan*
*marti-qaad u fidiyoon*
*maraq iyo digaag iyo*
*macmacaan u kariyee*
*haddaad igu masayrtood*
*muraad iyo xus leedahay*
*masaakiintan kabaha la'*
*wada meehannawga ah*
*minankayga cadarkiyo*
*maaweredka lagu shubay*
*ha ku soo maqiiqine*
*makhsinkaagi orod gee*
*marxuunkii ku qabi jirey*
*u akhriya dheh Mawliid".*

*"Hadday muufo waayeen*
*maanigaa kasoo xaday*
*haddii tuug u soo dhacay*
*denbigooda weeyee*
*may jikooyinkoodiyo*
*kushinkooda ootaan*
*Bileyskaan dalbanayaa*
*ha la baadho aqallada*
*kaygana ha lagu daro*

muufaad ka hadashee
bal in rooti laga helo
af-lagaaddo badanaa
maba cuno hadhuudhkee
maxaad ii hafraysaa?"

Duqu ways nasakhayaa
dabbaal saasa maahee
dulucdiisa maahda ah
wuxuu duurxul uga dhigay
dundumuu u haystaa
dadka tuban hortiisoo
dala'saa ku jira weli,
waxse aanu kuba darin
inay dooddu xidhan tahay.

Isagoo galgalad kale
la hadlaaya gabadhii
wuxu yidhi Guddoonshuhu:-

"Nin ku qaba sidaan ahay
kiradiyo ijaarkiyo
la baxsaday masruufkii
ku khammaaray biilkii
ama xaafad kale tegey
gabdho kale shukaansaday
maxaad iigu maran tahay?
Hooy hooy wadaaddaay
bilcan yahay dabbaal yahay
bilis yahay inkaar yahay
qaadka adigu naag yahay
iima aanad qaadine
qashqashaadda iga dhaaf
qujbal[41] baan ku leeyahay
haddaad quusan weydoo
weli soo quturan tahay
waa yahaye bal soo daa
dirridiina waa taas.
Wey diririg leedahay
wey dig iyo damleedahay.

41 qujbal-waa Af Amxaari, macnihiisuna waa fadhiiso



Dheeshu xeego weeyee
ulihii inoo keen
iyo siidhi-walayaal
dadkuna hayna daawado
raggu aniga weeyee
adna xaawaleydoon
Ubax iyo Ayaan iyo
Ururrada Haweenkiyo
marwadayda lagu darin
tigidhada u soo goo
mahadhooyinkaan dhigo
haddii aan wargeysyada
Xiddigtiyo Ogaal[42] qorin
waxaan sheegay waa been".

"Si Allaaba badanoo
taariikhda seben hore
soddoh baa nin legeddee
haddii aan sabbeeyood
iga gacan sarraysana
ma inaan baxsanayay
caqligaaga kula tahay?
Gobanimo-u-dirir baan
kuu samaysan doonaa.
Jabhadaha Uniitiyo[43]
Birigaato Roosaan[44]
hub ka keensan doonaa
Birarna waaban haystaa
aan wiilal biima ah
Biljam iyo Isbeen iyo
kaga keeno Baariis
kuwa lagu badhaadhee
nin dulmani u yeedhee
qarannimada daafaca.

Ma oggoli dabuubtaas
sida damasha qaarkeed
dad ma soo cawaal baxo

42 Xiddigtiyo Ogaal-Waa wargeysyada Taliska diktatooriga ah ee Soomaaliya.
43 UNITA-jabhad ka jirta dalka Angoola.
44 Birigaato Roosaa-Koox argagixiso ah oo dalka Talyaaniga ka jirta.

*dal goblamayna lama maqal*
*gabbal dumeyba waa beri.*

*Duqu waxaanu weli garan*
*inaan dawga noloshiyo*
*taariikhdu dib u noqon.*

*Isagoo galgalad kale*
*dadka goonni ugu digey*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"Wax la duufsanaayoo*
*faddaroobey weeyaan*
*miyuu dhaafay hadalkaan*
*ku celceliyey dhawr jeer".*
*"Ha qamaaminaan idhi*
*qunyar seexda baan idhi*
*is-qaboojiyaan idhi*
*hantideennu keligey*
*anba iguma aaddee*
*iska quusta baan idhi*
*qalbigaa ku naaxee*
*heeso qaada baan idhi*
*qof hadduu bulshada xado*
*waa loo xil qariyaa*
*qaladkiyo waxaan falo*
*haygu qabanninaan idhi,*
*aakhiraa la tegayaa*
*Jannaday ka buuxaan*
*midhihii Fardawsee*
*samir qooshta baan idhi,*
*ku qadeeya baan idhi,*
*dulmigana qastaan idhi,*
*ku qaxweeya baan idhi,*
*dhimashadu xaq weeyee*
*hilbihiinna bahalkiyo*
*yaanay haaddu gurannine*
*xabaalaha qotaan idhi,*
*ilka qayta baan idhi,*
*qiyaamaa danbeeyee*
*ka xorooba noloshoo*
*cibaadada badshaan idhi,*
*cunto looma ooyee*



*waxa sharafka dhaawaca*
*ha sheeg sheeginaan idhi,*
*nafta waa la laylyaa*
*qadoodiga bartaan idhi,*
*waa lagu cadaabaa*
*qofka dahabka kaydshee*
*waxaad qaali haysaan*
*qiimihiisu badan yahay*
*iska soo qubaan idhi,*
*qofka aniga iga dhana*
*ruuxa iiga hiishaa*
*ajar buu ka helayaa*
*ka i neceb qabtaan idhi,*
*anbiyada la doortaa*
*ruuxaan wax xaasidin*
*u shafeeca qaaddee*
*marka kharash i soo galo*
*illaa waan shaqaystee*
*hambalyada i siiyoo*
*i shaxaada baan idhi,*
*cashadaan wax laayee*
*meydkiinnu badan yahay*
*denbigaa ku maydhmee*
*iska wada qoslaan idhi.*

*Weli kaashifaan ahay*
*waa lay siyaartaa*
*habeenka iyo maantii*
*intaas waan siraataa*
*ha i xamanninaan idhi,*
*haddaad yeeli weydaan*
*jaajuur noqdaan idhi.*
*Haddii aad dhibaatada*
*u adkaysan weydaan*
*dhuumaha saliiddiyo*
*dhulka Carabta aadoo*
*iska dhoofa baan idhi.*
*Dhidid waxa ku hoysaan*
*ama muruq ku dheeftaan*
*anaa meelo kala dhiman*
*ku dhammaysanaayee*
*Baanka soo dhigaan idhi,*

*Aniguba ma caasiyo*
*casharrada raggaygiyo*
*codka macallinkaygee*
*cilmiyada afkaygiyo*
*carrabkiyo tusaalaha*
*ku celceliya baan idhi.*
*Intaasoo dhan baan idhi*
*qawlkaa san baan idhi.*

*"Dadkan joogi waayee*
*millaterigi aan diray*
*la dagaallamaayaa*
*af-dhalaalka keenee*
*haddii qaammudkood galay*
*in tacshiirad lagu furo*
*abaalkooda weeyee*
*maanigaa wax-saarka leh".*

*Duqa waa runtiisee*
*dar Allee sidaas yidhi,*
*hadda wuu iskuna deyey*
*inaan diidey cidi odhan.*

*Duqu waxaanu weli garan*
*inaan saas dad laga helin.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi Guddoonshuhu:-*

*"Sida ruux i caashaqay*
*doondoonis badaneey*
*haddii aad i neceb tahay*
*anba waan ku shuufee*
*rida rida haddaad tidhi*
*habaar weeye saasiye*
*cudud laysu sheegtiyo*
*carrab iyo ishaariyo*
*markay baadh canaad tahay*
*nin waliba ciddiisuu*
*cuskadaa u yeedhaa*
*kuwo laga ducaystoon*



*isha loo mar-maran baa*
*i hareera joogee,*
*anna boqorki Shaah iyo*
*Xusni iyo Xuseen iyo*
*Xasankii ku biiriyo*
*rooxaanta Bari Dhexe*
*ku bariisanaysee*
*Bahda Fahad u weyn tahay*
*Barre iyo Mabuutiyo*
*jacfar iyo Bukaasiyo*
*Beegan iyo Samoosiyo*
*Diktoor Baandaheediyo*
*Baaderiga Roomiyo*
*burjigiyo karaamada*
*ninka lagu barriijee*

*Baakistaan u taliyiyo*
*Bootaan cuskanayaa*
*iyo weliba Beeriis*
*ha dhacdaannu leenahay*
*gabayohow ha beenaan*
*naagta beerka kala goo*

*Duqu wuxu cuskanayaa*
*dawliskii bahdiisiyo*
*xunbo daad la socotoo*
*digaduu dhir moodee.*
*Waxse aanu kuba darin*
*isagiyo dirkiisiyo*
*inaan dayro fara-madhan*
*ducadooda la aqbalin.*

*Isagoo galgalad kale*
*la hadlaaya gabadhii*
*wuxu yidhi guddoonshuhu:-*

*"In dhoweyto suuqii*
*kaa xaabi waayee*
*haddii aanad iga tegin*
*waxa igu Wallaahiya*
*intaan kookayaashiyo*
*jaariyadahaygiyo*

naagtayda kugu diro
inay xaaqin kula dhici
iyo baafaf waaweyn.

Bal cajuusaddaa daya
hadhka galay hadmaa dumar
Madaxweyne noqon jirey
makarafoon sidsidan jirey
shir jaraa'id qaban jirey".

"Horta anigu yaabee
dawladnimo ma Baastaa
ma quraac la dubayaa
mayska qalin daraalaa
habartuna ma geydaa
muslinyohow islaameed
kursigani ma doonnaa
ma bas buu ku yaallaa
kiro iyo ma lacag baa,
miyaa layska ka korayaa"?
Waynaan dareemine
dadka naagahaw daran
dillaal iyo mallaal iyo
dib u socodna wayaga".

"Waddankaa cuslaadoon
shicib ila walwaaliyo
markab qaada waayee
miyaa subaxan saaka ah
kibir iyo is-yeelyeel
cidi iila imanlayd".

Duqu wuxu ka kulul yahay
doonniduu ku joogaa
doobigeedi buuxsamey.
Didmaday la booddiyo
dildillaanka ruxankuu
dawannada ku sara-kacay.

Duufaanka dhacayiyo
danabkuu ku selelee
miyay doobir leedahay
xaggee doohdu joogtaa ?



Duqu waxaanu weli garan
kol hadday dillaacaan
dakhalkiyo shiraaqyadu
inaan qiilba loo deyin.

Isagoon garaysnayn
dadku inay gadoodkii
kaga gacan sarreeyeen
wuxu yidhi Guddoonshuhu:-

"Weligood ha dhaarteen
dhoobo hays marmariyeen
iyo dhiilo aan jirin
dhagxan iyo ha qaateen
dhalo iyo faraajiin
guryo laga caraabiyo
saro madhan ha shiideen
laamiyada ha oodeen
intay taayir oloshaan
dabadeed ha dhuunteen".
Kibirkaan dhutinayiyo
ma dheeldheelligaygay
inaan dhacayo moodeen"?

"Madaxweynahaan ahay
anigaa guddoonshe ah
indhihii dadkaan ahay
dhegihii dadkaan ahay
maskaxdii dadkaan ahay
barihii dadkaan ahay
aabihii dadkaan ahay
keligay dalkoo idil
anigaa ka kaabba ah
dhici maayo weligey.

Dirqi buu ku yidhi saas
duqu wayska laban yahay
si xun bay u daareen
dafiraadda fara badan
denigaa ku dhalay saas.

*Hadda garo daldalankiyo*
*duryankiisa quusta ah*
*halka uu ka dirayaa*
*waa diyaarad guudkeed.*

*Waxse aanu kuba darin*
*inay duushay geeddii.*
*waa daruuro guudkood*
*duqu ways xansanayaa".*

*"Dunidu hawlo badanaa*
*tanna laysu dacaree*
*caawaba ma dibad baa !*
*Tolow dawlad dhega-xidhan*
*dummaddayda lagu qoro*
*dal tolow habeensadey*
*geyi aan dab laga shidan*
*dayaxuna u soo bixin*
*qorraxduna dellegan tahay*
*dugsi iyo aqoon iyo*
*garashiyo dareen iyo*
*dadnimiyo xishood iyo*
*dastuur iyo xisaab iyo*
*dacwad iyo garsoor iyo*
*tartan iyo dardaan iyo*
*dibjir iyo wax buuqiyo*
*danyar qaylisaa jirin*
*dimuqraaddinimadiyo*
*xaqa cidina daaficin*
*taliyaha la daba gelin*
*denbi dhacay la faallayn*
*dulmi laga calaacalin*
*dilka iyo xasuuqiyo*
*deldelaaddu furan tahay*
*ammaantaydu diin tahay*
*Deeleyna laga tirin,*
*raggu daakirraaddii*
*sida adhiga daaq tago*
*dumarkana la dhaansado*
*dadku wada nasakhan yahay*
*xaggee baan ka doontaa" ?*



*Dabbaal maaha Xaajigu*
*duqu waa ogsoon yahay*
*in dastuurka qarankiyo*
*dugsigiyo aqoontiyo*
*dareenkiyo xishoodkiyo*
*dimuqraaddinimadiyo*
*waxa ridey dadnimo tahay.*

*Duqu waa ogsoon yahay*
*inaan daayin abidkii*
*dawladdaas la yaabka leh*
*damaciisu siinayn*
*duniduuse barayaa*
*sida uu dastuurkiyo*
*dugsigiyo aqoontiyo*
*dareenkiyo xishoodkiyo*
*daacaddiyo sinnaantiyo*
*dimuqraaddinimadiyo*
*dadnimada u neceb yahay,*
*dar kalaa la qaba saas.*

*Duqu waxaanu garanayn*
*duulka uu tilmaantiyo*
*haddii uu dalkaas helo*
*isna inu dameer yahay.*

*Duqu waxaanu weli maqal*
*Dun Carbeed inuu yidhi*
*diric keli ahaantii*
*daleel guusha kama helo*
*dadkaa geesi lagu yahay.*

*Qofba wuxu ku dagan yahay*
*halkuu daacad kaga hadho.*

*Duqii Maarkos waa kaa*
*waddadii dayacan koray*
*jidka aaran dubatadu*
*ku dambayso weeyaan.*
*Dawga weeye loo maro*
*sannadaha dul-saarka ah*
*iyo nolosha daalka leh.*

*Dawga weeye loo maro*
*duni aan tilmaannayn*
*duuggeedu male yahay*
*qof ku daaya mooyee*
*qof ku doonayaa jirin.*

*Cudurrada dad leeyahay*
*dawadoodu qaar bay*
*dacar iyo dhunkaal tahay.*
*Qof hadduu mar kaga daro*
*sida doorku ugu jiro*
*sida daranba loo yeel.*

*Nin is doortay keligii*
*in la doorsho mooyee*
*isma doorsho weligii.*

*Nin dushiisa lagu shaxay*
*wax inuu durduriyoo*
*bal si uun u didi karo*
*ka dareen qabaan jirin.*
*Duudsi baa ku dhacay culus*

*dibindaabyo lagu falay*
*waxa loogu daray nacas*
*damqashadu ka dheer tahay*
*dirir buuse ku hubsaday*
*inuu diidi karo taas.*

*Nin kastoo dardara kulul*
*dabar lagu ceshaa jira*
*Diin kastuu la soo shiro*
*dacwad baa ka furan kale.*

*Cirka sare nin degeshadey*
*dayaxiyo marmari jirey*
*xiddigaha la deriska ah*
*markuu hoos u soo dego*
*dhulku wuu dir soocaa*
*digashada ku fara badan*
*dantaan dhuux ku odhanayn*
*halka loogu daran yahay*



*daymadiisu kuma foga*
*wuxu daawadaa meel*
*dura loogu roonaa,*
*dib hadduu u noqon laa*
*dal tabyaan ku beerrayn.*

*Dunta bili nin lagu xidhay*
*dabin loogu yimi bahal*
*haddii aano loo dilo*
*doqonniino ugu filan.*

*Dar xumooy nin kula cola*
*dadna kuugu dhow dhow*
*dannigiisu badanaa*
*hadduu daawo kula galay*
*muxuu kuugu dudyaa?*
*Daryeel maadigaa dhala?*

# HAMBABBER

*Habeenada weysha*
*dhurwaa habarteeda*
*dorraad ku hiraabtay*
*haabhaabadka naaska*
*haaneed ka deyeysa.*

*Nirgaa hugun yuuska*
*halkii lagu ooday*
*hamuunta ka yaw leh*
*riyaa hoganaaya*
*idaa tuban heelka*
*cadceedda hagoogtey*
*haleelada weydda*
*dhaqaaq hidin waaga*
*hareeriga taagan*
*dantaa ku habsiisey*
*inay hakadaane,*
*dhulkoo hanad joogo*
*intaan gadadh heerin*
*ka sii degin heerka*
*haddeer la yaqaanno.*

*Intaan habqan beeshu*
*huluulaha oodan*
*ku saan go'in hawdka*
*intaan habac jiitan*
*badhkeed ku hallaabin*
*markay habaq baahdo*
*dugaaggu hilbaysan*
*intaan hawa-boodka*
*fardaa higil raacay*
*kuwii higsanaayey*
*hummaaggu ka reebin*
*xayeeshku habaabin*
*intaan halladaadka*
*hayaanku is waayin*
*habeenku dhex qaadin*
*hadhow la shallaayin.*



*Hadaadunka naaftay*
*sidii habas daalka*
*hawaarsadey ciidda*
*anaa hiddiddiida*
*hobey hobe hooda*
*durbaankiyo heesta,*
*ku soo hoga geyne*
*adaa hal-abuurka*
*tixraaca ha'leyda*
*ujeeddada hoose*
*hawaala yaqaanne*
*haruu orod Faarax*
*horweynka jiciirtay*
*hadhaaga u jooji.*

*Haydaartiyo doogta*
*hantaaqada ciilka*
*dareenka huqdiisa*
*qamuunyada haarta*
*caloosha hugmaysa*
*hiirtaanyada raagtey.*
*Dhinbiisha hulaaqday*
*dabkaan hurin doono*
*colkaan humin doono*
*hargaa igu laalan*
*dhowaan henggel baasta*
*ninkaan huwin doono.*

*Sabaanka hagaagey*
*barwaaqada hoortay*
*daruur iyo heego*
*waxaa hogol gaaxsan*
*hadhaysay dushayda*
*harooyinka buuxa*
*hoobaanta bislaatay*
*haraaciga daadka*
*caleenta hiraysa*
*indhaa halacdooda*
*hibaaqiyo laaca*
*naftayda hankeeda*
*waxay hibanayso*
*haddii wedku daayo*

*inay heli doonto*
*anaa huba taase.*

*Hambaaber dhowaanta*
*dareen ma hurdaana*
*dagaal wata heeso*
*hidday u lahayde*
*Hargeysi ma toostay*
*hoggaanka ma diiddey*
*harqoodka ma tuurtay*
*inaanay hummaagga*
*hadoodilan yeelin*
*sidii hebed geel ah*
*heshii Nebi Saalax*
*horaaddada dhiiban*
*hankeedu ma siiyey*
*waxay hibanayso*
*ninkay la hadlayso*
*hagaag ma u sheegtay*
*hadday sama weydo*
*inay hantideeda*
*nafteeda hurayso*
*hubaal ma caddaysay.*

*Allaylehe waa hog*
*shax aan la hilmaamin.*
*Malaa Hugur tiisa*
*waxaabu u haystey*
*inaan hayal toosan*
*harraati aqoonne*
*maskii Hilqadaale*
*ma soo hardaf boodey.*

*Horaanse u sheegay*
*inaan hadda beeshu*
*hadhiino ahayne*
*haddeer waxa jooga*
*hadmaan ka afeeftay.*

*Hasaasaha muuqda*
*wallee hagar daamo*
*falkaagu habeensey*
*higlooy gabbalkaa dhac.*



*Hangaalli hungaalli*
*hegaan hega gaalli*
*hunjaalli hantoolli*
*bidhaan had-hadowga*
*hiwaali hahoodka*
*jibaanjib hunnuunnu*
*huraalka hiraalka*
*hambaaber mardaadi*
*hadeedab haraanhar*
*kallaal himbiriirsi*
*hawaawir hayaayir*
*sadaad herimooya*
*hunnuushle hannaashle*
*sareedo hamboorri*
*hankooble hayoosle*
*falaad habbabbaale*
*hanquusle halowle*
*garaad himhimowle.*

*Hayaayub xumaanta*
*humbaalle dhaqaaqa*
*hallaallimo soofka*
*hallaasiga sheelka*
*harawsiga qaawan*
*hiliiliqa jeexa*
*higiishis boqoolka*
*Galbeed hiyi raaca*
*Maraykan ku hiilka*
*shirqool la hadaafka*
*habheeb alalaaska*
*hinraag qayayaabka*
*haraaryada neefta*
*hantaatac ergeynta*
*hagaas caga jiidka*
*walaac haghagoodka*
*tawaawac higgoodka*
*hamuun taltallawga*
*calaacal hungowga*
*heshiis macaluulka*
*hunfey salsalaaxa*
*hinfaal wax u sheegga*
*wasiirro habaynta*
*hoggaanno samaynta*

*hadhuubada daatay*
*hareero ka leefka*
*jalbeebta hal leyda*
*rogaal halalleyda*
*hemaal shaqalkeeda*
*higgaadda shanlleyda*
*halkaan ka abbaaray*
*hadhuudhku Carraale*
*huftoo hufmi waaye*
*maxaad kala haadin?.*

*Intaas haqab beelka*
*badhaadho horteed dheh*
*hal baase xusuus ah.*

*Nin tiisa u heellan*
*haddaan taladayda*
*hayaankiyo beesha*
*hoggaami idhaahdo*
*in taydi hallawday,*
*anaa huba taase*
*hadhow iyo fuullan*
*waxaanan huraynin*
*inaan hadda yeelo*
*ayaa ka haggaagsan.*

*Qabiil ku hadaaqa*
*hobsheyntiyo faanka*
*masayrkiyo haybta*
*hinaase la boodka*
*holayntiyo maagga*
*hirrooda qab dhaafka*
*tollaay hebel meeyey*
*sidii horor waalan*
*hilbaa igu yaalla*
*halgaad kula duulka*
*colaad hurgumootey*
*u sii hangaggaarka*
*heleysada dhiiggu*
*markuu heleleyda*
*sidii harawaati*
*hamuun tiro ciidda*



*dagaal lagu hoobtay*
*halyey ku idlaaday*
*ka soo hindiwaaska,*
*tabaalada huursan*
*hangoollada qaybta*
*fulaa halistiisa*
*inaan hagartiisa*
*u sii gacan haadsho*
*halkay godobtaydu*
*ka soo habqamayso*
*ninkay huntutuulka*
*ku soo hullanayso*
*inaan dib u haybsho*
*hillaabta ka qaado*
*ayaa ka hagaagsan.*

*Shirqool hadiwaaga*
*hiqlaynta riyaaqa*
*hubsiino la'aanta*
*haloosiga luuqda*
*hawaawi la boodka*
*hanuun la jibboodka*
*dhurwaa halab saarka*
*waraabe u heeska*
*hufnaanta kashayda*
*nin aan hibo saaray*
*xariir ku habsiiyey*
*markuu hal haleelka*
*sidii hurin yey ah*
*u soo hal haliilo*
*anoo hadhsan waayey*
*i soo hungureeyo*
*inaan hanqalkayga*
*sidii habla weynta*
*u soo rogo hoosta*
*inaan af-lahaarka*
*harraati ku diido*
*ayaa ka hagaagsan.*

*Hanraawe i boobay*
*markuu iga haago*
*inuu hadhadaydu*
*hafeefta xanuunka*

*markay hurgumooto*
*hoosaaso afuufo*
*halbawlaha kayga*
*sidaas kula hoydo,*
*nin haad i cunsiiyey*
*inaan horor siiyo*
*ayaa ka hagaagsan.*

*Hawraar iyo sheeko*
*haween laga reebay*
*beraa habar guurtey*
*hayaan rareygeeda*
*culaab iyo haamo*
*waxay hilif saartay*
*haldhaa kici waayey*
*hiyeeda gadh jiidka*
*markuu hollan waayey*
*ayey hindiskeeda*
*halaanhal ku keentay*
*midaan kolla haabka*
*markaa lagu haynin.*

*Waxay tidhi "hoogey*
*hayaay Cabdul-Qaadir.*
*hareer qabo awrka".*

*Markuu hayinkeedu*
*hagaag isu taagey*
*ayay tidhi "haakah".*

*Hebloo gabanteed ah*
*hilowna basteeda*
*malaa u han weynna*
*karaamadan hiirta*
*ku soo hormanaysa*
*hilmaamina weydey*
*wadaadka hoggiisa*
*ka soo hangallaystay*
*siduu ugu hiishey*
*ayaa tidhi "hooyo*
*muxuu horta sheekhu*
*inoo yahay haybta"?*



*Waxay tidhi "heedhe*
*Hibooy ratigeennu*
*markuu hinqan waayo*
*ayaan huriwaaga*
*haleel cuskadaaye*
*habeen ma wadaagno*
*haddaan magaciisa*
*dantaydu higgaadin*
*ma soo hadal qaado".*

*Ujeeddiyo haatan*
*nin tiisa u heegan*
*halyeynimadiisa*
*hashiisa ku dheelmay*
*iddiisa ku hoystey*
*inuu hantidayda*
*habaynta xilkayga*
*dhismaa hodankayga*
*hiddaa sharafkayga*
*waxaan nolol haysto*
*horseed ka ahaado*
*inaan ka habaaro*
*ka haayir idhaahdo*
*ayaa ka hagaagsan.*

*Hashayda nin maalay*
*markuu hordhaceeda*
*habniin kaga daalo*
*inaan hanbadiisa*
*hafriinyaha beenta*
*habeedda qalaysan*
*ku hoorsado weelka*
*Gobaad ka hillaabto*
*inaan ku hagoogto*
*ayaa ka hagaagsan.*

*Anoo qaba hawsha*
*habeen iyo maalin*
*intaas sida heeryo*
*habaaska i fuushan*
*inaan ku hungoobo*
*hulleelka madhnaanta*

hamaansiga quusta
hamuun la carrawga
heshiis ku ahaado
naftayda ka hiisho
hugaas doqonnino
Hurrow nin i saaray
inaanan u hoogin
calaacal harraaddan
xaqayga ku haybsho
ayaa ka hagaagsan.

Habkii xidinxiidka
dugaag huwantiisa
heshiis lagu duuley
horyaal ka ahaaye
markii hankakoobka
la soo helay guusha
libtii lala hoydey
tukaa yidhi "hoy day
hashaan qalay saami
hagaagna u qaybi
hadhowna i toosi".

Tukow hayedaadu
waxbay huwanayde
dantiisa ka haybi
qorshii hiyigiisa
halkay talo joogtey
ka sii wadey hawsha
ninkiina halmaanyey.

Saqdii dhexe hawda
ninkii hurdey toosyey
hareeraha eegyey
raqdii ku hungowyey
hanqaar warwareegga
hankaag jaljalleeca
haqdii samri waayey,
tukii hanfariirka
waldeys kula haadyey
gar laysu hankaabsey.



Hamuun gorayaale
ninkii Halac-dheere
wuxuu yidhi "hoo war
intaan hana qaaday
haddeer iyo caawa
haddee weligayba
inaanan hanbaynin
horaad u ogayde
maxaad igu hiifi"?.

Ninkayse ka hoostay
mar bay hawireene
ka soo kabey haarta
bahaysiga haadda

hilbaa cuniddooda
habeen gama'iisa
inaanu haweysan
ayuu han fogaanta
halkii kaga dhaartay.

Ujeeddiyo haatan
rag waa hal adayge
heddeyda wedkeyga
inaan hanbalyeeyo
tubaa halaq yaalka
hog layga qaniiney
ku sii hiradkiisa
ka haarri agtiisa
ayaa ka hagaagsan.

Haddaanan haddaanan
haddaanan dhawaaqa
hireyda wireyda
hayay ka kacayda
jihaadka Hargeysa
barbaartu hagayso
haweenka gadoodey
ka qayb gelin hawsha.

Haddaanan haddaanan
intii isku hiila

*Hargeysiyo Bayla'*
*intii la hal maasha*
*Bakool hilinkeeda*
*heeraarta Kismaayo*
*ilaa Hobyo geynin*
*Hiiraan u tallaabin.*

*Runtay la hudmeene*
*haddaanan haddaanan*
*haddaanan dhawaaqa*
*sidii hanqar yeedha*
*hillaac iyo maayad*
*dhulkoo dhan hadhaynin*
*Banaadir ka heesin*
*wixii hurda toosin*
*halyeeyada ciilka*
*ka haajirey ciidda*
*halkay talo joogto*
*u sii farin haadda.*

*Haddaanan haddaanan*
*waxaan huro caawa*
*dhammaan huga xaaska*
*haylaa maryahayga*
*sariirta hanbaadha*
*kuraasta hagoogan*
*ashuunka hunbuuca*
*haraaq iyo daahyo*
*waxaan jaqaf haysto*
*haddaanan xaraashin*
*waxay hanti goyso*
*intaan hub u siiyo*
*dadkayga habaynin*
*dagaal u hormaynin*
*la soo hadhin guusha*
*hawraartiyo luuqdu*
*Cabdow hadalkaygu*
*hawaawi kac weeye*
*ninkii hebel miihi.*



# DIBADYAAL

*Deelley karaankeed*
*in kastaanay duuduub*
*demmanaha wax ugu odhan*
*hadalkana u duur xulin*
*ama daaqsin geel marin*
*doc qudhay shifaysee*
*dhanka kale ma daaweyn*
*nin sharaystay kuma duxin*
*dhego debecsan kama helin.*

*Ma hirgelin dabuubtii*
*dooddiina lama garan*
*ama waa la dala'sadey*
*lama baanan doogtii*
*dakharkiina lama dhayin*
*wuu sii darsanayaa*
*daldaloolkii sii korodh*
*Daba-keenna faalkii*
*ku dayow xiddigiskii*
*dugtey xeegadiisii.*

*Dildillaaca maradii*
*wax la sii daneeyoo*
*la dugsado ka weynaa*
*misna deylo bixisada*
*dhaw dhawdu kama degin*
*Gaarriyow dabuubtiyo*
*la dardaaran keenii*
*doolaalo dheeraan*
*dira dire ka soo qaad.*

*Dabaqyada dhunkaasha ah*
*ninkii duubi kala baxay*
*durba soo rogaal celi*
*dooraalayaashii*
*weli ways dalbanayaan*
*damaciyo hungurigii*
*sii durug hankoodii*
*darka laysu mari waa*
*xaajada delleganata ah*

*weli dawliskeedii*
*dandan buu ku dhacayaa.*

*Qalinkiyo dawaaddii*
*weli ways dul-yaalliin*
*Dul-fiqaarna lama dhigin*
*qubanaha la duudsiyey*
*isagana dagaal faran.*

*Dayeerku laan buu*
*weli dacalka haystaa*
*bahal ceedhin deyn waa*
*anna waxa la ii diray*
*daaraanta godobtoo*
*nabarrada damqanayaan*
*hadba dacar ku noolayn*
*ilaa dayin abidkay*
*dawankaan ruxruxayaa*
*falla waan ku darayaa*
*marka doobi buuxsamo.*

*Intaan deebshey gaawaha*
*danbarsaday irmaantaas.*

*Adigaa hal doorkiyo*
*suugaanta derida leh*
*dir ku kala kexeeyoo*
*midba dara-dhigiisiyo*
*dhirta looga diiriyo*
*dillo ugu abtiriyoo*
*dantu waxay u magan tahay*
*darka fayl is dhaafiyo*
*daran doorri shubiddee*
*inta aynu dirirtiyo*
*dood wadaagga leenahay*
*dabra celinta xeeshiyo*
*shax dalaynta togashada*
*hindisaha godkaan dego*
*ku danbee Rashiidow*[45]
*jire waa ii duufaa*
*jarta haygu sii deyn.*

45 *Rashiid-waa Rashiid sh.Cabdillaahi*



*Intaa deebshey gaawaha*
*danbarsaday irmaantaas.*

*Wax la yidhi nin dooloo*
*beryo dibada meeroo*
*dani baajin weydaa*
*caal waa dib ugu kacay*
*degelkuu cid ku ogaa.*

*Fadalkiyo durduraddii*
*wuxu dacal ka soo galay*
*dooryaanle waagii*
*didibkii la oollaa.*
*Daaqsin buu ka halacsaday*
*dayra-dhaaf nin jiilaal*
*shitay dogobbo waaweyn*
*waxa duunka hoosiyo*
*damaciisu kula faqay*
*ninkaas daartay xaabada*
*wax u dagamsan baa jira.*

*Lugihii degdegayuu*
*u duwadey dhankiisii*
*isla doonasho Ilaah*
*doobku waa walaalkii*
*waa ninkuu dad iyo maal*
*dummaddiisa kaga tegey.*

*Durba laysku soo bood*
*degdeg laysu gacan qaad*
*wuxu yidhi "bal soo durug*
*hadalkana i deeqsii*
*marmar baan daraaddiin*
*degdeggiyo kalgacalada*
*odhan jirey ma duushaa*
*meel bay dalooshoo*
*dal tabyaa i haysee,*
*duni waa ku dhaqannoo*
*dareen lagama waayee*
*degmadii ma nabad baa"?*

*Wuxu yidhi "dareen ma leh*
*degmadana shil kama dhicin*
*dadna waa fayow yahay".*

*kuye "dooddigaygii*
*dardartaan u yeellaa*
*imminkaan debcinayaa".*

*Ninba dabada meel saar*
*warku sii dabayl raac*
*laysu daaddeg toyashada.*

*Wuxu yidhi "hal ii daran*
*goraygii dufka lahaa*
*ma rakaatay doobtii*
*shinbiraha ma didiyaa"?*

*Wuxu yidhi "ku daayaa".*
*Maxaa daaray "buu yidhi"?*

*Wuxu yidhi "dabbaalkii*
*lafii Daabbad qaarkood*
*sow duleedka kama helin*
*duf ku bexe wedkiisii*
*doqonniino gurayaa*
*nacasnimo daldalayaa*
*dabadeeto eedyaa".*

*Wuxu yidhi "dul badanii*
*doonnidii la raran jirey*
*ma naf baa ka daydeen*
*mise wuu dibboodoo*
*dugaag caydha baa helay"?*

*Kuye "daayinkiisii*
*denbi dhaaf ha siiyee*
*sawti duugti loo qalay*
*ducadii adoogeen".*

*Wuxu yidhi "duqeennii*
*degta inagu sidi jirey*
*isaguna ma dubuq yidhi".*



*kuye "seben ummulo doox*
*dabayaaqadiisii*
*intii aan duqduba hoyan*
*dabra weerar nagu dhacay*
*duullaan ku dhimayaa".*

*Wuxu yidhi "ma Daadana"?*
*kuye "daad la orodyaa*
*daaddeys ka xooryaa*
*intaan danabadaadii*
*ubadkiyo durriyaddii*
*dahrigaaga laga jaray*
*subax keliya duudduub*
*lagu darin xabaalaha".*

*Wuxu yidhi "dabayshaday*
*dayaxay madoobaa*
*gabbalkay dam weeyaan*
*da'yartii cuddoonayd*
*iyagana docdoodii*
*ma daleel bannaan baa"?*

*Kuye "duumo xaaqadaa*
*intaan Dahabadaadii*
*duulal raacay loo tirin*
*iyagana ka daba gee*
*wixii aakhiraw degey".*

*Kuye "Dahabadaydii*
*iyaduna ma duug baa*
*maxaa loogu daw-galay"?*

*Ma dumaashiday baa?*
*Kuye "waaban daalee*
*sawtii Duleedow*
*daandaansi keentee*
*jin dagaagay maagtee*
*aqalkii ka dumisee*
*lagu helay denbiga culus*
*sawtii la doorshee*

*dalandoolli laga dhigay*
*intaan xoolo dabar go'in.*

*Duugowyey xiisii*
*dirgan waayey hadalkii*
*indhuhuna is daydaye.*

*Wuxu yidhi "dad yaa hadhay*
*maxaa duunyo weli nool"?*

*Kuye "duunyadeennii*
*daratiyo kud weydii*
*dadna waa anoo qudha".*

*Duleedoo yaqiinsaday*
*inaan guul danbaysoo*
*lagu diirsadaa hadhin*
*ayaa daymo muruga ah*
*dibno jiitamaayiyo*
*deelqaaf ku yidhi ciil*
*danab iyo wajaaf iyo*
*daacuun ku kala goo!!!*
*reerkan daaha loo rogey*
*dubbihii Ilaahay*
*darandoorri ugu dhacay*
*dam daguugan laga dhigay*
*miyaad guul darraystow*
*nabad iyo dardaan iyo*
*igu tidhi dareen ma leh*
*waxa duur-xulkaagani*
*kaa daarran yahay sheeg!*

*Dibadyaal kal adakaa*
*naxariisi kuma duxin*
*damqashada walaalkii*
*weji duban ku baabi'i*
*af daboolan kula hadal*
*ma degdegin jawaabtii*
*docdan iyo docdaas dhawr*
*dib xusuuso ugu noqoy*
*dabkii xaabo saarsaar*
*madax diiran baaqbaaq*



*taataabey dakharrada*
*qosol buu ku yara daray*
*wayska dagagar jiifee*
*deexashuu la soo kacay.*

*Wuxu yidhi "degmadayda*
*dugsi keliya baa jira*
*diric keliya dhiga*
*dersi baanu baranaa*
*dulliga iyo beentiyo*
*doqonniino faankiyo*
*qoqobkiyo dirsoociyo*
*ducadiyo yaboohdiyo*
*inta laga diqoodiyo*
*dawersigu ka kow yahay*
*digashadu u mudan tahay.*
*Marka qalin daraalaha*
*dilla shegga la cuskado*
*intixaanka loo dego*
*ka dul dhiga jawaabtiyo*
*doorkiyo wax-garadkaa*
*inta daadata u badan".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*dibnahaa la cunayaa*
*qosolkaa la deexdaa*
*adigoo il dabayaa*
*dadku inaanay kaa garan*
*misna lagu dedaalaa*
*marka aad Duleedow*
*sidaad doonto weydaad*
*sidaad diiddey yeeshaa".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*si dareenka garashadu*
*aanu nooga noqon duug*
*dawrigaan hayin ahayn*
*ma dagmaha indhaa qaba*
*tiisa waw daboollaa*
*waanu daadahaynaa*
*wuxuu daymo boganlaa*
*dulmar bay ku gaadhaan.*

*Ka dheguu daloolaan*
*daba gala wixii dhacay*
*xanta durugsan heli kara*
*dooca waw gufaynaa*
*deeqsiinta hadalkana*
*farahaannu dirannaa*
*iyagaa ka door roon*
*dibno sheega godobaha*
*hayska dagamsanaatee*
*yeedhow dam weeyaan".*

*Wuxu yidhi "degmayada*
*roobabkii ka di'i jirey*
*dirirradu ma baahaan*
*dalka uma sinnaadaan*
*annagaa daruuraha*
*deebaanka haynnoo*
*meeshaanu doonnaa*
*lagu soo dabbaalaa.*
*Dooxaannu seerraa*
*deyr ooda marinaa*
*hogolaha darrooraa*
*marka ay ku daataan*
*deegaan ka saaraan*
*waxa doog ka soo baxa*
*yaa daaqa ma ogtahay ?*

*Inta duunyo dhaqatadu*
*docol ruug tidhaahdee*
*markay xaabka daaftiyo*
*inta dacaydu gaadhiyo*
*daab gaabta laastaan*
*dhirta hoose diirtaan*
*xoolaha dar-leefka ah*
*jeenyaha dul-saaree*
*laamaha duxleyda ah*
*damac fuul ku goostee*
*daamankaan wax sii marin*
*dira waxay haleelaan*
*gawsaha dalqada ku leh".*



*Wuxu yidhi "degmadayada*
*ninka ragga daryeelkiis*
*ama duubka sharafkiyo*
*derejada la siiyaa*
*dabar iyo nac weeyaan*
*darbbo waw ma dhaafaan*
*deldelaaddu xeer ma leh*
*kol haddaan xaq lagu dilin*
*denbbi meesha kama dhicin*
*deero deero ma hirddiyin*
*Sama-diidna loo qaad*
*meydka waw baroor diiq*
*dumarkana hugoodiyo*
*diibkoodu waa weer*
*dacar bay ku dhaashtaan ".*

*Wuxu yidhi "degmadayadu*
*boobka way la dirirtaa*
*in la duro garsoorkiyo*
*in la dumiyo ma oggola*
*badi waxay danaysaa*
*dadku inay sinnaadaan*
*kefedaha dalooliyo*
*miisaanka dalabta leh*
*waxa laysu dacal sudhay*
*dibindaabyo maahee*
*waa daryeel sida u yaal*
*danyar loogu tala galay.*
*Si aan laysu daba gurin*
*dulmiguna xaqa u cunin*
*dayaxaannu awdnaa*
*qorraxdaannu daahnaa*
*nuurkaannu daminaa*
*mugdigaannu daarnaa*
*dabadeeto fulinaa*
*sharcigii dalka u yiil*
*cir da'furay habeenkii*
*dallad baa la qaataa".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*dahab baanu shiillaa*
*lafta dhagax dixeedkiyo*
*bir-lab aan dubnixinoo*

*debcin baannu shiidnaa*
*derbiyaannu fanannaa*
*daaraannu taagnaa*
*digir iyo galley iyo*
*dalag baanu keennaa*
*daacaddaannu beerraa*
*in yar oo dalxiiskiyo*
*weriyaha dan-fulintiyo*
*marti daansha socotiyo*
*ragaan loo darraan karin*
*lagu dararsho mooyee*
*isku duubnideedaa*
*dekedaha la geeyaa*
*duniday u dhooftaa*
*dulmigaannu gadannaa*
*dibadaha ka keennaa*
*waa daba qabsiye garo.*

*Qabqabtiyo durbaannada*
*daran doorri dhacayaa*
*diihaal ma reebaan*
*dayac beel ma haynee*
*dundumaanu maydhnaa*
*sida ogaxda diinkaa*
*daymadu na korisaa".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*cudurrada dillaacee*
*aayaadka diintiyo*
*dadku uu Quraankiyo*
*Daa'inkay ka magan galay*
*waaba lagu ducaystaa.*

*Haddaannaan dagaal ridin*
*ama ciidan soo dumin*
*dawliil ku naalloon*
*ama duul xeryo u goyn*
*ama keenin daacuun*
*ama daadad soo rogin*
*webiyada durdurayaa*
*jiilaal wax naga dilin*
*Daba-dheer na salabayn*



*diigaanyo nagu dhaban*
*miyaa daasdaa madhan*
*Dirham noogu dhacayaa"?*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*ruuxii la duugaa*
*marka laga dareeruu*
*dardar soo ceshaayoo*
*dib u soo dhashaayoo*
*durba loo mashxaradaa".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*dadku waxay la yaabaan*
*dan quntaa u fara badan".*

*Wuxu yidhi "degmadayadu*
*duleed joogta maqashiyo*
*ka hagrada ma durugtada*
*ayay geel u diratαa".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*dibida iyo weylaha*
*waxa dhala dameeraha".*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*waxa jira Duleedow*
*habar doobir kululoo*
*dhererkana Dijaal le'eg*
*dadabkiyo ballaadhkana*
*dhirta daray ka xoog-weyn*
*dhakaday il daaftoon*
*dawo karin ku leedahay*
*mar inay wax dihatoo*
*ubad daaddahaysay*
*si kastaba u doontoo*
*markay ciil dellegantee*
*toddobaatan dayrood*
*dedan iyo si daalacan*
*nafta damac u gelisee*
*baryadii ka daashaa*

*Rabbi deeqsi weeyee*
*ducadeedi ka aqbalay".*

*"Da'baa wiil gurracano*
*falanoo derderanoo*
*denbi iyo xasarad badan,*
*curad guri danbbaysna ah*
*dirqi iyo si fool adag*
*hoosteeda laga deyey".*

*Iyadoo ha dagantii*
*digta qalabka reenka leh*
*kaga dananinaysoo*
*Demman guulaheedii*
*u dabbaal degeysaa*
*Suul Cayn durduriyoo*
*Dubur buu ka xulay Hawd".*

*"Damdamtiyo mashxaraddii*
*iyo darammalkeedii*
*miyaa dhiillo darartiyo*
*dugey lagu gunaanadey".*

*"Daadduunka ciilkii*
*dib waxaan u dhici karin*
*duqdu sow khalaawaha*
*wax kastaba iskuma deyin*
*dulucana umay xidhan".*

*"Kolba daw shixnadan bay*
*sanqadhaha docdeeda ah*
*hadba ruux la duushaa*
*markay dayma bogashada*
*weji dadabka quusta ah*
*isha daawisiisay*
*qofkaan duud carrale noqon*
*daad xoor ku tuurtaa".*

*"llaa maalintii dura*
*sidii bay Duleedow*
*xaajadu dudduuc iyo*
*deji iyo dul gee tahay".*



*Ninka dalawadiisii*
*duhur geed ka seexdee*
*dib-jirtee habeenkii*
*bahaluhu durdduurteen*
*dildillaaca waaberi,*
*markuu daydaygeedii*
*dalag dalagta raacdada*
*ka dul dhacay raqdeedii*
*runta Magan is diidsii*
*indhahana dib ula noqoy*
*ruuxeeda doon doon*
*dad kaleeto weyddii.*

*Wuxu yidhi "degmadayada*
*danbbar laguma maalee*
*dar-xumaa ka oloshoo*
*dalawadu nin moogow*
*may gabin dadkeedee*
*waxa loogu daw galay*
*ninaan daawo xidhinoo*
*ilaa dalan-dalkiisii*
*doofaaro dhiqi jirey".*

*"Duluglaha is haystiyo*
*dibiyada herdamayaa*
*dixda ay ku shaxayaan*
*waxa damashi weyneyd*
*dhirta looga dabar jaray*
*durba haysu muuqdeen*
*kibir haysu dooxeen*
*dacawaa basaastoo*
*dufan looga shubayaa.*

*Dooh doohdu waa been*
*nin dalaafsan baa yidhi*
*waxay daarran tahay waa*
*isku didi ibleysow*
*mid ahaan duxdiisiyo*
*daribtiisa noo loog.*

*Degelkaad xusaysaa*
*ma dal buu ka weyn yahay*

*naf adaa u dudayee*
*afka sow ma hadal deyn".*

*Kuye "daba-likaalow*
*Allaylehe dad baa ba'ay.*

*Waxaan doogsin cararkii*
*diihaal la orodkii*
*habeenkoo dalool tegey*
*socodkiyo dawaafkii*
*didmo caymadkaygii*
*deli iyo jar kala dhacay,*
*wixii doox rogmmanayaa*
*igu daray badweyntee*
*daad-xoorta iga dhigay*
*waxaan reer i diir neceb*
*ku dib jirey agtiisee*
*da'dey gacanta hoos dhigay*
*qalo iyo dir-sooc iyo*
*waxaan diif la golongolay*
*dalan dool u yeellaa*
*daalaa dhacaygii*
*rugtaan soo duggaashadey*
*miyaa ii darraatoon*
*ugu imi dardaar werin*
*maantana degaankay*
*ma Dagaar u guur baa*
*iyo diillintii Gurey"?*

*Wuxu yidhi "Duleedow*
*dilalyada ku haysaa*
*ambba iima dihinoo*
*intii ay dabayluhu*
*hadba meel deleeliyo*
*daaddeys ku dhigayeen*
*wixii daad mahiigaan*
*dal shisheeye kugu furay*
*dabataan ku noolaa*
*dhaxan baan dugsanayoo*
*anbba dayro ku ahaa*
*Dibadyaalla kula baxay*
*dooyeysigaygiyo*
*dunqulaalka hoosiyo*
*digsigaan babbinayaa*



*gacma daalis weeyee*
*dux inaanan kala bixin*
*malaa daawashada guud*
*dunjigaygu kugu filan".*

*"Haddaad diidday maandhow*
*bal ninkaad u tahay deni*
*iyo xaaji soo degey*
*saadaasha kugu daray*
*isna tiisa daymood".*

*Ninkii duurka caydha ah*
*duufaan ku soo ridey*
*halkuu daalac heli laa*
*markii deyn ku sii go'ay*
*intuu doobi quusiyo*
*dib u liqay candhuuftii*
*dirri-xaradh ku hawshoo.*

*Wuxu yidhi "dulmanidaa*
*misna gacan degganidaa*
*aaway dawladnimadii*
*iyo doorarkeedii*
*ma dad baan arllada jirin*
*ma nin baa daraaddii*
*u daddaabba xidhantiin*
*caku aaran dubatada*
*iyo dooxatada baas*
*dabar maa u goysaan*
*xadhig maa u diirtaan*
*dibso maa tidhaahdaan*
*colka wadhaf ku daydaan*
*nafta deeq u bixisaan"?*

*Wuxu yidhi "degmadaydu*
*dareen way ka siman tahay*
*doogna way gudboon tahay*
*doorna waw midowdaa*
*libna way ku dirirtaa*
*xilla way daryeeshaa*
*daba gelisyadiisiyo*
*dad-qal way ka adag tahay*

*danna way wadaagtaa*
*duddadaa u kala rogan*
*mana kala dab qaataan*
*dadab baa ku kala xidhan*
*kala durugsanaantiyo*
*digadana nin baa shiday*
*dawaduu ku huriyaa*
*rag inay ku damiyaan*
*dannigoodu farayaa*
*gaas bay ku darayaan*
*meel daad u baahnayd".*

*"Waxse jira Duleedow*
*dibirrooti kulul baa*
*dingaraaradiisii*
*xaska lagula daatee*
*duugoobi maayaan*
*dakharrada la geystoo*
*waa daanno culusoo*
*rag iskaga danbbeeyaa".*

*Malaa wayla durugtee*
*aan soo dabbaale*
*tartan laba ku dirireen*
*dahab loogu beretamey*
*in la seexsho dacawada*
*danta laga lahaa waa*
*inuu diinku guul helo*
*dulmarkiyo ujeeddadu*
*dadka waxay baraysaa,*
*in dedaalku wacan yahay*
*dhanna dulucda sheekada*
*duur-xul baa ku yara jira*
*iyo dala'si laga wado*
*duqu inaanu dheerayn.*

*Sida loogu daran yahay*
*iyadoo ka diimmoon*
*dayo moog habaarkaas*
*awgiis ma daaree*
*isna duubka hibada ah*
*doomaarta cawskiyo*
*daristuu ka jecel yahay.*



*Doqonniino lama dhayo*
*hedna lama daweyn karo.*

*Dadka aad ka dhalatiyo*
*dalka aad u dhalatiyo*
*nin la yidhi danta u tali*
*hanad laga dab qaatiyo*
*diric iyo fariid noqo,*
*dibin daabyo ka ogow*
*duco iyo xusuus iyo*
*duug aad ka dhaxashide*
*xilka daacad ugu hay*
*ha dullayne gaadhsii*
*meeshay daraaddeed*
*u galeen dagaalkii*
*diiftiyo kulka lahaa*
*dib u dhaca ka maaree*
*dumar iyo rag hawl geli*
*kartidooda deeqsii*
*derejow sugnaatoo*
*guul baa u dagatee*
*Alla doori saw kaa*
*darka jiidhay Maaweel!.*

*Waxan dooddi kaga baxay*
*hadalkana ku daa idhi*
*nin dab ligay Rashiidow*
*dhuxul buu ka daacaa!!!*
*Ma darmaanta booddee*
*didday baan u jeedaa?*
*ma dalilka muugdiyo*
*dhamac hoos ka darartoo*
*is -dallaallimaysiyo*
*danbas baan aqaannaa?*
*halka deyr wakhtigu dhigo*
*dib baa looga sheekayn*
*Kaddaraa[46] u magac bixin!*

46 *Kaddare -Waa Xuseen Sh. Axmed*

# GOL JANNO

*Wakhtigaa is-gurayoo*
*hadba xaajo godadliyo*
*ged la soo baxaayoo*
*garashada damqaayoo,*
*gudgudaa hillaaciyo*
*geydha iyo fooraha*
*Xasan Ganey[47] ladhkiisii*
*Gol jannaa ka dhalatoo*
*galabta iyo sheekada*
*gorgor yimi Hargeysiyo*
*geeskaannu joognaa.*

*In dhoweyd guhaankii*
*gulcub buu dhalaayoo*
*gorgor iyo wax yaabliyo*
*tuke hilib gadaayiyo*
*xuunsho geel la joogtiyo*
*golli heeryo sidatiyo*
*rati gorod madow iyo*
*geesoole boqoriyo*
*saadaal gurracanoo*
*gurran waa la filayee,*
*ninkii beesha soo galay*
*gonda-dhigashadiisii*
*ri' garbaa iskaga taag,*
*marna saaryey gaaddada.*
*Mar gadhkeeda feedh feedh*
*afka godan ku kaakici*
*marna geesaheediyo*
*kaga weehay goonyaha*
*marna caws u soo goo*
*marna sheemi gaarkeed*
*ka takooryey gacalkeed.*

*Gabankiyo haweenkii*
*iyo gurungurcoodkii*
*gurxan iyo colaad iyo*
*guulguul u saar-saar*

47 *Xasan Ganey-waa Xasan Xaaji Cabdillaahi*



*ku gadoodyey beeshii*
*habeenkiina gaadhkiyo*
*gaaf-meerka tarantari.*

*Warka lays galaa-bixi*
*dabadeeto goobtii*
*gurmadkii isugu tegey*
*afka gacanta wada saar.*

*Mar la yidhi ridaa guul*
*gallad hoose wadatoo*
*cidi aanay garanayn.*

*Marna gacal xijaabtoo*
*gunno iyo xusuus iyo*
*laga gooyey samahoo*
*godka lagu illaawoo*
*isa-soo galluubtiyo*
*nin gargaar u dudayoo*
*gibil doorsan lagu sheeg.*

*Marna aayad gaaroo*
*xidid iyo gun dheeroo*
*Rabbi soo guddoonshiyo*
*ged la yaab leh lagu sheeg.*

*Marna duni gablooshoo*
*isa-soo guraysoo*
*socotoo gudbaysoo*
*guuraysa lagu sheeg.*

*Marna caashaq guunoo*
*goobaayey beeshoo*
*rida Garo jeclaadoo*
*guur-doon ah lagu sheeg.*

*Googaadu badatee*
*Xasan Ganeyna tiisii*
*biyo gebi ka soo degey*
*galka ay ku jeedaan,*
*gurdankooda sii raac*
*godankiyo ishii doon*
*gunta hoos u sii baadh.*

*Gorgorkii xammuurraa*
*gacan haadis ugu yeedh*
*dadka goonni uga saar*
*gole xaadhan soo taag*
*googoos u kala bixi*
*gobannimo ku sooryee*
*gelbi oo lugaysii*
*geyigoo dhan soo mari*
*gobolkana wax uga sheeg*
*guji oo wax weydii*
*fuley baa wax gaadee*
*go'e yidhi iskeen sii*
*xaajada gun iyo baar*
*geeraar ku xadantee*
*gudbi oo is dhaafsii*
*hal-abuurka gaadhsii*
*ragna galangal soo celi*
*gabayana ka daba tiri.*

*Gudcur baa arlada jira*
*gogoshaa la jiifaa*
*gama' waa la maqan yahay*
*goonyaha cabaad iyo*
*gurxan baa ka baxayoo*
*reerihii badh baa gudey*
*in la guuro weeyaan*
*gaadiid ma laylyana*
*gadh-wadeenka beeshuna*
*gabadh buu ku xidhan yahay*
*iyaduna galbeed iyo*
*dhul fog bay go'doonkiyo*
*gocashada ku joogtaa*
*wakhti waa is gurayaa.*

*Goor danboo xisaabtii*
*geba geba ku dhowdahay*
*ayaa Gaarriyow qaar*
*gabrantii dayeysnayd*
*garaadkii ku soo degey.*



*Talo laysu geegee*
*dadku hawlo gaaxdiyo*
*gale baadi doonkii*
*Gudcur laysla soo taag*
*gabadhii la weydii*
*geedka aan tagnuu yidhi*
*garta jilibka loo laab*
*hadalkiina go'i waa.*

*Gudcur baanihiisii*
*markuu soo gunaanadey*
*guuyo keena buu yidhi.*

*Gucle orod la soo roor*
*goolal soocan loo miidh*
*ahminkiina loo gee.*
*Gudcur baa hadana yidhi*
*"waxaa goobta keenteen*
*magtii Giibba maahee*
*gashigii badh baa hadhay*
*hasha gabanku maaliyo*
*gaadiiidka beeshiyo*
*geyigiyo dhulkoo idil*
*waxa geelal joogiyo*
*inta gorod madowliyo*
*geesleyda soo tuba".*

*Iyadoon la kala gurin*
*hanti oo dhan loo gee*
*lagu yidhi guddoon hoo*
*inantii ma gadan tahay.*

*"Yaa is gaadhey" buu yidhi.*
*Googaradda dumarkiyo*
*waxa aad go' haysaan*
*iyo googo' lacageed*
*iska soo guruu "yidhi".*

*Guryihii la baadh baadh*
*guntintii danbaysiyo*
*kawlkiina loo gee.*

*Gudcur baa haddana yidhi*
*"xinjir gaatamaysiyo*
*cadraddiyo gashaantida*
*inta wiil gantaashiyo*
*gaashaanka hanatiyo*
*ordoo geesigiinniyo*
*gaaridiinna labadaba*
*goobtan keena "buu yidhi.*

*Codsigaasna loo gee*
*wuxu yidhi guddoonsadey*
*gabadhiina waa taas.*

*Guul-Allaa la wada yidhi*
*gaaridii la soo hoy*
*geesigiina loo door*
*guurkeeda hananlaa*
*gobolkana xilkiisiyo*
*geeddigiisa koowaad*
*gadh wadeenka noqonlaa.*

*Golihii la dheehee*
*harrarrada la goobiyo*
*googooska lagu xidhay,*
*gelbiskii rugtii yimi.*
*Gurxankiyo mashxaradii*
*dadku gooli baadhkii*
*gumucyada rasaasta ah*
*sida galayax loo tuur*
*isna goobta quruxda leh*
*hadba gees u daymoo*
*guurtidii isugu timi*
*mahad celin ku gaalgaal.*

*Markii waagu guubaha*
*iyo furay garayskii*
*gaafkiyo xusuustii*
*inta ubax guduutiyo*
*duco lagu gunaanadey*



*Gaarriyow halyeygii*
*hanbalyada la gaadhsii*
*gacan qaadka lagu dhaaf.*

*Ka gadaala wiilkii*
*intuu gaadh u diray qaar*
*gargaraacyey aqalkii*
*soo gal baana lagu yidhi.*

*Gobaad foolku ka hor yimi*
*isha laysku galac sii*
*garashaa fogeysoo*
*gabadhuba ma heellana*
*wejigeeda guul iyo*
*gacaltooyo kuma taal.*

*Gacan qaawan soo fiiq*
*"kaa geysan" bay tidhi*
*xiisihii ka gaagaxay*
*hogashada gandoodkii*
*soo laabtay goroddii*
*isaguna guhaaddiyo*
*guul guulka ka hor yimi*
*gabbashada is weydii.*

*Waxay tidhi "guntiga xidho"*
*go'a iga fur "buu yidhi*
*gudin iyo hanggool iyo*
*garab qaad is weheshay*
*tidhi "qabo guddoonshow"*
*gogol buu ku "yidhi" keen*
*ginbir bay ku "tidhi hoo".*

*Gargariirka lahashada*
*cabashada is gabangabi*
*milliqsiga galaa bixi*
*durba gaajo soo qaad.*

*Dib u guratay Joogdheer*
*eeg eegtay gurigii*
*gudur meel halkana yaal*
*iyo gocay hadoodilan*

*ugu geysey meeshii*
*Gurracow ku tidhi hoo*
*isaguna guddoon yidhi.*

*Baahiduu u golon golay*
*gunnadii xujaysnayd*
*markii uu gondaa dhigay,*
*galladii ku rayray*
*hadduu guur xil leeyahay*
*gabadhiiba kuma lurin*
*kaba goosey hadalkii.*

*Dadkii soo gadaal noqoy*
*hadba goosan soo biir*
*higsi laysku soo gaadh*
*gawraha duleedkii*
*gacalkii isugu yimi*
*golihii la weynee*
*dhagxan laysu soo gurey*
*shaxda loo garraaddee*
*lagu guulyey meeshii*
*sheekadu gabaabsiday*

*badh gataatigii ciir*
*galaayuuska hibashada*
*guuxa hoos ka tuurka ah*
*gocashada kor loo qaad.*

*Goray baa ka ciyey meel*
*"Gurayow war lagu sii*
*gobanimadi waa halis*
*geesku baylah weeyaan".*

*"Kaalay gawrac neefkaa"?.*

*"Gurigiina dadab ma leh*
*laga gurey wixii yiil*
*dadkii waa la gaasiray*
*lama gudin xilkoodii".*



*"Goosaradihii qaar*
*Gurrac kuuma dhiginaa".*

*"Gabadhiina waa ugub*
*iyaduna geyaankeed*
*guumeys ka noqotoo*
*guudkaa u daban weli".*

*"Sarar gool wan shilisoo*
*geedeysan hooyaa"?.*

*Goraygiina yaabyoo*
*ka gur Qaafo buu yidhi.*

*Guray oo xuslinayoo*
*baahi geylameysiyo*
*gabaddano eryeysaa*
*gooddiga ka soo kudey.*

*Gobaad leexadiisay*
*meel dheer ka garatoo,*
*waa gaal la jooggii*
*yaradkiyo gabbaatiga*
*gudcur siiyey berigii*
*waa ninkii gumeystuhu*
*marka uu gabraar tago*
*garanuugta celin jirey.*

*Isna soo galaydhyee*
*iyadana talaw go'an.*
*haan bay garays iyo*
*ganbo iyo hagoog iyo*
*googgarad jacfaaniyo*
*maryo dumar u gelisoo*
*gunta iyo furkii bay*
*xinne ugu guduuddoo*
*waxay tidhi Gadaan Dheer*
*ninka soo gurdamayaa*
*gabadh doonimaayoo*
*gogol looma fidiyee*
*guushkiyo qadhaabkiyo*
*gawska ugu roonow*

*dhaxantana wax uga geli*
*aniguna gadaashiyo*
*guradaan ka baxayaa*
*gurigiina waa kaas.*

*Geyllankii xawaaraha*
*gurma go'an xaskeediyo*
*gubad raran leh soo jiidh*
*dadkii qaar galaafaha*
*gaaddada ku soo qaad*
*gurigii ku soo biir*

*Gurrac xadhig ku taandhee*
*ku gaggabi tummaatida*
*garba duub iskaga reeb*
*ginbirkiina soo fuul.*

*Yidhi yidhi Gobaad yidhi*
*gacan dhiig leh soo taag*
*laye gooha soo reen*
*haantiina kama gurin.*

*kol hadduu gabbood iyo*
*goosarado caammiya*
*is la helay ninkii Gurey*
*cidi lama gudboonee*
*hanbaddii ku gooraan*
*gufarkii ku naallo*
*hadba goobo soo qaad*
*ku gufee calooshii.*

*Haki Maxamed geenyada*

*hasha Garow u yeedh yeedh*
*godol oo u gaal gaal*
*gabantana ka yara celi.*

*Wax la yidhi guyaal hore*
*Bahal geed -is marisaa*
*maqlay gobol Islaamoo*
*wadaad gaasa- baxay raba.*



*Gadh intuu samaystuu*
*kutub garabka soo sudhay*
*soo gaadhyey beeshii.*

*Hadba dadabta loo goo*
*hadba goolal loo loog*
*badhi iyo leg loo gee*
*gallad loogu roonaa*
*hoosna gaadhku kala socoy.*

*Gahan gaha abaaraha*
*sida weerka guuree*
*hadba reer ku soo gaas*
*hadba galab carraabaha,*
*masallaha gabboodkiyo*
*hoos galbeedka soo dhigey*
*gelin qudha maqnaan waa*
*guryihii ku fara badey*
*gal gal iyo xasarad keen*
*gacan dhaafna lagu arag.*

*Gungunuuska beenta ah*
*ku galgaley Quraankii*
*guudaanki dhayi waa*
*goosan lumay bariin waa*
*lagu barey geddiisiyo*
*inaan Geeddi Baabow*
*naf gunaanadkeediyo*
*garshada ku dheerayn*
*misna gogosha loo badi.*

*Isna laba gar-daaqii*
*hadba taako sii gudub*
*ganacsiga ku sii durug.*

*Guul- darraa ka salaglee*
*galab buu ka kacay meel*
*gegi laysu soo baxay*
*dadkii joogey goobtaas*
*kadin geela weydii.*

*warka Geeddi Baabbow*
*gujo iyo faq hoosiyo*
*insha laysku gaadhsii*
*waa dad soo gubtoo jabay*
*dhegahay gufaysteen.*

*sii garooc hankiisii*
*gu' rin qaalinuu yidhi*
*yaa godkiisa hoosiyo*
*geysanaaya aakhiro?.*

*Shirka ruux garaaboo*
*gacan taaga laga waa.*

*Iyadana ka sii gudub*
*kuye gacallayaalow*
*boqol shilin ha lay guro.*

*Goroddaa la wada lulay*
*ku go' baana lagu yidhi.*

*Gonduhuu u sii degey*
*kuye geed -is mariskii*
*gini lacaga yaa hura?*

*laga gaabsey hadalkii.*

*wuxu yidhi galkiisiyo*
*yaa kitabka naga gada?*

*Gaw baa la wada yidhi*
*go'a boodhka laga tumey*
*la bannee gawaankii*
*dadku galab carrabaha*
*badhba gees u siigee*
*raabe raabe loo guran*
*golihi ku nogoy keli*
*goobtaas la kala dhimey.*

*Isna Geeddi Baabbow*
*galalkiyo khamiiskiyo*



*garan gari kitaabkii*
*ged kaluu u diga rogey*
*miciyii gahaydhiyo*
*daba goojinaysiyo*
*gawsihii u sheellaa*
*gibishii u duubnayd*
*gashey saamihiisii*
*gaaleemadii tuur*
*gafi waa runtiisii.*

*dadku gacan macaanaa*
*gobsanaa furfuranaa*
*gacaltooyo badana*
*Gaarriyow shabeelkaas,*
*gabbal iyo galaal iyo*
*maxaa gaasho loo qalay,*
*maxaa goobo loo shiray*
*maxaa guulo loo qoray*
*taariikhda guunka ah*
*maxaa baalal loo gubey*
*immisaa garaaddiyo*
*billad gaara lagu tolay*
*immisaa go'sharafliyo*
*shaal guduudan lagu xidhay!.*

*Gurey baynu haynee*
*hadda goosh labaakii*
*aynnu guulihisii*
*isla sii gorfaynoo*
*gurigii ku noqonnee*
*markuu guufakii ligay*
*ayuu daaca goodlaha*
*guulaamo kiciyoo*
*geeri buu ku yidhi tali*
*waxay tidhi dadku ha gudo*
*golxobkana u diro sahan.*

*Dadka gees biciid dheer*
*guubaabo ugu lali*
*gurgurshaaga loo yeedh*
*lagu giiji canykii*
*guryo samo allahayow*
*ku dareeryey geelii.*

*Luuqduu ku garan jirey*
*gosha lagu hayaanshee*
*goonbaarta wadatiyo*
*guuguuda hugunkiyo*
*goofaadhtankii yaab,*
*codka gaban ka xoorka ah*
*hadba soo gadaal eeg.*

*Beeshu waa gawaan raac*
*dayax rogey gadaafaha*
*gudcurkiina sii baah*
*la is waa go'doonkii*
*gelliyada dugaagga leh*
*hadba goosan lagu dhaaf*
*hadba guura raacii*
*laba guuto loo reeb*
*gamas iyo warmaa raran*

*halkan gaban yar baa qalan*
*halkan geesi baa yaal*
*halkan gaari baa wadhan*
*halkan waxa ku gawracan*
*guurtidii xulka ahayd*
*dhankan culimo gaariyo*
*gadh- cas iyo wadaad iyo*
*golfof iyo raq baa quban*
*gaadiidku waa naxash*
*gadh hayuuna waa mawd*
*waxa geeddi lagu degey*
*godadkiyo xabaalaha*
*dhulka hoose loo guur.*

*Wax la yidhi duq guunoo*
*golxoshoo idlaadoo*
*lafta dheeri godatoo*
*gaabshey oo cuslaadaa*
*guudadley ku soo baxay*
*mayracaysa galab adhi.*

*Gooli baadhka sheekada*
*haasaawe goo goo*
*hadalkii gar adag iyo*



*gendel iyo alool saar*
*hadba garangar oodee*
*hadba gooddi kala bixi*
*galka ulo ku baadh baadh.*

*Goobyaalka inantii*
*garan weydey baanuhu*
*geesuu u dhacayoo*
*waxay tidhi geddaa hadal.*

*Aan is guursannuu yidhi*
*Alla yay gujay tidhi.*
*Kol hadduu gedmado hadal*
*goobta waan ka dheelmaa*
*ayay gololadii "tidhi".*

*Wuxu yidhi god bay hadhay*
*waxay tidhi Gadh -cawsow*
*adhigaa galbanayee*
*aan gadaal u soo rogo".*

*Isna yidhi ka gaadhsii*
*guusha maanta kuu dagan*
*gol -dalooladiisiyo*
*guga faraqa haystiyo*
*gedihiisa qari yidhi*
*ganbaraashka sii luud*
*gumar buu ka jaray qodax*
*geed kaluu ku soo mudey*
*gabbashada ku soo noqoy*
*ku soo laabey goobtii*
*gabadhiina ugu timi.*

*Gol castii dhacaysuu*
*go'a sare hagoogtiyo*
*gacantiisa ka hadhsaday*
*wuxu yidhi "galoolkaas*
*maxaa gaari dumareey*
*gunta hoose kaga mudan?*
*ma gammuun ku jabay baa*
*ma fallaadh ku ganan baa*
*ma gafuur maxaadh baa*

*ma atoor gadoodaa*
*geesihii mid kaga tegey"?*

*Geedka way u jeedaa*
*waxa gaar u raacee*
*guur -doonku sheegee*
*gunta hoose kaga mudan*
*indhaheedu gabadhii*
*markay gaadhi waayeen*
*waxay tidhi inoo gee*
*runta aynu gunudnee.*

*Fadalkaa la wada guray*
*garo oo barbbaarkii*
*gabgabtiyo is waalkii*
*wuxuu guudka kaga dhacay*
*hal fadhida gelgelin show*
*ka sokaysa geedkii.*

*Qosol guuli keentay*
*hayn weydey gabadhii.*

*Isaguna gilgilashada*
*gebi dhaca is yidhi toos*
*misna gudub u soo ciir*
*gabaxdii is qaban waa*
*gadhka ciidda kula duul*
*show illayn gardaadkiyo*
*garab iyo shanshaa jaban.*

*Jaljalleecday gegiduu*
*ku burburay geyaankeed*
*laye guud haldhaaley*
*garangarisay laafyaha.*

*Isna gocasho sii dhawr*
*baalal goof ku yaalliyo*
*indha gudhay ka daba tuur*
*dabadeed galgashda*
*la gurguurey boodhkii*



*gawdiidsey meeshii*
*salka dhigey go'doonkii*
*ku wadh wadhey gabaahiir.*

*Waxa hodey garaaraha*
*golxadiyo cabbadhyaha.*
*Goobtaasi hadal ma leh*
*goolkaasi dhalan waa*
*guurkaasi beenow*
*gabow baa da' mehersaday.*

*Gurey baan xusuustee*
*gobor iyo turxaan iyo*
*ninku gaatir badanaa*
*qudhun buu far geliyaa*
*marka gacal la yaabuu*
*guudkiisa mariyaa*
*Gaariyouw na naagtii*
*loo Maydhay gacantiyo*
*gambadii la sheegiyo*
*gabaygii la tiriyaa!!!*

*Gol jannaan ka shaxayee*
*goormaan dawaafkii*
*tegey webi Ganaaniyo*
*gabbala dusheenna ah?.*
*waxba yaan ku raad gadan*
*nabarrada i gubayee*
*gorof legedka hoosiyo*
*gunta aan u soo dego*
*xaajadu galoof iyo*
*nin gawaan ordaayoo*
*cidla' gelelefaayo*
*Geriyaad jafaayoo*
*garab maray abbaartoo*
*iska gola- ka -fuuliyo*
*garo iyo jacayl iyo*
*gorgor iyo ri' maahee*
*murti gooli baadhiyo*
*gibil saaran weeyaan*
*gudban iyo shax weeyaan*
*gunaad biiray weeyo*

*gumuc lala dhacaayoo*
*umal gaaxdey weeyaan*
*gubashiyo ladh weeyaan*
*gocashiyo dan weeyaan*
*gabay iyo xil weeyaan*
*bahal loo gabbanayoo*
*nin geddiis yaqaannaa*
*u gurguuranaayoo*
*gaadaayo weeyaan.*

*Xasan Ganey tummaatida*
*ummaddana guddoonsii*
*gocorkana ku naafee*
*gunta taabey eelkii*
*maansada gef kuma jiro*
*hasha Goray sideedaba,*
*waxaa loo gayaxa maray*
*inay Geeska deeqdoo*
*saameesho gaawaha*
*ama garo ama ha garan.*

*Rag gudboon sal iyo baar*
*haddii geel isugu jiro*
*gar maqaate dhega li'i*
*go'aan wadari leedahay*
*hadduu goonidiisiyo*
*gaarkiis u maamulo*
*keligii nin goba yahay*
*inta badan gun hoosiyo*
*garas iyo qadhoon iyo*
*gaagaab ka wada dhigo*
*marka loo ged sheegtana*
*galka seefta kala baxo*
*wuxuu goosto keligii*
*ama geysto dabadeed*
*garashaa ku tidhi yeel.*

*Ninka kale gilgilashada*
*hadduu giirto hibashada*
*ama goosto dabadeed*
*gacan inu ku ciil baxo*
*dala'siga la gaasiray*
*garashaa ku tidhi diid.*



*Dabadeeto goobtaas*
*dibno foolku goostiyo*
*gogoshoo la laaliyo*
*gama! oo la dayrshiyo*
*dhulka oo guhaad iyo*
*gubashiyo xanuun iyo*
*gulcub lala xarriiqiyo*
*godob baa ka dhalatoo.*

*Iyadana go'ann iyo*
*guubaabo tarantiyo*
*gurmashaa ka dhalatoo.*
*Iyadana gantaal iyo*
*gaashaan is jiidhiyo*
*baadidoo is guratiyo*
*gocondhaa ka dhalatoo.*

*Iyadana col gulufiyo*
*galow fooridiisiyo*
*geesi haadku loogtiyo*
*gaaridoo hengelatiyo*
*guryo laga baroortiyo*
*goblan iyo xabaal iyo*
*geeri baa ka dhalatoo.*

*Iyadana go'doon iyo*
*gocashiyo hagoog iyo*
*gacal kala fogaadoo*
*weji gabax is dhaafiyo*
*nabaddoo gurracantiyo*
*hantidoo gablooshiyo*
*gob jabtaa ka dhalatee*
*iga gunud Rashiidow.*

*Geba gebada heestiyo*
*gabaygaygan kama wado*
*Gaax-nuug la talintii*
*gabbal dhacay ka hadalkii*
*hadda galabta sheekada*
*waxaan uga gol-leeyahay*
*samihiyo is garabsiga*
*berri yaan la gees marin.*

# SIRTA NOLOSHA

*Saaxiibkayow heedhe*
*safar baan ka imi dheere*
*marka hore salaan diirran*
*marka xiga samow heedhe*
*ha ka nixin si-dalagtayda*
*sacab fara-madhnaantayda*
*suugaanta yaabkeeda*
*salka iyo fadhaa keena*
*marka xiga sugnaanteeda*
*socodkiyo falkaa sheega*
*xeerkeedu waa saase.*

*Saaxiibkayow heedhe*
*anba saaka qaybteeda*
*Sirsirraan ka joogaaye*
*xadhiggiyo bal eeg suunka*
*iyo sabarka gaadiidey*
*iyo salabka ii qaaran*
*iyo suudha guudkayga.*

*Hilaygiyo waxaan saabka*
*u gilgiley Samaw haanta*
*subag inay ku dhiiqdaaye*
*saasay ku badisaaye*
*sannad weliba xeeshiiye*
*kol hadday silloonaato*
*samaheedu waa dhiige*
*sumuc talada loo dhiibye*
*sida sida sidaas weeye*
*si la yeeli jirey weeye.*

*Marka xiga Samaw heedhe*
*talo sibiq dhaqaaqeeda*
*soof-daran habawgeeda*
*sal-fudaydka hooggiisa*
*bal sallaankan fuul laalan*
*iyo sagabtan heensaysan*
*dhulka saas u jeedaali*
*sidan iyo sidaas fiiri*
*sidan iyo gadaal dheeho*



*raqda solan lafaa soogan*
*bal su'aal u celi meydkan*
*sababtuu u go'ay raadi !*
*Bal dhegeyso saylaanka*
*iyo salowga beer-qaadka*
*iyo sebiga yeedhiisa*
*waxad aragtayoo saasa*
*waxad maqashayoo saasa*
*maxaad odhan lahayd Suudi ?*[48]

*Samalaho furfuriddooda*
*godka seer-ma-weydaanka*
*marka ay sabbuux gaadho*
*si kalaan u dhigi taase.*
*Saaxiibkay Waayaale*
*suurtuu dhalaay heedhe*
*heedhe Sahraay heedhe*[49]
*waxaan adiga kuu saantay*
*dadka kaaga soo soocay*
*Sahra kuugu yeedh-yeedhay*
*siduu aabbahaa heedhe*
*samo ii faraan heedhe*
*kuu siinayaa heedhe*
*sooyaalka taariikhdu*
*iyadaan salguurayne*
*murtidaan Sahraay heedhe*
*sadar kuugu qorayaaye.*
*Heedhee Sahraay heedhe*
*curad suubbaneey heedhe,*
*sumaddii Rashiid yeelo*
*iyo weynidii Saado*[50]
*iyo sawracii hooyo*
*sinjigii hablaa geeska.*

*Subaxdii indhaa kuulo*
*tintu saqafta yay waayin*
*iyo diibka loo saaro*
*subko oo hayaabayso*
*korka siigo yay taaban*
*ku ilaali saabuunta*

48 *Suudi-halkan Rashiid Sh.Cabdillahi ayuu ugu jiraa.*

49 *Sahra-waa Sahra Rashiid Sh.Cabdillaahi*
50 *Saado-waa Saado Cabdi Bacad*

*dharku siifad yuu yeelan*
*suyac iyo bar gaasheysan*
*ku ilaali saahoodka.*

*Garashadu Sahraay ruuxa*
*sed u gaara weeyaane*
*hadduu saamigaas yeeshay*
*qurux ma leh saluuggeedu.*
*Dadku siigga dida maaha*
*sogob iyo ri'weyn maaha*
*sumal iyo laxdiis maaha*
*rati iyo sabeen maaha*
*falka iyo sugnaantiisa*
*socodkiyo abbaartiisa*
*dhaqan sida xishoodkiisa*
*dabar iyo silsilad haysa*
*iyo suun ma dhaafaan ah*
*wuxuu soofka xoolaaba*
*kaga soocanyahay weeye.*

*Waxan uga socdaa heedhe*
*naftu seeto yay waayin*
*hana falin sidaad doonto.*

*Hadalkana sar weedhiisa*
*una saaf qofkii waaya*
*ha ka tegin sarbeebtiisa*
*hana gelin sursuur oodan*
*hana lumin sargoyntiisa*
*hana liqin sangaabtiisa*
*ha ku saxan badheedhkiisa*
*runta sogordoh haw yeelin*
*ha suldaarin dooddiisa*
*sisibaa wadaaggiisa*
*sababee abbaartaada*
*hana badin su'aashiisa*
*sarrifkiyo tilmaantiisa*
*saddex erey halkii dooni*
*soddon yaanay kaa qaadan*
*siddi-qabaxi yay raacin*
*sare haw dhig-dhigin luuqda*
*gacantana ha saydh-saydhin*
*hana odhan wax sawliila.*



*Heedhe Sahraay heedhe*
*sarta hilibka dheehaaga*
*samaydaada dhererkaaga*
*sarajooga muuqaaga*
*sanqaroorka jaahaaga*
*dahab iyo xariir saaran*
*uma baahna saantaadu,*
*hadda silis ha xidhan maaha*
*luquntana ha sudhin maaha*
*waxan uga socdaa heedhe*
*marka aad sunuud hayso*
*waxa suuq mug-weyn yaalla*
*ha la simin kitaab weeye.*

*Hurdo iyo Sahraay jiifka*
*marka hore sariir raadi*
*salli iyo furaash dayday*
*saddexdaba haddaad weydo*
*lama seexan kari waayo*
*hadda saantu qodax maaha*
*suubaantu gogol weeye.*

*Nin ku qaday Sahraay tiisa*
*hadduu seed liqliqiddeeda*
*ku saruurad goyn waayo*
*subag iyo baruur doono*
*sidu jecelyahaa been ah.*

*Dhadhan iyo sibraar kayda*
*sidig caanaheedaa leh*
*badar iyo sarreen shiidan*
*iyo sixin ku iidaaman*
*wax la cuno sabiibbaa ah*
*nin samaystay baa faan leh*
*waxaad haysataa saas ah*
*ka sokow intaan sheegay*
*hadda soortu dacar maaha.*

*Dharku Saadhi qudha maaha*
*Saylooni garan maaha*
*iyo sabarandaa giiran*
*mana aha surwaal biid ah*

haddaan saarku kuu diidin
saddex qaydu ceeb maaha.

Heedhee Sahraay heedhe
sar daruuranoo maasa
maro Abu Sarmaantiiya
dhacle baarka loo seesay
boqor wada siyaakhaysan
sindiyaal jiljila dhiibsan
tusbax dhawr sagaal laaba
iyo qool sunaar dheehan
subeciyad xiddiyo laaf leh
adigoo siddeeddaas hal
iyo timaha oo soohan
ku darsaday sifaa guudka
garashiyo sarriig sheegtay
sinta bidix ka laafyooday
ma qof kaa sitaa jooga.

Hadda salamadhlow gaabi
ha ku jabin saqlaa waalan
salow ololka hoy jooji
ha saloolan xayndaabka
ha ku bixin saloognaanta
ha sariiran waayeelka
sakatiga ka daa beesha
saha iyo af kala qaadka,
ha ka nixin hiddaa suubban!.

Gabdhayohow sidee waaye !
Ilbaxnimadu saas maaha
hadba suuf karkaro maaha
sararaha bannee maaha
qorqor suunniyaa maaha
dhabannada sibbaaq maaha
sanka oo la mudo maaha
sakhrad iyo xashiish maaha
sawir iyo riyaaq maaha
filin iyo sarcaad maaha
saxan reer galbeed maaha
kabo sookal dheer maaha
suuriyo durduro maaha



salsalaw cid kale maaha
qof silloon ku dayo maaha
wax sawaaban noqo maaha
sinta iyo lafaa duudka
saddex goor jejebi maaha
dhaqankaaga saydh maaha
Soomaali diid maaha
sidaad doonto yeel maaha
dhulka oon ku sidi waayin
samadoo la koro maaha.

Xilliyada wax saareenka
iyo saacadaa reebban
sabadiyo rugtay joogtey
gabadh timi ma saalloona
ku salliya Rasuulkiinna
salka dhiga guryaa seexda.

Sunsun falan siddaa feyda
sati fudud salaan sheegan
indha suhub af geed saarrey
hadba surin ka sheekeeya
sidan iyo si baas yeela
ereyada saluuggoo dhan
kuma lihid Sahraay meella.
Adigiyo intii seeran
inta saahiddee dhawran
inta gabadh sidaadaasa
uma socoto weedhaydu.

Sunbo iyo maraadaa leh
inta sibiq dhaqaaqdaa leh
sagan daaqa jiitaa leh
inta marinka seegtaa leh
waxba aan sugeyn baa leh
inta sharafka saydhaa leh
suuraafta maqan baa leh
xadhig lama sitaan baa leh
saca Faarsa nacay baa leh
Barni sumal xadkeedaa leh.

*Heedhee Sahraay heedhe*
*suugaantu iib maaha*
*erey iyo sunnee maaha*
*hugun iyo sitaad maaha*
*siddi iyo i daya maaha*
*sadho iyo xajiin maaha*
*laba saaq ku gado maaha.*
*Waxan seylad geyin weeye*
*sahdi iyo dareen weeye*
*bulsho saasaheed weeye*
*samaheeda mudan weeye*
*sawdkeeda diga weeye*
*sacabkeeda kulul weeye*
*marna baadi sooc weeye*
*sahan iyo tilmaan weeye*
*dhaxal soo jireen weeye*
*wax ku saabsan meel weeye*
*so'da iyo ka guro dhuuxa.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*sirta noloshu xoog maaha*
*dhagar iyo suryee maaha*
*surma seegto dedan maaha*
*sibqi iyo hunguri maaha*
*sacab iyo ka leef maaha*
*sukhrad iyo fal xumo maaha*
*hadba seeb u rogo maaha*
*salfo iyo ku faan maaha*
*damac iyo sandaho maaha*
*derejiyo saldano maaha*
*saro iyo dhalaal maaha*
*sidan iyo sidaas maaha*
*hadda sadadu lacag maaha.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*bulsho saami loo tuurtay*
*shan siyood wax loo yeelay*
*samir inay xigtaan maaha*
*surka inay dhigtaan maaha*
*sas inay didaan maaha*
*inay suudalaan maaha*
*sardho inay galaan maaha*
*sixir inay dirtaan maaha*



*inay kala saftaan maaha.*
*Nin i sugayayow heedhe*
*anigoo ku sugey heedhe*
*maxaad ii sugtaa heedhe ?*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*marka haaddu socod deyso*
*dhirta sare tukuu fuulo*
*gorayadu sanqadha reebto*
*adna soonka xidho maaha*
*mugdi talada sii maaha*
*berri iyo siday doonto*
*sug cadceedda maqan maaha*
*saqda dhexe habeen soocan*
*gudcur simay adduunkeenna*
*wax siraata noqo weeye.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*saranseerka jiilaalka*
*surbacaadka jaahweynta*
*sumal haadka roob waaga*
*iyo solanka daaduunka*
*cirka oo sabaad guurey*
*dhulka oo huwadey siigo*
*iyo dogobbo soogsoogan*
*marka beladu sooyaanto*
*saadaashu beenowdo*
*saca nuguli kaa leexdo*
*adna sebenka raac maaha.*

*Inan sabadu duugoobin*
*sayax iyo ugbaad waayin*
*sudda iyo degaankaagu*
*surmi iyo harraad yeelan*
*ama saacu guur-guurin*
*sohda ceelku dheeraannin*
*adaa yeeli kara saasba.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*saxariirka aafaadka*
*saxallada kal-meerkooda*
*sambabkuba col weeyaane*

*marka saymo loo iisho*
*ama soofku jaan qaado*
*ushu way sabooshaaye,*

*ha ku dagan sidsidadkeeda*
*qalinkaa wax suureeya*
*kugu sima halkaad doonto*
*saaxiib kal furan weeye*
*sunto fara ku hayntiisa*
*weligaa ha sii deynin.*
*Sisin iyo ku beer muufo*
*iyo laanta saytuunka,*
*ku qotomi sugnaan waarta*
*iyo nabadda seeskeeda*
*samo iyo ku doon heedhe*
*dunidiyo sinnaanteeda.*
*Ku dawee sawaaceenka*
*iyo siica daacuunka*
*ku burburi sarbaa mooska*
*iyo soohdimaa meersan*
*ku midee samuud raaca*
*midabada la sooc soocay*
*dadkan tobanka saamood leh.*

*Weligaa ha tumin seefo*
*iyo sabaradaa mowdka*
*dar samaysan baa yaalla*
*sancayahan gaboobaa leh*
*sahankaynu diranaa leh*
*nin sokeeyeheenaa leh*
*ninka sida xilkeennaa leh*
*ka sarjara heddeennaa leh*
*salab ciiddu hayn weydey*
*ninka sudhay xiddigahaa leh*
*nin sabuul la aayaysto*
*dhulka siib ku ridin baa leh*
*nin Sahraay adduunkeenna*
*saacad gubi karaa haysta*
*ninka sigay kun jeer baa leh*
*waxa nolosha saameeya*
*sako nimaan ka bixin baa leh*
*nafta saawa-saawaysan*
*santi nimaan ku furan baa leh*



*nin aqoonta soorkeeda*
*sida kale u rogey baa leh*
*ninka sulubka maadhiinka*
*ugu roon saboolkaa leh*
*nin samaa ku adag baa leh*
*nin ku filan sal guurkaa leh*
*sannadkaynu caydhowney*
*kaynu suus ka weynaa leh*
*naftu waa sir xeel dheere*
*nimaan suubin karin baa leh*
*wedka qudha sameeyaa leh.*

*Sula iyo xannuunkeeda*
*shalay iyo sadaaddeeda*
*iyo saawihii hoogga*
*naxdintii badh baa suuxsan*
*selelkii badh baa waashay*
*dad sawaaban baa buuxa*
*dumar waayey saygooda*
*hengashii sidaa muuqda*
*ololkii badh baan seexan*
*sarihii dumaa jiifa*
*qabrigii sinmaa jeexan*
*waxa saaka joogow ah*
*surrad baa i guud taalla*
*salabkii horaa tuuran*
*samadiyo dhulkaa buuxa*
*baddu waa sakalo miidhan*
*qalab suruc leh baa laalan*
*sanqadhuhu hub kacay weeye*
*sabarkii dadkaa baahan*
*saantii dadkaa qaawan*
*weli talo ma saalloona*
*waxa soo socdaa yaab leh*
*wershed suufiyaa daaran*
*waxay soo siddaa geeri*
*midhaheedu waa saymo*
*belo aan fan seeraarka*
*saxar loo mar-maran weeye*
*waxan ahay qof cayn saaban*
*deldelaad u sudhan jeebka !.*

*Allow yaa wax suureeya*
*salka dunida yaa dhawra*
*iyo seeska jiriddeeda*
*wacanaa sansaankeedu*
*badanaa sudaaddeedu*
*saxanaa hannaankeedu*
*Allow yaan sugnaanteeda*
*saymiyo u rogin duullan*
*subax noolba dhiig daata*
*xadhig iyo silsilad shiilan*
*Allow yaan sinnaanteeda*
*ku beddelin saraar oodan*
*iyo seere wiil qaytey*
*dadka saaran guudkeeda*
*yaan ka dhigin sabool qaawan*
*iyo soobir caydh jooga*
*erey sami wuxuu gooyo*
*Allow yaan ku jarin soodhka*
*garashada ka dhigan seefo.*

*Allow yaa su'aashaasi*
*sida ay u tahay yeela.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*dhulka iyo wixii saaran*
*sare iyo wixii laalan*
*inta sudan intii seemman*
*waxa jira sir iyo caadba*
*Rabbi qudha sax weedhiisa*
*sida uu ku yidhi buuxi*
*waxa hadhay salkiyo baarka*
*inta sool qarsoon joogta*
*inta seel xidhxidhan jiifta*
*inta saydha waabayda*
*maroodiga siddaa dheer leh*
*wiyil iyo sah boodkeeda*
*inta laga subxaanaysto*
*kolay tahay libaax sayn leh*
*marka aad Sahraay meel fog*
*uga suul dhabaalayso*
*degdeg inay sujuuddaada*
*suxullada dhigtaan weeye !*



*Sidashada awooddaasi*
*sahal iyo wax fudud maaha*
*qofba waa si garadkiisa.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*badda iyo sulaaqeeda*
*iyo buurta saysaaban*
*onkodkiyo sawaxankiisa*
*salowgiyo jibaadkiisa*
*danabkiyo salsalihiisa*
*sarka dhabanka duufaanka*
*ha ka didin sawaxankooda,*
*duni kuu sakhiran weeye*
*sayid baad u tahay caana*
*suubaali oo layli*
*ku sasabo aqoontaada*
*senge iyo ka dhigo doonni*
*sallo iyo ka dhigo oori*
*gabadh weeye caad saaran*
*badi saayiraaddeeda*
*iyo laab salaaxeeda*
*guro saadka guudkeeda*
*iyo sahayda uurkeeda*
*kordhi noole soorkeeda*
*iyo baahi saarkeeda*
*hubi nabad sugnaanteeda*
*iyo sabo negaanteeda,*
*ha ku deyin xannuun saaqa*
*ha ku badin saqaaf ciiddan*
*suluf iyo colaad waarta*
*ha ku saaxin naabaalka*
*iyo sulubka baaruudda*
*ha ku didin sabbeeyaanka*
*sabareynka boodbooda*
*iyo sukhula naareedka*
*ha la dhicin sawaariikhda*
*iyo saanadaa miiggan*
*ha sumayn macaankeeda*

*salabaha ha marin doogga*
*ha burburin sansaankeeda*
*quruxdiyo sureerkeeda*
*ha sadhayn hagoogteeda*

*sagalkiyo daruurteeda*
*ha sukuumin uunkeeda*
*saryankiyo ugaadheeda*
*ha furfurin sin-dadabkeeda*
*ha ka rogin dul saarkeeda*
*udubbada ha siibsiibin*
*ha afuufin suurkeeda*
*subax qudha ha duuduubin*
*sakaraadka taaheeda*
*uga xilo samaanteeda*
*sacabkiyo mashxaraddeeda*
*garashadu mid soofaysa*
*ha ka dhigin sadqaynteeda*
*ha ku solo wanaaggeedu*
*ku sin inan-dumaalkeeda*
*kuwa saadanbee laalan.*

*Heedhee Sahraay heedhe*
*seben tegey xusuustiisa*
*raad raaca Siinleyda*
*socod barashadii doodda*
*Saxarliyo abbaarteeda*
*anigaan wax saaraynin*
*sannad iyo garaadkiisa*
*saadaashu been weeye*
*waxba samir ma liileeyo*
*ha sarwicin qof kaa jeeda*
*hana sugin nin kaa maarmay*
*hana sigan mar mooyaane*

*nin ku siray ha faallaynin*
*sababana ha weydiinnin*
*ha u seeta dheeraynin*
*hana sidin culayskiisa*
*siriq iyo ku qabo baydo*
*hana falin siduu yeelay.*



*Nin ku yidhi anaa saasa*
*ha ku odhan sidaas weeye*
*sida uu ku yidhi heedhe*
*haddii ay siniin weydo*
*ama sarin sanaan weydo*
*waxa furan sidaas maaha*

*qof saluugey maankiisa*
*ama suufay muuqiisa*
*ka sal kacay xaqiiqdiisa*
*qabku saami ladha maaha*

*nin sitaba bar baa saaran*
*nin ka sii sitaa jooga*
*ragannimada sooceeda*
*adigoo sagaal buuxshey*
*hal ku seegay baa yaalla.*

*Nin salaad u kacay oogan*
*sahwi galay xalaaleeye*
*adna sahankan beel loogan*
*ha ka dhigin socdaal baada.*

*In halkii sal hayn waayo*
*laga saba rogtaa doora*
*in su'aal jawaabteed leh*
*lala sara kacaa fiican*

*nin ku yidhi sinnaan mayno*
*adna buri sarrayntiisa*
*sidka waa wadaagtaane*
*ma sagaashan baa tiisu.*

*Selelkaba hurdaa keenta*
*haba seexan goor baas leh*

*han sareedo loo waayey*
*in saraaye loo daayo*
*sida aan u idhi weeye.*

*Bela saacaddeed joogta*
*sabti nabada haw riixin*

*subax dhalatay caadkeeda*
*ha ka bogan wax saarkeeda*
*adiguba samee maanta*
*berritona sargoo heedhe*
*noloshaba inaad saafto*
*qaabayso saabkeeda*
*waxan suura gelin maaha.*

*Garashiyo sugnaan hoyso*
*falka sami ha kuu raaco*
*mana jiro sed kaa baaqday*
*ilbaxnimadu saas weeye*
*sirta noloshu taas weeye.*



# DAALALLEY

*Marka hore dad baan ahay*
*dad dad reebay baan ahay*
*dunji dhalan rogtaan ahay*
*hadba fadal durkaan ahay*
*nebi dooran baan ahay*
*han dareersan baan ahay*
*hiyi durugsan baan ahay*
*da' da'deed u talisoo*
*ugu damac fog baan ahay.*
*Dunidaannu wada naal*
*noloshaannu deris nahay*
*dalandoolka geeddiga*
*dan qudhaan u jeedaa*
*haddii taas mid lagu daro*
*ama daadku halis yahay*
*inta mudan wax doorshaan*
*inta daran u leeyahay.*
*Dab waxaa ku guban kara,*
*inuu daaro mooyee*
*nimaan xeel ku damin karin*
*docse aniga way wehel*
*iyo dulucda guulaha*
*intaan daw ku laalla.*

*Daray waarayaan ahay*
*duufaanku ima lulo*
*dulin hoose ima galo*
*dardaraale ima rido*
*digdig beena kuma ruqo*
*cirka danab ka soo dhacay*
*deli igama raarrido*
*kuma dumo tab iyo xeel*
*dibin daabyo mooyee*
*digaxaadhku ima tiro*
*nin danaystay ima tebo*
*nin darjiidhay kama naxo*
*nin u go'ay daraadday*
*isba garey daraadday*
*in dalleemo lagu huro.*

*nin dushayda ku xajiyey*
*iska daansha daanshoo*
*siduu iigu diran yahay*
*ayuu iigu dagan yahay*
*nin Dagaar fog iga koray*
*anaa daaf u soo roga*
*marna waxaan dammiintaa*
*nin dil iigu xidhan geed.*

*Danni kuma tallaabsado*
*wax dahsoonna uma tago*
*demmanida shil kama dhigo*
*ma aqaanno digashada*
*haddaan lay dardaar werin.*

*Dib waxaan u dhigan karo*
*degdeggeeda kuma qalo*
*waxaan daadshey baa jira*
*intaan daastey baa badan.*
*Daymadaydu waa gelin*
*duur-xulkaygu waa seben*
*dul-qaadkaygu waa guun*
*digniintaydu waa boqol*
*diidmadaydu waa kow*
*hadday daahdo waa laba.*

*Dardartiisa gaarka ah*
*qofna iguma deeqee*
*dalabtaanan moogeyn*
*inaan dayro lagu mudan*
*qofna xagal ka daaciyo*
*dal-daloolka kuma naco*
*nin la yimi dedaalkiis*
*anigaa wax ugu dara*
*marna waxaan daboolaa*
*xubnihiisa derida leh.*

*Dedda kaca hayaan dheer*
*nin dekaanka ila lumay*
*inaan soo duwaa furan*
*hadduu daal la kala dhaco*
*dul la saaro kuma gabo*



*uma dudu karaankiyo*
*waxaan daafad loo hayn.*

*Doqonkana anaa xila*
*si aan dawga uga xidho*
*waracana anaa dira*
*si daddaabba lagu furo*
*damacana anaa dhiga*
*halka dabinku ii yaal*
*ninka daacad igu nacay*
*duudsigayga kuma helo*
*wuxuu doonayee baas.*

*Ninka ii darraadow*
*anba waw darsanayaa*
*dibin-daabyadaadee*
*tirtirsiga ha iga deyn.*

*Carrab dananka laasima*
*wacdi dowdab lagu yidhi*
*ninka ii dudubiyow*
*kuma deexdo hadalkee*
*wax kaloon daneeyoon*
*ku damqado ma haysaa.*

*Duni aanan weli maqal*
*nin i daawisiiyow*
*kuma arag daraandaro*
*midabbada dalxiiskiyo*
*ku dalaysan dheehee*
*dux la'aanta gadantee*
*wax intaas ka door roon*
*la dugsado ma hidisaa?*

*Waxaan daanka soo marin*
*dalqadaaba celisee*
*wax dareenku iga jiro*
*ninka ii dardarayow*
*taas dameero loo sheeg*
*dirxi iima dhuuntee*
*midho daray nin jecelow*
*ku liq adigu duuduub.*

*Ninka dayday kaga dhacay*
*dad intuu u xilan jirey*
*noloshiisu duug ma leh.*

*Bad daruuran baan ahay*
*laygama dabbaashee*
*ninka doonidaydii*
*kala degey halkiisow*
*anba doonnidaadii*
*kala degey hankaygii.*

*Damdamtiyo shirqoollada*
*dirashada dhufaannada*
*shaxda dalagta lawlaban*
*waa laygu dagayaa*
*xadhig qoob la duulaa*
*marba lay debcinayaa,*
*nin i deydeyaayow*
*dhulka qaar ha iga deyin*
*nin dorraad ogsoonaa*
*halkii Daado lala maray*
*jidh dubaaxi maayee*
*nin gar iigu dudayow*
*dermo haygu kala bixin,*
*duhur lays hor-joogaa*
*la'i deedafeeyoo*
*duqaydiyo wax garadkii*
*dhulka ugu da'weyneyd*
*dunbukh baan u dhiiboo*
*meyd bay dul yaallee*
*miyaan geedka damalka*
*dooyaysan karayaa.*

*Naxariisi kuma duxin*
*dhegihii dorraatee*
*hadday ii daloolaan*
*damqashaa ku dhalisee*
*dayo toobad laga filo*
*denbigeedu ma oggola*
*dawliilka hadalkay*
*nin qabow ku durataa*
*wax u dihin shar baa jira*



*sharcigeeda dura baxay*
*dawadaydu kuma taal,*
*da'day maanta joogtana*
*haddii loo kitaab dayo*
*waxay daaqdo mooyee*
*waxay deeqdo lama cuno*
*malaa waa duqowdee*
*haddii layska deyn laa*
*dulmigay ku tarantoo*
*dacawooyinkaa badan*
*boqol baa ku daba jira!*
*Intuu daalac leeyahay*
*ninka doonan karayaa*
*dacwad qoro ma liqi karo.*

*Marka deelba deel cuno*
*anaa tayda diirtee*
*toban daawo lala galo*
*derejiyo xil lagu taxo*
*ama duunyo lagu qubo*
*uma korin darmaantee*
*waxaan duullan u cuskaday:*

*Inaan duug ku hubin karo*
*madal iyo shir ila da'a*
*inaan dood ka odhan karo*

*inaan daahan garan karo*
*dibnahayga bari karo*
*in la diidi karo yeel*

*anigiyo dedaalkay*
*inaan door ka filan karo*

*anoo doogsin cararkii*
*la durduriyey haamaha*
*inaan roob i daba maray*
*ufadiisu igu digan*

*debeciyo is dhigashada*
*haddaan duulo halabsiga*
*inaan hoos u degi karo*
*dersi qudha ka dhigo laba*

*dakharrada kol igu dhacay*
*misna inaanay doog noqon*
*ilaa daayin igu shidan*

*daribtayda malabka leh*
*in dugaaggu nici karo*

*inaan doogistaydiyo*
*danahayga labadaba*
*nin direyska igu qaba*
*dummaddiisa lagu xidhin*

*dad inaanu kala noqon*
*dangalooyin kala jira*

*si la dayaba aayaha*
*dur u tuuran maayee*
*dufan iyo nin jecelow*
*rido adigu daabaca.*

*Laba duni ku kala mudan*
*doqonkaba u kala mida*
*waxaan doortay taydee*
*dirgan waaga hurisada*
*maqashaa is dadabtoo*
*dalanbaabi noqotee*
*dib u guuri maayee*
*nin da' furay kalkiisow*
*dalka waan aqaannaa*
*bahal iga da'weynoo*
*dad cunii ma joogee*
*ma didee hargoolow*
*haygu tumin durbaannada*
*iyo daasadaa madhan.*

*Talo duubka laga furay*
*degdeggana wax lagu faray*
*iyadaa durduro falan*
*sebenkay derderan tahay*
*xadhko lagu dabbaaliyo*
*qabashiyo diddii ma leh*
*dib waxay ka noqotaba*



*below doorkan maanta ah*
*adaan daacad kuu ahay*
*haddii laygu kaa diro*
*digashaan ka dhigayaa*
*adna diid nin kula faqay.*

*Samana waysu dihinnahay*
*gabadh ii dambaysoo*
*ii doonnan weeyaan*
*waxaan dayday leeyahay*
*degmo lagu aroosiyo*
*gole lagu dabbaal dego.*

*Dibno iima gooyaan*
*dakanooyinkaygee*
*laba daw mid iga xidhan*

*iga dayrsan nacasnimo*
*iga deyran lahashadu*
*iga duuban googoos*
*boholyowna iga dedan.*

*Ha is deyso qiil ma leh*
*dushaa layska eegtaa*
*dib baa laysu eedaa*
*haba diillin badatee*
*shaxi duud u kala rogan*
*siba deleb u kala guran*
*weligaa ha igu degin*
*godka daraya qoolka leh*
*daran doorri nabarrada*
*xagga hore u dalandali*
*ha durduuratee sii*
*ha is daashatee lali*
*ha is daasatee hubi.*

*Dadna wada dad maahee*
*dalladaa habeenkiyo*
*danbas buu huwanayee*
*sawnigii rag kala diray.*

*Kuwa dayrta iyo guga*
*sida diinka sugayow*
*anaa daaqa cawskoo*
*ku higsada daruurtee*
*ka hadh-gala diraacaha.*

*Nimaan diiftu saarrayn*
*dusha sare ka qolof dhicin*
*dubatadu ku shaacnayn*
*nimaan daawa shiillayn*

*ama degel ku sheellayn*
*ama dibad ku sheegnayn*
*daymadaydu suurayn*
*waxaa loogu digayaa*
*dohdu Waamo maahee*
*dirir baa ka socotee*
*firdhisada iskaga durug.*

*Marka dirir gabaabsiyo*
*isma dayada dhiifta leh*
*iyo duraha jiilaal*
*dayawgiyo kulka is wada*
*doorsoonka garashada*
*daadduunka nugulkiyo*
*dac ku dhiidhigeediyo*
*dar-wisiisigeediyo*
*danbabeera ruqankiyo*
*daabaan u jedankiyo*
*duul duulka Jaahweyn*
*anigaa ka doogoo*
*weligay danbeeyee*
*dhulka deexda dharabka leh*
*nin dallaallimaystow*
*dad anaa ku hadhayee*
*dhanka kale u diga rogo.*

*Anoo daaya mooyee*
*godobteyda daah iyo*
*dadab yaa ku xidhi kara ?*
*Anoo daadsha mooyee*
*dabka yayga dhigi kara ?*



*Haddaan doohba lay barin*
*dibso yaa i odhan kara ?*

*Rag dagaal isugu yimi*
*haddaan guuli kala dirin*
*ama duubi wada jabin*
*isma dooda dhuuxdee*
*marka dhaylo dubantee*
*digsi xanan kulkaan bado*
*iska rogo daboolkee*
*fadhi dagagar yeeshaan*
*garan dooca hadalkee*
*debci qorigu hay faro.*

*Dirirtaan dhanna u dhicin*
*dillo aan cuskanoo*
*dabar ugu badheedhaa*
*docna ima hor-taallee*
*waxaan dani i yeelsiin*
*is dugaashan maynoo*
*dalqad baa ka taallee*
*ilaa laysu deyn baxo*
*waa duurxul nabadduye*
*anigoo wax dili kara*
*duco qaadan maayoo*
*nolol kuma dardaarmee*
*haba diirran oloshoo*
*danba haw gilgilatee*
*aaway dawladdii Xamar ?*

*Duqri may maqlaysaa*
*daratiyo kud iyo caal*
*durey iyo kul iyo daaf*
*waxaad duumo hidisiyo*
*waxaad hayso daacuun*
*annagaa daweynee*
*dabaq qudha isugu gee*
*ha ka tegin duruustay*
*rag isaga danbeeyeen*
*isku soo daroo keen*

*cirka sare badh soo dumi*
*Waxad hayso soo daa!*

*Dala'siga xanuunka leh*
*dadnimaa ka dhalatee*
*nolol aan ku dirirree*
*darxumooyin nagu fala.*
*Aan doombir qodannee*
*durdurrada si naga dhaha.*
*Dhirta aanu daaqnee*
*guba dalagga beeraha*
*dekedoo dhan naga xidha.*
*Aan diinka qalannee*
*cagta mariya duunyada.*

*Aan direyska jamannee*
*dirka maradu leedahay*
*duni yaanay nagu hadhin.*
*Marka salabku deeddamo*
*daran doorri laba dhaco*
*ardadaa dillaantee*
*dadku haysu boodee*
*ku dalbada hubka is wada .*

*Dawersaad ku dhaqataa*
*dixda dhagaxa yaalliyo*
*dogob aan ku furannoo*
*farsamooyin dayannee*
*keen dabbaabadii hadhay.*

*Cabsi iyo dardaan iyo*
*dacwad iyo baroor iyo*
*dugey yeedhi maysoo*
*hengel waa la daayee*
*ha mashxarado dumarkuye*
*deldelaadda boqol boqol*
*kala daran isugu xidha.*

*Dacartaa ku shidantee*
*ha darrooro hilibkuye*
*daldaloosha xididdada.*



*Marka toban la dooxaba*
*annagaa kun dihannoo*
*badhba diir u gelinnee*
*dubta beerka caydiga.*

*Dunqulaalka madagtiyo*
*xoloddada ka daba hura*
*annagaa ku daarroo*
*qaybo degel gufeynoo*
*duni kale abuurree*
*duddun waayi maynee,*
*idinkaa wax dumiyee*
*daari yaanay taagnaan.*

*Idinkaa degdegayoo*
*nafta doojinaayoo*
*diihaal la sahayee*
*dux halkaa ku aragtaan*
*dardarsada wadaamaha*
*isku lura daldalalashada.*

*Docolkiyo hareeriga*
*annagaa ka diirree*
*furta dahabka ooryaha*
*iyo duluca gaarida.*
*Diriciyo malkhabadaha*
*kala baxa dukaannada.*

*Inta lagu dekeeyiyo*
*inta lagu dingiigsado*
*inta daabac lagu dhigo*
*in durraaxad lagu simo*
*adaa dawladee guro.*

*Anna weliba deeqdaas*
*waxaan kuugu darayaa*
*inta igu dul-saarka ah.*

*Marka ay dibbootee*
*nin hagraday ka dayrshee*
*dugsi looga leexdaan*
*daba geli aqaannaa.*

*Markay ciinka daaqdaan*
*dabka ugu xiddigiyaa.*
*Nin dumaala baan ahay*
*degel fule ka bara kacay.*
*Nin ku diirsadaan ahay*
*maalintay u daran tahay.*

*Marka daawad lala tago*
*nin didsani iskaga hadho*
*annagaa ku dirirroo*
*halka daran ku dhicinoo*
*sida loogu dabar go'ay*
*Deelley ka tirinnee*
*nin debcow dhan uga guro.*

*Dibadda iyo gudahaba*
*dacallada hor iyo gees*
*doc kastaba adoo jira*
*isu baydh dad-qalatoy.*
*Isku daya kas iyo maag*
*inaad xeesha dalabta leh*
*igu laba dibleysaan.*
*Isku duuba qorigiyo*
*birtaan daabka haystiyo*
*midigtayda daalacan.*

*Rabbi derejadiisiyo*
*deeqdiisa culus iyo*
*diintaan ku dhaartay.*

*Culimada ducaysee*
*lagu hubo daliilkee*
*digridaan ku dhaartay.*

*Xilka dawladnimadiyo*
*dalka iyo shinkiisiyo*
*dad leh baan ku dhaartay.*

*Dooddigii Mandheeree*
*laga qaxay dayaankiyo*
*darban baan ku dhaartay.*



*Dhabbad iyo Gal-dogob iyo*
*digtii awrayaal iyo*
*duman baan ku dhaartay.*

*Birjeex deedankeedii*
*laga diday kulkeediyo*
*degsan baan ku dhaartay*
*Lixle*[51] *damacyadiisii*
*diric Ina Saleebaan*[52]
*duxan baan ku dhartay.*

*Ifkuu Xaamud*[53] *daariyo*
*Khaliif*[54] *doorrankiisiyo*
*digan baan ku dhaartay.*

*Hurre*[55] *doonnantiisii*
*Gurey Ina Dawaarriyo*[56]
*dar kalaan ku dhaartay.*

*Islow*[57] *dara-dhigiisii*
*danab Aadan Shiiniyo*[58]
*dadban baan ku dhaartay.*

*Karuur*[59] *duur-xulkiisii*
*iyo damalki Koosaar*[60]
*dedan baan ku dhaartay.*

*Dil-dillaanka dhiiggiyo*
*inta nacabku dooxee*
*dahan baan ku dhaartay.*

---

*51 Lixle-waa Maxamed Xaashi Diiriye*
*52 Ina Saleebaan-waa Xasan Saleebaan X. Maxamed*
*53 Xaammud-waa Xaammud Ibraahim Yaasiin*
*54 Khaliif-waa Khaliif Sheekh Axmed*
*55 Hurre-waa Maxamud Xaaji Xasan Hurre*
*56 Gurey ina Dawaarre-waa Ibrahim Faarax Dawaarre*
*57 Islow-waa Maxamed Axmed Maxamuud (Islaweyn)*
*58 Adan Shiine-waa Adan Sheekh Maxamed Sh.Cabdillahi*
*59 Karuur-waa Cabdi Sheek Jaamac*
*60 Koosaar-waa Cabdilqaadir Koosaar Cabdi*

*Inta daaha dhagartiyo*
*ku xidh-xidhan dalluuntee*
*dabran baan ku dhaartay.*

*Dalan-doolka caydhiyo*
*dingaraarka mudankiyo*
*dibjirkaan ku dhaartay.*

*Inta cadowgu dayrshee*
*dibadaha u hoyatee*
*dulman baan ku dhaartay.*

*Aqallada daloolee*
*Doolaabo huruddee*
*dansan baan ku dhaartay.*

*Garashada dareenkiyo*
*inta laga dab-qaatee*
*i dirtaan ku dhaartay.*

*Dacar iyo ladh jiifiyo*
*inta doogta kicisee*
*damaqdaan ku dhaartay.*

*Dhulka hanad ka duuliyo*
*Duriyaan ku dhaartay,*
*Daalacaan ku dhaartay.*

*Dar-daraa barbaartiyo*
*inta dirirta geydee*
*diran baan ku dhaartay.*

*Dedda-ruxanka maankiyo*
*daaraanta godobtiyo*
*dunbukhaan ku dhaartay.*

*Doodaha sinnaantiyo*
*dimuqraaddinimadiyo*
*daacaddaan ku dhaartay.*



*Deebaanka noloshiyo*
*diiwaanka nabaddiyo*
*duuggaan ku dhaartay.*

*Dil-dillaaca waagiyo*
*dabka iyo cadceeddiyo*
*dayaxaan ku dhaartay.*

*Qalinkiyo dawaaddiyo*
*dugsiyada aqoontiyo*
*dawankaan ku dhaartay.*

*Dalawada la maaliyo*
*daableyda gudintiyo*
*doobigaan ku dhaartay.*

*Darka iyo wadaantiyo*
*inta doojinaysiyo*
*dawliskaan ku dhaartay.*

*Digirtiyo galleydiyo*
*durdurrada waraabshiyo*
*dibigaan ku dhaartay.*

*Inta dhididku deeqee*
*dan xalaala jiratiyo*
*dubbahaan ku dhaartay.*

*Da'da soo kacaysee*
*dummaddayda xilatee*
*dagan baan ku dhaartay.*

*Hirka Daalalleydiyo*
*dersan iyo Rashiid iyo*
*dulucdaan ku dhaartay.*

*Inta diib is marisiyo*
*naxariista dunidiyo*
*dumarkaan ku dhaartay.*

*Dab haddaad hunqaacdiyo*
*haddaad daacdo dhabataba*
*haddaad adigu doontiyo*
*haddaad adigu diiddaba*
*haddaad ii darraatiyo*
*haddaad ii ducaysaba*
*haddaad maato dabatiyo*
*haddaad doobta lalisaba*
*haddaad doolli noqotiyo*
*haddaad daasas fagataba*
*haddaad geelal didisiyo*
*haddaad deylo shabisaba*
*haddaad faan dudubisiyo*
*haddaad been daldalataba*
*haddaad kaara ducatiyo*
*haddaad geeri dihataba*
*haddaad dooddi oroddiyo*
*haddaad deeddan socotaba*
*haddaad soo durdurisiyo*
*haddaad xeel la durugtaba*
*haddaad waalli duushiyo*
*haddaad maan ku dirirtaba*
*haddaad daad faruurtiyo*
*haddaad soo da' fanataba*
*haddaad duusho kicisiyo*
*haddaad dawri carisaba*
*haddaad dawga xidhatiyo*
*haddaad deyr is marisaba*
*haddaad buur la deristiyo*
*haddaad dooxyo qodataba*
*haddaad doobir shidatiyo*
*haddaad diina taxataba*
*hadduu dhiiggu daatiyo*
*hadday xaydhi dixataba*
*hadday guushu degatiyo*
*hadday daahyo rogataba*
*hadday qaanso debecdiyo*
*hadday shiish dellegantaba*
*hadday Daydo curatiyo*
*hadday deero tebisaba.*



*Adoo dool dhaqaaqiyo*
*adoo daata mooyee*
*damac waa halkiisii*
*dabna waa dabkiisii.*

*Dusduskay ku dheregtee*
*haddaan daalku dheeraan*
*gabbal baas u dumin nabad.*
*Nin dalleensi lagu cunay*
*haddaan guuto loo dilin*
*dakharkiiba toban noqon.*
*Nin kastoo dun iga qaba*
*haddaan daab-cad lala dhicin.*
*Janannada durduurta ah*
*haddaan daadku soo qubin.*
*Aqallada derbiga dheer*
*haddaan daaqad laga gelin.*
*Ninka dabin ka boodka ah*
*haddaan diirad lagu helin.*
*haddaan duubka gogoshiyo*
*lagu dhuuman dalowyada.*
*Haddaan shaashka derejada*
*dallacaadda laga nixin.*
*Dar Allay u kibirtee*
*haddaan iilka lagu degin.*
*Haddaan meydku duurkiyo*
*derrimaha ka fara badan.*
*Sanqadhaa dabayshiyo*
*haddaan fiinta laga didin.*
*Fadhigay ku daaqdee*
*haddaan soodhku dalandalin*
*halka doobi lala maro*
*haddaan raacdo daba gurin.*
*Dacfalaanka mahaddiyo*
*dardarsiga barwaaqada*
*iyo doosha subagga leh*
*haddaan laysu dacarayn,*
*Inta daran intaw daran*
*haddaan duulal lagu falin.*
*Haddaan deebta gumuciyo*

*lagu guban dabkaan shido.*
*Duhur laysla wada jiro*
*haddaan guusha lay deyn*
*Allay-lehe docdaydii*
*ha goblamo dal weynuhu.*



# GUDGUDE

*Gedgedoonka maankiyo qalbiga*
*gocasho soo boodka*
*Xaajada garlayliga jartiyo*
*gun-u-saluugayga*
*Gibladiyo mashxaraddayda iyo*
*farax la goohayga*
*Gandoodkayga taahayga iyo*
*goobo xaradhkayga*
*Gurmadkiyo haloosiga taxmiyo*
*guluf alooskayga*
*Gama' li'ida reenkayga iyo*
*jiif galgaladkayga*
*Goobyaalka caga-jiidka iyo*
*meel-ka-gabargaalka*
*Gucla orodka seeraarka iyo*
*geyllan dirirkayga*
*Haddaan geestan eegana cabsida*
*gaarkay igu raaran*
*Gabranaanta qoollaalligiyo*
*mala gorfayntayda*
*Gadoobnaanta yeelkayga iyo*
*kala gantoobnaanta*
*Garab li'ida soodhkayga iyo*
*gooninnimadayda*
*Goofkiyo xabaalaha shixnadan*
*godadka buuxbuuxa*
*Cagta go'an lugaa iyo gacmaha*
*gabawar duugoobey*
*Naafada garbaha kaashatee*
*sumucu gaagaabshey*
*Geerida shinkeed dhaaftay iyo*
*Guri dambayskayga*
*Goodaadsigaygiyo hiyiga*
*garar tallawgiisa*
*Kol haddaan wadnuhu kuu garrayn*
*geydha kugu yeedhye*
*Garasow[61] anaa kula hadlee*
*gacalkayow heedhe*

61 *Garas- waa Muxumed Carte Jaamac.*

*Nafta gororaheediyo haddii*
*galowda lays taabto*
*Geesteyda waa fule ninkii*
*goob ka saahidaye*
*Guddoon dhacayna waa doqon ninkii*
*gaar u faashadaye*
*Guri ba'ayna waa cadow ninkii*
*raarta sii guraye*
*Gobannimana waa quus ninkii*
*gawska dhaafsadaye.*
*Ummad geeska loo tumay habeen*
*gocasho soo jeeddo*
*Haddii aan tashiga loo golayn*
*amase gaashaanka*
*Fallaadhiyo gabooyaha haddaan*
*godobta loo taaban*
*Iyadoo gadoodiya hadday*
*fadal garmaammayso*
*Hadba nabar gataatiya hadday*
*gebi dhac tuuryayso*
*Galladdeeda oo dhow hadday*
*gaadhi kari weydo*
*Inta gudashadeed tahay hadday*
*geysan kari weydo*
*Iyadoon garaysnayn haddii*
*gacantu ay daasho,*
*Gamaarshaa ku dhaca amase way*
*gabax tidhaahdaaye*
*Gabbashay liqdaa amase way*
*gamashi luuddaaye*
*Way kala guddaa amase way*
*kala go'doontaaye*
*Ways gawdhisaa amase way*
*feedha gurantaaye*
*Guushay nacdaa amase way*
*gubasho oydaaye.*

*Inkastoo guddoonkii burburay*
*loo gudcura joogey*
*Inkastoo go'aankii dulliga*
*Geesinnimo diiddey*
*Inkastoo giyigu waa xormee*
*gaadhka lagu meershey*



*Inkastuu gaggaabkii cuslaa*
*garangar duul duulay*
*Xaajada god-raaca leh haddii*
*loo gabbala eego*
*Sida ay u kala geysan tahay*
*way gun dheertahaye*
*Kol haddaan garaad lagala hadhin*
*galabba sheeggeeda*
*Inta maanku gaajeysan-yahay*
*guuli waa weliye.*
*Gashigayga way dhaqanyihiin*
*gaasaskii qabaye*
*Weli gaaf dugsoon bay hurdaan*
*ganacya weyntiiye*
*Dibjirkii gidaarrada hurdaa*
*laysu soo guraye*
*Gebegebe rag lagu keenay baa*
*layga gadayaaye*
*Erey gara haddii loola tago*
*godol ma waayeene*
*Gargaarkoodu wuu dhimi lahaa*
*guul-darrada taalle*
*Lafa-gerina way jebin lahayd*
*maalin gudeheede*
*Gobanimana way dhalin lahayd*
*loo gudboonyahaye*
*Gacalnimana way hubin lahayd*
*aan la goyn karine.*
*Weli gumucu meel baydhsan buu*
*gawda ku hayaaye*
*Gariirkaad maqlaysaan ka dhow*
*goobahaan rabaye*
*Gadhqaadkeedu waa leexsanyahay*
*waana gudayaaye*
*Garar loo maleeguu ku ridey*
*guura socodkiiye*
*Guudkeedu waa wada fin iyo*
*gaatir iyo booge*
*Hadday gooli-baadh tahay waxaa*
*gabay raggeediiye*
*Guyaal iyo guyaal bay rarteen*
*gocorro shaydaane*

*Iyadoon goblamin baa haddana*
*geelo loo hadhaye*
*Gol-dalooladeedaa ka badan*
*galalka ciideede*
*Gelin looma wada sheegi karo*
*xaajo geda weyne*
*Gawdiidka iyo quusta waa*
*lagu gumoobaaye*
*Mar haddaan hillaab lagu gudbayn*
*giriftan mooyaane*
*Gabgabteedu waa xubin intay*
*gawrac leedahaye*
*Geeddiga cagaa daaliyaa*
*lagu geyoodaaye*
*Gellimaadka hayskaga jirtiyo*
*goosan habaqlaaye*
*Gubuxsiga mar uun bay tirsiga*
*meel ka soo geliye*
*Gargaraaciddeediyo ha deyn*
*geed ka didinteeda.*

## II

*Garashadu hadday ruux la tahay*
*suu u garanaayo*
*Garaadkiisu suu qabo haddii*
*loola garan waayo*
*Gardarruu u qaataa ninkii*
*yidhi garaadkiise*
*xaajadu markay gobo'da iyo*
*gawda culus joogto*
*keligii nin gaashaantay wuu*
*gola ka fuulaaye*
*Gadaashiisa uun baa durbaan*
*laga garaacaaye*
*Labadiisa geesood ma jiro*
*ruux ku gelayaaye*
*Arrin lalama guulee warkuu*
*gura yidhaahdaaye*
*Dadka wuxu u gacan haadiyaa*
*qof iyo gaarkiise*
*Gendi iyo dhukaan buu qabaa*
*cudurro guumeede*



*Gogol wuu ku shaashoonayaa*
*loo gudboonyahaye*
*Sida goray fallaagoobey buu*
*gooni joog yahaye*
*kol hadduu nin mawd lagu gudbadey*
*tiisa uga guuro*
*Xil uun buu guddoontaye ka baydh*
*gudashadiisiiye,*
*ka galgaley habaar-qabe halkuu*
*gool ku cuno weyne*
*Nin hadduu tashiga guuto faran*
*keli ganaanaysto*
*Gaaraayucuuntiyo shinnida*
*gurucya dhaadheerta*
*Giiryaalayaashiyo fulaa*
*laguma guuraanka*
*Gumarta iyo maajeenta iyo*
*geed-xunkiyo tuugga*
*Gungunnaafka iyo maarta iyo*
*gocorka aan quudhin*
*kun ninoo guraangura hadduu*
*goob isugu keeno*
*Guufkiyo haddii hooda iyo*
*giniga loo qaybsho*
*Dadka kale intii gudan haddii*
*gararka loo jiido,*
*Ninka gaaban meel dhow haddii*
*looga geda-sheegto*
*Guubaabadeedii haddii*
*loogu godadleeyo*
*Hadallada galoofta ah haddii*
*loogu mala gaaxsho*
*Guryo-noqoshadeedii haddii*
*lagu gawaan-raacsho*
*Gabbal daye sidiisii hadday*
*laba gar-daymooto*
*Shimbiraha gabraartiyo hadday*
*galow wax weydiiso*
*kol hadday galaydh soo kallahay*
*laabta uga guuxdo*
*Garba-raar cadhaysani hadduu*
*gooyo taladeeda*

*Guulkeedu dheeraa sidii*
*geenyadii Bixine*[62].
*Weligeed fal baa loo guntaa*
*lagu guhaamaaye*
*Mar uun bay gadooddaa siday*
*gees lo'aad tahaye*
*Galab xiisaheedaa wakhtigu*
*kaga gaboobaaye*
*Ninuun baa ku guuree iyada*
*geeddi waw weliye*
*marka wiil ku guro Naarta iyo*
*godadka Yaahuuda*
*Ayay kii Jannada geyn lahaa*
*dayasho goobtaaye*

*Marka uu galaa buu iyaga*
*guba yidhaahdaaye*
*Markay raar guraysaba nin bay*
*gudub tidhaahdaaye*
*Gabno ugubi way quusisaa*
*gaawe Cumarowe*[63]
*Garab-daar ninkii lagu bokhraa*
*geedad sare waabye*
*Gar-ma-qaatayaashiyo dadkaa beera*
*ruux gudhane*
*Ganbo nimaan la soo bixin haddii*
*guulo lagu waabo*
*Markuu dhaawac geystaba haddii*
*loo gargarateeyo*
*Isagoo canaan lagu gudbiyo*
*gaarran filanaaya*
*Giblo iyo haddii sacabbo lulan*
*loogu gogol-xaadho*
*Keligii inuu guurti yahay*
*maalintaa gunudye*
*Marka uu gadaan iyo gadaan*
*gacan-togaaleeyo*
*Ayuun buu waxaan ganac lahayn*
*sii gorgoriyaaye*

62 *Geenyadii Bixin-waa geenyo degel fadhi ku ahayd ceel oo marka loo soo arooro loogu iman jirey; waana tii ay ku baxday "sow geenyadu ma cabto, sow ceelka kama tagto, sow colaad laguma tebo".*
63 *Cumarowe,- Waa Cumar Salaad Cilmi*



*seetada nin goostaba*
*wuxuu gesto lala yaabye,*
*mar hadduu tallaabada gurguro*
*gaatan iyo booddo*
*Dhaaxaa gadaal laysla tebey*
*wiil galbaday jeere.*
*Toojaba waxaa lagu godlaa*
*say u gaar tahaye*
*Gurranidu mar waa dhalasho iyo*
*gacanba qaabkeede*
*Marna waa calool garac siddiyo*
*xaal ku soo gala'e*
*Kol haddaanay maankaaga gadin*
*talana kaa geynin*

*Gurracnaanta qiil lagu saxoo*
*loo gudbaa jira'e*
*Gudboonaantu way daalisaa*
*ruuxa meel gurane*
*Nin hadduu go'aankiyo sharciga*
*gawrac ugu jiido*
*Hadba goondhabaaliyo hadduu*
*gooddi-furan keeno*
*Gacalnimo hal loo yidhi hadduu*
*gubasho sii beero*
*Guudaan haddii uu ku liqo*
*ereyga geedeysan*
*Runta wuxu u guul-guulayaa*
*way gun-dheer tahaye*
*Goldaloolo qudha maaha iyo*
*goonnidaa taliye*
*Gedaan loo filayn baa jirtiyo*
*geel-la-daaq kale'e*
*Hadba geed-is-maris baa u hadha*
*guul dad leeyahaye*
*Miyaan Geeddi-Baabbow arladu*
*gelina waayeynin.*

* * *

*Gole miiggan, geed sheegan iyo*
*garangar muunaysan,*

*Gudban iyo cod laba geesa iyo*
*guurti kala soorta,*
*Garnaqsiga midducigoo tashiga*
*gooni uga showrey,*
*Geda labe maddaacaley hadloo*
*dhaabad ba'an geystey,*
*kala gurasho meertiyo rogaal*
*la isla guur guurey,*
*Maahmaaho wada guuna iyo*
*gabayo raac raacay,*
*Guddoon dhacay hubaal iyo go'aan*
*laysku gacan qaaday,*
*shan god oo murtidu leedihiyo*
*gororka suugaanta,*
*Gedda hadalka loo ruga geshiyo*
*marin gobaadeed dheh.*

## III

*Gobannimadu waa libin ku taxan*
*geeddi nololeede*
*Waa gumaro aadmigu hantiyo*
*guusha ugu weyne*
*Guddoonkeedu waa faral siyaal*
*loo gafaa jirine*
*Geduun buu ka leeyahay khalqigu*
*maalintuu gado'e*
*marka uu gabaabsiyo xilliga*
*laga gu'weynaadey*
*Ayuun baa ninkii gudan karaa*
*dhan ugu guuraaye*
*Qabyadeedu waa guun intay*
*gaadho weligeede*
*Galab noolba ooddeedu waa*
*gudinta loo hay-ye*
*Nin gufeeya mooyiye ma jirin*
*ruux gunaanadaye*
*Gelbiskeeda oo qudha haddu*
*tacabku kuu gooyo*
*Adigoo gadaashaday hadday*
*guure kugu dhaafto*
*Gommodkiyo yaboohdeedu way*
*goora badataaye*



*Haddii aan gantada loo adkayn*
*amase gaafaanta*
*Guddo iyo waxay yeelataa*
*gulufo shaydaane*
*Gaadaa dhexdeedaba ka kaca*
*maalin gelinkeede*
*Gacmaa lagu xejaa amase way*
*galab dhaqaaqdaaye*
*Waa lagu gam'aa amase way*
*geeri badisaaye*
*Gob baa lagu noqdaa amase waa*
*lagu gumoobaaye.*
*Garan maayo maalmaha intuu*
*soor gad leeyahaye*
*Mar hadduu gidaad bahal qabaa*
*gaajo kula ciiro*
*Gujo-dhaadhigeediyo hadduu*
*taabo gorofkeeda*
*Waxba kama go'aan ruux ku shubay*
*xeedho gudaheede*
*Hadduu gaar u maamulo qof*
*waa geel nin leeyahaye*
*Inkastoo gantaal iyo wed iyo*
*gawrac lagu hooyo*
*Meel loo gun-raaciyo haddaan*
*gogol dhig loo yeelin*
*Mar haddaan garaad loo lahayn*
*wayska gubataaye*
*Geedkeed ba' waa sixir haddaan*
*garasho liilayne*
*Hadduu gaws dhurwaa ruugi karo*
*waa laf guri taalle.*
*Gunti-furey nin caashaqay haddii*
*guudka loo sudho'e*
*Galacdeeda uun baa indhuhu*
*golongol eegaane*
*Giniis iyo hadday kala dhaxlaan*
*gaar-la-ababkiisu*
*Waa maro gargaranoo adhyaha*
*lagu gabraartaaye*
*Mar hadduu waraabuhu gashado*
*giiro waa halise*

*Iyadoo gashaantiya sidii*
*loola gogol dhaafay*
*Guurkeedu tuugu ahaa*
*gaabsi iyo beene*
*Iyadoo garoobiyo markay*
*guudka fidhanaysey*
*Inanuu gumeystuhu dhalaa*
*gaadhka ka ahaaye*
*Gabowgeeda way doonnantahay*
*gedaha waayeele*
*marka ay geyaan sheelataa*
*garacu yeeshaaye*
*Hadba wiil is gaalaynayaa*
*loo gu'tiriyaaye*
*Nin dharaar wuxuun laga guntay*
*guushu jamataaye*
*Gobannimadu ruux kuma xidhniyo*
*Giib ninkii dilaye*
*Agaabaynta maalmaha gudbiyo*
*galaha taariikhda*
*Gadood dhacayba sheekuu lahaa*
*geyfan iyo raade*
*Ganba-xoorka waayaha haddii*
*laysu minan guursho*
*Dad uun baa ma guurtada lahaa*
*goobihii baxaye.*
*Gurgurshaagu awr buu ka yahay*
*rarasho gaadiide*
*Gadh-wadeenku ruux buu ka yahay*
*geylan wadareede*
*Nin uun baa guddoonsha'e xil waa*
*laysu gororshaaye*
*Galladduna waxay saaran tahay*
*wax isu geygeyne*
*Inkastuu wax galo ama wax gudo*
*ama wax weyn gooyo*
*Inkastuu galool mudhay ka yahay*
*dhiraha gaagaaban*
*Hadduu geel abuuriyo hadduu*
*gaas cartama beero*
*Inta ruux wax gaadhsiin karaa*
*way gun dhowdahaye*



*Noloshana galgalaheeda iyo*
*gebi ahaanteeda*
*Waxaan geesi karin baa jiroon*
*gaar ninaw faline,*
*Xaajaba gan baa loo unkaa*
*talaba waa goore*
*Ummadyahay tiraa kaa gedmane*
*wax isu geygeyso*
*Ninkii aad garaaddiyo shaxshaxo*
*saartay garabkiisa*
*Kol hadduu dharaar goonya kulul*
*kaa gelgelin doontay*
*Waxaad galabsatuun baa jiree*
*gaado kale yeelo*
*Ninkii aan gondaha kaala dhayin*
*gololo hawsheeda*
*Gardaadkaaga yuu baran inaan*
*taada lagu gaadhin*
*Hadday gibili kaa saarantahay*
*gocomo hooseeya*
*Waxaan geedna kaa qarin indhuhu*
*yay ka gabargaalin*
*Hadba soo gadaal eeg ninkaad*
*gadato hiilkiisa*
*Gol dalooladaaduu nin ogi*
*galagalaystaaye*
*Aduun bayse kaa go'an yihiin*
*maalmahays guraye*
*Godan baa la yeeshaa xadhkaha*
*haysku wada giijin*
*Geyigiisa wiilkaan ahayn*
*gibilka mooyaane*
*Gun-dhigiisu meel kaa fog buu*
*geed ku leeyahaye*
*Si aad uga go'daba ruux ku neceb*
*gaarar kala yeesha*
*Guushaada waa lala jiraa*
*gees ha ka ahaannin*
*Godobtaada meelee intaan*
*gacantu kaa boobin*
*Gacalnimada noolee intaan*
*gocasho kaa oodin*

Guddoonkaaga reeree markay
kula gudboonaato
Gamaaddaada muunee haddaad
geeri huri weydo
Guntashana xusuusnow waxaad
godolba soo joogtey
Gurgurshaana haw raran nimaan
gudasho kuu doorin
Garashana ogsoonow inay
xaaja badan goyso
geeraarku waa sude hadduu
kuu ged-bixi-waayo
Adba goor is weydii intuu
gabaygu kaa dhaafo.

* * *

Cir gadoodey, dirir gaamur da'ay
galayax waalaystay,
Onkodkoo gariirkii ka baxay
galowgu yaab yaabay,
Guulaamo sawsaba kortiyo
dhibic garaaraysay,
Guluuluco mareegeysey iyo
gabadhle miish-miishtay,
Fad godladey, mahiigaan dhex galay
mayay ku soo gaadhey,
Waqal gaaftey jarar soo gabradey
gebiyo soo ciiray,
Gibil bururtay, gale foos burburay
galangal leexastay,
Gurdan baxay, xareed galal jabtiyo
godanno miilaystay,
Dadka oo intuu nabad gogladey
godob la'aan toosay,
Qorraxdoo garayskiyo martii
gees isaga xoortay,
Dayaxoo intuu gaadh ka degey
gacalo muunsooday,
Tigaaddoo ganbada uunsatoo
shidatay geed-saaqa,
Marka geela laantiisa dheer
gabantu soo reebto,



Guryahoo haleelada sidkani
gaabis kaga fooftay,
Marka gororka naasaha fatahay
gobo'da deyn weydo.

Galabuu kulaylkii ka jabay
gubayey jeedaalka,
Qorraxdoo gollaha kuulatood
gaari wacan mooddo,
Gaaraabidhaankiyo markay
taranto goobaantu,
Caweys ay gabdhuhu boodayaan
golaha saarreyda,
Dayaxoo galshada meersadood
geesi ba'an mooddo,
Xilligay gammaankiyo ifaan
quruxda gaarreydu,
Dhulka oo galaaluhu simeen
gun iyo baarkiisa,
Cosobkoo golxada fooraroo
laba gardhaalaystay,
Qorraxdoo gelgelimaysatoo
goroddu laallaaddo,
dayaxoo go'yaal wada cas iyo
shaal galgala qaatay,
gu' xasilay, gudgudayaal habsadey
adhaxda Gaaroodi,
Marka awrku goojada ka simo
gaasa-baxa dhaartay
Qorraxdoo guduud lagu bokhroo
meel garba ah saaran
Dayaxoo intuu garab la baxay
gooddi uga muuqda,
Gararkiyo taraaraha madow
Kala geddoonkooda,
Gabbal ururay, waa soo gurguray
labada goorood dheh.

## IV

*Ged ninkii ogaadaba shillale*
*guuto loo wacaye*
*Inta aan gar- waaqsaday intaan*
*garasho diidaayo*
*Inta laygu gaad gaadayaa*
*iiga geed ba'ane*
*Cishaday gabnowdiyo intay*
*gelinba heer joogtey*
*Girif-giriftu way igu badnayd*
*gu'iyo jiilaale*
*Inaan gaabsho mooyiye cishana*
*tayda maan gabine*
*Galka seefta kuma haysan jirin*
*maalin gulufeede*
*Misna geeladay, gocoraday*
*iiga gaws kulule*
*Goonbaartu eelkay dhigtaba*
*gaari baw xidhane*
*Godobteedu waxay saarantahay*
*meelo aan geyine*
*God markaan daboolaba far baa*
*laygu godayaaye*
*Nin gefaaba lay tirinayaa*
*garasho waa yaabe*
*Waxan ahay nin lagu saan gatoon*
*raadba soo geline*
*Garraantayda qaar iyo lag iyo*
*gaasas baa necebe*
*Gabbashayda duul iyo badh iyo*
*goosan baan rabine*
*Haddaan gaasho yeeshana dar bay*
*gawl la leedahaye*
*Hadba waxaan ku guul seegayaa*
*lama garaystaane*
*Garba-duub waxaan ugu xidhnahay*
*maan gurracaneede*
*Inaan geenyo buubsaday haddii*
*guuxu weli joogo*
*Gadaal baaba lay eegayaa*
*gool tirsaa jira'e.*



*Ummadyahay dib uma guuri karo*
*gooshkan maanta ahe*
*Gosha hooyo waa laga koraa*
*goodir kay tahaye*
*Gashi baxana waa lagu dayaa*
*geed ka hadalkiiye*
*Hadday gudubto yeedhaydu waa*
*sheeko ii gadane.*
*Geyigaygu waa kow intuu*
*waajib ii galo'e*
*Dhulka kale intaan gaadhi karo*
*waw gol leeyahaye*
*Adduunyada go'doon kagama jiro*
*garangar loo yaalle*
*Garaadkaygu waa dhaafsan yahay*
*xaajo goboleede*
*Dareenkaygu gooddiga sibuu*
*ii gilgilayaaye*
*Guhaad iyo canaan buu hiyigu*
*ii gab-leeyahaye*
*Inta garasho ii meel la'dahay*
*tayda maan gudane*
*Hadba waxan galiilyoonayaa*
*goobo lay tebaye*
*Asaaggay wuxuu galo ayaan*
*anigu gooyaaye*
*Anigiyo kuwii lagu goblamay*
*waa gudboonnahaye*
*Qayrkay intuu guul suntaday*
*gooni ii farane*
*Nin kastoo ganbadu saarantahay*
*dunida guudkeeda*
*Gurmadkayga waw baahanyahay*
*ruux la gaasiraye*
*Taydana ninkii igu guntadey*
*waw gar leeyahaye*
*Marba gooha dhiillada halkii*
*igu galoollaata*
*Karaankayga waan geyn intaan*
*geeri moogahaye*
*Waxa ina rag ii guulayaa*
*tiisa gaarka ahe*

*Anna waxaan go'aansaday inaan*
*lay gabood faline.*
*Garawshiiyo jeeraan ka helo*
*gaanka dunidayda*
*Jeeraan galaa baxo arllada*
*gooddi iyo gooddi*
*Jeeraan gufaacada ku tago*
*meelo geriyaada*
*Gaaliyo Islaamkaba ilaa*
*taydu wada gaadho*
*Barigiyo Galbeedkaba ilaa*
*laygu gacan qaado*
*Gurey[64] iyo Islow[65] iyo Hurrow[66]*
*gabaygu waa beene*
*Godadleysan maayee tashiga*
*waan guddoonsadaye*
*Waxba yaan indhaha laygu gubin*
*gaabsi ma aqaanne.*

* * *

*Gudcur laga tallaabsaday ilays*
*baadi lagu goobtay,*
*Gamas iishay, gaashaan burburay*
*gawrac laga maarmay,*
*Dunidoo giblada iidsanoo*
*gacal walaalowdey*
*Gudboonaanta xeerkeeda iyo*
*garasho nuurkeed dheh.*

64 *Gurey-Ibraahim Faarax Dawaarre(Gurey)*

65 *Islow-Maxamed Ahmed Maxamuud(Islaweyn)*
66 *Hurre-Maxamuud X.Xasan (Hurre)*
*oo saddexduba ahaayeen mujaahidiin naftoodii u huray, dhiiggoodiina u hibeeyey halganka Xoraynta Ummadda Soomaaliyeed.*



# XUSUUS

## *- A -*

**Aadan Shiine:-**
*(Aadan Sheekh Maxamuud). Waxa uu ahaa sarkaal ka tirsanaan jirey Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Bilowgii sannadkii 1982kii, ayuu u dibad baxay halganka xoraynta ummadeed.*

*Aadan Shiine wuxuu ka mid ahaa saraakiisha ugu magaca weyn leh uguna soo horraysey Ururka Dhaq- dhaqaaqa waddaniga Soomaaliyeed. Aadan Shiine xilal sare oo kala duwan ayuu ka soo qabtay Ururka SNM, xilalkaas oo kala ahaa:-*

*1. xoghayaha Ciidammada Xoraynta.*
*2. Guddoomiye-ku-xigeenka Ururka sannadihii 1982-1986.*

*Aadan Sheekh Maxamud, naxariistii janno Alle ha ka waraabshee cadowgu shirqool gaadmo ah ayuu ku diley 31/5/1987, isaga oo hawl ka haya goob ka mid ah goobaha dagaalka*

**Af-Qalooc-Xaaji Aadan Axmed:-**
*Alle ha u naxariistee wuxuu ku dhashay Gobolka Sanaag. Suugaan- yahan waddaniya oo xarakaddii gobanimada kaalin sheegan, gaar ahaan suugaanta ku lahaa buu ahaa xaajigu. Silsiladii "Siinleyda" ahaydna wu u ka qayb galay. Hal-abuur waayeel ah oo aad loo qaderiyo ayuu ahaa. Boqol iyo siyaado ayuu ku geeriyodey Xaaji Aadan.*

**Aaminatu Wahab - Aamina Bintu Wahab (Ilaahay** *raalli ha ka noqdee): waa hooyadii Nebi Maxamed (nabad- gelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee).*

## *- I -*

**Islow - Maxamed Axmed Maxamuud (Islaweyn):**
*Wuxuu ka mid ahaa saraakiishii Ciidammada Cirka ee 1973kii la ruqseeyey, markii uu Siyad Barre bilaabay in shakhsiyaadka waddaniga ah laga safeeyo Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Islaweyn wuxuu ka mid ahaa saraakii- shii ciidammada ee aasaastay garabka hubaysan ee Ururka SSDF, muddo dheer- na wuxuu ahaa Taliyaha Aaga koonfur- eed ee Ururka. Laga bilaabo sannadkii 1984kii wuxuu ka mid noqday Ururka SNM, halkaas oo uu ku shahiidey dagaal ka dhacay Tuulada Balli-Dhiig (Gobolka Togdheer) 12/2/1987 isaga oo Taliye u ah Cutub SNM oo bartaa iyada ah weerar ku qaaday. Islaweyn wuxuu ahaa geesi waddani ah oo aad*

*loo jecelyahay iyo aftahan aqoon dheer u leh hiddaha iyo suug- aanta Soomaaliyeed.*

## - B -

**Barre- Maxamed Siyaad Barre:** *keli-taliyihii af-genbiga ku qabsa- day dalka Soomaaliya 21/10/1969.*

**Beeris - Shimon Peres** *Ra'iisal Wasaarihii hore, Dalka Israa'iil.*

**Beegan-Manaaxem Beegan:** *Ra'iisal Warsaare hore. Dalka Israa'iil.*

**Bilaal-Bilaal Bin Xaaris:**
*Wuxuu ahaa Asxaabi madow oo ka mid ah dadkii ugu hor rumeeyey Diinta Islaamka. Bilaal wuxuu caan ku ahaa Addimaadda.*

**Boobe-Cabdi Yuusuf Ducaali:**
*Mujaahid firinfircoon, ka mid ah dhallinyarada indheer-garadka ah. Boobe, wuxuu muddo dheer ka tirsanaa Ururka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed.Muddadaas gudaheeda wuxuu Ururka SNM hay'adihiisa sare ka soo qabtay xilal kala duwan sida:-*
*1. Xoghayaha Golaha Dhexe*
*2.Xoghayaha Warfaafinta.*

**Boota-W.G.Botha:**
*Madaxweynihii hore ee dalka koonfur Afrika ee ku caan-baxay siyaasadaha midab takoorka ah.*

**Boodhari-Cilmi Boodhari (1908-1941):**
*Waa astaanta iyo halqabsiga Jacaylka iyo Jamashada haweenka, Sidaas darteed waxa laga yaabaa in Jacaylka Cilmi yahay ka ugu caansan soomalida dhexdeeda. Wuxuu ku noolaa Magaalada Berbera markay Hodan indhuhu tuseen qiyaastii 30 nadii. Kalgacalkiisii Hodan ayaa caynka iyo baydda ka gooyey hibadii iyo hantidii Cilmi duunkiisa Jiiftay. Laakiin Hodan waxay oori u noqotay Maxamed Shabele. Waxa la rumeysanyahay in Cilmi Boodhari Jacaylkii Hodan dartii u hoydey.*

**Burhaan-Burhaan Daahir Afrax:**
*Barbaar gabyaa ah oo ka tirsanaa Xooggaga Mucaaradka ka soo horjeeda nidaamkii foosha xumaa ee ka dhisnaa Soomaaliya.*



**Bukaasa-Jean Bedel Bukaasa Keligii taliyihii dalka Afrikada** *Dhexe, ee af-genbiga kale lagu ridey.*

## - T -

**Taadjar - Margaret Thatcher:**
*Ra'iisal Wasaaradii hore ee dalka Ingiriiska iyo Hogaamiyihii Xusbiga Muxaafidka sannadihii 1979-1990.*

## - J -

**Jacfar- Jacfar Maxamed Numayri:** *Diktaatoor ka mid ah Diktaatoorada soo maray Afrika, horena muddo dheer uga talin jirey dalka Soodaan.*

## - X -

**Xaamud - Xaamud Ibraahim Yaasiin:**
*Mujaahid ku caan baxay geesinimo iyo xeel dagaal oo ka tirsanaa Ciidammada Xoraynta Ururka SNM. Xaamud Ibraahim naxariistii janno Alle ha ka waraabiyee wuxuu ku shahiidey goob uu mahadho ka geystey oo ka mid ah goobihii cadowga lagaga hor yimi sannadkii 1984kii.*

**Xasan - is bokhraha dalkaa Moroko. Xasan Saleebaan - Xasan Saleebaan Maxamed (Ina Saleebaan Weyne):**
*Sarkaal ka tirsanaan jirey Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Xasan wuxuu shaadhkii Xoogga Dalka Soomaaliyeed iska xayuubiyey ka dib markuu ku qancay in magaca Xoogga Dalku lumiyey kalsoonidii shacbiga. Xasan Saleebaan wuxuu ka mid ahaa saraakiishii dhinaca Ururka SNM ee xabbaddii ugu horraysey ku ridey cadowga xukunka dalka boobay. Xasan ma ahayn sarkaal ka tirsan ciidammada oo keliya.*
*Xasan Saleebaan wuxuu ahaa geesi keenadiid ah oo leh niyad bir ah. xasan, naxariistii Janno Alle ha ka waraabiyee wuxuu ku shahiidey goobihii ugu horreeyey ee cadawga lays kaga hor yimi sannadkii 1983kii.*

**Xasan Ganey - Xasan Xaaji Cabdillaahi:**
*Suugaanyahan aad looga yaqaano dalka Soomaaliya oo dhan, kana mid ah ragga ugu horreeya maansadda xilligan.Xasan Ganey wuxuu ka tirsanaan jirey Xoogga Dalka, gaar ahaan, kooxdii fanniga ahayd, ee loo yiqiin "Jeneral Daa 'uud", toddobaatanadii ayuu ku soo wareegey Hooballada Waaberi. Xasan Ganey waa nin ku xeel-dheer Afka Soomaaliga, kuna caan-baxay astaynta farshaxanimo, quruxda iyo adeegsiga sifooyinka dabeecada. Xasan Ganey wuxuu ka mid ahaa raggii kaalinta lama illaawaanka ah ka qaatay sisiladdii "Deelley". Xasan*

Ganey wuxuu ka mid yahay ragga ku leh qayb libaax suugaanta iyo fanka maanta, wuxuuna ka mid yahay ragga ugu riwaayado iyo heeso badan.

**Xaliimo - Xaliimatu Sacdiya:**
*Hooyadii Alle raali ha ka noqdee nuujisey Nebi Maxamed /Nabad iyo naxariisi korkeeda ha ahaatee) ka dib markii hooyadii Aamina Bintu Wahab (Ilaahay raali ha ka noqdee) geeriyootay.*

**Xuseen- Xuseen Bin Dalaal Bin Cabdalla:**
*Waa is bokhraha dalka Urdun.*

**Xusni - Maxamed Xusni Mubaarak:**
*Madaxweynaha dalka Masar.*

## - KH -

**Khaliif - Khaliif Sheekh Axmed:**
*Hanad dhallin yaro ah, oo kaalin xus mudan ka qaatay halganka ka hor jeeda taliska foosha xun ee ka dhisan Soomaaliya. Khaliif Alle ha u naxariistee wuxuu madax ka ahaa Qaybta Koonfureed ee Ururka SNM, isaga oo dhiif diriraya ayuu ku shahiidey goob dagaal, Gobolka Bakool ee Soomaaliya sannadkii 1985kii.*

## - D -

**Daktoor Baanda - Hastings Banda. Waa**
*Diktaatoorka ka taliya dalka Malaawi (Afrikada Koonfureed).*

**Dr. Maxamed Saalax -Dr.Maxamed Saalax xasan:**
*Gobolka Sanaag ayuu ku dhashay. Macallinimo ayaa dalka Soomaaliya loogu tababaray oo kulliyadda Macallimiinta ee Lafoole ayuu ka qalin jebiyey. Markii danbena dalkii Jarmalka Dimuqraadiga la odhan jirey ayuu waxbarashadiisii ka sii watey, halkaasoo uu cilmiga taariikhda "Bh.D" kaga soo qaatay. Wakhtigan xaadirka ahna cilma baadhis la xidhiidha raad-raaca taariikhda Soomaaliyeed ayuu dalka Ingriiska u joogaa.*

**Deeqa - Deeqa Jaamac Jibriil (Deeqa Colujoog):**
*Aqoonyahanad Soomaaliyeed oo ku takhasustay cilmiga bulshada. Deeqi waxay ahayd Guddoomiyaha Akaademiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta wakhtigii Ilaahay naxariis- tii janno ha ka waraabiyee Muuse Galaal geeriyooday. Deeqi waxay si xilkasnimo leh isugu taxallujisay inay badbaadiso nolosho Muuse Galaal.*



**Dun Carbeed - Cali Sugulle Dun Carbeed:**
*Maansa-yahan ku caan ah taariikhda fanka Soomaaliyeed, kana mid ah ragga tiirarka u taagey fanka Soomaaliyeed ee cusub. Cali Sugulle waa faylasuuf aragti dheer. Wuxuu aad u hantay afka Soomaliga saddex ilaa afar fac ayay maansadiisu soo taxnayd. Maansadiisu dhinacyada nolosha oo dhan iyo da' kasta oo bulshada ka mid ah ayay saamaysay welina ismay dhimin. Cali Sugulle wuxuu ka mid yahay ragga tirada iyo tayada ugu balladhan ku leh maansada iyo fan masraxeedka soomaaliyeed.*

## - R -

**Rashiid - Rashiid sheekh Cabdillaahi Xaaji Axmed:**
*Aqoonyahan ku takhasusay Cilmiga Bulshada.Suugaan ruug iyo qoraa ku xeel dheer siyaasadda. Rashiid intii dagaalka hubaysan ee SNM jireyba ka mid buu ahaa, waxaanu hay'adaha Ururka ee sare ka soo qabtay xilal ku siman ilaa heer Fulineed (Xoghayaha Xidhiidhka Dibadda).*
*Rashiid waa gabay dhaadhi caan ku ah dhadhanniga iyo kala shiilka maansade.*

**Raage - Raage Ugaas Warfaa:**
*Bilowgii Qarnigii 19aad ayuu dhashay. Raage wuxuu ka mid ahaa raggii ugu horreeyey ee ku caan noqda gabayga.*

**Reegan - Ronald Wilson Reegan:**
*Madaxweynihii dalka Maraykanka (1979 - 1988).*

**Riiraash - Maxamed Cabdillaahi Riiraash:**
*waa macallin ka qalin jebiyey kulliyadda Waxbarashada ee Lafoole. Dalka Ingiriiska wuxuu ka soo qaatay shahaadada "M.A".*

**Riiraash, waa hal-abuur daneeya** *suugaanta kana qayb qaatay silsiladdii "Siinley.*

## - S -

**Saado - Saado Cabdi Muxumed (Cabdi Bacaad):**
*Waa marwada Rashiid Sheekh Cabdillaahi.*

**Saado - Saado Cali Warsame:**
*Fanaanad cod baxsan, kana tirsan Hooballada Waaberi.Saado, waa hal-abuurad, waana gabadhii ka qayb gashay silsiladdii "Deelley".*

**Salaan Carrabey -Salaan Maxamed (Carrabey):**
*Wuxuu ahaa gabyaa caana oo ku dhashay Gobolka Togdheer, dhulmareen ayuu ahaa Salaan. Silsiladdii "Guba" gabayaagii ka qayb galay buu ku jirey.*

**Samoosa - Arestides Samosa:**
*Diktaatoorkii muddada dheer ka talin jirey dalka Nikaraagwa, ee kacdoonka shacbi lagu ridey dabayaaqadii 1970kii.Kacdoonkaas oo ay hoggaamina- yeen ciidammadii la magac baxay Sandinista, heesaagii caanka ahaa ee Diktaatoorku diley.*

**Sahra -Sahra Rashiid Sheekh Cabdillaahi:**
*Waa curadda Rashiid Sheekh Cabdillaahi iyo Saado Cabdi Bacaad.*

**Sayid Maxamed - Sayid Maxamed Cabdulle Xasan:**
*Wuxuu ahaa gabyaa caan ah oo si ba'an ugu talax-tegey afka Soomaliga Hoggaami- yihii dhaqdhaqaaqii ciidammadii Daraawiishta ee ka hor-jeeday gumaystayaashii Talyaaniga iyo Ingiriiska.*

**Siciid Saalax - Siciid Saalax Axmed:**
*Gobolka Sanaag ayuu ku dhashay. Macallimiintii hore ayuu Siciid ka mid yahay, kulliyadda Macallimiinta ee Lafoole ayuu ka qalin jebiyey, waana hal- abuur silsiladdii "Siinleyda" ahayd ka qayb galay.*

## *- sh -*

**Shaah - Maxamed Rida Bahlawi:**
*Shaahii, ama boqorkii ka talinayey Iiraan muddada ku dhow soddonka sannadood.*

**shirwac - Cabdillaahi Maxamed Shirwac:**
*Waa Jaamici, indheer-garad ah, leh sifooyin waddaninnimo iyo qarannimo.*

## *- DH -*

**Dhoodaan - Cabdillaahi Macallin:**
*1. Gabyaa ku xeel-dheer maansada Soomaaliyeed.*



*2. Muddo dheer ka horjeedey taliska bahalka ah ee ka dhisan Soomaaliya.*
*3.Dhoodaan wuxuu caan kusii yahay gabayada jacburka ah.*

## *- C -*

**Cabbaas - Axmed Cabbaas Axmed:**
*Dhaqaalayahan, Qoraa kuXeel-dheere cilmiga bulshada. Cabbaas wuxuu ka tirsanaa Xooggaga Mucaaradka ah ilaa sannadkii 1980. Cabbas waa ragga aad u daneeya fanka iyo Suugaanta, waddaniyaduna uraa rugtiisa iyo raaskiisa.*

**Cabdi Qays - Cabdi Aadan Xaad:**
*Suugaanyahan caan ka ah dalka iyo degaannada Soomaaliya oo dhan. Cabdi Qays waxaa Ilaahay ku mannays- tay hibooyin fanni ah oo fara badan, waxaanu ka mid yahay tira aad u yar oo awood u leh:-*
*1. Hal-abuurida iyo tirinta midhaha.*
*2. Samaynta codka.*
*3. Tumidda kamanka iyo qalab kale.*
*4. ku luuqaynta heesaha.*
*5. Jilidda riwaayadaha.*

*Cabdi Qays wuxuu ka mid yahay suugaan- yahannada heerka koowaad, waxaanu ka mid yahay kuwa loogu jecel yahay fankooda. Cabdi Qays wuxuu ka mid ahaa raggii ay bilowgiiba iska horyimaaddeen askartii xukunka Soomaaliya boobtay, muddadii askartaasi dalka ka talinay- seyna badankeeda Cabdi Qays wuxuu ku oodnaa xabsi.*

**Cali Dhuux -Cali Aadan:**
*Qarnigii 19aad qaybtiisii danbe ayuu dhashay.Qarnigii 20aad badhtami-hii- siina wuu geeriyoodey. Gabyaa caan baxay reer miy ah oo Gobollada Woqooyi Barigooda ku xoolo dhaqda buu ahaa.Silsilsddii "Guba" la baxday gabaygay ka unkantay- na isagaa curiyey Cali Dhuux.*

**Cumar - Cumar Salaad Cilmi:**
*Shaqada dawlada 1964kii ayuu ku biiray. Tan iyo waagaana xilal kala duwan ayuu Cumar dawladihii kala danbeeyey ka soo qabtay. sannadihii 1978 - 1980, Cumar wuxuu ahaa Xoghayaha Xisbiga iyo Guddoomiyaha Gobolka Woqooyi Galbeed. Cumar, sannadkii 1981kii ayuu ku soo biiray Xooggaga Mucaaradka Soomaaliy- eed, garabka SSDF oo uu xilal Fulineed ka qabtay. Haatana Cumar wuxuu ka tirsan yahay hoggaanka Urурka USC.*

## - Q -

**Qammaan - Qammaan Bulxan:** *Waa gabayaa caan ku ah Suugaanta Soomaaliyeed. Qarnigii 20aad bilowgiisii gabyaa ku noolaa Dhagaxbuur iyo nawaaxigeeda buu ahaa.Silsiladdii "Guba" ahaydna dood ba'an iyo farshaxanimo laysla sheegay buu kaga qayb galay.Tii "Halacna" gabyaagii isku helay buu safka hore kaga jirey.*

## - G -

**Garas - Muxumed Carte Jaamac:**
*Waxay isku dugsi iyo isku kacaan ahaayeen hal-abuurka Maxamed Ibraahim Warsame (Magaalada Cadan). Garas wuxuu ka mid yahay ragga Hadraawi ugu jecel yahay saaxiibbadiisii hore. Garas wuxuu markii ugu danbeysey ku sugnaa dalka Imaaraadka Carabta.*

**Gaarriye- Maxamed Xaashi Dhamac:**
*1. Jaamici indheer - Garad ah.*
*2. Gabyaa, safka hore kaga jira hogaaminta maansada Soomaaliyeed ee wakhtigan cusub, ama casriga ah.*
*3. Gaarriye wuxuu la kowsaday dagaalka hubaysan ee Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed, waxaanu Ururka SNM ka soo qabtay xilal kala duwan oo ka mid yahay Xoghayaha Aagga Dhexe. Gaarriye, waa raggii qaybta libaax ku lahaa silsiladdii siinley, Gaarriye waa hal-abuurkii bilaabay silsiladdii caanka ahayd ee Deelley.*

**Galaal - Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal:**
*(Muuse Galaal), Abwaan, Xidaar, Hoobal, gabyaa iyo caalim ku xeel dheeraa suugaanta, dhaqanka iyo xiddigiska. Muuse Galaal wuxuu caan ku ahaa degaanada Soomaaliyeed oo dhan, waxaana aad looga yiqiiney adduunweynaha. Muuse Galaal wuxuu ka mid ahaa tiirarkii budhcadda ka talisa Soomaaliya sahayatay, waxaanu Ilaahay naxriistii janno ha ka waraabiyee si dacdarro ah ugu geeriyoodey magaalada Muqdisho sannadkii 1980kii.*

**Gammuute - Maxamed Cabdille Cali:**
*Gobolka Togdheer ayuu dabayaaqadii Qarnigii 19aad ku dhashay, Gabyaa caanah kuna sii Caan baxay maansada geela ayuu ahaa.Waxaanu xijaabtay qiyaastii afartannadii.*

**Gaandi - Mahatma Gaandi:**
*Halyeygii horseedka ka ahaa halgankii gobannimada dalka Hindiya.*



**Giib - D.Gibbis:**
*Sarkaal Ingiriis ah oo mar ka talin jirey magaalada Burco wakhtigii gumaysiga Ingiriiska, markii danbena ciidamadii daraawiishtu ku dileen gobolka Togdheer, labaatannadii Qarnigan labaatanaad.*

**Gurxan - Xasan Gurxan Ibraahim:**
*1.Waddani indheer-garad ah.*
*2.Aftahan ku talax tegey siyaasadda.*
*3.Gurxan wuxuu weligii ka horjeedey dagaal siyaasi ah oo aqooni ku dheehantahayna ku hayey ninka madaxda ka ah dad qalatada caarcaarisay Soomaaliya.*

**Gurey- Ibraahim Faarax Dawaarre (1956-1986):**
*Wuxuu ka mid ahaa horseedkii dhaqdhaqaaqyadii ardayda ee Gobolka Sanaag, arrintaas darteed, Gurey wuxuu ku xidhnaa xabsiga weyn ee ku yaal tuulada Mandheera, degmada Berbera. Muddadii uu dhaxaysey 1979- 1981. Isaga oo dhawr iyo labaatan jir ah.Gurey wuxuu dagaalka hubaysan ku soo biiray 1982kii.*
*Gurey Illaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee, wuxuu shahiidey sannad- kii 1986kii, isaga oo gudanaya waajibaadkiisii ummadeed. Gurey wuxuu intuu noolaa tusaale iyo astaan u ahaa sifooyinka ku aroora ragannimada oo dhan. Waxaanu iftiin iyo ilays lagu hirto iyo hal-haysba u noqday, guud ahaan dagaalka hubaysan, gaar ahaan dhalinyarada Soomaaliyeed. Geeridii Gurey Faarax Dawaare ku timi waxay dad fara badan geyeysiisey inaan hagoog mooyee afkooda wax hadal ihi ka soo bixin in muddo ah.*

**Guush- Cali Jaamac Basaale:**
*Wuxuu wax ku bartay magaalada Burco. Wuxuu dhaqdhaqaaqyadii dhalinyarada ee Gobolka Togdheer ka ahaa xubin firinfiricoon. Guush wuxuu dagaalka hubaysan, garabka SNM ku soo biiray sannadkii 1983kii. uush gudashada kaalintii uu ku lahaa halganka ka sokow wuxuu kaalinta ugu weyn ka qaatay, ururinta, ilaalinta, faafinta iyo daabacaadda suugaanta buugan ku daabacan.*

## - F -

**Faarax- Faarax Axmed Cali (Faarax Gamuute):**
*Jaamici, cilmi baadhe iyo qoraa suugaanyahan ah. Faarax wuxuu ilaa sannadkii 1982kii ka tirsanaa Xooggaga Mucaaradka ah, garabka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM). Waxaanu muddo dheer xubin ka ahaa Golaha Dhexe.*

**Faarax Nuur:**
*Wuxuu ku noolaan jiray gobolka Woqooyi Galbeed, miyi iyo magaalo midna kama madhnayn. Ilaahay naxariistii Janno ha ka waraabiyee Faarax Nuur wuxuu ahaa gabayaa caan ah oo farshaxannimada iyo xeel dheerida ku darsaday aragti iyo aqoon kaabay oo ladhay hibadiisa. Farax Nuur wuxuu gaadh haye, Af-hayeen iyo abbaan duuleba ka ahaa qaddiyad ka xeel dheer kana xannun badantii raggii ahaa daafacayeen. Taasa waxay keentay in mar keliya talo ka gedman weydo sawirka qaddiyadaasina ka libdhi waayo.*

**Fahad- Fahad Binu Cabdulcasiis:** *Is-bokhzaha dalkaas sucuudiga.*

**Kaddare- Xuseen Sheekh Axmed:**
*Murtiyahan, ku xeel- dheer dhaqanka iyo suugaanta kana tirsan Akaademiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta.*

**Karuur- Cabdi sheekh Jaamac (Cabdi Karuur):**
*Wuxuu ahaan jirey sarkaal ku-xigeen ka tirsan Xoogga Dalka Soomaaliyeed muddadii hore ee Xoogga dalku macnaha samaynayey. Cabdi Karuur bilowgiiba waxaa uu la kowsaday dagaalka hubaysan garabka SSDF, wuxuuna ku danbeeyey garabka Jabhada SNM. Cabdi Karuur wuxuu ahaa halyey caan ku noqday halganka dhexdiisa iyo dalka Soomaaliyeed oo dhan. Wuxuu ahaa geesi ku xeel-dheer dagaalka dhuumaalaysiga (Guerrilla), gaadmada iyo is maydhaan- ka. Cabdi Karuur, wuxuu sas iyo selal joogta ah ku ridey ciidammada cadowga ee Gobolka Bakool, Gedo iyo Bay. Cabdi Karuur wuxuu mar iyo mararba weerar ku qaaday magaalo madaxda Muqdisho intii dawlad ku sheegta ka talisa Soomaaliya weli ilkaha iyo ciddiyha dhaadheer lahayd. Cabdi Karuur Ilaahay naxariistiisa ballaadhan ha huwiyee, goob dagaal oo uu ku xarrago qaatay (Washaaqo, degmada Yeed, Gobolka Bakool) ayuu ku shahiidey sannadkii 1987kii.*

**Koosaar- Cabdulqaadir Koosaar Cabdi:**
*Cabdulqaadir Koosaar, wuxuu ahaan jirey sarkaal ka tirsan Xoogga Dalka. Wuxuu ku soo biiray Xooggaga Mucaaradka ah garabka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed sannadkii 1982kii. Muddadaas Cabdulqaadir Koosaar ka tirsanaa Ururka SNM xilalka uu soo qabtay waxaa ka mid ahaa:-*

1. *Guddoomiyaha Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed SNM (1983-1984).*
2. *Taliyaha Ciidammada Xoraynta SNM.*
3. *Xubin guddida fulinta ah.*
4. *Xubin Golaha dhexe.*
5. *Taliyaha Aagga Koonfureed.*
6. *Taliyaha Aagga Dhexe.*

*Cabdulqaadir Koosaar wuxuu ahaa indheer-garad ku xeel-dheer afafka una bisil siyaasadda. Cabdulqaadir Koosaar Ilaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee waxaa cadowgu shirqool gaadmo ah ku diley 12/7/1987, isagoo ku guda jira gudashada waajibaadkiisa ummadeed.*

## *- L -*

**Lixle- Maxamed Xaashi Diiriye:**
*Wuxuu ka mid ahaa saraakiisha sare ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed, waxaana shaqada laga fadhiisiyey 1987kii isaga oo Gaashaanle Sare ah keeno- diidnimo awgeed. Lixle, wuxuu ka mid ahaa saraakiishii asaastay Ururka Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed, gaar ahaan garabka ciidammada xoraynta. Sannadihii 1983- kii iyo 1984kii wuxuu Ururka SNM ka qabtay xilal ay ka mid yihiin Xoghayaha ciidammada Xoraynta SNM. Wuxuu ku caan ahaa calool adayg. geesinimo, hawlkarnimo iyo naf hurnimo aad loo tebey.*
*Lixle, Alle naxariistii janno ha ka waraabiyee, wuxuu shahiiday 17/10/1984, isaga oo dagaal-gelinaya ciidan tira yar oo SNM ah oo cadow xooggani soo weeraray. Mintidnimada Lixle ayaa keentay in cadowgii aad loo jebiyo.*
*Goobtuu Lixle ku shahiiday waxay ka mid tahay kuwa ugu qiimaha badan dagaalka xooggaga Mucaaradku ku hayaan taliska Siyaad Barre.*

## *- M -*

**Maxamed Mooge- Maxamed Mooge Liibaan:**
*Heesaagii ma dhafaanka ahaa ee Soomaaliya. Maxamed Mooge, wuxuu ahaa macallin ka tirsanaa Wasaaradda Waxbarashada, ka hor intaanu hantiyin dhegaha dadweynaha Soomaaliyeed. Maxamed, wuxuu hoobal ahaan soo shaac- baxay sannadihii toddobaatanadii. Maxamed Mooge, waxaa taliska Soomaaliya ka dhisani shaqadii ka fadhiisiyey sannadkii 1971kii, ka dib markii talisku ku eedeeyey inaanu u jajabnayn hawlaha kacaan-ku-sheegaa boobay taladii dalka. Maxamed, intuu dalka gudihiisa joogey wuxuu ku heesi jirey heesaha si dad- ban uga soo hor-jeeday taliska Maxamed Siyaad Barre. Toddobaatannadii ayuu Maxamed si qarsoodi ah dalka kaga baxay, waxaanu in muudo ah ku noolaa dalka Kiiniya iyo dalka Ingiriiska, ka dib markuu naftiisa uga maaro waayey inay ka indha qarsato*

*durbaa- nadii beenta ahaa ee loo tumayey Siyaad Barre iyo hurintiisa sacabkiyo mashxaradda jeclayd. Dhaqdhaqaaqii ugu horreeyey ee Siyaad diidka ahaa (Jabhadda SSDF) ayuu bilowgiiba Maxamed Moogee ku biiray, waxaanu ahaa hoobalkii ugu horreeyey ee qaaday hees cod leh oo si badheedh ah uga soo hor-jeedda taliska Soomaaliya, sida heestii ahayd ee "Soomaalidu ma huruddaa" iyo " Lix iyo labaatankii Juun ku lednay, kowdii Luulyo liibaaney kow iyo labaatankii Oktoobar leeleelay".*
*Maxamed Mooge, waxaa aad ugu beerayd nacaybka taliska nacabka ah, mana jirin heeso kacaan-amaan ah oo uu ku heesay muddadii ka badaer kow iyo labaatanka sannadood ee mugdiga ah, xitaa may jirin heeso Maxamed Mooge ku duubay Idaacadaha Soomaaliyeed, sababtuna waxay ahayd isaga oo u arkay- ey Idaacado aan ka wakiil ahayn ama ku hadlayn afka shacbiga Soomaaliyeed, sidaas darteed ayaa loo dareemi karaa in heesaha Maxamed Mooge ku duuban yihiin cajaladaha madaxa bannaan.*
*Maxamed Mooge fankiisu wuxuu ka mid yahay kuwa ugu mudan fanka loo yaqaan "Fadhiga". Waxaa la rumaysan yahay inaanu jirin guri Af-Soomaali lagaga hadlo oo aanay heesaha Maxamed Mooge oollin.*
*Maxamed Mooge Liibaan, wuxuu lahaa cod lab oo legddan oo hannaan farshaxanimo ku dheehantahay iyo luuq aan carjabin oo dhegtu heellanaan, hanqal-taag iyo halhaleel ku dhegeysato. Maxamed Mooge, wuxuu ahaa bulshaawi, qalanbaawi ah, aad iyo aad ayuu naftiisa ugu han-weynaa. Wuxuu lahaa hilaad fog iyo hiyi durugsan. Fanka Maxamed Mooge ma duugoobi doono inta dad nool yahay.*
*Maxamed Mooge wuxuu la dhashay hoobalka kale ee caanka ah, ee Axmed Mooge Liibaan. Maxamed Mooge Ilaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee wuxuu shahiidey 5/6/1984kii, isagoo hawlihii xoraynta ku foogan.*

**Maarkoos - Ferdinando Marcos:**
*Keli-taliyihii muddada dheer ka talin jirey dalka Filibiin ee lagu ridey kacdoonka shacbi Feberweri 1986kii.*

## *- H -*

**Hodan -Hodan Cabdille Walanwal:**
*Waxay ku noolaan jirtey Hodan magaalada Berbera, waana gabadhii uu jacaylkeeda Cilmi Boodhari ku mashquulay, maansada badanna ka tiriyey. Ismayse calfan oo Maxamed Shabeele ayey oori u noqotay.*

*Sannadihii 60dii ayay Hodan Cabdille Ilaahay naxariistiisa ha ku badbaadiyee magaalada Xamar ku geeriyootey.*



**Hurre - Maxamuud Xaaji Xasan Muuse:**
*Macallimiintii hore ayuu ka mid ahaa, waxaanu ka qalin jebiyey kulliyada waxbarashada Lafoole.Wuxuu kaalin weyn ka qaadan jirey abaabulidda Ururrada Macallimiinta gobanimada ka hor iyo ka dib, marar badan ayaana lagu xidhay.Markii ugu danbeysey wuxuu dagaal hubaysan ka bilaabay buuraleyda Gobolka Sanaag, waxuu ka mid noqday taliyayaasha Ciidammada Xoraynta ee SNM. Laga bilaabo 1983kii wuxuu ka mid ahaa Golaha Dhexe ee SNM, wuxuu caan ku ahaa hoggaaminta, dadwadnimo, geesinimo iyo aqoonta dhuumaalaysiga ah.*
*Hurre, Alle ha u naxariistee, wuxuu ku shahiiday dagaal ku dhex-maray Diinle (Gobolka Togdheer) ciidammo SNM iyo ciidammada daacadda u ah taliska Siyaad Barre, isaga oo xubin ka ahaa Guddida Sare ee Dagaal-gelinta SNM.*
*Geeridii Hurre ku timi waa khasaace ballaadhan oo ku yimi dagaalka hu baysan ee cadowga ka hor jeeda.*

**Hurre - Cismaan Ibraahim Warsame:**
*Waa maanso-yahay ay Hadraawi walaalo yihiin.Heesaa caan ku ah ciyaaraha barbaarta miyiga iyo magaaladaba xilligii dhalin-yara-nimadiisii.Wuxuu ku barbaaray kuna dhaqan yahay Gobolka Togdheer. Wuxuu leeyahay heeso iyo gabayo badan.*
*Hurre Walanwal wuxuu aad iyo aad ugu xeeldheergahay dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.*

**Yaasiin - Yaasiin Axmed Xaaji Nuur:**
*Wuxuu ka qalin jebiyey Kulliyada Macallimiinta ee Lafoole. Yaasiin Dheere, wuxuu ahaa suugaan-yahan, xeel-dheere ka ahaa Akaademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta, waxaanu ka mid ahaa halganka hubaysan ee*
*Mucaaradka Soomaaliyeed, garabka SNM, muddo dheerna wuxuu ahaa Xubin Gole Dhexe. Yaasiin Axmed X. Nuur wuxuu ahaa geesi7 ma daala ah oo milgo iyo maamuus ku lahaa dagaalka hubaysan. Yaasiin-Dheere wuxuu caan ku noqon doonaa taariikhda halganka soomaaliyeed.*
*Yaasiin-Dheere Ilaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee wuxuu shahiidey badhtamahii sannadka 1991 isaga oo gudanaya waajibkiisii qarannimo.*